AL-FAARUUQ

SANNADIHII HORE

TAARIIKH NOLOLEEDKII
CUMAR IBN AL-KHADDAAB

MUXAMMAD YUUSUF

AL-FAARUUQ

AL-FAARUUQ

TAARIIKH NOLOLEEDKII CUMAR IBN AL-KHADDAAB

SANNADIHII HORE

MUXAMMAD YUUSUF

GARANUUG

Xuquuqda © Muxammad Yuusuf 2017.

Buuggani waxa uu wataa rukhsadda Creative Commons Sheegidda Qoraaga-Ganacsi La'aan-Wadaagid u Dhiganta 4.0 Caalami. Magaca Garanuug, summadda iyo galka buuggu kuma jiraan rukhsadda, lamana adeegsan karo iyada oo aan Garanuug laga helin oggolaansho qoran. Wixii faahfaahin ah ee rukhsaddan ku saabsan kala xidhiidh info@garanuug.com.

Buuggan isaga oo PDF ah waxaa laga heli karaa www.garanuug.com.

Waa la faafin karaa haddii aan laga ganacsanayn.

Waxaa faafisay Garanuug Ltd, London, United Kingdom.

Dhigaalka iyo naqshadaynta: Muxammad Yuusuf.

Qaabaynta jeldiga: Maxamed Cabdullaahi Cartan (Looh Press).

www.garanuug.com

Copyright © Mohammed Yusuf 2017.

This work is authored by Mohammed Yusuf Maalin and is licensed under a Creative Commons Attribution-NonCommercial-ShareAlike 4.0 International License. The Garanuug name, logo and book covers are not subject to the license and may not be reproduced without the prior and express written consent of the author. For questions regarding this license, please contact info@garanuug.com

Published by Garanuug Ltd, London, United Kingdom.

www.garanuug.com

Typesetting and design by the author, Mohammed Yusuf Maalin.

Cover Design by Mohammed Abdullahi Artan (Looh Press).

Cover Caligraphy is adapted from work by Petermaleh (Own work) [CC BY-SA 3.0 (http://creativecommons.org/licenses/by-sa/3.0)], via Wikimedia Commons.

British Library Cataloguing in Publication Data Available.

ISBN: 978-0-9957533-1-0

بسم الله الرحمن الرحيم

Hibeyn

Eeddo,
Hooyo,
Aabbe.

Soogaabisyo

SWT	*Subxaanahuu wa tacaalaa.*
SCW	*Sallallaahu calayhi wasallam.*
CS	*Calaysis salaam/ Calayhas salaam.*
RC	*Radiyallaahu canhu/ Radiyallaahu canhaa.*
HALKUUN	*Halkaa uun ka eeg.*

Tusmo

Hordhac *xiii*

1 Dajnaan *1*

2 Iqra' *21*

3 Laa ilaaha illallaah *43*

4 Nebi, Siddiiq, iyo Shahiid *79*

5 Bacdal Fatxi *123*

6 Cumarayn *161*

Dibdheh *203*

Tixraac *205*

Hordhac

"Haddii uu gadaashay nebi jiri lahaa, waxa uu ahaan lahaa Cumar."

—Nebiga scw,
Sunan at-Tirmidi, 4018.

Nebiga scw ka dib, taariikhda Islaamka ma soo marin qof ka saamayn badnaa Cumar ibnul Khaddaab rc, waana ay adag tahay in la helo cid u dhiganta, shakhsiyad ahaan iyo waxqabad ahaanba.

Buuggani waxa uu guudmarayaa taariikh nololeedkii Cumar ibnul Khaddaab rc, qaybtiisan koowaadna waxa ay diiradda saaraysaa sannadihii hore ee noloshiisa: heerkii uu bulshada kaga jirey iyo saamayntii uu ku lahaa, habkii uu uga falceliyey diintu markii ay soo degtay, islaamiddiisi iyo isbeddelkii ay dhalisay, kaalintii uu ka qaatay xoojinta iyo faafinta diinta, iyo booskii uu kaga jirey bulshadii cusbayd ee Muslimiinta.

Waxa uu buuggani tilmaami doonaa qayb ka mid ah shakhsiyaddii Cumar rc, iyo habdhaqankiisi. Waxaa kale oo innoo muuqan doonta habkii uu Nebigu scw u qaabeeyey shakhsiyaddii Cumar rc.

Waxa aynu arki doonnaa xidhiidhka Cumar iyo Qur'aanka ka dhexeeyey, iyada oo uu Cumar qayb ka ahaa sababihii ay ku soo degeen qaybo aan yarayn oo Qur'aanka ka mid ah, ilaa uu Nebigu SCW sheegay in Alle SWT xaqa dhigay Cumar carrabkiisa iyo qalbigiisa.

Taariikhdu waa kayd dhaxaleed oo ay ummadi leedahay; waa muraayad laga daawado tagtada iyo wixii cashar ku jira, lagu fahmo taaganta iyo sida loo wajaho, laguna hillaadiyo timaaddada. Suurado iyo aayado badan oo Qur'aanka ka mid ahi waxa ay ku saabsan yihiin sooyaalkii dadkii hore, iyo qisooyin ay tahay in aynu ku cibro qaadanno. Sheekooyinku saamayn ballaadhan ayaa ay ku leeyihiin wax-ka-beddelidda nolosha dadka.

Sooyaalka Cumar RC ahmiyad dheeraad ah ayaa uu innoo leeyahay, oo Nebiga SCW ayaa inna faray in aynu ku dayanno, raadkiisina aynu qaadno. Si ay taasi innoogu suuragasho, waxaa lamahuraan ah in aynu wax ka ogaanno taariikhdiisi.

Nebinimadu waa wax Alle bixiyo, laakiin Cumar waxa aan ka arkaynaa shakhsiyad heerka nebinimo u dhowaatay, Rasuulkana SCW waxaa laga soo weriyey in uu yidhi, "Haddii uu gadaashay nebi jiri lahaa, waxa uu ahaan lahaa Cumar."

Insaankan nebinimada ku dhowaaday ee la inna faray ku dayashadiisa, bal aynu sooyaalkiisi wax ka baranno.

Mahadnaq

Alle ayaa mahad oo idil iska leh.

Waxaa mahadnaq iga mudan asxaab badan oo aan ka faa'iidaystay talooyinkoodii iyo dhiirigalintoodii. Iyada oo aanan wada magacaabi karin, waxa aan jeclaan lahaa in aan si gaar ah u xuso Maxamad Cabdullaahi Cartan oo soosaaridda buuggan qayb weyn ka qaatay, iyo Maxamed Gaanni oo akhriyey qaybo badan oo buugga ka mid ah, wax badanna ka saxay. Waxaa iyaguna sixitaanka qaybo buugga ka mid ah iga kaalmeeyey Faarax Cali Yuusuf iyo Liibaan Jiirow. Boodhari Warsame, Idiris Maxamed Cali, Cabdiraxmaan Yuusuf, Cabdicasiis Guudcadde, iyo Cabduwahaab Cabduqaadir Saqa, ayaa aan dhanka af Soomaaliga meelo badan kala tashaday wax badanna ka faa'iidaystay. Waxaa kale oo mahadnaq iga mudan Macallimad Saynab Daahir oo qaybo higgaadda ah igala talisay. Dhammaan intii si toos ah iyo si dadbanba uga qaybqaadatay waxa aan leeyahay: Alle ha idin ka abaalmariyo, in badanna mahadsanidiin.

Alle ha abaalmariyo eeddaday oo igu korisay jacaylka aqoonta iyo waxbarashada, labadayda waalid, iyo macallimiintaydii ii suuragaliyey in aan buuggan qoro. Fasiraadda aayadaha waxa aan la kaashaday tafsiirkii uu duubay Sheekh Cumar Faaruuq, Alle ha u naxariisto e.

Waxaa mahadnaq gaar ah iga mudan marwadayda Ruqiya Dalmar, oo runtii dulqaad iyo taageero badan ila garab taagnayd intii aan buuggan qorayey, qaybo ka mid ahna wax ka saxday, iguna dhiirrigalisay in aan dhammeeyo. Alle ha ka abaalmariyo.

Afeef

Ujeeddada buuggani waa in uu akhristaha muuqaal guud ka siiyo sooyaalkii Cumar RC. Sidaas awgeed, ma koobayo wax kasta oo taariikhdiisi ku saabsan. Waa dedaal kooban oo aan ku damcay in aan wax ku taro maktabadda Soomaaliyeed. Waxa aanna rejaynayaa in uu dhiirrigalin noqdo, oo haldoorrada ummadda ee tirada badan wax laga qoro.

Dhacdooyinka buuggan ku qoran waxaa laga helayaa kutubka tixraaca aan ku xusay. Maadaama dhacdooyinka intooda badani ay kutubtaas oo dhan ku qoran yihiin, meelaha qaar aad isuguma hawlin in aan qodob walba tixraac gaar ah u sheego.

Dhammaan qoraallada aan soo xigtay waxa ay ku qoran yihiin af Carabi, qof aan afkaas aqoonna ma anfacayaan. Sidaas awgeed, tixraaca buugga gadaal kaga lifaaqani waa af Carabi, si qofkii danaynayaa u helo xogta kitaabka oo asalkeedi ah—maadaama higgaadda af Soomaaligu aysan wada dabooli karin xuruufta afka Carbeed. Laakiin, qoraalka dhexdiisa af Soomaali ahaan ayaa ay ugu jiraan, si akhristuhu ula socdo meesha laga soo xigtay.

Dhanka higgaadda, xuruufta af Carabiga ee aan afkeenna ku jirin, meelaha qaarkood waxa aan u adeegsaday higgaadda Laatiinka, sida magaca حارثة oo aan u qoray Xaari*th*ah. Maxaa yeelay, ث kuma jirto higgaaddeenna.

Waxa aan adeegsaday soogaabisyadan: SWT (*subxaanahuu wa tacaalaa*), SCW (*sallallaahu calayhi wasallam*), CS (*calayhis/calayhas salaam*), RC (*radiyallaahu canhu/canhaa*). Haddii ay jiraan labo qodob oo isu dhow, isku meelna aan ka

soo xigtay, tixraaca qodobka labaad waxa aan adeegsaday: HALKUUN, oo loo soo gaabiyey '*halkaa uun ka eeg*'. Waxa ay u dhigantaa meesha af Ingiriisigu adeegsado 'Ibid', ama نفس المصدر oo qoraallada af Carabiga loo adeegsado.

Wixii aan saxay, Alle SWT ayaa mahad ku leh. Wixii aan ku gefay ama ka ilduufayna, waxa aan rejaynayaa in dadka aqoonta u leh ay iga sixi doonaan, haddii Alle idmo. Haddaba, wixii sixitaan ah, talo iyo tusaale, ama guud ahaan buugga la xidhiidha, waxaa la iigu soo gudbin karaa cinwaannadan:

Facebook.com/muxammad.yuusuf

Twitter: @MuxammadYuusuf.

CUTUBKA 1

Dajnaan

"Fiqi tolkii kama Janno tago."

—Maahmaah Soomaaliyeed

"Haddii aad i arki lahayd aniga oo halkan la jooga geelii al-Khaddaab! Waxa uu ahaa qof kakan oo qallafsan. Marna geela ayaa aan dhowri jirey marna xaabaan guran jirey. Maantana waa taas dadku igu hareeraysan yihiin, oo qof iga sarreeyaa uusan jirin."[1]

Cumar RC ayaa hadalkaas laga soo weriyey mar uu marayey meesha la yidhaahdo Dajnaan, isaga oo ka soo laabtay Makah. Waxa uu soo xusuustay yaraantiisii iyo dhibtii uu soo maray markii uu dhulkaas ku raaci jirey geelii aabbihii. Waxa uu isbarbardhigayaa isaga oo yar oo halkaa keligii ku ah, iyo markan oo uu madax u yahay dawladdii adduunka ugu awoodda badnayd, dad badanina la socdaan oo ay isaga ka amar qaadanayaan. Dajnaan waxa ay Makah u jirtaa 54 kiiloomitir, waxa ayna ku taallaa jidka u dhexeeya Makah iyo Madiinah. Marka la eego dadka kala duwan ee

1 Diraasah Naqdiyyah, 118.

soo weriyey sheekadan iyo siyaabaha kala duwan ee ay u soo gudbiyeen, waxaa laga dareemayaa in uu Cumar ku soo celceliyey oo ay dad kala duwani maqleen, taas oo ay keeni karto in mar kasta oo uu meeshan soo maro uu yaraantiisii soo xusuusan jirey dadka la socdana uga sheekayn jirey.

Tilmaantan Cumar ka bixiyey aabbihii, al-Khaddaab, waxa ay ka mid tahay waxyaalaha aadka u kooban ee aynu ka ognahay aabbihii. Sidaas oo kale, wax badan oo intan dhaafsiisan kama ogin Cumar yaraantiisi. Isla sidaas ayaa aynaan hooyadiina war badan uga hayn. Waxaa jirta werin sheegaysa in hooyadii la odhan jirey Xantamah bint Hishaam, taas oo ka dhigaysa in ay walaalo ahaayeen Abuu Jahal—Camr ibnu Hishaam. Laakiin sida culamo badani xoojiyeen in ay sax tahay waa in magaceedu ahaa Xantamah bint Haashim, oo ahayd Abuu Jahal ina-adeertiis, ayna kala dhaleen Haashim ibnu Muqiirah iyo Hishaam ibnu Muqiirah. Cumar awoowgii, Haashim, waxaa lagu naanaysi jirey Labo Waranle. Haddaba ma aha Abuu Jahal walaashiis e, waa ina-adeertiis, sida uu xoojinayo Ibnu Cabdilbarr[2]. Laba gooraaleba, Abuu Jahal waxa uu Cumar u ahaa abti.

Xog yaraanta innaga haysata Cumar reerkiisi, iyo xitaa yaraantiisii, waxa ay muujinaysaa heerka Islaamku gaadhsiiyey Cumar. Cabbaas Maxmuud al-Caqaad buuggiisa *Cabqariyatu Cumar*[3], waxa uu bilowga horeba ku soo gudbinayaa su'aal ay habboon tahay in la is weydiiyo. Qoraagu waxa uu leeyahay: diinta Nebi Muxammad scw la yimid ee wanaaggii iyo weynaantii Carabta ku duugnayd bannaanka soo dhigtay, haddii aysan jiri lahayn, halkee ayaa

2 Al-Istiicaab fii Macrifatil Asxaab, 3/1144; 2/458, Diraasah Naqdiyah, 1/74.
3 Cabqariyatu Cumar, 7-8.

aynu ku maqli lahayn magaca Cumar ibn al-Khaddaab? Sooyaalka caalamkase halkee ayaa uu kaga jiri lahaa?

Maanta magaca Cumar waxa uu xidhiidh toos ah la leeyahay dhisiddii dawladdii Islaamka, iyo burburkii labadii dawladood ee markaa adduunka ugu awoodda badnaa: Ruum iyo Faaris. Qoraaga oo inna dareensiinaya heerkii Cumar gaadhi karayey Islaamka la'aantiisa waxa uu sheegayaa in uu awood u lahaa hogaaminta jilibkii uu ka dhashay ee reer Banuu Cadiy, amaba uu meel sare ka gaadhi karayey talada Quraysheed, laakiin ay u badan tahay in magiciisu uusan intaas dhaafeen, uuna mari lahaa jidkii madax beeleedyo badan oo ka horreeyey oo magacoodii baaba'ay. Taas waxa uu sabab uga dhigay in qofku bii'adiisa ka muujiyo karti, hawlkarnimo, dadaal iyo garasho u qalma heerkeeda baahiyeed, kuwaas oo inta badan aqoonsi iyo qaddarin uga soo jiida degaanka ku hareeraysan, laakiin aan inta badan gaadhsiisnayn heer in si ballaadhan adduunka looga aqoonsado.

Su'aalahaas iyo doodda la socota ee uu qoraagu soo bandhigay, waxaa ka markhtaati kacay Cumar RC oo waxa uu yidhi:

نحن قوم أعزنا الله بالإسلام فمهما ابتغينا العزة من دونه أذلنا الله

"Waxa aanu nahay dad Alle ku sharfay Islaamka, markii aanu meel aan isaga ahayn sharaf ka raadinnana, Alle ayaa na dulleynaya."

Waxa ay u badan tahay in qoyska al-Khaddaab ay ahaayeen danyar, oo Cumar waxa uu sheegay in uu

habaryarihii xoolaha u raaci jirey ka dibna ay xantoobo sabiib ah siin jireen. Xaaladda dhaqaale ee Cumar ku soo koray waxa aan ka dheehan karnaa hadal laga soo tebiyey Camr ibnul Caas RC, oo inta Cumar RC uu guddoomiye uga dhigay Masar, loo soo sheegay in uu haysto xoolo badan oo geel, lo', fardo iyo adhiba leh. Cumar ayaa warqad u diray uu leeyahay xoolo intaas le'eg kuguma ogayn e, ii soo sheeg meesha aad xoolahaas ka keentay. Camr waxa uu soo diray warqad jawaab ah oo uusan Cumar u bogin. Ka dib ayaa uu Cumar diray Muxammad ibnu Maslamah RC, oo u ahaa kormeere guud. Muxammad markii uu Camr gaadhey ayaa uu codsaday hantidii Camr haystay badhkeed, ilaa labadii kabood uu kab qaatay! Camr xanaaq baa uu cirka isku shareeray. Qoraaga *Ciqd al-Fariid* [4] waxa uu qoray in Camr ibnul Caas yidhi:

"Alle ha xumeeyo samaan uu Camr ibnul Caas shaqaale u yahay Cumar ibnul Khaddaab! Wallaahi, waxa aan garanayaa al-Khaddaab oo xidhmo xaabo ah madaxa ku sida, wiilkiisuna in la mid ah sido, oo aan midkoodna xidhnayn wax ka badan gunti yar oo aan gaadhayn canqawgiisa. Caas ibnu Waa'ilna ma uusan ku qanacsanayn in uu xidho xariir lagu qurxiyey dahab!"

Camr waxa uu la yaabay sida xaal adduun isu beddelay, oo isaga oo aabbihii aad u hanti badnaa, uu maanta hoos fadhiyo talada Cumarkii faqiirnimadaa ku soo koray.

Noloshaas adag ee uu Cumar yaraantii soo maray, waxa ay saamayn weyn ku yeelatay shakhsiyaddiisi. Mana aha wax fog in la yidhaahdo waxa ay sabab u ahayd ad-adayggii uu caanka ku ahaa—ilaa markii uu Abuu Bakar RC talada u

4 Al-Ciqd al-Fariid, 1/45-46.

dhiibay, saxaabada mid ka mid ahi uu ku dacwooday,

ما أنت قائل لربك إذا سألك عن استخلافك عمر علينا و قد ترى غلظته؟

"[Abuu Bakaroow] Rabbigaa maxaad ku dhahaysaa haddii uu ku weydiiyo talada aad noogu dhiibtay Cumar, adiga oo ogsoon qallafsanaantiisa?"[5]

Xadiis uu werinayo Imaam Bukhaari[6] ayaa sheegaya in maalin maalmaha ka mid ah, xilligii Madiinah, uu u yimid Nebiga scw oo ay la joogaan dumar codkoodu dheeraa. Markii ay Cumar codkiisa maqleen ayaa ay kala yaaceen, taas oo Nebiga scw ka qoslisay. Cumar ayaa markii uu arkay weydiiyey sababta uu u qoslayo, markii uu Nebigu scw u sheegayna, Cumar inta uu dumarkii ku jeestay ayaa uu canaantay, "Waxyohow nafahooda cadowga u ahi, ma aniga ayaa aad iga haybaysanaysaan idinka oo aan ka haybaysanayn Rasuulka Alle scw?!" Waxa ay ugu jawaabeen, "Haa oo adiga ayaa ka kakan oo ka qallafsan!" Markaas ayaa uu Nebigu scw yidhi marka shaydaanku uu Cumar jidka kaga soo hor baxo, waxa uu qaadaa jid kale!

Halkaas ayaa uu Cumar rc nolosha ka bilaabay, waxa uuna noloshiisi adduunkan dhammaystay isaga oo ah ninka ugu awoodda badan adduunka, ka dib markii uu tirtiray imbaraadooriyadihii waaweynaa ee adduunka tii ugu dambaysay ee Faaris. Waxa uu adduunkan ku soo biiray isaga oo faqiir ah oo aysan cid aqoon, waxa uuse ka

5 Taariikhul Khulafaa, 169.
6 Saxiixul Bukhaari 3480

tagey isaga oo magiciisu gaadhay daafaha dunida, dhanka aakhirana wata bishaaradii Jannada.

Xaaladdiisa dhaqaale waxa ay ahaataba, al-Khaddaab sharaf ayaa uu ku dhex lahaa tolkii, reer Banuu Cadiy. Tan waxaa innoo muujinaysa dhacdo dhex martay Sacad ibnu Abii Waqaas RC iyo Salmaan al-Faarisii RC, xilligii uu Cumar khaliifka ahaa. Salmaan waxa uu ahaa addoon Faarisi ah oo soo muslimay, xoroobeyna xilligii Nebiga SCW. Sacad oo reer magac leh ka dhashay, ayna isku dhaceen Salmaan, ayaa damcay in uu ugu faano tolkii, markaas ayaa uu u abtirsaday, ka dibna yidhi, Salmaanoow abtirso. Salmaan isma dhibin e, waxa uu ku abtirsaday Islaamka oo waxa uu yidhi: Alle ayaa iigu nimceeyey Islaamka oo waxa aan ahay Ina Islaam. Sheekadii ayaa gaadhay Cumar, markaas ayaa uu Sacad ku dirqiyey in uu mar labaad abtirsado.

Cumar isaga oo raba in uu Sacad dareensiiyo heerka abtirsigiisu joogo ayaa uu sheegay in aabbihii, al-Khaddaab, sharaf weyn ku dhex lahaa Quraysh, laakiin Cumar uu yahay Ina Islaam oo ay sidaa isaga iyo Salmaan walaalo ku noqdeen. Cumar waxa uu yidhi, "Miyaadan ogeyn in nin ku abtirsaday sagaal aabbe oo jaahiliyadii ah uu naarta gudaheeda kii tobnaad ku noqday. Halka mid kale Islaamka ugu abtirsaday nin kale isaga oo ka tageya intii ka korraysay dabadeedna uu Jannada la galay?"[7]

Reeraha Quraysh ka koobnayd hawshu waa ay u kala qaybsanayd, reer Banuu Cadina waxa ay saami u lahaayeen ergada, oo ciddii ay Quraysh dan ka gasho iyaga ayaa loo

7 Siyar Aclaam an-Nubalaa', 1/505.

diri jirey. Haddii ay heshiis galayaan, iyo haddii cidi ku xadgudubtaba iyaga ayaa loo diri jirey. Waxa aan dhihi karnaa waxa ay hayeen wasaaraddii arrimaha dibadda ee Quraysh. Sida la sheegay, Cumar waxa uu ka mid ahaa dadkii jagadan wax ka qabtay, oo ay Qurayshi ergo ahaan u dirsan jirtey marka ay dhexdeeda wax ka dhacaan ama iyaga iyo cid kale wax dhex maraan. Cabdisalaam aal Ciisaa, oo dabagal ku sameeyey wararka taariikheed ee Cumar ku saabsan[8], markii uu ka hadlayey ergeynimadii Cumar waxa uu yidhi, "In kasta oo warkani uu ku yimid jidad daciif ah, haddana in Qurayshi jagadan weyn ee muhiimka ah ay Cumar u dhiibtay waa wax suuragal ah, marka loo eego darajadii uu ku lahaa Quraysh dhexdeeda, iyo weliba heerkii ay aabbihii iyo awoowgii Quraysh dhexdeeda ka joogeen. Awoowgii, Nufayl ibnu Cabdilcusaa, waxa uu ka mid ahaa odayaashii Qurayshi garsoorka ula tegi jirtey[9]. Cumar qudhiisu waxa uu ahaa nin aad u caqli badan oo aragti suubban, iskuna darsaday tilmaamo abuureed oo awood muujinaya, iyo kuwo dhaqameed oo la mahadiyo."[10] Laakiin waxaa xusid mudan, Qurayshi ma dagaal badnayn, Carabta dhexdeedana waxa ay ku lahayd sharaf iyo qaddarin badan, oo waa la iska dhowri jirey colaaddeeda.[11]

Sidaa uu sheegay qoraagaasi, Cumar waxa uu lahaa abuur aad looga haybaysto, qaar badan oo dadka ka mid ahna baqdin galisa. Sida aan arki doonno, aad ayaa uu u dheeraa una awood badnaa. Intaas waxa uu ku darsaday

8 Diraasah Naqdiyah, 1/123.
9 Diraasah Naqdiyah, 1/64.
10 Diraasah Naqdiyah, 1/123-124.
11 Daariq Suweydaan, taxane uu ka duubay taariikhdii Cumar RC, cajaladda koowaad.

caqli iyo garaad aad u sarreeya, aftahannimo, iyo aqoon sare oo uu u lahaa dadkiisi, degaankiisi, iyo duruufihii ku hareeraysnaa. Taas ayaana ka kaalmaynaysay hawshaas ergonimo, oo safiirnimadu waxa ay u baahnayd in qofku aqoon xeel dheer u lahaado qabiilooyinkii Carbeed ee ku hareeraysnaa, Qurayshna ay xidhiidhka la lahayd[12].

Ninka safiirka ahi isaga ayaa u hadla reerkiisa, waxa uuna masuuliyaddiisa koowaad u arkaa difaacidda danahooda, iyo in uu is-hortaago wax kasta oo khatar u keeni kara jiritaankooda. Al-Khaddaab ma oggolayn wax khatar galiya jiritaanka Quraysh iyo wixii ay aaminsanaayeen toona, waxa uuna aad iyo aad ugu dadaali jirey ilaalinta diintoodii shirkiga ku dhisnayd.

Reerka uu Cumar ka dhashay waxa ay ahaayeen reer go'aan adag, mabda'na leh, oo waxa ay aaminsan yihiin aad ugu adkaysta, awooddooda oo aan kala maqnaynna isugu geeya ilaalinta iyo xoojinta mabda'aas. Sida aynu arki doonno, qoyskani ma aysan ahayn mid dabaysha dhacaysaa marba dhinac u tuurto, mabda' ay ku qancaan oo iyaga ka soo go'ay oo keli ah ayaa beddeli karayey. Inta aynu ogsoon nahay, iyaga oo ku sugan caqiiqadii shirkiga ku salaysnayd ee Qurayshi markaas haysatay, ayaa ay caqiidadaasi u cuntami weyday Sayd ibnu Camr ibnu Nufayl.

Sayd ibnu Camr iyo al-Khaddaab marna waxa ay ahaayeen walaalo, marna al-Khaddaab baa Sayd adeer u ahaa, oo Camr ibnu Nufayl iyo al-Khaddaab ibnu Nufayl waxa ay ahaayeen walaalo kala hooyo ah. Aabbahood Nufayl markii uu geeriyooday, ayaa al-Khaddaab hooyadii waxaa dumaaley wiilkii ay aayada u ahayd ee Camr, waxa

12 Cumar ibnul Khaddaab, Xayaatuh, Cilmuhu, Adabuh, 22.

ayna u dhashay Sayd. In wiilku xaaska aabbihii ka dhintay guursadaa waxa ay ahayd dhaqan ay lahaayeen Carabtii jaahiliyadu, sida Qur'aanka ku xusan.[13]

Markii shirkigii Qurayshi ku dhaqmaysay uu ka hor yimid fidradiisii, Sayd waxa uu ku koobnaaday diintii Ibraahiim cs, sidaana waxa uu ku noqday *Xaniif*. Qurayshi waxa ay ka soo farcantay Ismaaciil cs, oo diintii Ibraahim cs kuma cusbayn, maadaama ay qaybo ka mid ah ku dhaqmayeen, laakiin waxaa u dheeraa shirkigii ay gadaal kaga dareen. Sida la sheegay, Sayd inta uu Kacbada ag fadhiisto ayaa uu odhan jirey: Quraysheey wax diintii Ibraahiim sideedii u raacsan keligay baa idin ku jira. Meel adag ayaa uu ka istaagay Quraysh iyo wixii ay qasanayeen—sida ilaah inta timir laga sameeyo, la caabudo, oo la baryo, haddana la cuno marka la gaajoodo!

Imaam Bukhaari waxa uu werinayaa in Islaamka ka hor, Nebiga scw iyo Sayd oo kulmay, Nebiga scw loo keenay hilib, dabadeedna uu Sayd u sii gudbiyey. Sayd hilibkii waa uu diiday isaga oo leh, "Ma cuno waxa ay sanammadooda ku gawraceen, mana cuno wax aan magaca Alle lagu xusin." Sayd intaa kuma joogi jirin e, aad ayaa uu Quraysh ugu dhaliili jirey xoolaha ay asnaamta u qalayaan. Waxa uu odhan jirey, "Neefka Alle ayaa abuuray, cirka biyo uga soo shubay, dhulkana baad uga soo saaray, dabadeedna magicii Alle mid aan ahayn ayaa aad ku gawracaysaan!" Waa ay isu qaban weyday in Allihii intaas oo dhan sameeyey ay ka dul boodaan, oo sanam ay gacantooda ku samaysteen ay xaqii Alle siiyaan.

Intii Sayd uu Quraysh iyo shirkigeedii la dirirayey,

13 An-Nisaa': 22

isagana waxaa dhib ku hayey al-Khaddaab, oo aan ka hadhin ilaa uu Makah duleedka uga saaray. Haddii uu dhuumasho magaalada ku soo galana, waa ay dhibi jireen oo waxa ay ku diri jireen waxmagaratada ilaa ay magaalada ka bixiyaan. Waxa ay sidan u yeelayeen cabsi ay ka qabeen in uu Sayd diintooda khalkhal ka galiyo, oo ay dad ka raacaan.

Sayd iyo Quraysh markii ay isku wareereen, ayaa uu u baxay Shaam[14], isaga oo raadinaya diin dhaanta midda Quraysheed oo uu raaco. Yahuud iyo Kiristaan wixii ay haysteen midina uma cuntamin. Waxaa la sheegaa in ay israaceen Waraqah ibnu Nawfal, oo isagu qaatay diinta Kiristaanka.

Markii uu Shaam ka soo laabtay, isaga oo jidka ku jira ayaa la dilay, sida uu sheegay taariikhyahanka Ibnu Isxaaq. Waxa uu dhintay inta aan waxyigu soo degin oo aysan Nebinimadu bilaaban. Mar Nebiga SCW laga waraystay xaaladda uu ku sugan yahay, waxa uu sheegay in Maalinta Qiyaame la soo saari doono isaga oo keligii ummad u taagan. Dhashii Sayd waxaa ka mid ahaa Saciid ibnu Sayd RC oo warkiisu innoo soo socdo, qabeyna Cumar walaashiis, Faadumo bintil Khaddaab RC.

Cumar RC waxaa la dhashay walaal ay kala hooyo ahaayeen, Sayd ibnul Khaddaab RC, oo ka weynaa. Sayd waa uu ka hor islaamay Cumar, dagaalkii Bederna waa uu ka qaybgalay. Cumar aad ayaa uu u jeclaa walaalkii, oo markii uu Sayd ku shahiiday dagaalkii al-Yamaamah ee lala galay Musaylamah al-Kaddaab (Beenaale) sannadkii 12'd

14 Waxaa la isku odhan jirey dhulka immika u kala qaybsan: Waqooyiga Sucuudiga, Urdun, Falasdiin, Suuriya iyo Lubnaan.

ee Hijrada—isaga oo sida calankii Muhaajiriinta—Cumar aad ayaa uu uga murugooday, aadna waa uu u tebi jirey markii dambe. Waxa uu odhan jirey, "Marka ay dabayl bari soo dhacdaba waxa aan dareemaa caraftii Sayd."Wiilashiisa labo ka mid ahna waxa uu u bixiyey Sayd; Sayd Weyne iyo Sayd Yare. Waxaana suuragal ah in uu ugu magac daray walaalkii.

Waxaa muuqata in Cumar lahaa walaal kale oo aan soo islaamin. Imaam Muslim xadiis uu werinayo[15] ayaa sheegaya in Cumar uu arkay maro qurux badan oo lagu ag iibinayey irridda masjidka, markaas ayaa uu ku yidhi Nebiga scw: waa ay fiicnaan lahayd in aad iibsatid, si aad u xidhatid maalinta Jimcaha iyo marka wafdiyadu kuu yimaaddaan. Nebigu scw waxa uu ugu jawaabey, "Tan waxaa xidha dadka aan aakhiro waxba ku lahayn (dadka anshaxa xun)". Dhacdadan ka dib ayaa Nebiga scw waxaa loo keenay maradii kuwo la mid ah, markaas ayaa uu Cumar mid ka siiyey. Isaga oo hadalkii hore ee Nebiga scw xusuusan ayaa uu yidhi: Rasuulkii Alloow, sow adigii maradii maalintii sidii ka yidhi maxaa aad tan ii siisay? Nebigu scw waxa uu ugu jawaabey, "Kuuma siin in aad xidhatid". Ka dibna Cumar waxa uu u diray walaalkii oo joogey Makah ahaana Mushrik.

Dhanka dumarka waxaa la dhashay Safiya iyo Faadumo. Safiya bintil Khaddaab waxaa qabey Qudaamah ibnu Madcuun, oo ka mid ahaa saxaabadii ka qaybgalay hijradii labaad ee Xabasha. Laakiin waxaa muuqata in uu hore uga soo noqday, maxaa yeelay waxa uu ka qaybgalay dagaalkii Beder. Cumarna waxa uu jaahiliyadii guursadey Saynab

15 Saxiix Muslim 2068.

bint Madcuun oo ahayd Qudaamah walaashiis, iyadaana dhashay Cabdullaahi ibnu Cumar iyo Ummul Mu'miniin Xafsah bint Cumar. Khilaafadii Cumar ayaa uu Qudaamah guddoomiye ka noqday Baxrayn. Aayadda 93'd ee Suuradda al-Maa'idah inta uu khalad u fahmay ayaa uu khamri cabbay. Cumar markii uu warkii maqlay waxa uu ku fuliyey xadkii (ganaaxii) khamriga, oo waa la shaabuugeeyey, jagadiina waa uu ka casilay. Faadumo bintil Khaddaab waa ay ka hor islaamtay Cumar, sida aynu arki doonno marka aynu ka hadalno islaamiddii Cumar.

Cumar waxa uu ahaa nin laf weyn oo dherer badan, marka uu dadka la socdana la moodo in uu faras saaran yahay. Waxaa la sheegaa in uu degdeg u socon jirey, aadna u cod dheeraa, oo haddii uu hadlo cid waliba maqli jirtey. Waxa ay u badan tahay in uu ahaa maarriin, laakiin waxaa jira warar sheegaya in uu ahaa caddaan casuusi ay ku jirto. Culamada qaar ayaa sheegay in uu caddaan ahaa laakiin midabkiisii isbeddelay, oo uu maarriin noqday ka dib abaartii *Caam ar-Ramaadah* (17–18H). Waxa aan la isku haysan in Sayd ibnul Khaddaab ahaa maarriin aadna u dheeraa. Markaa haddii ay wadaageen dhererkii ma foga in ay midabkana wadaageen. Laakiin waa ay jiraan walaalo badan oo kala midab ah, iyada oo ay weliba sii dheer tahay in Cumar iyo Sayd ay kala hooyo ahaayeen. Sidaas awgeed, waa ay adag tahay in aynu si cad u qeexno midabkiisi.

Cumar aad ayaa uu u xoog badnaa, Islaamka ka horna waxaa la sheegay in uu Suuqii qadiimka ahaa ee Cukaad

ka legdami jirey[16]. Waxa uu lahaa gadhweyn oo uu xinnayn jirey, iyo shaarubo dheer oo inta uu miiqo uu maroojin jirey marka uu fekerayo. Sida ku dhacda rag badan oo gadhweyni lagu galladaystay, Cumar waxa uu lahaa bidaar. Waxaa la tilmaamaa in uu ahaa labamidigle isku si u adeegsada labadiisa gacmood.

Sida uu Cumar sheegay, waxa uu dhashay saddex iyo toban sano markii ay ka soo wareegtay *Caamul Fiil*, oo ahaa sannadkii uu dhashay Nebigu SCW. *Caamul Fiil* waxaa lagu qiyaasaa 570 Miilaadi. Markaa waxa uu dhashay qiyaastii 583 Miilaadi. Waxa uu ku dhashay goobtii reerkoodu ka degganaa Makah, oo hadda loo yaqaanno *Jabal Cumar*. Kacbada ayaa ay wax yar u jirtaa, waana dhanka galbeedka, oo hadda waxaa ku yaalla albeerkooyin (huteello) iyo suuq weyn. Shirkadda maalgalisay mashruucaas ayaa magicii qaadatay oo waxaa la yidhaahdaa *Shirkadda Jabal Cumar ee Horumarinta*.

Camr ibnul Caas oo shan sano ka weynaa Cumar, ayaa laga soo weriyey in uu yidhi, "Waan xusuustaa habeenkii uu dhashay Cumar ibnul Khaddaab. Aniga oo Quraysh habeen la jooga ayaa waxaa noo timid addoon uu lahaa al-Khaddaab oo dab raadinaysa. Markii lagu yidhi maxaa aad dabka ku samaynaysaa, ayaa ay tidhi, 'Waxa aan ka imid Xantamah oo foolanaysa.' Markii aanu waaberisannay ayaa la yidhi: xalay waxaa al-Khaddaab loo dhalay wiil."

Cumar waxa uu guursadey toddobo haween ah, oo ay qaar kala tageen, qaarna uu ka dhintay. Waxa uu dhalay saddex iyo toban ilmood: sagaal wiil iyo afar gabdhood. Cumar RC

16 Diraasah Naqdiyah, 1/98; Dabaqaat Ibnu Sacad, 1/235.

waxa uu odhan jirey danta aan guurka ka leeyahay waa ilmo iyo tafiir iga farcanta e, dumar jacayl igama aha. Waxa uu sheegay in uu iskhasbi jirey isaga oo Alle ka rejaynaya in uu siiyo ilmo Alle xusa[17]. Aad ayaa uu ragga ugu boorrin jirey in ay guursadaan oo aysan ka welwelin xoolo la'aan, isaga oo daliishanayaa aayadda:

إِن يَكُونُوا فُقَرَاءَ يُغْنِهِمُ اللَّهُ مِن فَضْلِهِۦ

"Haddii ay danyar yihiin Alle ayaa ku hodminaya fadligiisa."

an-Nuur: 32

Waxaana laga soo weriyaa in uu odhan jirey: guurku waaba ballanqaad Alle, oo hodantinimo lagu gaadhayo!

Waxaa jirta sheeko caan baxday oo sheegta in uu Cumar nolosha ku aasay gabadh uu dhalay. Sheekadu waxa ay u timid sidatan: Cumar oo la fadhiya qaar saxaabada ka mid ah, ayaa yara qoslay dabadeedna ooyey. Markii la weydiiyey sababtana waxa uu ku jawaabey, "Jaahiliyadii inta aanu timirta cajwada sanam ka samaynno ayaa aanu caabudi jirney, dabadeedna aanu cuni jirney—taas ayaa aan ku qoslay. Waxa aanse u ooyey, gabadh aan dhalay baa aan doonay in aan nolosha ku aaso, markaas ayaa aan qaaday oo aan god u qoday, iyada oo ciiddii ka daadinaysa gadhkayga,

17 Cumar ibnul Khaddaab, shakhsiyatuhu wa casruhu, 14-15.

ayaa aan noloshii ku aasay."[18]

Sheekadani kuma qorna dhammaan kutubta taalla ee ku saabsan taariikhda iyo wixii la xidhiidha[19]. Waxaana soo tebiyey qoraaga Cabbaas al-Caqaad, isaga oo sheegaya in aan waxba ka jirin oo aysan caqligal ahayn. Waxaa isweydiin mudan, haddii uu Cumar aasi jirey gabdhihiisa, maxaa uu u daayey Xafsah oo curaddiisa ahayd, dhalatayna shan sano ka hor intii aan waxyigu soo degin oo aan Nebiga scw la soo bixin—ilaa toban sano ka hor intii aanu islaamin?

Waxaa kale oo iyaduna cad in aysan ahayn dhaqan reerkoodu lahaa oo labadii gabdhood ee la dhashayba, Safiya iyo Faadumo, waa ay noolaayeen. Xaqiiqdii waa wax aan ka suuroobi karin qof shakhsiyadda Cumar oo kale leh. Ha ad-adkaado, laakiin naxariis darrada intaas le'egi waa mid ka hor imaanaysa sooyaalkiisii lagu yaqaannay.

Nucmaan ibnu Bashiir RC ayaa waxa uu yidhi[20]: waxa aan maqlay Cumar ibnul Khaddaab oo inta wax laga weydiiyey "وَإِذَا الْمَوْءُودَةُ سُئِلَتْ" sheegay in nin la odhan jirey Qays ibnu Caasim uu u yimid Rasuulkii Alle scw. Qays waxa uu sheegay in uu aasay siddeed gabdhood oo uu dhalay. Markaas ayaa uu Nebigu scw ku yidhi, "Mid kasta hal addoon ka xoree." Qays waxa uu yidhi geel baan leeyahay. Markaas ayaa uu Nebigu scw ku yidhi, "Mid kasta qaalin ka bixi." Haddii uu sidaa sheekada hore sheegtay uga warramay gabadhiisii uu nolosha ku aasay, waxa ay u badan tahay in uu tilmaami lahaa ee uusan ku gaabsadeen werinta sheekada Qays oo keli ah.

18 Cabqariyatu Cumar, 183.
19 Diraasah Naqdiyah, 1/111-112.
20 Tafsiirka Ibnu Kathiir, suuradda at-Takwiir: 8.

Jaahiliyadii

Cumar waxa uu ahaa nin aad u caqli iyo karti badan oo hawlkar ah. Waxa uu ahaa geesi aan gabbanin oo Alle awood jidh iyo aftahannimo isugu daray. Geesinimada meel fog kama uusan keenin e, waa tilmaan ay caan ku ahaayeen reerka uu ka dhashay[21].

Qusayi ibnu Kilaab oo ahaa awoowgii afraad ee Nebiga scw ayaa mideeyey Quraysh oo inta uu beel Khusaacah la odhan jirey oo Xaramka maamulaysay kala wareegay, Quraysh halkaas dejiyey. Dhulkii Makah ayaa uu u kala qaybiyey oo uu reerba meel dejiyey. Wixii jago iyo sharaf Makah yaallayna isagaa la wareegay (gacan-ku-haynta kacbada furaheeda; *xijaabah/ sadaanah*, calanka dagaalka; *liwaa'*, waraabinta xujaajta; *siqaayah*, martigalinta xujaajta; *rifaadah*). Waxaa kale oo uu aas-aasay *Daar an-Nadwah* oo ahayd golaha ay Qurayshi ku kulanto, kuna tashato, go'aankeeduna ka soo bixi jirey[22]. Markii uu Qusayi duqoobay geerina ku dhowaaday, ayaa uu jagooyinkii uu hayey ku wareejiyey curadkiisii, Cabdiddaar ibnu Qusayi.

Muddo dheer markii la joogey ayaa reer Cabdimanaaf ibnu Qusayi, oo meel sare gaadhay, ay damaaciyeen jagooyinkii iyo sharaftii reer Cabdiddaar ibnu Qusayi. Waxa ay sheegteen in ay iyagu u xaq leeyihiin jagooyinka reer Cabdiddaar hayaan[23]. Reer Cabdimanaaf waxa ay isbahaysi iyo gaashaan buureysi la galeen beelo kale si ay uga helaan taageero. Intii taageertay mooyaane, intii kale ayaa ka dhiidhiyey arrintaas waxa ayna la safteen reer Cabdiddaar.

21 Diraasah Naqdiyyah, 1/63.
22 Ibnu Hishaam, 1/123–.
23 Ansaab al-Ashraaf, 1/62

Halkaas ayaa Quraysh iyo qolyihii ku hareeraysnaa, sidii ay u badnaayeen, ay labadii reer ee walaalaha ahaa la kala safteen. Qoloba waxa ay isku ballansatay in la istaageero oo aan la kala hadhin ilaa dhammaadka.

Dhaqanka Carabtu waxa uu ahaa in markan oo kale ay gacanta galiyaan milix iyo dambas si ay ballanta u xoojiyaan[24]. Reer Cabdimanaaf waxa ay soo qaadeen weel udug ku jiro waxa ayna dhigeen Kacbada agteeda si ay isbahaysigoodi u adkeeyaan. Weelkii baa ay gacanta darsadeen ka dibna uduggii ayaa ay Kacbada ku masaxeen. Halkaas ayaana ay ku qaateen magaca *al-Mudayyabiin*—kuwii la udgiyey.

Reer Cabdiddaar iyo intii la socotayna waa ay is ursursadeen, waxaana loo bixiyey *al-Axlaaf*—gaashaanbuur. Reer Banuu Cadiy oo la safnaa reer Cabdiddaar, ayaa iyaga oo liidaya qolyihii cadarka soo qaatay, inta ay yidhaahdeen udugga dumarka ayaa iska leh, waxa ay soo qaateen weel dhiig ku jiro, dabadeedna ay gacmaha darsadeen oo ay leefeen dhiiggii![25]. Labadii reer markii dambe waa ay heshiiyeen, reer Cabdimanaafna waxaa la siiyey waraabinta (*siqaayah*) iyo martigalinta xujaajta (*rifaadah*), oo xilligii Nebiga scw waxaa masuul ka ahaa Cabbaas ibnu Cabdilmuddalib—Nebiga scw adeerkii. Intii kalena waxaa sii haystay reer Cabdiddaar, oo ilaa maanta iyaga ayaa furaha Kacbada haya.

Beeshaas ayaa uu Cumar ka dhashay. Geesinimadii iyo go'aan adayggii uu aadka ugu caan baxay waxa ay ahaayeen wax uu tolkii la wadaagey. Waxa aynuna soo aragnay Sayd ibnu Camr iyo wixii uu Quraysh la maray.

24 Ansaab al-Ashraaf, 1/63.
25 Halkuun.

Cumar waxa uu aad u jeclaa, aadna u cabbi jirey khamrada[26]. Waana mid ay Carabtii xilligaa joogtay aad caan ugu ahaayeen, gabayadoodiina laga dheehan karo. Markii uu islaamayna waxa uu ku ducayn jirey in Alle u caddeeyo xukunka khamriga, ilaa ay markii dambe ka soo degeen aayadaha al-Maa'idah (90–91) ee khamriga xaaraantimeeyey.

Culamada tafsiirka qaar ayaa qaba in Cumar uu sabab u ahaa soo degidda labadan aayadood[27]. Ibnu Xajar markii uu sharxayey xadiis ku saabsan dhacdadan waxa uu xoojiyey in ay ahayd sannadkii siddeedaad hijrada ka dib, markii la furtay Makah. Waa labo sano ka hor geeridii Nebiga SCW, ama 21 sano ka dib markii uu soo dagey waxyigii ugu horreeyey. Waa tii Caa'ishah RC ay lahayd: Qur'aankii ugu horreeyey ee soo dagey waxa uu ahaa suurado gaagaaban oo ka hadlayey Jannada iyo Naarta, ilaa ay dadkii ka qaateen Islaamka, ka dibna waxaa soo dagey aayadihii xalaasha iyo xaaraanta. Haddiise waxa ugu horreeya ee soo degaa uu ahaan lahaa: 'ha cabbina khamriga,' waxa ay odhan lahaayeen, 'weligayo ka tegi mayno khamriga.' Haddii ay soo degi lahayd, 'ha sinaysanina,' waxa ay odhan lahaayeen, 'weligayo ka tegi mayno sinada'."[28]

Marxalado kala duwan ayaa ay soo martay xaaraantimaynta khamrigu. Nebigu SCW saxaabada iimaankooda ayaa uu dhisay waxa uuna gaadhsiiyey heer markii ay soo degeen aayadahaas oo ay ugu dambayso (فَهَلْ أَنتُم مُّنتَهُونَ), "Ma ka reebtoomaysaan?", uu Cumar yidhi, "Waanu reebtoonnay.

26 Dairaasah Naqdiyyah, 1/107-108.
27 Tafsiirka Ibnu Kathiir, al-Maa'idah: 90-91.
28 Saxiixul Bukhaari 4707.

waanu reebtoonnay." Khamrigii la daadiyeyna waxa uu qulqulay jidadka Madiinah.

In kasta oo uu ku koray saboolnimo iyo wax la'aan, uuna aabbihii iyo habaryarihii xoolaha u raaci jirey yaraantiisi, markii dambe waxa uu noqday hodan xoolo badan haysta, waxa uuna ku biiray dadkii Quraysh ugu hantida badnaa. Cumar waxa uu ka qaybqaatay ganacsigii Qurayshi waddey ee ay jiilaalka aadi jireen Yaman, xagaagana Shaam. Sidaas oo kale waxa ay xidhiidh ganacsi la lahaayeen Ciraaq iyo Xabashah. Waxyaalihii uu ka ganacsan jireyna waxaa ka mid ahaa dharka[29]. Markii uu Madiinah u hijroodayna ganacsigiisi waa uu sii wadey oo suuqa Madiinah ayaa uu ka ganacsan jirey[30].

Sida uu Cumar sheegay, habeen isaga oo jiifa Kacbada agteeda, ayaa inta uu nin dibi keenay uu ku ag gawracay sanammadii halkaa yaallay. "Wax aanan cod dheeraantiisa wax la mid ah hore u maqlin ayaa dibigii ka dhex qayliyey," ayaa uu Cumar yidhi. Waxa qayliyey hadalkiisi waxaa ka mid ahaa in uu soo baxay nin dhahaya, *"Laa Ilaaha ilallaah."* Cumar oo hadalkii sii wata ayaa yidhi, "Muddo yar ka dib ayaa la yidhi, 'kani waa Nebi'."[31]

29 Diraasah Naqdiyyah, 1/120.
30 Saxiixul Bukhaari 1956.
31 Saxiixul Bukhaari 3653.

CUTUBKA 2

Iqra'

"Alloow ku xooji Islaamka labadan nin kii aad jeceshahay: Abuu Jahal ama Cumar ibnul Khaddaab."

—Nebiga scw,
Sunan at-Tirmidi, 4013.

Soo bixiddii Nebiga scw

Laga soo bilaabo Aadam cs, dhulka iyo cirka waxaa isku xidhayey waxyi isdabajoog ah, oo kolkii Nebi geeriyoodaba mid kale ayaa booskiisii gali jirey. Ka dib markii Alle kor u qaaday Ciise cs, muddo shan boqol (500) oo sano ka badan ayaa uu waxyigii dhulka ka go'ay.

Habeen Isniin ah, oo ay tahay Laylatul Qadri, bishii Ramadaan, kuna beegnayd sannadkii 610 ee Miilaadiga, ayaa waxyigii mar labaad isku xidhay dhulka iyo cirka. Goobtu waa god ku yaalla oogada buur ilaa 5 kiiloomitir u jirta Kacbada. Malag Jibriil cs oo farriintii waxyiga sida ayaa goobtaas ku soo booqday Muxammad ibnu Cabdillaahi, oo in muddo ahba halkaas u joogey khalwo (Cidloonsho) cibaado ah.

Maanta dhacdadani macne weyn ayaa ay innoogu fadhidaa. Goobtaasi waa godka *Qaarul Xiraa'* oo ku yaalla

buurta Jabal Nuur. Muxammad ibnu Cabdillaahina waa Nebi Muxammad scw. Sida ay innoo soo werisay Caa'isha RC[1], Jibriil markii uu Nebiga scw u yimid ayaa waxa uu ku yidhi,

"Iqra'" oo macnaheedu yahay 'akhri'. Jawaabtii Suubbanuhu scw waxa ay ahayd, "Ma ihi mid wax akhriya." Markaas ayaa uu Jibriil qabtay Nebiga scw oo uu ceejiyey ilaa uu aad u dhibaatooday, ka dibna waa uu sii daayey. Mar labaad ayaa uu ku celiyey, "Akhri," waxa uuna la kulmay isla warcelintii, "Ma ihi mid wax akhriya." Haddana waa uu ceejiyey illaa uu aad u dhibaatooday Nebigu scw, ka dibna waa uu sii daayey. Mar saddexaad ayaa uu ceejiyey, ka dibna inta uu sii daayey ayaa uu yidhi,

اقْرَأْ بِاسْمِ رَبِّكَ الَّذِي خَلَقَ ﴿١﴾ خَلَقَ الْإِنْسَانَ مِنْ عَلَقٍ ﴿٢﴾ اقْرَأْ وَرَبُّكَ الْأَكْرَمُ ﴿٣﴾

"Ku akhri magaca Rabbigaaga wax abuuray. Insaanka ka abuuray xinjir. Akhri, Rabbigaana waa Deeqbadane."

al-Calaq: 1–3

Nebigu scw isaga oo argagaxsan oo gariiraya ayaa uu reerkiisii u tagey, waxa uuna ka codsaday in ay dedaan. Markii uu xasilay, ayaa uu Khadiijah RC uga warramay wixii ku dhacay, waxa uuna u sheegay in uu naftiisa u baqay. Khadiijah oo dejinaysa ayaa ku tidhi, "Wallaahi in uusan Alle weligaa ku hoojinaynin—waxa aad xidhiidhisaa

1 Saxiixul Bukhaari 3.

qaraabada, waxa aad qaaddaa culayska (dadka), waxa aad kaalmaysaa wax-ma-haysatada, waxa aad soo dhowaysaa martida, wanaaggana dadka ayaa aad ku kaalmaysaa."

Khadiijah intaa kuma aysan joogin e, waxa ay u geysay ina-adeerkeed, Waraqah ibnu Nawfal, oo Kiristaan noqday aqoonna u lahaa kitaabka Injiilka. Markii Nebigu scw uu uga warramay wixii uu arkay, ayaa uu Waraqah gartay oo uu yidhi: waxaa kuu yimid malaggii ku soo dagey Muuse. Waraqah waxa uu intaa ku xejiyey hadal tiiraanyo ka muuqato oo waxa uu yidhi, "Alla maan dhalinyaro ahaado, Alla maan noolaado marka tolkaagu ku saarayo."! Nebigii scw oo yaabban ayaa weydiiyey, "Oo miyey i saarayaan?" "Haa. Waxa aad la timid nin kasta oo la yimid waa lala diriray, haddii aan maalintaada gaadhana aad baa aan kuugu hiilinayaa." Ayaa uu Waraqah yidhi.

Waraqah fursaddaas ma helin oo muddo yar ka dib ayaa uu geeriyooday. Waxyigiina intaas ayaa uu ku go'ay. Dhawrkaa aayadood ee dhidibbada u aasay hab nololeedka laga doonayo Muslimiinta ayaa uu ku joogsadey in muddo ah. Ilaa maalin maalmaha ka mid ah iyada oo uu Nebigu scw meel marayo uu maqlay cod kor ka yeedhaya, markii uu eegayna waxa uu arkay malaggii ugu yimid Xiraa' oo cirka iyo dhulka dhexdooda kursi ku fadhiya. Muuqaalkii inta uu ka argagaxay ayaa uu ku noqday gurigii waxa uuna codsaday in la dedo. Qofka marka naxdintu ka badato, badanaa waxa uu dareemaa qabow iyo dhaxan daran. Malaggii sidaa kagama hadhin e, Nebiga scw oo dedan ayaa uu u yimid isaga oo u wada waxyi cusub.

يَا أَيُّهَا الْمُدَّثِّرُ ۝١ قُمْ فَأَنذِرْ ۝٢ وَرَبَّكَ فَكَبِّرْ ۝٣ وَثِيَابَكَ
فَطَهِّرْ ۝٤ وَالرُّجْزَ فَاهْجُرْ ۝٥

"Kan isdedayoow. Istaag oo dig. Rabbigaana weynee.
Dharkaagana daahiri. Qudhunkana ka fogoow."

al-Muddathir: 1–5

Aayadihii hore waxaa lagu siiyey Nebinnimada, kuwan dambena waxaa lagaga dhigay Rasuul waajibkiisu yahay in uu dadka u digo, farriinta loo dhiibayna gaadhsiiyo. Intaas wixii ka dambeeyeyna waxyigu si isdabajoog ah ayaa uu u socday, ilaa geeridii Nebiga scw.

Dacwadii Qarsoodiga ahayd

Abuu Bakar, Khadiijah, Cali iyo Sayd ibnu Xaarithah ayaa ugu horreeyey cid soo islaamta, laakiin doodda dheer ee ka taagan koodii ugu horreeyey ma aha mid halkan ku habboon. Khadiijah waxa ay ahayd xaaskii Nebiga scw, Calina waa ina-adeerkii uu soo koriyey gurigiisana ku noolaa, Saydna Nebiga scw ayaa yaraantiisi wiil ka dhigtay (*tabanni*) oo korsaday, waxaana la dhihi jirey Sayd ibnu Muxammad. Saddexdaasi waxa ay ahaayeen reerkiisii, waxa uu galo iyo waxa uu gudana waa ay ogaayeen oo qancin badan ugama baahnayn.

Sida taariikhyahannada qaarkood ay soo weriyeen, Nebiga scw iyo Abuu Bakar rc waxa ay ahaayeen saaxiibbo Islaamka ka hor, oo Abuu Bakar aqoon badan ayaa uu u lahaa

Nebiga scw iyo habdhaqankiisi. Waana midda keentay in uu markiiba diinta qaato, isaga oo aan marnaba ka shakiyin rasuulnimada Suubbanaha scw. Sannado badan ka dib ayaa Abuu Bakar iyo Cumar ay maalin wax dhex mareen, Abuu Bakar isla markiiba Cumar in uu raalli galiyo ayaa uu isku dayey, laakiin Cumar ayaa diidey. Abuu Bakar markii uu Cumar qancin kari waayey ayaa isaga oo cadhaysan oo tafta haysta uu u tagey Nebiga scw. Cumar oo cadho burburay baa ka daba yimid, laakiin waxa uu la kulmay Nebigii scw oo cadho awgeed wejigiisii isbeddelay. Nebigu scw waxa uu yidhi, "Alle ayaa ii soo kiin diray markaasaad igu tidhaahdeen, 'been baa aad sheegaysaa,' Abuu Bakarna waxa uu yidhi, 'run baa uu sheegayaa', waxa uuna i la garab istaagay naf iyo maalba. Ma ii daynaysaan saaxiibkay? Ma ii daynaysaan saaxiibkay?" Sida xadiiska uu weriyey Imaam Bukhaari ku jirta, maalintaas ka dib cid dhib u geysatay ma jirto.[2]

Dhacdadani waxa ay si cad u muujinaysaa taageeradii uu Abuu Bakar RC u fidiyey Nebiga scw, iyo kaalintii uu ka qaatay faafinta diinta. Sida uu Ibnu Isxaaq qorayo, Abuu Bakar waxa uu ahaa nin la jecelyahay oo dadka soo dhoweeya laguna soo hirto. Waxa uu ahaa khabiir aad ugu xeeldheer aqoonta Quraysh, nasabkeeda, khayrkeeda, iyo sharkeedaba. Waxa uu ahaa ganacsade dabci wanaagsan oo samafalid lagu yaqaanno. Wanaaggiisa iyo khibraddiisa ayaa lagu soo hiran jirey, oo ay tolkii ugu iman jireen una jeclaayeen la fadhigiisa. Abuu Bakar awooddan waxa uu u

2 Saxiixul Bukhaarii 3661; Fatxul Baarii, 8/335; al-Bidaayah wan Nihaayah, 3/224.

adeegsaday taageeriddii iyo faafintii diinta.[3]

Sida wararka qaarkood ay sheegeen, in kasta oo sugnaantooda aan la hubin, dadkii ugu horreeyey ee soo islaamay in badan oo ka mid ahayd, islaamiddooda isaga ayaa sabab u ahaa. Dadkaa waxaa ka mid ah: Cusmaan ibnu Cafaan RC, Dalxah ibnu Cubaydillaah RC, Subayr ibnul Cawaam RC, Sacad ibu Abii Waqaas RC, Cabdiraxmaan ibnu Cawf RC, Cusmaan ibnu Madcuun RC (Cumar seeddigii), Abuu Cubaydah ibnul Jarraax RC, Abii Salamah ibnu Cabdil Asad RC, iyo Arqam ibnu Abil Arqam RC[4]. Waa akhyaartii saxaabada. Lix ka mid ahna waxa ay ku jiraan tobankii Jannada loogu bishaareeyey.

Xilligan hore waxaa iyaguna diinta raacay dad ay ka mid yihiin Cabdullaahi Ibnu Mascuud RC, Khaalid ibnu Saciid ibnul Caas RC, Saciid ibnu Sayd RC (Cumar ina-adeerkii iyo seeddigii), Faadimah bintil Khaddaab RC (Cumar walaashii), Qudaamah ibnu Madcuun RC (Cumar seeddigii), Khabbaab ibnul Arat RC, Bilaal ibnu Rabaax RC, Jacfar ibnu Abii Daalib RC iyo xaaskiisii Asmaa' binti Cumays RC, Asmaa' binti Abii Bakar RC, Cayaash ibnu Rabiicah RC iyo xaaskiisii Asmaa' bint Salamah RC, … iyo kuwo kale. Intan ka dib ayaa rag iyo dumarba koox-koox loo soo galay diinta, ilaa warkii Islaamku magaalada Makah ku faafay oo lagu sheekaystay.[5]

Islaamiddii Abuu Bakar RC waxa ay ahayd guul aad u weyn oo dacwada u soo hoyatay. Nebigu SCW waxa uu ku dadaalayey in uu dhiso koox gundhig adag u noqota

3 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 3/227.
4 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 3/227-228.
5 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 3/238-239.

dacwada—dad awood badan u yeela dacwada; dad islaamiddoodu isbeddel weyn ay keeni karto. Odayaashii Quraysheed sidii uu ugu dadaalayey waa tii lagu canaantay markii uu ka jeestay Cabdullaahi ibnu Ummi Maktuum RC, ee ay soo degtay suuradda Cabasa. Hawsha aad waddaa waxa ay doonto ha ahaato e, dad tayo leh waa lagama-maarmaan, gaar ahaan xilliga asaasidda.

Saddex sano ayaa ay dacwadu qarsoodi u socotay, iyada oo uusan Nebigu SCW si cad oo la wada og yahay ugu dhawaaqin diinta, ee ciddii lagu kalsoon yahay oo keli ah loo sheego. Saxaabadu qarsoodi ayaa ay ku kulmi jireen, marka ay tukanayaanna bannaannada ayaa ay u bixi jireen oo ay ku soo tukan jireen.

In kasta oo ay dacwadu qarsoodi ku socotay, haddana warkeedu waa uu faafay, Makana waa lagaga sheekaystay. Laakiin waxaa isweydiin mudan, maxaa ay odayaashii Quraysheed uga aamuseen oo aysan wax tallaabo ah uga qaadin Muslimiintii hore? Jawaab cad oo lagu go'aa ma jirto, laakiin Quraysh dhexdeeda kuma cusbayn dad diinta shirkiga ka baxa oo diimo kale qaataa. Waxaa soo maray Umayah ibnu Abii as-Salt, Qis ibnu Saacidah, Camr ibnu Nufayl, iyo Waraqah ibnu Nawfal, oo aynu ka soo hadalnay. Sida uu sheegay Sheekh Muxammad al-Qasaalii[6], waxaa laga yaabaa in ay kuwaa hore ku tiriyeen, oo ay isyidhaahdeen muddo yar baa ay sheekadiisu ku dhammaanaysaa. Laakiin taasi ma dhicin, waxaana galay welwel oo waxa ay bilaabeen in ay u kuurgalaan dacwadii, warkeedana ay dhowraan.

Marxaladdan qarsoodiga ahi waxa ay qayb weyn ka qaadatay xoojinta iyo faafidda diinta, oo waxa ay suuragalisay

6 Fiqhus Siirah, 100.

in la dhiso dad awood iyo adkaysi u leh in ay u dulqaataan wixii dhib ka hor iman kara, islamarkaana awood u leh in ay xambaaraan masuuliyadda dacwada. Iimaankii oo aan weli qalbigooda ku xididaysan haddiii ay iskahorimaadyo badan gali lahaayeen, waxa ay u badan tahay in aysan dacwadu sii socoteen, xididdada u siibiddeeduna waa ay u fududaan lahayd Mushrikiintii Quraysheed.

Nebigu scw waxa uu ku dadaalay dhisidda koox udubdhexaad u noqota inta kale, oo tusaalaysa iimaankii iyo habdhaqankii qofka Muslimka ah laga rabey—in uu hawshaas ku guuleysteyna waa ay caddahay, oo dadkii tababarkaas ka soo baxay waa kuwii adduunka beddelay, mid ka mid ahna sooyaalkiisi ayaa aynu halkan ku qaadaa-dhigaynaa.

Saddex sano markii ay dacwadu qarsoodi ku socotay, ayaa ay soo degtay aayadda 94'd ee suuradda al-Xijr, sida uu soo weriyey Imaam Dabarii.[7]

فَاصْدَعْ بِمَا تُؤْمَرُ وَأَعْرِضْ عَنِ الْمُشْرِكِينَ ﴿٩٤﴾

"Ku dhawaaq waxa lagu farayo, kana jeeso Mushrikiinta."

al-Xijr: 94.

Halkaas ayaa ay ku dhammaatay dacwadii qarsoodiga lagu wadey, waxaana bilaabmay heer cusub oo halis badan.

7 Jaamicul Bayaan can Ta'wiil Aayil Qur'aan, al-Xijr: 94.

Shaacbixii Dacwada[8]

Heerkii labaad ee dacwadu waxa uu ku bilowday aayadda 214'd ee suuradda Shucaraa'.

وَأَنذِرْ عَشِيرَتَكَ الْأَقْرَبِينَ ﴿٢١٤﴾

"Una dig ehelkaaga kuu dhow"

ash-Shucaraa': 214

Saddexdii sano ee ay dacwadu qarsoodiga ahayd tirada Muslimiintu ilaa afartan ma dhaafin. Suuradda Shucaraa' qaybteeda hore waxa ay ku bilaabatay samirsiin Nebiga scw laga samirsiinayo in aysan dad badani rumayn diintii. Intaa ka dib waxaa bilaabanaya faahfaahin ku saabsan qisadii Nebi Muuse cs, sidii rasuulka looga dhigay, isaga iyo Fircoon wixii dhex maray iyo sidii ay u beeniyeen, la bixiddii reer Banuu Israa'iil iyo sidii Fircoon iyo ciidankiisii badda loogu halaagay, Mu'miniintiina u badbaadeen. Taas waxaa ku xigta qisadii Nebi Ibraahiim cs iyo wixii isaga oo iyo Mushrikiintii dhex maray. Waxaa ku sii xigta Nebi Nuux cs sidii uu tolkii uga waaninayey shirkiga iyo diidmadoodii, iyo sidii biyaha loogu fatihiyey ee loogu halaagay.

Intaas ka dib, suuraddu waxa ay ka hadashay Nebi Huud cs iyo sidii uu tolkii, Caad, u waanin jirey, sidii ay u beeniyeen, iyo sidii loo halaagay. Waxa ay ugu jawaabeen, "*Waa isugu kaaya mid haddii aad na waaniso iyo haddii kale*." Alle swt dhaqankoodaas waxa uu ku tilmaamay in uu yahay dhaqankii dadkii hore, ee uusan ahayn wax cusub—

8 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 3/240-.

ismadhaanto iyo dhasheed. Ka dib suuraddu waxa ay ka hadashay Nebi Saalix cs iyo tolkii Samuud, iyo wixii dhex maray waano iyo ku gaaloow, ilaa ay dileen hashii loo soo saaray. Waxaa ku xiga Nebi Luud cs oo tolkii ka waaninaya dhaqan xumadii ay ku kacayeen, markii ay ku gaaloobeenna la halaagay oo dhulka lagu afgembiyey.

Qisooyinka Anbiyada ee ay suuraddu ka warrantay waxaa ugu dambeeya Nebi Shucayb cs iyo dadaalkii uu ugu jirey in uu tolkii ka waaniyo dulmigii iyo xaqdarradii ay ku kacayeen, ee ay xoolaha dadka ku boobayeen. Iyaguna markii ay waxba maqli waayeen waa la halaagay.

Dabadeed, suuraddu waxa ay ka hadashay Qur'aanka iyo in uu Jibriil ku soo dejiyey Nebiga scw qalbigiisa, si uu uga mid noqdo kuwa diga, laguna soo dejiyey af Carbeed oo cad, laguna sheegay kutubtii hore ee Nebiyadii laga soo warramay. Suuraddu waxa ay sii tilmaantay in aysan Mushrikiintu si fudud ku rumaynayn Qur'aanka, intii diiddana ciqaab la marsiin doono, laakiin ay ka horrayso in loo digo oo waanada la gaadhsiiyo. Ka dib ayaa Alle swt uu Nebiga scw faray in uu u digo ehelkiisa ugu dhow, iyo in uu u dhimriyo oo uu u debecsanaado Mu'miniinta raacday. Waxaa loogu xejiyey in haddii ay beeniyaan uu kufrigooda ka beri noqdo, uuna Allaha awoodda leh ee naxariista badan talo saarto—Allahaas oo arkaya marka uu taagan yahay ee uu salaadda iyo sujuudda ku jiro.

Halkan waxaa laga dareemayaa ahmiyadda ay cibaadadu u leedahay qofka masuuliyadda dacwada qaaday. Waxaana la ogsoon yahay in marka arrini ku timaaddo, uu Nebigu scw dhanka salaadda u carari jirey, Allena baryi jirey. Maanta xaalka ducaadda intooda badani aad ayaa uu uga

duwan yahay sunnadaas Nebiga scw.

Qur'aankii xilligan hore soo dagey waxa uu inta badan ku saabsanaa tawxiidka, iimaanka, iyo ka fogaanshaha shirkiga iyo wixii la mid ah. Waxa uu tilmaamayey Jannada iyo Naarta, iyo jidka mid kasta loo maro. Waxa uu dhisayey iimaanka Mu'miniinta, waxa uuna uga sheekaynayey mu'miniintii ka horreeyey iyo wixii ay dhib kala kulmeen tolkood, iyo sidii ay ugu dambayntii u guuleysteen.

Haddaba, markii aayaddani ay soo degtay ayaa uu Nebigu scw koray buurta Safa oo uu dadkii u dhawaaqay. Dadkiina waxa ay noqdeen mid isagii yimid iyo mid cid u warranta soo dirsaday.

"Reer Banuu Cabdulmuddaliboow, Reer Banuu Fihriyoow, Reer Banuu Lu'ayoow, ka warrama haddii aan idiin ka warramo col fardoolay ah oo buurtan salkeeda maraya oo raba in ay idin weeraraan—ma i rumaysan lahaydeen?" Ayaa uu ku dhawaaqay Nebigu scw.

"Haa, weligayo been kuguma aannaan arkin." Ayaa ay ugu jawaabeen.

Markaas ayaa uu bilaabay in uu u digo oo uu diintii u bandhigo. Reer-reer ayaa uu ula hadlay isaga oo leh: nafihiinna naarta ka badbaadiya. Cadow meel dheer lagama raadsho e, Abuu Lahab oo Nebiga scw adeerkii ahaa ayaa meeshii ka kacay, oo isaga oo gacmaha boodhkii iskaga jafaya yidhi, "Inta maalinta ka hadhay hoog e, ma intanaad noogu yeedhay?" Waana tii Alle swt ugu jawaabay aayadaha suuradda Tabbat ama al-Masad oo dhani ay ka kooban tahay.

Halkaas ayaa ay marxaladdii labaad ee dacwadu ku bilaabatay. Nebigu scw dacwada si muuqata ayaa uu u

wadey, uuna hadh iyo habeen Mushrikiintii u waaninayey, meel kasta oo ay joogaanna uu ugu tageyey, isaga oo aan kala saarayn mid sabool ah iyo mid hodan ah, mid addoon ah iyo mid xor ah, mid taag daran iyo mid awood badan. Laakiin Muslimiintii raacday intoodii badnayd weli waa ay isqarinayeen oo cidi kama war hayn.

Waxaa Saciid ibnu Sayd RC laga soo weriyey in uu yidhi: hal sano ayaa aannu isqarinaynay, oo aannaan ku tukan karin meel aan ka ahayn guri xidhan ama dooxo madhan[9]. Heerka ay qarsoodi ka gaadheen, dad badani marka ay soo islaameen waxa ay u haysteen in ay yihiin qofkii afraad, ama shanaad, ama lixaad ee soo islaamay, isaga oo aan ka war hayn tirada Muslimiinta kale. Abuu Dar RC iyo Camr ibnu Cabsah RC, labaduba waxa ay sheegteen in ay ahaayeen qofkii afraad ee soo islaamay, iyada oo ay u badan tahay in ay soo islaameen xilligan dacwadu shaac baxday oo ay Muslimiintu intaas ka badnaayeen.

Taasina ma aha wax adag in la fahmo oo haddii ay markiiba bannaanka isa soo dhigi lahaayeen, oo iyaga iyo Mushrikiintii uu iskahorimaad weyni dhex mari lahaa, kooxdan yar ee Muslimiinta ah weerar ba'an inta lagu qaado ayaa la baabi'in kari lahaa.

Muddadan hore wax iskudhac ah waxaa la sheegaa: in maalin maalmaha ka mid ah iyada oo koox saxaabada ka mid ahi ay salaad meel ku tukanayaan sannadkii afraad, ay koox Mushrikiin ahi arkeen, dabadeedna aflagaaddo iyo cay u geysteen ilaa gacmaha la isu qaaday. Sacad ibnu Abii Waqaas RC ayaa inta uu qaatay lafta daanka geela oo meesha taallay, Mushrikiintii mid ka mid ah ku dakhray.

9 Ansaab al-Ashraaf, 1/132.

Dhacdadan ayaa lagu sheegaa in ay ahayd dhiiggii ugu horreeyey ee Islaamka dartiisa ku daata.[10]

Dhacdadan ka dib, Nebiga SCW iyo saxaabadii waxa ay xarun ka dhigteen daartii Arqam ibnu Abil Arqam RC, oo ku taallay buurta Safa. Halkaas ayaa ay ka bilaabatay xaruntii waxbarasho ee ugu horreysay. Daartaas ayaa uu Nebigu SCW ku diyaariyey oo uu ku dhisay saxaabadii adduunkan beddelay. Dadkii halkaas ku islaamay waxaa ka mid ahaa: Muscab ibnu Cumayr RC, Cammaar ibnu Yaasir RC, Suhayb ar-Ruumii RC, iyo saxaabo kale oo badan. Waana goobta laga yaabo in Cumar ku Islaamay.

Makah waa ay isla qaraxday, Mushrikiintiina dhiiggaa ku karay. Kala dambayn baa jirtey oo ninna tolkii looma dhaafi karin e, odayaashii Quraysheed waxa ay dacwo ugu tageen Abuu Daalib oo Nebiga SCW adeerkii ahaa, reerkoodana madax u ahaa. Dacwaddoodu waxa ay ahayd, "Wiilkan aad adeerka u tahay waxa uu caayey Ilaahyadayadii, waxa uu ceebeeyey diintayadii, wax-ma-garato ayaa uu nagu sheegay, aabbayaasheenna wax lunsan baa uu ku sheegay, ee laba mid: in aad naga qabatid iyo in aad noo kala dhex baxdid, oo adiga isku wax baa aynu aaminsannahay e, aannu sharkiisa kaaga filnaanno."[11]

Abuu Daalib kama qasin e, hadal qaboow oo deggan ayaa uu kula hadlay, waana uu diray iyaga oo qanacsan. Laakiin dacwadii sideedii ayaa ay u socotay, oo Nebigu SCW halkiisii baa uu cid kasta tawxiidka ugu yeedhayey.

Mushrikiintii siyaabo badan oo kala duwan ayaa ay isku dayeen in ay dacwada ku hor istaagaan. Waxa ay bilaabeen

10 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 3/239-240.
11 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 3/253.

ku jeesjeesid iyo ku qosol, yasid, iyo wax la mid ah—si ay nafsad ahaan u jabiyaan Nebiga scw iyo intii yarayd ee raacday. Dacaayaddoodii waxaa ka mid ahaa in uu beenaale yahay, in uu sixirroole yahay, in uu waalan yahay, in dadka raacay ay yihiin intii bulshada ugu taagta yarayd oo haddii uu xaq wado ay madaxdu uga horrayn lahayd, in Qur'aankani yahay sheeko xariir uu meelo kale ka keenay, ama uu qof kale ka soo bartay… iyo anshax xumo kale oo badan.

Intaasiba markii ay shaqayn weyday, ayaa ay isku dayeen bal in ay la saayiraan oo iyaga iyo Nebigu scw wax isku afgartaan, meel dhexana la isugu yimaaddo. Muxammadoow waxa aad caabudayso aanu kula caabudno, ee adiguna waxa aanu caabudayno nala caabud, baa ay yidhaahdeen. Jawaabtu waxa ay ahayd suuradda al-Kaafiruun[12];

قُلْ يَا أَيُّهَا الْكَافِرُونَ ﴿١﴾ لَا أَعْبُدُ مَا تَعْبُدُونَ ﴿٢﴾ وَلَا أَنتُمْ
عَابِدُونَ مَا أَعْبُدُ ﴿٣﴾ وَلَا أَنَا عَابِدٌ مَّا عَبَدتُّمْ ﴿٤﴾ وَلَا أَنتُمْ
عَابِدُونَ مَا أَعْبُدُ ﴿٥﴾ لَكُمْ دِينُكُمْ وَلِيَ دِينِ ﴿٦﴾

"Ku dheh, Gaalooy. Caabudi maayo waxa aad caabudaysaan. Idinkuna caabudi maysaan waxa aan caabudayo. Aniguna ma ihi mid caabudaya waxa aad caabuddeen. Idinkuna caabudi maysaan waxa aan caabudayo. Idinkuna diintiinna ayaa aad leedihiin, aniguna diintayda ayaa aan leeyahay."

al-Kaafiruun: 1-6

12 Tafsiirka Ibnu Kathiir, al-Kaafiruun: 1-6.

Markii ay dacaayaddii ku guuldarraysatay in ay demiso ilayskii Islaamka, ayaa ay Mushrikiintii Quraysheed bilaabeen marxaladdii ku xigtay iyo in ay gacanta ka hadlaan, oo ay xoog wax ku muquuniyaan.

Dhibkii lagu hayey Muslimiinta iyo kaalintii Cumar

Nebiga scw dhib badan ayaa ay Qurayshi u geysatay. Si kasta oo ay u dhibi kareen ayaa ay u dhibeen: cay, aflagaaddo, hanjabaad, xadgudub jidheed (ceejin), iyo bahdilid—intaasiba waxa ay ku dhacaysay iyada oo adeerkii Abuu Daalib iyo reer Banuu Haashim ay difaacayaan oo ay ilaalinayaan. Abuu Lahab baa isagu reerka ka baxay oo ay isaga iyo xaaskiisu, Umm Jamiil bint Xarb—ahaydna Abuu Sufyaan walaashii—aad u dhibi jireen Nebiga scw.

Cuqbah ibnu Abii Mucayd ayaa iyada oo Nebigu scw Kacbada agteeda ku tukanayo, soo qaaday hal dhashay mandheerteed, ka dibna Nebiga scw oo sujuudsan dusha ka saaray, Abuu Jahal iyo intii kale ee meesha fadhidayna qosol baa ay la daateen. Nebigu scw isaga oo sidii u sujuudsan ayaa ay gabadhiisi Faadumo timid, oo ay ka tuurtay mandheertii. Markii uu madixii dhulka ka qaaday ayaa uu habaar saf kala maray isaga oo mid-mid u magacaabay: Abuu Jahal, Cutbah ibnu Rabiicah, Shaybah ibnu Rabiicah, Waliid ibnu Cutbah, Umayyah ibnu Khalaf, Cuqbah ibnu Abii Mucayd, iyo mid toddobaad oo uu hilmaamay ibnu Mascuud oo qisadan soo weriyey. Ibnu Mascuud waxa uu sheegay in uu arkay intii Nebigu scw habaaray oo maydkoodi lagu guray ceelkii Beder.[13]

13 Fatxul Baarii, 8/566; Al-Bidaayah wan Nihaayah, 3/249.

Sidaas oo kale ayaa Abuu Bakarna loo dhibi jirey[14], in kasta oo reerkiisu ay garab taagnaayeen. Muslimiintii masaakiinta ahaa ee aan reer difaaca haysan, ama addoomada ahaa, ayaa Qurayshi wixii ay awood lahayd isugu geysay. Reer waliba dadkoodii Islaamay in ay ciqaabaan ayaa ay u dhaqaaqeen. Inta ay xidhaan baa ay garaaci jireen, gaajeysiin jireen, harraadin jireen. Waxa ay ku ciqaabi jireen ciidda iyo dhagaxa kulul ee Makah marka cadceeddu ugu kulushahay, oo ay saabka ama dhabarka u jiifin jireen—mar ay ciiddaas kulul ku aasaan iyo mar ay dhulka ku jiidaan.[15]

Abuu Jahal cid la mid ahayd ma jirin. Marka uu maqlo nin baa muslimay inta uu u tago ayaa uu u hanjabi jirey, oo haddii uu ganacsade yahay ama uu sharaf bulshada ku dhex leeyahay, waxa uu odhan jirey: sharaftaada iyo xoolahaagaba baaba' ayaa aannu ka dhigaynaa, ganacsigaagana waa aannu tirtiraynaa haddii aadan ka noqon.[16]

Muscab ibnu Cumayr oo ka mid ahaa dhalinyarada Makah ugu hantida badan, ee labbiska quruxda badan iyo udugga wanaagsan lagu yaqaannay, markii ay hooyadii maqashay in uu muslimay ayaa ay gurigii ka eriday[17], laakiin saboolnimadii kama aysan celin iimaankii iyo xidhiidhkii uu Alle la lahaa. Subayr ibnul Cawaam markii uu muslimay, adeerkii baa inta uu derin ku duubo dab ku qiiqin jirey si uu diinta uga laabto. Sacad ibnu Abii Waqaas oo hooyadii aad baarri ugu ahaa, markii ay hooyadii ogaatay cunno iyo cabitaan waa ay ka go'day ilaa uu diinta ka laabto. Laakiin markii ay ku guuldarraysatay celintiisi, cuntadeedii iyo

14 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 3/229.
15 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 3/268.
16 Siiratu Ibnu Hishaam, 1/344; Al-Bidaayah wan Nihaayah, 3/271.
17 Ar-Raxiiqul Makhtuum, 78.

cabitaankeedii ayaa ay iskaga noqotay.

Cadaadiskii iyo ciqaabtii badnayd dad baa u adkaysan kari waayey, oo sidaa diintii uga laabtay, markii ay xammili kari waayeen wixii lagu samaynayey. Dadkii islaamiddooda ugu hor muujiyey waxa ay ahaayeen toddobadan: Abuu Bakar RC, Bilaal RC, Khabbaab ibnul Arat RC, Suhayb ar-Ruumii RC, Cammaar ibnu Yaasir RC iyo hooyadii Sumayah RC. Cammaar aabbihii, Yaasir RC, iyo hooyadii waxaa ciqaabi jirey Abuu Jahal ilaa ay sidaa ku dhinteen odaygii iyo islaantiiba.[18]

Bilaal waxa uu ahaa addoon ay leeyihiin qaar ka mid ah reer Banuu Jumax, waxa uuna u dhashay Xabashah ama Geeska Afrika. Umayah Ibnu Khalaf oo ka mid ahaa odayaashii Quraysheed ayaa ciqaabi jirey. Duhurkii marka ay cadceeddu kululaato ee dhulku aadka u kulul yahay, ayaa ay soo bixin jireen, markaasay ayaa ay dhagax weyn laabta ka saari jireen. Umayah ayaa ku odhan jirey: wallee sidaas ayaa aad ahaanaysaa ilaa aad ka dhimatid ama aad ku gaalowdo Muxammad, oo aad caabuddid Laata iyo Cusaa. Bilaalna waxa uu ku jawaabi jirey, "*Axadun Axad*."—Alle keligii baa aan qirayaa. Ilmaha inta ay u dhiibaan ayaa ay ku soo wareejin jireen daafaha Makah isaga oo xidhxidhan, oo la rafaadiyey.

Waxaa la sheegaa in Nebigu SCW yidhi: haddii aannu wax haysanno Bilaal ayaa aannu ku soo furan lahayn. Markaas ayaa uu Abuu Bakar RC ka iibsaday Umayah oo uu xoreeyey. Abuu Bakar dahabka uu ku bixiyey markii ay arkeen ayaa ay ku yidhaahdeen: hal wiqiyad oo keli ah haddii aad naga siisan lahayd waa aanu oggolaan lahayn—

18 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 3/270-271.

iyaga oo uga dan leh in uusan qiimo ugu fadhiyin. Isaguna waxa uu ugu jawaabay: haddii aad boqol codsan lahaydeen waa aan idin siin lahaa!

Wax uu sugaba, maalintii Beder ayaa uu Bilaal fursaddiisii helay oo uu Umayah gacanta ku dhigay, halkaasaana Umayah uu nafta ku waayey.

Khabbaab ibnul Arat waxa uu ka mid ahaa saxaabadii aan tolka adag ku lahayn Makah, ee sida naxariis-darrada ah loo jidh dili jirey. Heer waxa ay gaadheen ay ku jiifiyaan dhuxul holcaysa ilaa uu jidhkiisu shiilmo![19] Xilligii khilaafadii Cumar ayaa uu mar dhabarkiisa qaawiyey oo uu tusiyey raadkii jidhdilkii lagu sameeyey. Maalin maalmaha ka mid ah ayaa uu Khabbaab u tagey Nebiga scw oo go' ku dangiiga Kacbadana hadhsanaya. Waxa uu ka cabanayey xaaladda ay ku sugan yihiin iyo sida loola dhaqmayo. Waxa uu yidhi,

"Rasuulkii Alloow, maad Alle hiil noo weydiisid, maad Alle noo baridid?"

Nebigu scw waxa uu ugu jawaabay, "Dadkii idin ka horreeyey inta ninka god loo qodo oo lagu rido, ayaa inta minshaar la keeno oo madaxa laga saaro, labo loo kala goyn jirey. Sidaas oo kalena, inta mindi sidii shanlo bir ah oo kale la soo qaado, ayaa hilibkiisa iyo laftiisa la kala saafi jirey, waxaas oo dhanina diintiisa kama aysan celin jirin."[20]

Waxa uu intaa ugu daray bishaaro ah in ay guuleysan doonaan, baqdintanna laga bixi doono oo ay nabad ku noolaan doonaan, laakiin ay degdegayaan oo aan wakhtigeedii la gaadhin.

19 Ar-Raxiiqul Makhtuum, 79.
20 Fatxul Baarii, 8/566-; al-Bidaayah wan Nihaayah, 3/268-273.

Cumar qayb weyn ayaa uu ka qaatay xadgudubkii lagu hayey Muslimiinta. Waxa uu xidhxidhay Saciid ibnu Sayd RC oo ay ilmo adeer ahaayeen, isaga oo islaamiddiisa diiddan[21]. Waxaa kale oo jirtey addoon muslintay oo ay lahaayeen qoladii Cumar ka dhashay jifi ka mid ahayd oo la odhan jirey Banuu Mu'ammil, oo ahaa reer Banuu Cadiy. Cumar ayaa aad u jidhdili jirey oo sida uu u garaacayo marka uu daalo, isaga oo ku diganaya, kuna jeesjeesaya waxa uu ku dhihi jirey,

"Iga raalli ahow, daal baa aan kuu daayey e"!

"Alle ayaa ku daaliyey," baa ay iyaduna ugu jawaabi jirtey.

Markii dambe waxaa iibsadey oo xoreeyey Abuu Bakar RC.[22]

Markii rafaadkii Muslimiintu batay, Mushrikiintiina ay cadaadiskii iyo ciqaabtii sii kordhiyeen, ayaa uu Nebigu SCW saxaabadii ku yidhi: Xabasha waxaa jooga boqor aan agtiisa cidna lagu dulmiyin e, u taga ilaa Alle faraj idiin furayo. Sidaas ayaa ay ku timid hijradii koowaad ee ay Muslimiintu ku aadeen Xabasha iyo boqorkeedii Najaashi. Tiradii baxday waxaa lagu sheegaa koow iyo toban nin iyo afar dumar ah, oo si qarsoodi ah mid-mid uga baxay Makah. Waxaa ugu horreeyey Cusmaan ibnu Cafaan RC iyo xaaskiisi Ruqayah RC, oo ahayd gabadhii Nebiga SCW. Waxa ay ahayd bishii Rajab, sannadkii shanaad ee Nebinimada.[23]

Mushrikiintii markii ay ka war heleen waxa dhacay

21 Fatxul Baarii, 8/584-585.
22 Diraasah Naqdiyah, 1/104.
23 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 3/281-282.

waxa ay isku dayeen in ay soo celiyaan, laakiin waa ay ku guuldarraysteen. Ka dibna waxa ay sii badiyeen cadaadintii iyo ciqaabtii ay Muslimiinta ku hayeen. Maalin ayaa uu Abuu Jahal aad u caayey Nebiga scw, dhibaato badanna u geystay. Warkii baa gaadhay Xamsah ibnu Cabdulmuddalib oo Nebiga scw adeer u ahaa, ka dibna inta uu Abuu Jahal u tagey ayaa uu qaanso uu ku ugaadhsanayey madaxa kaga dhuftay, waxa uuna gaadhsiiyey dhaawac xun. Halkaas ayaana uu ku muslimay.[24]

Xamse RC waxa uu ahaa dagaalyahan aan loo dhowaanin, aadna loo qaddariyo. Islaamiddiisii wax weyn ayaa ay Muslimiintii u tartay, dadkii Nebiga scw dhibi jireyna waa ay ka gaabsadeen.

Nebiga scw yoolkiisu waxa uu ahaa in uu dadka xaqa gaadhsiiyo, ee ma ahayn in uu xukun dusha kaga rido ama naarta u diro. Cadow, saaxiib iyo ehelba waxa uu kula dadaali jirey in ay xaqa qaataan. Waxa uu ahaa hoggaamiye aqoon sare u leh dadkiisa, oo kala yaqaanna dadka; qof waliba awoodda uu leeyahay, iyo meesha uu buuxin karo. Waa karti hoggaamiyuhu uusan marnaba ka maarmin. Si qorshaha aad waddaa u meel maro, waa in aad heshaa dadkii kaala qayb qaadan lahaa fulintiisa.

Xadiis uu werinayo Imaam Tirmidi oo saxiix ah[25], ayaa sheegaya in Nebigu scw uu ku duceeyey in Alle diinta ku taageero Abuu Jahal iyo Cumar, midkooda uu jecel yahay. Tan oo muujinaysa saamayntii ay lahaayeen, iyo haddii ay islaamaan, in ay xoojin lahaayeen Muslimiinta

24 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 3/233.
25 Saxiix Sunan at-Tirmidi, 3662.

laga awoodda badan yahay, dabadeedna xidhiidhka iyaga iyo Mushrikiinta u dhexeeya ay wax badani iska beddeli lahaayeen.

Immisa innaga mid ah ayaa u ducayn lahaa Abuu Jahal? Immisa Abuu Jahal ka dhib yar baa aynu cagta marinnaa, halkii aynu ku dadaali lahayn qancintooda iyo u ducayntooda? Cumar iyo Abuu Jahal iyaga oo Muslimiinta dhib weyn ku hayey, ayaa haddana uu Nebigu scw u ducaynayey. Maanta haddii qof Muslimiinta dhiba aad ugu ducayso in Alle hanuuniyo, waxaaba laga yaabaa in dadka qaar kaa shakiyaan!

Ujeeddadu ma aha la dagaallan, ee waa in aad hanuunka tustaa. Waa in aad ka shaqaysaa kuwa kaa soo horjeeda sidii aad dhinacaaga u keeni lahayd. Waxaana la rabaa in aad kala og tahay dadkaagu waxa ay galaan iyo waxa ay gudaan—"*Hebel waa nin fiican oo cidda ah…*", "*Hebel waa nin fiican oo wadaad ah…*", "*Heblaayo waa gabadh khayr qabto ah…*", … ka fiican ee aan cidda ahayn, ama aan wadaadka ahayn, in aad soo kaxaysid oo aad hawsha ka qayb galisid ayaa la rabaa. Hawl walba cidda ku habboon in loo raadiyo loona dhiibo weeyaan. In koox yar oo isku aragti ahi wax kasta isku koobto waa laga fiican yahay, wax waarana sidaas laguma dhiso.

Runtii dhaqankeenna maanta iyo kii Suubbanaha scw wax weyn ayaa u dhexeeya. Nebigu scw si wanaagsan baa uu ula dhaqmi jirey Mushrikiinta. Waa uu la fadhiisan jirey, la doodi jirey, waanin jirey—laakiin maanta qaarkeen gaal marka ay maqlaan baa ay xajiimoonayaan. Sidee ayaa aad xaqa ugu sheegi kartaa qof aad ka xajiimoonayso, oo marka aad aragto aad wejiga u kaduudaysid? Waxa aynu kala saari

la'nahay goobtii dagaalka iyo goobtii nabadda. Nebigu scw maalintii uu Makah ka hijroonayey, Cali RC ayaa uu ku ballamiyey in uu ammaanooyinkii uu hayey dadkii lahaa u celiyo. Dadkaasi Mushrikiin baa ay lahaayeen. Iyada oo aan xidhiidh fiicani u dhaxayn sidee ayaa ay ammaano ugu dhiibteen? Qof aad nabad ku wada nooshihiin iyo mid dhiillo idin dhextaal, midkee baa aad qancin kartaa oo aad dacwo u sheegi kartaa?

Immisa sano ayaa uu Cumar jirey markii uu saamayntan ballaadhan ku lahaa Makah, taas oo keentay in Nebigu scw ku duceeyo in Alle diinta ku taageero Cumar? Waxaa lagu sheegaa in uu jirey 26 ama 27 sano. Maanta 27-jirkeennu saamaynta uu bulshada ku leeyahay intee ayaa ay le'eg tahay? Ma yahay qof taageeradiisu ay arrin sidan oo kale u ballaadhan wax ka beddeli karto?—"*Dhalinyartu waa mustaqbalkii*" baa aad maqlaysaa, afartankiina waa uu cagacagaynayaa! Goorma ayaa dhalinyaranimada laga baxayaa?

Cumar waxa uu ahaa dhalinyaro awood u leh in uu gilgilo magaalo iyo bulsho dhan, waxa uuna horseed ka noqday marxalad cusub oo ay dacwadii Islaamku gashay.

CUTUBKA 3

Laa Ilaaha Illallaah

"Laga bilaabo markii Cumar islaamay, awood iyo sharaf baa aanu ku noolayn."

—Cabdullaahi ibnu Mascuud rc,
Saxiixul Bukhaari, 3863.

Islaamiddii Cumar

Islaamiddii Cumar ma ahayn kedis—sida sheekooyinka la weriyo qaarkood laga dareemayo e, waxa ay soo martay heerar kala duwan oo soo debciyey Cumar iyo aragtidii uu ka haystay Islaamka. Waxa aynu dhihi karnaa aayar-aayar ayaa uu Islaamku u galay Cumar, qalbigiisana u dhex dagey.

Cumar intii uusan islaamin ayaa dadkii ku hareeraysnaa cidna ugu dhowaa ay diinta qaateen, in kasta oo qaarkood ay isqarinayeen oo uusan ka war hayn islaamiddooda. Walaalkii oo ka weynaa, Sayd ibnul Khaddaab, iyo walaashii Faadumo, ayaa hortii diinta qaatay. Sidaas oo kale, ina-adeerkii ahna seeddigii ayaa hore u islaamay.

Sida uu Cumar ka warramay[1], isaga oo Kacbada agteeda jiifa ayaa nin dibi wadaa yimid, ka dibna waxa uu ku ag

1 Fatxul Baarii, 8/586-.

gawracay sanammadii halkaa yaalley ee ay caabudi jireen. Cumar waxa uu yidhi: wax aanan cod dheeraantiisa wax la mid ah hore u maqlin ayaa dibigii ka dhex qayliyey, hadalkiisiina waxaa ka mid ahaa in uu soo baxay nin dhahaya *Laa Ilaaha ilallaah*. Cumar waxa uu sheekada sii raaciyey, in muddo yar ka dib uu maqlay iyada oo dadkii ku sheekaysanayaan, "Kani waa Nebi." Waxa ayna u muuqata in ay ahayd markii uu Cumar ka war helay diinta Islaamka.

Dhacdooyinka aynu ka dheehan karno in islaamidda Cumar ay marxalado soo martay, waxaa ka mid ah sheeko ay qoraan kutubta taariikhdu oo dhex martay Cumar iyo haweenay la odhan jirey Umm Cabdallah RC, oo Muslimad ahayd. Iyaga oo isu diyaarinaya in ay hijradii Xabasha u baxaan, ninkeediina uu ku maqan yahay in uu soo dhammeeyo hawlo meelo kaga xidhnaa, ayaa waxaa u yimid Cumar oo weli mushrik ah. Umm Cabdallah waxa ay sheegtay in Cumar uu ku hayey dhibaato iyo xumaan badan, oo uu rafaadiyey iyaga iyo Muslimiintii kaleba.

Inta uu agteeda soo istaagay ayaa waxa uu ku yidhi, "Ma bixitaan baa, Umm Cabdallah?" Waxa ay ugu jawaabtay, "Wallaahi, haa. Dhulkaa Alle ayaa aanu u baxaynaa—waad na dhibteen oo waad na cadaadiseen—ilaa Alle dhibtan meel nooga saaro oo na samatabixiyo." Markaas ayaa waxa uu Cumar yidhi, "Alle ha idin garabgalo." Ka dibna waa uu ka tagey isaga oo ay ka muuqato in uu ka xumaaday bixitaankooda.

Umm Cabdallah waxa ay sheegtay in ay Cumar ka dareentay debecsanaan iyo naxariis aanay hore ugu arki jirin. Isbeddel ayaa ku dhacay dabeecaddiisi, oo Cumarkii hore ee ay taqaannay ma uusan ahayn. Markii uu ninkeedii,

Caamir, hawshii uu ku maqnaa soo dhammeeyey ee uu soo laabtay ayaa ay ku tidhi, "Abaa Cabdallah, haddii aad arki lahayd Cumar mar dhowayd iyo sida uu u debecsanaa ugana murugaysnaa xaaladdeena." Caamir RC oo la yaabban xaaskiisa ayaa weydiiyey, "Ma in uu islaamo ayaa damac kaa galay?" Iyaduna waxa ay ugu jawaabtay, "Haa." Laakiin Caamir waa uu sawiran kari waayey Cumar oo Muslim ah. Wax aad loola yaabo oo fogaan badan ayaa ay ula muuqatey—Cumar iyo Islaamkuna labo aan israaci karin ayaa ay u noqdeen. Caamir waxa uu yidhi, "Kaa aad aragtay islaami maayo ilaa dameerka al-Khaddaab islaamo!"[2]

In uu dameerku caqliyeysto oo uu Muslim noqdo, ayaa Caamir kala macquulsanayd islaamidda Cumar. Quusta ilaa heerkan gaadhsiisan ee hadalkaa layaabka leh Caamir ka keentay, waxaa sabab u ahayd sidii darnayd ee uu Islaamka uga soo horjeeday, iyo qaabkii naxariis la'aanta ahaa ee uu Muslimiinta ula dhaqmi jirey.

Alle ayaa cidda uu rabo hanuuniya, qadartiisuna waxa ay ahayd in Cumar islaamo. Kutubta taariikhdu waxa ay sheegeen in uu islaamay iyada oo saddex cisho laga joogo islaamiddii Xamse ibnu Cabdilmuddalib RC. Sida uu tilmaamay Ibnu Xajar, war cad oo tilmaamaya sannadkii uu islaamay lama hayo, laakiin Ibnu Isxaaq waxa uu ku sheegay in ay ahayd ka dib hijradii Xabasha, weliba tii hore. Al-Waaqidii waxa uu ku muddeeyey in ay ahayd bishii Dul Xijah, sannadkii lixaad ee Nebinimada[3], iyada oo uu Cumar markaa 27-jir ahaa, sida uu Imaam Suyuudii ka

2 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 3/300.
3 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 3/230.

soo xiganayo Imaam Dahabii[4]. Laakiin, haddii uu dhashay markii 13 sano laga joogey Caamul Fiil, waxa uu Nebiga scw ka yaraa 13 sano. Waxa aynuna og nahay in waxyigu soo degay markii uu Suubbanuhu scw ahaa 40-jir. Xilligan oo da'da Cumar RC ay noqonayso 27-jir. Sidaas awgeed, waxa ay u badan tahay in uu 32- ama 33-jir ahaa markii uu islaamay.

Xilligan uu soo islaamay Muslimiintu waa ay ka yaraayeen 60 qof. Taariikhdan waxaa taageeraysa in Cabdullaahi ibnu Cumar uu xusuustay markii uu aabbihii Islaamay, isaga oo markaa jirey shan sano. Waxaa la ogsoon yahay in Cabdullaahi uu 14-jir ahaa maalintii Uxud—waxa ayna bilowgii nebinimada ka dambaysay 16 sano. Markaa dhalashadiisu waxa ay ku beegmaysaa iyada oo labo sano laga joogo bilowgii nebinimada. Sidaas awgeed, islaamidda Cumar kama horrayn karto sannadkii lixaad ama todobaad.

Xilligan uu Cumar islaamay waa markii ay Qurayshi ku guuldarraysatay in ay soo celiso saxaabadii u hijrooday Xabasha[5], ka dibna ay bilaabeen in ay cadaadis xad-dhaaf ah saaraan Muslimiintii soo hadhay ee aysan tiradoodu dhaafin lixdanka qof. Waxa ay galiyeen nolol aad u adag, iyaga oo xadgudub iyo arxandarro kasta oo suuragal ah ku samaynayey Muslimiinta.

Siyaabo badan oo kala duwan ayaa loo soo tebiyey sababtii iyo qaabkii Cumar u islaamay, waana ay adag tahay in la kala saaro, oo qaabkii wax u dhaceen laga soo dhex dhiraandhiriyo. Maxaa yeelay, haddii aynu saarno halbeegga

4 Taariikhul Khulafaa', 208.
5 Ibnu Hishaam, 1/342].

cilmiga xadiiska, waa warar daciif ah oo aan sugnaantooda la hubin. Kaaga daran e, meelaha qaarkood aad ayaa ay ugu kala duwan yihiin, toosna waa ay isaga horimaanayaan oo suuragal ma aha in ay taageero isu noqdaan oo ay iskabaan. Caadi ahaan culamadu aad isuguma ay hawli jirin dabagalka wararka la xidhiidha taariikhda iyo wixii la mid ah, ee waxa ay ku dadaali jireen xadiisyada axkaamta (xalaal iyo xaaraan) iyo wixii la mid ah laga qaadanayo ee laga soo weriyey Rasuulka scw. Sidaas awgeed, waa ay fududaysan jireen iskaqaadashada wararka taariikhda ku saabsan, iyaga oo aan wax axkaam ah ku dhisayn, waana laga wanaagsan yahay in wararka taariikhda si xooggan loogu fuliyo axkaamta adag ee cilmiga xadiiska.

Haddaba, maadaama wararka ku saabsan islaamiddii Cumar ay u kala duwan yihiin qaab aan oggolaanayn in la iswaafajiyo, inta ugu caansan baa aan soo qaadanayaa aniga oo raacinaya sababaha dhaawici kara kalsoonida lagu qabi karo warkaas.

Guud ahaan intooda badan waxaa loo qaybin karaa labo: kuwo sababta ka dhigaya in uu ka war helay walaashii oo islaamtay, dabadeedna uu gurigeedi tagey, oo markii uu Qur'aanka akhriyey uu sidaa ku islaamay, iyo qayb sheegaysa in uu arkay Nebiga scw oo Kacbada agteeda ku tukanaya, dabadeedna markii uu Qur'aanka dhegaystay uu islaamay.

Haddii aan kuwa Kacbada ku bilaabo, mid ka mid ah oo laga weriyey saxaabiga Jaabir ibnu Cabdillaah[6], waxa ay sheegaysaa in sababta uu Kacbada u aadey ee uu guriga uga baxay ay ahayd in walaashii ay guriga ku foolanaysay, habeenkaasna dhaxan darani ay dhacaysay oo uu kiswada

6 Xilyatul Awliyaa', 1/39-41.

(marada Kacbada ku dedan) hoosta ka galay si uu dhaxanta uga dugsado. Isaga oo halkii ku jira ayaa Nebigu scw yimid Kacbada, dabadeedna inta uu dhex galay Xijri Ismaaciil (dayrka yar ee Kacbada ku dheggan gudisiisa) uu salaad ku tukaday, ka dibna iska laabtay. Sida qisadan ku xusan, Cumar aad ayaa uu ula yaabay Qur'aankii uu Nebigu scw akhrinayey, waxa uuna yidhi: weligay ma maqlin wax la mid ah. Waxa ay sheekadu intaa ku daraysaa in Cumar uu dabo galay, oo markii uu Nebigu scw dareemay uu yidhi, "Waa kuma?"

"Waa Cumar."

Dabadeed ayaa Nebigu scw ku yidhi, "Cumaroow, maxaa aad ii deyn la'dahay hadh iyo habeen?!"

Halkii ayaa uu Cumar ku ashahaatay—sida sheekadan lagu weriyey. Waxaa kale oo ku xusan in Nebigu scw uu Cumar ku yidhi qari islaamnimadaada, Cumarna diidey oo uu ku adkaystay in uu caddaysan doono sidii uu shirkigaba u caddaysan jirey.[7]

Qisada labaad waxaa weriyey Ibnu Isxaaq[8], waxa aana ku jirta in uu Cumar ka warramay sidii uu Islaamka uga fogaa iyo in uu khamrada cabbi jirey oo uu aad u jeclaa, ayna lahaayeen goob ay ku kulmaan isaga iyo rag reer Quraysheed ahi. Waxa uu sheegay in uu habeen guriga ka baxay isaga oo raadinaya raggaas ay wada fadhiisan jireen, laakiin uu goobtii cidna ka waayey. Ka dibna waxa uu aadey nin khamriga iibin jirey bal in uu wax uu cabbo ka helo. Kiina waa uu waayey. Markii uu soo quustay baa uu

7 Diraasah Naqdiyah, 1/132-133.
8 Ibnu Hishaam, 1/346-348.

Kacbada aadey si uu u dawaafo. Halkaas oo uu ku arkay Rasuulkii scw oo salaad ku jira. Waxa uu isyidhi bal caawa dhegaysto waxa Muxammad sheegayo. Kacbada maradeeda inta uu hoosta ka galay ayaa uu u soo dhowaaday, ilaa uu dhex istaagay Rasuulka scw iyo Kacbadii. Waxa uu yidhi, "Markii aan Qur'aanka maqlay ayaa qalbigaygii u jilcay oo aan ilmeeyey, Islaamkuna qabligayga galay."

Halkii baa uu taagnaa ilaa Rasuulku scw ka dhammaystay salaaddii. Markii uu tagey baa uu dabo galay. Cumar waxa uu yidhi, "Markii uu i dareemay baa uu u maleeyey in aan rabo in aan dhibo, markaas ayaa uu i canaantay oo uu yidhi, 'Ina Khaddaaboow saacaddan maxaa ku keenay?' Waxaan idhi, 'In aan rumeeyo Alle, Rasuulkiisa, iyo wixii uu kala yimid Alle agtiisa.' Kolkaas ayaa uu Nebigu scw Alle mahadiyey oo uu yidhi, 'Cumaroow, Alle ayaa ku hanuuniyey.'"

Sida ay qisadu werinayso, Nebigu scw laabta Cumar ayaa uu masaxay, waxa uuna ugu duceeyey in Alle xaqa ku sugo. Ka dibna midba dhankii uu u socdey ayaa uu u dhaqaaqay.

Ibnu Isxaaq oo taariikhdiisa ku qoray qisadan iyo qisada sheegtay in Cumar ku islaamay guriga walaashiis, markii uu labadaba sheegay waxa uu raaciyey, "Alle ayaa og labadan tii dhacday."[9] Qisadan jidka lagu weriyey ma xidhiidhsana oo dadka kala werinaya qaar ayaa ka maqan, qaarkoodna magacooda lama sheegin, sidaa awgeedna lama garan karo cid ay yihiin, iyo in warkooda lagu kalsoonaan karo toona. Waxaa Cumar ka soo weriyey labada taabici ee Cadaa' ibnu Rabaax iyo Mujaahid ibnu Jabr, midkoodna Cumar lama kulmin. Sidaas awgeed, qisadu waxa ay noqonaysaa warka

9 Ibnu Hishaam, 1/348.

lagu tilmaamo *mursal*ka, waana daciif.[10]

Qisadan ay Cadaa' iyo Mujaahid wariyeen, iyo midda Jaabir soo weriyey meelo badan baa ay isaga eg yihiin, bixitaankiisana waxaa dhici karta in ay walaashii foolanaysay oo uu isyidhi asxaabtii la soo yara khamree. Laakiin inta dambe waa ay ku kala duwan yihiin.

Mid saddexaad ayaa jirta, laakiin waxa ay sheegtay in sababta Cumar u baxay ay ahayd in uu rabey in uu waxyeello u geysto Rasuulka scw. Waxa ay intaa ku dartay in Nebigu scw akhrinayey suuradda al-Xaaqah oo uu Cumar la yaabay Qur'aanka, ka dibna uu yidhi, "Kani waa gabyaa, sidii ay Qurayshiba u sheegtay." Markaas ayaa Nebigu scw akhriyey,

إِنَّهُ لَقَوْلُ رَسُولٍ كَرِيمٍ ﴿٤٠﴾ وَمَا هُوَ بِقَوْلِ شَاعِرٍ ۚ قَلِيلًا مَّا تُؤْمِنُونَ ﴿٤١﴾

"Qur'aanku ereygii Rasuul sharaf leh weeyaan. Mana aha erey gabyaa, waxaa aad u yar inta aad rumaynaysaan."

Cumar waxa uu la yaabay sida wixii uu ku sheekaysanayey iyo aayaddu isugu beegmeen, markaas ayaa uu yidhi, "Waa faaliye," ka dibna waxa uu Suubbanuhu scw akhriyey,

وَلَا بِقَوْلِ كَاهِنٍ ۚ قَلِيلًا مَّا تَذَكَّرُونَ ﴿٤٢﴾ تَنزِيلٌ مِّن رَّبِّ الْعَالَمِينَ ﴿٤٣﴾ وَلَوْ تَقَوَّلَ عَلَيْنَا بَعْضَ الْأَقَاوِيلِ ﴿٤٤﴾ لَأَخَذْنَا مِنْهُ

10 Diraasah Naqdiyah, 1/132.

بِالْيَمِينِ ﴿٤٥﴾ ثُمَّ لَقَطَعْنَا مِنْهُ الْوَتِينَ ﴿٤٦﴾ فَمَا مِنكُم مِّنْ أَحَدٍ عَنْهُ
حَاجِزِينَ ﴿٤٧﴾ وَإِنَّهُ لَتَذْكِرَةٌ لِّلْمُتَّقِينَ ﴿٤٨﴾ وَإِنَّا لَنَعْلَمُ أَنَّ مِنكُم
مُّكَذِّبِينَ ﴿٤٩﴾ وَإِنَّهُ لَحَسْرَةٌ عَلَى الْكَافِرِينَ ﴿٥٠﴾ وَإِنَّهُ لَحَقُّ الْيَقِينِ ﴿٥١﴾
فَسَبِّحْ بِاسْمِ رَبِّكَ الْعَظِيمِ ﴿٥٢﴾

"Mana aha ereyga faaliye, waxaa aad u yar inta aad waansamaysaan. Waa mid laga soo dejiyey Rabbiga uunka leh Xaggiisa. Haddii uu Nagu abuuran lahaa hadallada qaarkood. Waxa Aan ku qaban lahayn midigta. Dabadeedna waxa Aanu goyn lahayn halbowlaha. Idinkana mid ma aha qof isaga wax ka celinayaa. Qur'aanku waxa uu waano u yahay mutaqiinta. Annagu waa Aan og nahay in ay idin ka mid yihiin kuwo beeninayaa. Waxa uu qoomamayn ku yahay kuwa gaaloobay. Waana run kama-dambays ah. Ee huf magaca Rabbigaaga Weyn."

al-Xaaqah: 40–52

Cumar waxa uu sheegay in markii uu aayadahan maqlay Islaamku qalbigiisa galay. Qisadan asalkeeda waxaa weriyey Imaam Axmed[11], waana sanad saxiix ah—laakiin, xadiis ahaan waxaa lagu qabsanayaa in dadka soo weriyey uu ku jiro Shurayx ibnu Cubayd oo aan gaadhin Cumar. Sidaas awgeed, waa daciif[12]. Ibnu Kathiir[13] markii uu ka hadlayey

11 Musnad Imaam Axmad, 1/17.
12 Diraasah Naqdiyah, 1/129, oo xiganaya al-Haythamii, Macmajuz Zawaa'id, 9/62.
13 Tafsiir Ibnu Kathiir, al-Xaaqah: 40-52.

tafsiirka aayadahan waxa uu tilmaamay in ay ka mid ahaayeen sabibihii saameeyey hanuuniddii Cumar. Waa qisada la moodo in ay ugu xoogga badan tahay dhanka xadiis ahaaneed. Qiso ahaanna waa la rumeysan karaa oo kuwa kale waxba kuma diiddana. Waxa ay tilmaamaysaana waa marxalad uu soo maray e, ma sheegayso in uu islaamay.

Qisada caanka ah ee aynu inta badan maxaadirooyinka ku maqalnay, faahfaahinta badanna ka bixisay qaabkii Cumar u soo islaamay, ma laha isnaad sugan oo lagu kalsoonaan karo. Muxaddiska iyo taariikhyahanka caanka ah, Imaam Dahabii, waxa uu sheekadan ku tilmaamay in ay tahay dhacdooyin la isku kabkabay, maxaa yeelay, dhawrka siyaabood ee lagu weriyey waa ay iska horimanayaan. Waxaa kale oo ay ka horimanaysaa qiso sugan oo uu weriyey Imaam Bukhaari, taas oo sheegaysa in markii Cumar uu ka war helay islaamidda ina-adeerkii ahna seeddigii, Sayd ibnu Camr, uu xadhig iyo ciqaab isugu daray[14]. Qisadani iyadu waxa ay sheegaysaa in Cumar uusan war u hayn, oo isaga oo warmaqabto ah oo Nebiga scw weerar ku ah, loo sheegay in walaashiis iyo seeddigii ay islaameen, dabadeedna uu sidaa gurigoodi ku tagey. Faahfaahinteediina waa tan.

WERINTA LAGA SOO TEBIYEY ANAS IBNU MAALIK RC

Werintani waxa ay leedahay Cumar oo seeftiisi ku jeeniqaaran ayaa jidka kula kulmay nin reer Banuu Suhrah ah (mid kale waxa ay leedahay ninka iyo Cumar isku reer baa ay ahaayeen: Banuu Cadiy). Ninkii baa waraystay

14 Fatxul Baarii, 8/584.

meesha uu Cumar u socdo, isaguna waxa uu ugu jawaabay in uu u socdo Muxammad oo uu rabo in uu dilo. Ninkii baa weydiiyey sida uu uga nabad galayo reer Banuu Haashim haddii uu Muxammad dilo. Cumar waxa uu ugu jawaabay, "Waxaa ii muuqata in aad diintaadii ka baxday!"

Ninkan Cumar la kulmay waxa uu ahaa Muslim isqarinaya, in Cumar sii qodqodo oo isaga ku soo jeestana dan uguma jirin. Nebiga SCW in wax la yeelana ma rabin e, xal kale ayaa uu raadiyey. Waxa uu yidhi, "Cumaroow, arrin layaab leh ma kaaga warramaa? Seeddigaa iyo walaashaa waa ay ka baxeen diintaadii."

Halkii ayaa uu Cumar ka leexday ilaa uu gaadhay gurigii walaashii Faadumo RC iyo odaygeedii Sayd RC. Waxaa saddexeeyey Khabbaab ibnul Arat SCW. Markii uu maqlay codkii dheeraa Cumar, ayaa uu Khabbaab isqariyey. Cumar reerkii waxa uu ku bilaabay su'aalo iyo qodqod. Wixii ugu horreeyey ee uu weydiiyey waxa uu ahaa, "Waa maxay nuxnuxdan aan idin ka ag maqlayey?"

Sida ay qisadu sheegtay, waxa ay akhrinayeen suuradda Daahaa laakiin taas uma aysan sheegin e, waxa ay yidhaahdeen, "Waanu iska sheekaysanaynay."

"Armaa aad diintii ka baxdeen?" ayaa uu Cumar yidhi.

"Cumaroow, ka warran haddii xaqu ku jiro diintaada mid aan ahayn?" Sayd baa weydiiyey.

Cumar afka ugama jawaabin e, inta uu ku booday ayaa uu si xun u waxyeelleeyey. Faadumo oo ninkeedii u soo gurmatayna nabar wejigeedii ka dhiijiyey ayaa uu ku dhuftay. Inta ay cadhootay ayaa ay tidhi, "Ka warran, Cumaroow, haddii xaqu uu ku jiro diin aan taada ahayn? Ma qiraysaa in aysan jirin cid la caabudo oo aan Alle ahayn,

oo ma qiraysaa in Muxammad yahay Rasuulkiisii?"

Faadumo isqarintii waxa ay u beddeshay in ay mabda'eedi caddaysato, oo ay Cumar dood la gasho. Markii uu ka quustay ayaa uu ku yidhi, "Ii dhiiba kitaabka aad haysataan aan akhriyo e."

Cumar waxa uu ka mid ahaa Qurayshta farakutiriska ah ee wax akhriska yaqaannay xilligan.

"Nijaas baa aad tahay, cid aan daahir ahaynna ma taabato e, orod oo soo qubayso ama weyseyso." Ayaa ay Faadumo ku tidhi—sida ay qisadani sheegayso. Markii uu isa soo daahiriyey ayaa uu akhriyey kitaabkii, waxaana ku qornaa aayadaha bilowga suuradda Daahaa, ilaa uu gaadhay,

إِنَّنِي أَنَا اللَّهُ لَا إِلَٰهَ إِلَّا أَنَا فَاعْبُدْنِي وَأَقِمِ الصَّلَاةَ لِذِكْرِي ﴿١٤﴾

"Anigu waxa aan ahay Allaah, ma jiro Ilaah aan Aniga ahayn, ee I caabud, salaaddana u oog Xuskayga."

Daahaa: 14

Kolkaa ayaa uu Cumar codsaday, "Muxammad ii geeya."

Khabbaab ayaa markii uu intaa maqlay dhuumashadii ka soo baxay oo yidhi, "Bishaarayso Cumaroow, waxa aan rejaynayaa in aad tahay ducadii Rasuulka Alle scw ee habeenkii Khamiista." Khabbaab waxa uu sheegay in uu Nebigu scw ku duceeyey,

اللهم أعز الإسلام بعمر بن الخطاب أو بعمرو بن هشام

"Alloow Islaamka ku xooji Cumar ibnul Khaddaab ama Camr ibnu Hishaam."

Intaa ka dib, waxa ay u sheegeen in Rasuulku SCW joogo Daarta Arqam. Xamse RC, Dalxah RC, iyo saxaabo kale oo kadinka taagnaa ayaa arkay, markaas ayaa qaar ka mid ah ay cabsi gashay. Xamse oo taas dareemay ayaa ku yidhi, "Haddii uu Alle khayr la rabo Cumar, waa uu islaamayaa, Nebigana SCW waa uu raacayaa. Haddii kalese, dilkiisu waxba naguma aha."

Markii uu Cumar yimid, ayaa uu Nebigu SCW go'ii Cumar iyo seeftii uu watey inta uu isku qabtay oo uu dhuuntiisa isugu geeyey, waxa uu ku yidhi, "Cumaroow, miyaadan joogsanayn ilaa Alle kugu rido hooggii iyo beladii uu ku riday Waliid ibnul Muqiirah? Alloow, kani waa Cumar ibnul Khaddaab. Alloow, diinta ku xooji Cumar ibnul Khaddaab." Kolkaas ayaa uu Cumar yidhi, "Waxa aan qirayaa in aad tahay Rasuulkii Alle."

Sidaas ayaa uu ku islaamay. Intaa kuma uusan joogin e, isla markiiba waxa uu codsaday in Rasuulka SCW iyo saxaabadu ay isqarinta joojiyaan oo ay bannaanka u baxaan.

Sheekadan waxaa laga soo xigtey nin la yidhaahdo Qaasim ibnu Cusmaan al-Basrii, oo ay culamada xadiisku—sida Bukhaarii, Cuqaylii, iyo Daaraqudnii—daciifiyeen, markii dabagal lagu sameeyeyna waxaa la ogaaday in uu yahay qofka keli ah ee warkan laga maqlay, oo aysan cid kale ku raacin soo tebintiisa. Imaam Dahabii waxa uu sheekadan ku tilmaamay in ay aad *munkar* u tahay oo aan la qaadan

karin.[15]

Waxaa layaab leh sababta ay Waliid ibnul Muqiirah u tilmaantay. Waliid waxa uu ka mid ahaa odayaashii Quraysheed ee Nebiga scw aadka u dhibi jirey, isaga ayaana lagu soo dejiyey aayadaha suuradda al-Muddathir qaar ka mid ah. Intii aan arkay, kutubta taariikhdu ma sheegin wax gaar ah oo ku dhacay xilligan Cumar islaamayey, waxa uuna dhintay hijradii wax yar ka dib.

Midda kale, ninka Cumar jidka kula kulmay, haddii uu arkay Cumar oo raba in uu Nebiga scw dilo, dabadeedna uu dhan kale u diray, maxaa uu ugu tagi waayey, oo uu ugu sii digi waayey? Kutubta taariikhdu ma xusin in uu sidaa yeelay.

WERINTA LAGA SOO TEBIYEY ASLAM, MAWLIHII CUMAR RC

Cumar isaga ayaa ka sheekaynaya sidii uu u soo islaamay. Guud ahaanna tii hore ayaa ay la mid tahay. Waxa ayse kaga duwan tahay meelo kooban, iyo faahfaahin dheeraad ah oo ay ka bixisay wixii uu sameeyey ka dib markii uu islaamay. Sida qisadan ku xusan, suuradda warqadda ku qornayd waxa ay ahayd al-Xadiid, aayadaha 1–7. Waxa ay intaa ku dartay, in uu Cumar ashahaatay isla markii uu akhriyey aayadahaas, isaga oo weli gurigii walaashii jooga. Werintani waxa ay intaa raacisay in markii uu tagey daartii Arqam, uu Nebigu scw ku yidhi, "Ina Khaddaaboow islaan, Alloow hanuuni." Ka dibna uu Cumar ku jawaabay:

أشهد أن لا إله إلا الله ، وأشهد أن محمدا عبده ورسوله

15 Miisaanul Ictidaal, 3/375.

"Waxa aan qirayaa in uusan jirin ilaah aan Alle ahayn, waxa aanna qirayaa in Muxammad yahay Addoonkiisi iyo Rasuulkiisi."

Markaas ayaa ay Muslimiintii farxad darteed takbiirsadeen—ilaa codkoodii hareeraha Makah laga maqlay. In ay isqarinayeenba waa ay illaaween! Laakiin su'aashu waxa ay tahay, haddii uu guriga ku soo ashahaatayba, maxaa uu ugu sheegi waayey Nebiga scw?

Werintani waxa ay faahfaahin ka bixinaysaa tallaabadii ugu horraysay ee uu qaaday ka dib markii uu ashahaatay. Cumar waxa uu yidhi, "Muslimiinta la dhibayo ee la garaacayo ayaa aan rabey in aan wax la qaybsado. Kolkaas ayaa aan u tagey abtigay oo la tixgalin jirey."

Cumar markii uu gurigii abtigii gaadhey ee albaabkii laga furay ayaa uu abtigii ku salaamay, "Ma og tahay in aan islaamay?" Abtigii waa uu ka naxay, laakiin awood uu Cumar ku dhibaateeyo ma lahayn, waxa uu yidhi, "Ma kaa dhab baa?!" Taas oo Cumar kaga warceliyey, "Haa.". Abtigii oo damacsan in uu ka waaniyo tallaabadan ayaa ku yidhi, "Ha samayn." Cumarna waxa uu ugu jawaabay, "Sameeyeyba!"

Abtigii inta uu gurigii galay baa uu albaabkii ka xidhay Cumar oo dibadda taagan.

Kutubta qaar waxa ay sheegaan in abtigani ahaa Abuu Jahal, waana suuragal oo Cumar abti kasta isagama tageen e, sabab uu u doortay ayaa jirtey. Haddii uu Abuu Jahal ahaa, sababtu waa ay caddahay oo waxa uu ahaa qofka ugu Islaam nacaybka badan, dhibaatada ugu badanna ku hayey Muslimiinta.

Qisadu waxa ay sheegtay in uusan Cumar intaa ku joogin e, markii abtigii waxba ku samayn waayey, uu aadey mid kale oo odayaashii Quraysheed ka mid ah. Kiina intii in le'eg baa uu ugu jawaabay. Iyada oo qorshihiisi socon la'yahay ayaa lagu yidhi, "Haddii aad rabtid in lagu ogaado, hebel u tag oo u sheeg." Ninkan loo diray waxaa la odhan jirey Jamiil ibnu Macmar, waxa uuna ahaa nin aan waxba qarin. Markii uu u tagey warkiina u sheegay, ayaa uu Jamiil yidhi, "Miyaad samaysay?" Cumarna waxa uu ku jawaabay "Haa." Jamiil aflabadii baa uu yeedhay, "INA KHADDAAB WUU ISLAAMAY!"

Goobtu waa Kacbada agteeda oo ahayd barkulankii reer Makah, waana la buuxaa. Hal mar baa ay sidii shinni ku soo xoomeen oo ay dagaal ku bilaabeen, isaguna kii wax ku dhuftaba uu intii in le'eg gaadhsiinayey, ilaa abtigii yimid oo uu ka magan galiyey, dabadeedna waa ay ka fuqeen.

In muddo ah markii uu sidaa ku nabad galay, waa ay u cuntami weyday in Muslimiintii dhib iyo jidhdil lagu wado isagiina uu nabad qabo. Abtigii ayaa uu u tagey oo uu ka codsaday in uu magangalintiisii la noqdo. Halkii baa dirirtii ka bilaabatay mar kale ilaa Islaamkii ka xoogaystay.

Suuradda al-Xadiid waxa ay soo degtay xilligii Nebigu scw uu Madiinah ku noolaa, suuragalna ma aha in ay warqad ku qornayd markii Cumar islaamayey. Haddii aan raadraacno silsiladda lagu weriyey sheekadan (dadka kala weriyey), waxaa ku jira nin la yidhaahdo Isxaaq ibnu Ibraahiim al-Xunaynii. Muxaddiska weyn ee Imaam al-Bazzaar waxa uu sheegay in Isxaaq indho beelay oo uu xadiiskiisii isku dhex yaacay. Imaam Xaakim isna waxa

uu tilmaamay in xadiisyada uu weriyo ay ku jiraan kuwo *munkar* ah—oo aan wax-ka-sooqaad lahayn. Sidaas oo kale, waxaa xadiisyadiisa daciifiyey Bukhaarii iyo Nasaa'ii. Waxa ugu weyn ee lagu haystaana waa dhanka xifdigiisa[16]. In kasta oo ay taasi jirto, sida aan dib ka arki doonno, meelo ka mid ah qaybta dambe ee faahfaahinaysa wixii dhacay islaamiddiisa ka dib, waxaa taageeraysa werin kale oo iyadu saxiix ah.

WERINTA LAGA SOO TEBIYEY THAWBAAN RC

Middani kuwii hore waxa ay kaga duwan tahay in markii uu walaashiis nabarka wejiga kaga dhuftay, uu habeenkii ku riyooday iyada oo akhrinaysa suuradda Iqra' (al-Calaq). Dabadeedna waxa uu aadey Nebiga scw. Bilaal oo kadinka joogey ayaa uu idan ka qaatay. Markii uu Nebiga scw la kulmayna waa uu islaamay. Sida muuqata aad baa ay uga duwan tahay kuwii kale ee aynu soo marnay. Isnaadkeeda waxaa ku jira nin la yidhaahdo Yasiid ibnu Rabiicah ar-Raxbii, oo ay culamadu ku tilmaamaan nin aan waxba laga qaadan; *matruuk*. Imaam Juusajaanii waxa uu yidhi, "Waxa aan ka baqayaa in xadiisyadiisu yihiin wax uu alliftay (*mawduucah*)."[17]

WERINTA LAGA SOO TEBIYEY IBNU CUMAR RC

Werintani waxa ay inna siinaysaa sababtii Cumar ku kalliftay in uu isku dayo dilitaanka Nebiga scw. Waxa ay sheegtay

16 Diraasah Naqdiyah, 1/137.
17 Miisaanul Ictidaal, 4/422.

in odayaashii Quraysh ay kulmeen oo ay isla soo qaadeen dilka Nebiga scw. Cumar ayaa qaatay masuuliyadda in uu hawshaas fuliyo. Warkii ayaa gaadhey Nebiga scw, ka dibna, goor ay makhribkii ahayd ayaa uu Cumar albaabka soo garaacay. Ma aha gurigii walaashii iyo Daartii Arqam toona e, waxa uu toos u aadey gurigii Nebiga scw. Xilligaa waxaa Nebiga scw la joogey sagaal nin iyo Khadiijah, laakiin Xamse magiciisa lama sheegin. Saxaabadii halkaa joogtey waxa ay rabeen, in maadaama iyaga oo sagaal ah ay Cumar heleen xilli habeen ah, in ay ka aargoostaan, laakiin Nebigu scw taas in uu oggolaado iskadaa e, waxa uu ugu duceeyey isla ducadii hore aynu u aragnay—"Alloow Islaamka ku xooji Cumar ibnul Khaddaab." Markii uu soo galay baa uu waraystay Nebiga scw,

"Maxaad leedahay, Muxammadoow?"

Nebigu scw waxa uu u soo koobay caqiidadii Islaamka. Ka dibna Cumar halkaas ayaa uu ku ashahaatay. Saxaabadii baa biyo korka uga shubay ilaa uu ka qubeystay. Ka dibna Nebiga scw ayaa uu la casheeyey lana tukadey. Markii ay waaberisteen ayaa uu seeftiisii qaatay, Nebiguna waa uu dabo galay, iyada oo saxaabadii kalena ku xigaan, ilaa ay Mushrikiintii soo dul istaageen, ka dibna hortooda ayaa uu ku ashahaatay.

Qurayshi halkii baa ay quus la kala dareertay!

Sheekadan waxaa haysta dhibaatooyinkii kuwii hore, oo waxaa werinaya dad aan lagu kalsoonayn. Intaa waxaa u dheer, qaarkood lama yaqaannaba, oo dabagal laguma samayn karo si warkooda loo hubiyo, sidaas ayaana ay daciif ku noqotay[18]. Midda kale, haddii uu Cumar u baxay

18 Diraasah Naqdiyah, 1/139; 1/128.

in uu dilo Nebiga SCW, maxaa isbeddelay markii uu guriga gaadhey?

In kasta oo aan saxiixnimada wararka taariikhda aad la isugu dhibin, dabagalku waxa uu yeelanayaa muhimad dheeraad ah, marka wararkii la soo tebiyey ay iska horyimaaddaan, ama ay aad u kala duwanaadaan, iyaga oo isla dhacdo keli ah ka hadlaya. Wararka kala duwan ee ku saabsan islaamidda Cumar waa ay ku yar yihiin wax saxiix ah oo lagu kalsoonaan karo. Inta saxiixa ahi waxa ay la xidhiidhaan wixii dhacay ka dib markii uu islaamay. Iyada oo ay taasi jirto, waxa ay culamada qaarkood, sida Ibnu Cabdilbarr iyo Ibnu Xajar, u janjeedhaan dhanka in uu guriga walaashiis Qur'aan ka maqlay, iyada oo laga dareemayo in ay werintaas ku qabaan xoogaa kalsooni dheeraad ah.

Si ay ku dhacdayba, Qur'aanku kaalin weyn ayaa uu ku lahaa islaamiddii Cumar, waana mid wararka aynu soo tilmaannay ee kala duwani ay ka siman yihiin. Sidaas oo kale, ducadii Nebigu SCW qayb weyn ayaa ay ka qaadatay, oo ducada Nebigu SCW waa *mustajaabah* (waa la aqbalaa).

Waxaa jira war laga soo tebiyey Cabdullaahi ibnu Cabbaas RC oo sheegaya in iyada oo ay Nebiga SCW raaceen soddon iyo sagaal (39) qof, uu Cumar soo islaamay oo uu afartankii buuxiyey. Ka dibna ay soo degtay aayadda 64'd ee suuradda al-Anfaal,

يَا أَيُّهَا النَّبِيُّ حَسْبُكَ اللَّهُ وَمَنِ اتَّبَعَكَ مِنَ الْمُؤْمِنِينَ

"Nebiyahow, waxaa kugu filan Alle, Mu'miniinta ku

raacdayna (isaga ayaa ku filan)."

al-Anfaal: 64

Waxaase xusid mudan, in suuraddani ay soo degtay ka dib markii uu Nebigu SCW u hijrooday Madiinah—gaar ahaan dagaalkii Beder ayaa ay ku soo degtay, waana muddo ku dhow in sagaal sano laga joogo islaamiddii Cumar. Ibnu Kathiir markii uu aayaddan fasirayey ayaa uu sheegay warkan, waxa uuna yidhi sax ma aha maadaama ay aayaddu xilligii Madiinah soo degtay, islaamiddii Cumarna ay u dhexaysay hijradii Xabasha iyo tii Madiinah.[19]

Tiradan 40'ka ah iyo kuwo kale oo la sheegaba shaki ayaa ku jira. Waa mid e, markii uu muslimay saxaabadii qaar baa ku maqnaa Xabasha oo aan xisaabtan ku jirin. Waa midda kale e, weli dad baa isqarinayey oo ma uusan ogaan karin tirada dhabta ahi inta ay gaadhaysey. Tan waxaa laga dheehan karaa in muddo yar ka dib ay hijradii labaad ee Xabashah u bexeen rag gaadhay 83 iyo ilaa 13 haween ah. Muddo tiro intaas le'egi ku muslintana waa ay ka yarayd. Waxa ay u badan tahay—sida Ibnu Kathiir sheegay—in tiradani ay tahay intii rag markaa Nebiga SCW la joogey ee Cumar uu arki karayey.

Cabdullaahi ibnu Mascuud RC oo ka faalloonaya isbeddelkii ay keentay islaamidda Cumar waxa uu yidhi, "Laga bilaabo markii Cumar islaamay awood iyo sharaf baa aanu ku noolayn."[20] Sidaas oo kale waxa uu yidhi, "Haddii

19 Tafsiir Ibnu Kathiir, al-Anfaal: 64.
20 Fatxul Baarii, 8/587.

aad na arki lahayd annaga oo aan awood u lahayn in aanu ku tukanno Guriga (Kacbada) ilaa uu Cumar islaamay—markii uu Cumar islaamay ayaa aanu la dagaallannay ilaa ay salaaddii noo daayeen."[21] Mar kalena waxaa laga soo weriyey, "Islaamiddii Cumar waxa ay ahayd awood iyo sharaf, hijradiisina gargaar, madaxtinimadiisina naxariis. Wallaahi, si muuqata uguma aannaan tukan karin Guriga (Kacbada) agtiisa ilaa Cumar islaamay."[22]

Hadalka Ibnu Mascuud RC waxa uu soo koobayaa sidii xaaladdu isu beddeshay ka dib markii Cumar islaamay. Ibnu Mascuud RC waxa uu ahaa wiil yar oo aan Makah u dhalan, waxa uuna adhiga u raaci jirey Cuqbah ibnu Abii Mucayd—Mushriggii Nebiga SCW oo tukanaya hasha mandheerteeda dusha ka saaray. Cabdullaahi isaga ayaa dhacdadaas innoo soo weriyey oo goobta joogey, laakiin awood uu wax kaga qabto ma lahayn. Islaamiddii Cumarna awood badan ayaa ay u yeeshay isaga iyo Muslimiintii kale ee ay mushrikiintu madaxa kaga taagnaayeen.

Suhayb RC iyo Cabdullaahi ibnu Cabbaas RC ayaa iyagana laga soo weriyey in ay yidhaahdeen, "Markii Cumar islaamay ayaa ay Mushrikiintii yidhaahdeen, 'Hadda ayaa ay innaga aargoosteen!'"[23]

Waxaa la sheegaa in islaamiddii Xamse ibnu Cabdulmuddalib iyo Cumar ay u dhexaysay saddex cisho. Labadan halyey ee waaweyn, Xamse iyo Cumar,

21 As-Siirah an-Nabawiyah as-Saxiixah, 1/178.
22 Fatxul Baarii, 8/383.
23 Fatxul Baarii, 8/384.

islaamiddoodu waxa ay Quraysh ku noqotay filanwaa'. Jaahwareer iyo argagax baa ku dhacay. Taas oo ay kaga falceliyeen in ay cadaadiskii ay Muslimiinta ku hayeen sii jibbaaraan. Wixii ay awood hayeen ayaa ay isugu geeyeen sidii ay u damin lahaayeen nuurkii Islaamka, una baabi'in lahaayeen Muslimiintii tirada yarayd ee Makah ku noolaa.

Sheekadii ku saabsanayd islaamidda Cumar ee laga soo tebiyey Aslam, waxa aynu si kooban ugu aragnay ninkii warka badnaa ee uu Cumar u tagey si uu islaamiddiisa u baahiyo. In kasta oo ay guud ahaan sugnaanteedu liidatay, waxa aan sheegay in qaybta ninkan tilmaamaysa laga soo tebiyey dad kale ayna sugan tahay. Sida taariikhyahanka Ibnu Hishaam kitaabkiisa siirada ku dhigay[24], Cumar markii uu islaamay waxa uu ku dhaqaaqay sidii uu warkaa u faafin lahaa oo uu Quraysh oo dhan u gaadhsiin lahaa. Waxa uu raadiyey cidda Quraysh ugu warka badan ee aan waxba qarin. Nin arrintaa caan ku ahaa oo magiciisu ahaa Jamiil ibnu Macmar al-Jumaxii, ayaa loo tilmaamay. Dabadeedna markii waagu baryey ayaa uu Cumar ninkii ku kallahay, waxa uuna u sheegay in uu islaamay. Jamiil isaga oo aan waxba hubsan baa uu fadhigii ka kacay, oo uu dhaqaajiyey isaga oo go'iisi jiidaya! Cumarna waa uu dabo galay. Markii uu gaadhey Kacbada, oo meeshii la isugu imaan jirey ahayd, ayaa uu aflabadii yeedhay,

"QURAYSHEEY! CUMAR IBNUL KHADDAAB WAXA UU NOQDAY SAABI'"

Saabi' waa erey ay u adeegsan jireen qofka islaama, oo ka

24 Ibnu Hishaam, 1/347.

dhigan waa uu gaaloobey.

Cumar oo dabo socdaana waxa uu lahaa, "Waa beentiisa e, waa aan islaamay, waxa aanna qiray in uusan jirin Ilaah aan Alle ka ahayni, Muxammadna yahay Addoonkiisi iyo Rasuulkiisi."

Hal mar baa ay ku kaceen, oo sidii ay u garaacayeen, isaguna kii uu qabtaba uu u garaacayey—ay qorraxdii korkooda istaagtay. Cumar markii uu daaley ayaa uu iska fadhiistay isaga oo leh, "Wixii aad doontaan sameeya. Alle ayaa aan ku dhaartaye, haddii aanu ahaan lahayn 300 oo nin, waa aad nooga tagi lahaydeen ama waa aanu idiin ka tagi lahayn."

Cumar waxa uu lahaa dareen cajiib ah. Si degdeg ah ayaa uu u dersay Muslimiintii iyo awooddoodii, waxa uuna ogaadey in dadkan oo ay tiradoodu 300 gaadhayso ay awood u yeelanayaan in ay Quraysh inteeda kale iska celin karaan. Waxa aan ogsoonnahay in goobtii dagaal ee ugu horraysay ee Muslimiinta iyo Mushrikiintii ku diriraan ay ahayd Beder, sannadkii labaad ee hijrada. Tirada saxaabadu waxa ay ahayd saddex boqol iyo dhawr-iyo-toban nin, waxa ayna si ba'an u jabiyeen Mushrikiintii oo kun nin gaadhayey. Waa maalintii odayaashii Quraysh madaxda u ahaa intoodii badnayd maydkoodii ceelka lagu guray.

Cumar waxa uu awood sare u lahaa garashada dadku waxa ay galaan iyo waxa ay gudaan. Waxa aad dareemi kartaa sababta Nebigu scw uu Cumar ku doortay uguna duceeyey, Mushrikiintuna uga naxeen islaamiddiisa.

Iyaga oo sidii shinnida ugu xoonsan ayaa odayaashii Quraysheed mid ka mid ahaa goobtii yimid.

"Maxaa idin ku dhacay?" baa uu warsaday.

Waxa ay ugu jawaabeen, "Cumar baa saabi' noqday."

Odaygii waxa uu yidhi, "Waa nin naftiisa arrin u doortay e, maxaad ka rabtaan? Ma u malaynaysaan in reer Banuu Cadiy ninkooda sidaa idiin ku daynayaan?"

Halkii baa faraha lagaga qaaday.

Cumar wiilkiisii Cabdullaahi, oo goobjoog ka ahaa dhacdadan, sheekadana soo weriyey ayaa yidhi, "Sidii maro laga dul xayuubiyey baa ay uga kala dareereen."[25]

Beri dambe markii Madiinah la tagey ayaa uu Cabdullaahi aabbihii weydiiyey odaygii maalintaas badbaadiyey, markaas ayaa uu Cumar u sheegay in uu ahaa Caas ibnu Waa'il, oo ka mid ahaa madaxdii Quraysh ee Nebiga SCW aadka u dhibi jirey. Waxa uuna dhalay saxaabigii weynaa ee Camr ibnul Caas RC. Culamada tafsiirka qaar ka mid ahi waxa ay sheegeen in suuradda al-Khawthar (*Innaa Acdayn*) ay ku soo degtay, oo ay u jawaabayso Caas ibnu Waa'il.

In kasta oo uu maalintaas halkaa kaga badbaadey, waxaa muuqata in aysan sidaas kaga hadhin e, ay dabagaleen ilaa uu gurigii ka bixi kari waayey. Cabdullaahi oo mar kale ka warramaya wixii kala qabsaday aabbihii iyo mushrikiintii Quraysheed, waxa uu sheegay in Cumar oo cabsi darteed gurigiisi jooga uu u yimid Caas ibnu Waa'il. Markii la iswaraystay ayaa uu Cumar u sheegay in Qurayshi rabto in ay dilaan maadaama uu islaamay. Caas waxa uu yidhi cid ku taaban kartaa ma jirto, isaga ayaana magangalyo siiyey.

Caas markii uu gurigii Cumar ka laabtay, ayaa waxaa ka hor yimid dad badan. Kolkii uu waraystay meesha ay u socdaanna waxa ay u sheegeen in ay ku socdaan Cumar.

25 As-Siirah an-Nabawiyah as-Saxiixah, 1/180.

Markaas ayaa uu u sheegay in uu isagu magan galiyey oo aan la taaban karin. Halkii ayaana ay ka noqdeen.

Hore ayaa aan u soo aragnay in Quraysh dhexdeeda ay kala lahaayeen isbahaysiyo hoosaad, oo markii ay Banuu Cabdimanaaf isku dayeen in ay Banuu Cabdiddaar ka qaadaan jagooyinkii ay haysteen waa tii la kala saftay. Beesha Cumar (Banuu Cadiy) iyo beesha Caas (Banuu Sahm) waxa ay ku jireen isbahaysigii taageersanaa Banuu Cabdiddaar ee dhiigga gacanta darsaday.

Dhaqankan magangalinta aad ayaa loo qaddarin jirey, oo in qof aad magan galisay laguu dhaafo oo waxyeello loo geystaa, waxa ay keeni kartey in reero idil isku baaba'aan. Sida ay dhaqanka Carabta uga reebbanayd in maganta la isu dhaafo, ayaa ay dhaqanka Soomaalidana uga reebbanayd. Soomaalidu maganta waxa ay u qaybin jireen: magan kula taal, magan kuu timi, magan kaa tagtay, iyo magan kugu soo socota. Waxa aana lagu maahmaahaa, "Raggu saddex waa iskaga mid: magaca, magta iyo maganta." Waxaa jirtey magangalin qofka bixinaya xoolo lagu siiyo, qofkaasna waxaa lagu magacaabi jirey Abbaan.

Dadkii xilligan magangalyada la siiyey waxaa ka mid ahaa Abuu Bakar RC. Nebiguna SCW markii uu Daa'if ka soo laabtay ee uu Makah gali kari waayey, waxaa magan galiyey Mudcim ibnu Cadiy oo inta ay wiilashiisii iyo tolkii hubkoodii soo qaateen ay Nebiga SCW soo kaxeeyeen ilaa ay Kacbada keeneen. Ka dibna Mudcim oo Mushrikiintii la hadlaya ayaa yidhi, "Quraysheey, Muxammad waa aan magan galiyey, ee cidina yaa aysan taaban." Waxaa la sheegaa in Abuu Jahal uu Mudcim kala weydiiyey in uu

magan galinayo oo keli ah, iyo in uu raacay oo uu Muslim noqday, Mudcimna uu ugu jawaabay, "Waxa aan ahay magangaliye." Markaas ayaa uu Abuu Jahal yidhi, "Waa aanu magan galinnay cidda aad magan galisay."

Nebigu scw abaalkaas ma illaawin, oo dagaalkii Beder dadkii Quraysh laga qabsaday mar uu ka hadlayey waxa uu yidhi, "Haddii Mudcim ibnu Cadiy uu noolaan lahaa oo uu kuwan qudhunka ah igala hadli lahaa, waa aan u sii dayn lahaa."[26] Nebigu scw waxa uu sidaa leeyahay iyada oo uu Mudcim gaalnimo ku dhintay—"Abaal dad galaa badan, dad gudaase yar." Mudcim wiilashiisii waxaa ka mid ah saxaabiga Jubayr ibnu Mudcim rc.

Mushrikiintii waxa ay sii kordhiyeen cadaadintii iyo ciqaabtii ay Muslimiinta ku hayeen. Waxa ay waardiye ka qabteen irridihii Makah, si aan cid Muslim ahi uga baxsan, intii reerahoodu xidhi karayeenna waa la xidhxidhay.

Si ay noqotaba, Alle ayaa u suuragaliyey in ay mar labaad ka baxsadaan dhibtii Qurayshi ku haysay. Waxaa hijradii labaad u baxay ilaa 83 nin iyo 18 ama 19 dumar ah, oo uu hoggaaminayey Jacfar ibnu Abii Daalib rc.

Hijradan labaad ee Xabasha lagu aadey waxaa ku jirey Qudaamah ibnu Madcuun rc oo qabey Cumar walaashiis, laakiin magaceedu kuma jiro dadkii hijradaa u baxay, waxa aana suuragal ah in aysan isqabin xilligaas ama ay sabab kale uga hadhay. Sidaas oo kale, waxaa ka mid ahaa dadkii hijrooday Cabdullaahi ibnu Mascuud rc, taas oo xoojinaysa in islaamidda Cumar u dhexaysay labada hijrood. Maxaa yeelay Cabdullaahi waxa uu joogey dhacdooyinkii

26 Fatxul Baarii, 9/73-75.

islaamidda Cumar ka dambeeyey iyo isbeddelkii ay keentay.

Mushrikiintii waxaa ku beryey waa cusub. Waxa ay arkeen in wax kasta oo ay sameeyaan aysan hor istaagi karin Islaamka. Waxa ay isku dayeen in ay Nebiga SCW la saayiraan oo meel dhexe la isugu yimaaddo, laakiin Nebigu SCW waa uu ka diiday. Albaab kasta oo ay xal ka raadin lahaayeen markii uu soo xidhmay, waxaa caddaatay in ay qaadi doonaan tallaaboyin rejogo' ah, taas oo cabsi galisay Abuu Daalib[27]. Waxa uu isugu yeedhay tolkii (Banuu Haashim iyo Banuu Cabdulmuddalib). Kulankoodii ka dib, gaalkoodii iyo Muslimkoodiiba waxa ay isku ballansadeen in ay ilaaliyaan Nebiga SCW. Waxaa reerka ka fallaagoobay Abuu Lahab, oo isagu diiday qorshihii tolku isku raacay.

Quraysh inteedii kalena waxa ay go'aan ku gaadheen, in ay Banuu Haashim iyo Banuu Cabdulmuddalibba xidhiidhka u jaraan. Waxa ay go'aansadeen in aysan ka guursan, wax ka gadan waxna ka gadin, la fadhiisan, dhex galin, la hadlin—haba yaraato e, in aysan wax xidhiidh ah la samayn ilaa ay soo dhiibaan Muxammad, si loo dilo.

Heshiiskii warqad ayaa lagu qoray waxaana la sudhay Kacbada dhexdeeda. Halkaas ayaa Banuu Haashim iyo Banuu Cabdulmuddalib cunaqabatayn lagu saaray. Dhaqaale ahaan iyo bulsho ahaanna waa la go'doomiyey. Waa muddo aan bil gaadhin ka dib islaamiddii Xamse RC iyo Cumar RC. Laga bilaabo bishii Muxarram ee sannadkii toddobaad, waxa ay ku go'doonsanaayeen Goshii (*shicb*) Abuu Daalib. Silic iyo rafaad aad u badan ayaa halkaa ku haleelay, kaas oo gaadhsiiyey in ay caleenta dhirta iyo hargaha xoolaha cunaan. Saddex sano ayaa ay halkaa ku go'doonsanaayeen,

27 Ar-Raxiiq al-Makhtuum, 95-96.

ilaa cunaqabatayntii la joojiyey sannadkii tobnaad.[28]

Lix bilood markii la joogey ayaa uu Abuu Daalib geeriyooday. Labo ilaa saddex bilood ka dibna waxaa raacday Hooyadii Mu'miniinta, Khadiijah bint Khuwaylid RC. Waana sababta sannadkan loogu tilmaamo *Caamul Xusn*, ama Sannadkii Murugada. Labo tiir oo uu Nebigu SCW taageeradooda ku xoogganaa ayaa meeshii ka baxay.

Geeridii Abuu Daalib waxa ay dhiirigalisay Mushrikiintii, oo sii kordhiyey dhibkii ay Nebiga SCW iyo Muslimiintaba ku hayeen. Nebigu SCW waxa uu isku dayey bal in uu bannaanka Makah dacwada gaadhsiiyo, dabadeedna waxa uu aadey Daa'if oo aan aad uga fogayn Makah. Iskadaa in ay wax ka dhegaystaan e, isagii martida u ahaa ayaa ay si xun ula dhaqmeen, waxa ayna ku direen ciyaalkii iyo addoomihii si ay u dhagxiyaan. Soolaabadkiina waxaa magan galiyey Mudcim ibnu Cadiy—sidii aan soo marnay. Halkii baa ay dacwadii Makah ka sii socotay, oo uu Nebigu SCW ciddii uu arkaba diinta ugu yeedhayey. Xilliga xajka oo Carab oo dhan Makah timaaddana qabiilo kasta waa uu u tagi jirey si uu diinta u gaadhsiiyo, iyo bal in uu ka helo taageero iyo degaan isaga iyo asxaabtiisu ay u wareegaan.

Xajkii sannadkii koow-iyo-tobnaad ayaa uu Nebigu SCW la kulmay lix dhalinyaro ah oo Yathrib (markii dambe: Madiinada) ka yimid. In yar markii la iswaraystay ayaa uu Nebigu SCW ka codsaday in ay fadhiistaan si uu ula hadlo, waana ay ka oggolaadeen. Goobtii ayaa uu diinta ugu soo bandhigay oo uu Qur'aan ugu akhriyey[29]. In kasta oo ay

28 Ar-Raxiiq al-Makhtuum, 100.

29 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 3/400-401; As-Siirah an-Nabawiyah as-Saxiixah, 1/196-197.

mushrikiin ahaayeen, haddana nebinimadu kuma aysan cusbayn, maxaa yeelay, waxaa la degganaa Yahuud ahlul kitaab ah.

Mushrikiinta Carbeed ee Yathrib degganaa waxa ay ahaayeen labo beelood: Aws iyo Khasraj, waxaana muddo dheer ka dhex aloosnaa dagaal ba'an oo ay isku dhammeeyeen. Intaa waxaa u dheerayd, Yahuudda iyo Mushrikiintu marka ay wax isku qabtaan, ayaa ay Yahuuddu ugu gooddin jireen in nebi u soo bixi doono oo wakhtigiisi la joogo, dabadeedna ay cidhibtiri doonaan Carabta mushrikiinta ah. Haddaba, markii Nebigu scw la hadlay lixdii dhalinyarada ahaa, qaarkood ayaa markiiba yidhi waa nebigii Yahuuddu innoogu hanjabayeen e, yaan la innooga hor marin. Sidaas ayaana ay ku aqbaleen, diintiina ku qaateen, waxa ayna ballan qaadeen in ay tolkoodii warka gaadhsiin doonaan diintana ugu yeedhi doonaan. Markii ay magaaladii ku laabteen ayaa ay warkii faafiyeen ilaa guri kasta laga ogaaday Islaamkii.

Sannadkii ku xigayna waxaa xajka yimid 12 ka mid ah reer Yathrib. Waxa ay Nebiga scw kula kulmeen goobta al-Caqabah, halkaas oo ay bayco (heshiis) kula galeen[30]. Qodobbadii baycada waxaa ka mid ahaa in aysan Alle u shirki yeelin, in aysan waxba xadin, sinaysanin, ilmahooda dilin, xadgudub af iyo addin toona in aysan la imannin, iyo in aysan wanaag ku caasiyin Nebiga scw. Haddii ay intaas ka soo baxaan in ay Janno ku helayaan, haddii kalena—Alle haddii uu rabo uu cadaabayo, haddii uu rabana uu u dembi dhaafayo. Nebigu scw waxa uu ku daray Muscab

30 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 3/401-402; As-Siirah an-Nabawiyah as-Saxiixah, 1/197-198.

ibnu Cumayr si uu macallin ugu noqdo, oo uu Qur'aanka iyo diinta aqoonteeda kaleba u baro.

Xajkii ku xigey ayaa uu Muscab ka soo noqday, waxaana weheliyey reer Yathrib oo Muslim iyo Mushrik isugu jira[31]. Laakiin mushrikiintu warmaqabto ayaa ay ka ahaayeen waxa socda. Muslimiintii waxa ay Nebiga scw kula ballameen goobta al-Caqabah (goobta dhagaxtuurka xajka) mar ay habeen tahay. Habeenkii waa la wada seexday, laakiin habeen badhkii ayaa intii isballansatay mid-mid u duseen si ay u la kulmaan Nebiga scw. Waxa ay ahaayeen saddex iyo toddobaatan nin iyo labo dumar ah.

Nebiga scw waxaa weheliyey adeerkii Cabbaas, isaga ayaana u hor hadlay. Waxa uu yidhi, "Muxammad tolkii baa uu ku dhex jiraa, iyaga ayaana difaaca oo garab taagan. Laakiin idinka ayaa uu doortay in uu idiin yimaaddo e, haddii aad oofin karaysaan masuuliyaddaas waa hagaag, haddii kalese, haddaba ka taga." Cabbaas ka dibna Nebiga scw ayaa hadlay, dadkiina waano iyo wacdi u soo jeediyey. Dabadeed ayaa ay Baycadii Labaad ee al-Caqabah la galeen, taas oo ay shuruuddeedu ahaayeen in wax kasta oo dhaca ay hiil iyo hooba la garab taagnaanayaan Nebiga scw. Ka dibna Nebigu scw waxa uu ka codsaday in ay iska soo saaraan labo iyo toban nin oo madax u noqda, halkii ayaana ay ku magacaabeen. Intii aan waagu beryin ayaa qof waliba meeshiisi ku noqday, iyada oo dadkii kale ay weli hurdaan.

Waxaa la sheegaa in shaydaan meeshii ka qayliyey oo warkii uu Quraysh gaadhsiiyey. Aroortii baa ay yimaaddeen iyaga oo welwelsan.

"Waxaa na soo gaadhay in aad u timaaddeen in aad

31 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 3/413-424.

dhexdayada ka kaxaysataan ninkan, aadna bayco kula gasheen in aad nala dirirtaan, mana jiro reer Carbeed oo aanu ka neceb nahay in dagaal na dhex maro idinka." ayaa ay odayaashii Quraysheed dhaheen.

Qolyihii warmaqabtada ahaa ee reer Yathrib ayaa ku dhaartay in waxaas aysan waxba ka jirin. Cabdullaahi ibnu Ubayi ibnu Saluul ayaa ka mid ahaa dadkii ay u tageen, waxa uuna ku yidhi waxaasi wax jira ma aha, tolkayna falkaas oo kale kuma kaceen iyaga oo aan ila tashan, iskadaa aniga oo jooga e, haddii aan Yathrib joogo waa ay ila soo tashan lahaayeen. Qurayshi waa ay qanacday. Sidii ayaana lagu kala dareeray—xajkii markii uu dhammaadayna qolo walbaa meesheedi ayaa ay ku noqotay.[32]

Hijradii Madiinah

Islaamidda reer Madiinah waxa ay ahayd guul weyn oo Islaamka u soo hoyatey. Muslimiintiina waxa ay heleen xarun ay ku soo hirtaan, iyo taageero hiil iyo hooba leh. Oday beeleedyadii Madiinah qaar ka mid ahna waa ay ku soo biireen, taas oo taageero siyaasadeed siisay Muslimiintii.

Nebiga SCW manaam ayaa lagu tusay goobta uu u hijroonayo, manaamka nebiyaduna waa nooc ka mid ah waxyiga ay helaan. Intaas ka dib waxa uu saxaabadii Makah ku silicsanayd, ee aan Xabasha aadin u oggolaaday in ay Madiinah u hijroodaan. Muscab ibnu Cumayr RC iyo Cabdullaahi ibnu Ummi Maktuum RC in muddo ahba Madiinah ayaa ay ku sugnaayeen, oo waxaa loo diray in ay dadka diinta baraan. Dadkii ugu horreeyey ee Madiinah u

32 Ibnu Hishaam, 1/452-492.

hijrooday waxaa ka mid ahaa Bilaal RC, Sacad ibnu Abii Waqaas RC, iyo Cammaar ibnu Yaasir RC.

Cumar RC waxa uu ka mid ahaa dadkii hore ee Madiinah gaadhay, waxaana ku soo biiray ilaa labaatan ehelkiisi iyo qaraabadiisi ah[33], oo ay ka mid ahaayeen walaalkii Sayd RC iyo ina-adeerkii Saciid ibnu Sayd RC.

Cumar RC waxa uu sheegay in markii uu go'aansaday in uu hijroodo ay isaga iyo labo kale—Cayyaash ibnu Rabiicah iyo Hishaam ibnu Caas—ku ballaameen in ay israacaan, waxa ayna ku heshiiyeen in ay ku kulmaan meel Makah duleedkeeda ah. Ballantu waxa ay ahayd, ninkii aan halkaas waagu ugu beryin waa la xannibay e, labada kale ha iska socdaan. Cumar iyo Cayaash ayaa halkii isugu yimid, Hishaamse waa la qabtay. Sidii ayaa labadoodii ku socdeen ilaa ay Madiinah gaadheen.[34]

Sida sheekadan ka muuqata, Cumar dhuumasho ayaa uu ku baxay, oo weliba si habaysan ayaa uu u qorsheeyey bixitaankiisa. Laakiin waxaa jirta sheeko kale oo tan ka hor imaanaysa, taas oo tilmaamaysa in markii uu go'aansaday hijrada uu seeftiisi jeeniqaartay, qaansadiisi iyo budhkiisina soo qaatay, uuna Kacbada yimid isaga oo leeb gacanta ugu jiro. Toddoba goor markii uu dawaafay, ee uu salaadna tukaday, ayaa uu koox-koox isu kor taagay Quraysh oo golayaasheedii fadhida—"Wejiya xumayaal! Ninkii doonaya in hooyadii weydo, oo ilmihiisu agoomoobaan, xaaskiisuna asay qaaddo, toggaas dhabarkiisa ha iigu yimaaddo." Ayaa uu Cumar yidhi, sida sheekadani ay xusayso.

33 Diraasah Naqdiyah, 1/158.
34 Ibnu Hishaam, 1/474-476.

In yar oo waxmagarato ah mooye e, cidina kama dabo dhaqaaqin. Sidii ayaana uu ku baxay. Sheekadani ma laha jid sugan oo lagu kalsoonaan karo oo ay innagu soo gaadhay. Dadka werinaya waxaa ku jira saddex nin oo wax ay yihiin aan la aqoon (majhuul), sida uu sheegay Shaykh Albaani. Kutubta siirada ee Ibnu Hishaam, Ibnu Kathiir, Dahabii, iyo Ibnu Xajar, midkoodna ma sheegin markii ay ka hadlayeen hijradii Cumar[35]. Sidaas oo kale, waxaa sheekadan wax aan sugnayn ku tilmaamay Akram Diyaa' al-Cumarii, kitaabkiisa *as-Siirah an-Nabawiyyah as-Saxiixah*[36]. Dhibtuna waxa weeyaan in ay weriyeen dad aan la aqoon, isla markaana ay ka hor imaanayso sheeko kale oo sugan, kana macquulsan.

Markii ay Madiinah yimaaddeen, ayaa waxaa ka dabo yimid Abuu Jahal iyo walaalkii Xaarith oo raadinaya Cayaash, oo marna ay ilmo adeer ahaayeen, marna walaalo isku hooyo ah. Abuu Jahal baa xeelad u dagey—waxaa lagu yidhi, "Hooyadaa waxa ay ku nedertay in aysan madaxeeda shanlo taabsiin, qorraxna aysan ka hadhsan ilaa ay ku aragto." Cayaash taas waa uu ka xumaaday hooyadiina waa uu u dabcay.

Cumar RC oo dareensan in ay tahay shirqool Abuu Jahal soo maleegay ayaa ku yidhi, "Wallee waxa keli ah ee ay kaa rabaan waa in ay diinta kaa fidneeyaan e, ka digtoonoow. Wallee marka ay cinjirtu hooyadaa dhibto iyada ayaa iska shanlaysan doonta, marka kulka Makah ku darnaadana iyada ayaa hadhsan doonta!"

35 Diraasah Naqdiyah, 1/161.
36 As-Siirah an-Nabawiyah as-Saxiixah, 1/206.

Cayyaash waxa uu ugu jawaabay, "Waa in aan dhaarta hooyaday ka furtaa. Xoolo halkaa ii yaallana waa aan soo qaadanayaa."

"Wallaahi waa aad og tahay in aan ka mid ahay dadka Quraysh ugu hantida badan, ee qaado hantidayda badhkeed oo ha raacin." Ayaa uu Cumar yidhi, isaga oo ku dadaalaya in uu Cayaash baajiyo. Laakiin Cayaash waa uu diiday. Cumar markii uu ka quustay ayaa uu siiyey hashiisi gaadiidka u ahayd oo uu ku yidhi, "Waa hal fiican ee dhabarkeeda ha ka degin, oo haddii aad ka shakidid ku baxso."

Meel dhexe markii la marayey ayaa Abuu Jahal ku yidhi, "Awrkayga waa aan dhibsaday e, hashaada ma kula koraa?" Cayaash oo lugtii kale dabinka la galaya ayaa codsigaas oggolaaday. Markii uu hashii joojiyey baa ay isugu tageen oo ay xidhxidheen, sidaas ayaana ay Makah ku geeyeen. Waxaana ay ku wadeen dhib iyo ciqaab ilaa uu diintii ka baxay.

Cumar RC waxa uu ku soo koray saboolnimo daran, laakiin halkan waxaa ka muuqata in uusan sidaa ku joogin e, uu hanti badan yeeshay markii dambe. Ganacsigii dharka iyo wixii la midka ahaa, ee Shaam iyo Yaman, ayaa uu ka xoolaystay.

Sida uu Cumar RC sheegay, saxaabadu waxa ay aaminsanaayeen in qofkii diinta ka baxa aan Alle wax tawbad ah ka aqbalayn. Markii Nebigu SCW Madiinah yimid, ayaa waxaa ku soo dagey ayaadaha 53–55 ee suuradda Sumar:

قُلْ يَا عِبَادِيَ الَّذِينَ أَسْرَفُوا عَلَىٰ أَنفُسِهِمْ لَا تَقْنَطُوا مِن رَّحْمَةِ

اللَّهِ ۚ إِنَّ اللَّهَ يَغْفِرُ الذُّنُوبَ جَمِيعًا ۚ إِنَّهُ هُوَ الْغَفُورُ الرَّحِيمُ ﴿٥٣﴾
وَأَنِيبُوا إِلَىٰ رَبِّكُمْ وَأَسْلِمُوا لَهُ مِن قَبْلِ أَن يَأْتِيَكُمُ الْعَذَابُ ثُمَّ
لَا تُنصَرُونَ ﴿٥٤﴾ وَاتَّبِعُوا أَحْسَنَ مَا أُنزِلَ إِلَيْكُم مِّن رَّبِّكُم مِّن
قَبْلِ أَن يَأْتِيَكُمُ الْعَذَابُ بَغْتَةً وَأَنتُمْ لَا تَشْعُرُونَ ﴿٥٥﴾

"Waxa aad dhahdaa, addoomadayda ku xadgudbay nafahoodoow ha ka quusannina naxariista Alle, Ilaahay waa uu dhaafaa dembiyada dhammaantood, Isagu waa Dembidhaafaha Naxariista badan."

as-Sumar: 53–55

Cumar markiiba aayadihii baa uu qoray waxa uuna u diray Hishaam ibnul Caas. Markii ay gaadhay, ayaa Hishaam inta uu bannaanka ula baxo akhrin jirey, laakiin waxa uu sheegay in uu fahmi waayey dulucda aayadaha. Waxaa laga soo weriyey in uu ku ducaystay, "Alloow i fahansii", ka dibna uu gartay in ay ka hadlayaan dadka isaga la midka ah, ee inta ay islaameen haddana dib uga laabtay diintii. Markii baa uu awrkiisi ku soo booday ilaa uu Madiinah iyo Nebigii scw u yimid.[37]

Markii uu khaliifka noqday, Cumar RC waxa uu dhacdada hijrada u doortay in ay noqoto bilowgii kaltirsiga Muslimiinta, ilaa iyo haddana waxa aynu ku tilmaannaa *Taariikhda Hijriga* ah.

37 Diraasah Naqdiyah, 1/156-165; as-Siirah an-Nabawiyah as-Saxiixah, 1/204-206.

Hijradii Madiinah waxaa ka bilaabatay marxalad cusub oo ka mid ah noloshii Cumar RC.

CUTUBKA 4

Nebi, Siddiiq, iyo Shahiid

"Waxa uu ahaa, wallaahi, hawlkar aan cid u dhigantaa jirin."

—Ummul Mu'miin Caa'ishah rc,
Taariikh Dimashq, 30/313.

Muhaajiriintii Madiinah tagey oo uu Cumar ka mid ahaa waxa ay degeen duleedka magaalada, meel la odhan jirey al-Cusbah oo ahayd agagaarka Quba. Xajkii sannadkaas iyo Baycadii Labaad ee Caqabah ka dib, Nebigu scw in muddo ah baa uu Makah sii joogey, isaga oo sugayey waxyi oggolaansho u siiya in uu Madiinah u hijroodo[1]. Dhanka kale, Mushrikiintii waxa ay go'aan naf-la-caari ah ku gaadheen in ay Nebiga scw dilaan[2]. Cumar rc iyo saxaabadii kale ee Madiinah joogey waxaa ku raagey imaatinkii Nebiga scw. Waxa ay maalin kasta u soo bixi jireen bannaanka iyaga oo rejaynaya in uu yimaaddo, ka dibna guryahoodi ayaa ay ku laaban jireen marka ay cadceeddu duhurkii kululaato[3].

Ugu dambayntii waxyigii uu sugayey ayaa u yimid

1 As-Siirah an-Nabawiyah as-Saxiixah, 1/207.
2 Ar-Raxiiq al-Makhtuum, 145.
3 Diraasah Naqdiyah, 1/162.

Suubbahana SCW, waxa uuna Makah uga baxay qarsoodi, iyada oo uu Abuu Bakar wehelinayo. Mushrikiintii waxa ay aad ugu dadaaleen in ay soo qabtaan ama dilaan, laakiin wax kasta oo ay sameeyeen waa ay ku guuldarraysteen in ay horjoogsadaan hijradii Nebiga SCW iyo Abuu Bakar RC. In muddo ah kolkii ay sii socdeen, waxa ay Madiinah gaadheen 12'kii bishii Rabiicul Awal, maalin Isniin ah. Waxa ayna ku dageen Quba, halkaas oo uu Suubbanuhu SCW ku sugnaa 14 habeen (afarna waa lagu sheegaa), kana aasaasay masjidkii ugu horreeyey ee ay Muslimiintu dhistaan; Masjid Qubaa'[4].

Cumar RC waa uu ka qaybqaatay dhisiddii Masjidka Quba. Intii uu Nebigu SCW Makah joogey, waxaa Cumar iyo Muslimiintii kaleba salaadda tujin jirey Saalim mawlaa Abii Xudayfa RC, oo Qur'aanka ugu badan xifdisanaa. Saalim waxa uu ahaa addoon Faarisi ah oo la xoreeyey, dagaalkii Yamaamah ee Musaylamah lala galay, xilligii Abuu Bakar RC, ayaa uu ku shahiiday, ka dib markii uu calankii Muhaajiriinta kala wareegay Sayd ibnul Khaddaab RC oo la diley. Waxa uu ahaa saxaabi aad u qiimo badan, Cumarna markii uu sii geeriyoonayey, waxaa laga soo weriyey in uu yidhi, "Haddii Saalim noolaan lahaa, isagaan gadaashay talada u dhiibi lahaa."

Ilaa iyo xilliyadii dambe, Cumar xidhiidh toos ah baa uu la lahaa Masjidka Quba, waxaana la sheegaa in uu Isniin iyo Khamiis kasta aadi jirey kuna soo tukan jirey[5]. Xadiis saxiix ah oo Nebiga SCW laga soo weriyey ayaa sheegaya: in qofkii booqda Masjidka Quba, salaadna ku tukadaa uu leeyahay ajar u dhigma cumro.

4 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 4/18.
5 Diraasah Naqdiyah, 1/174; 1/483.

Dhisiddii Masjidka Quba ka dib, Nebigu SCW waxa uu u sii gudbay Madiinah, oo markaas Yathrib lagu magacaabi jirey. Markiiba waxaa la aasaasay Masjidka Nebiga SCW oo xarun u noqday Muslimiintii. Waxaana la gudagalay in tiirka loo taago maamul iyo dawlad ay Muslimiintu leeyihiin, kuna taagan tawxiid iyo cibaadada Alle SWT. Waxaa dhisantay bulsho Muslimiin ah oo isku xidhan hal hoggaanna leh.

Madiinah waxaa xilligan wada degganaa Carab iyo Yahuud. Carabtu waxa ay ahaayeen labada beelood ee Aws iyo Khasraj, oo in badan dagaal ka dhexeeyey iskuna dhammaaday, laakiin intoodii badnayd hadda Islaamka ku walaaloobeen, iskuna noqdeen *al-Ansaar*. Muslimiintii soo hijrootayna waxaa loo bixiyey *al-Muhaajiruun*. Nebigu SCW waxa uu Yahuuddii la galay heshiis ah in wanaag lagu wada noolaado, magaalada danteeda laga wada shaqeeyo, oo wixii dhibaato iyo waxyeello u keenaya meel looga soo wada jeesto. Taas oo suuragalinaysay in la helo bulsho isku duuban oo nabad ku wada noolaata.

Muhaajiriinta intooda badani hantidoodi waa ay ka soo tageen—maadaama ay dhuumasho ku baxeen—ama waa lagala hadhay. Xoolo la'aan, degaan ku cusub oo dadkiisa iyo cimiladiisa toona aysan aqoon baa ay yimaaddeen. Madiinah waa dhul beereed huurka iyo xanuunnadu ku badnaayeen, cimilo ahaanna ka duwan Makah. Waxa ay lahaan jirtey xummad daran, oo hadda loo badiyo in ay ahayd duumo ama malaariya. Taasina waxa ay sababtay in saxaabo badan oo Muhaajiriin ahi aad u xanuunsadaan. Abuu Bakar RC iyo Bilaal RC ayaa ka mid ahaa saxaabadii duumadu ku dhacday,

waxaana laga soo weriyaa tixo boholyow iyo tebid ay Makah u qabeen ka muuqdaan. Ducadii Nebiga scw ayaa Alle kaga saaray aafadii duumada magaalada Madiinah.

Sannadkii koowaad waxa uu ahaa mid lagu yagleelayo bulsho Muslim ah. Waxyaalihii uu Nebigu scw qabtayna waxaa ka mid ahayd in uu Muhaajir kasta la walaaleeyey nin Ansaarta ka mid ah, si ay isu kaalmeeyaan. Wararku waxa ay sheegaan ilaa afar qof oo ay Cumar walaaloobeen, taas oo ay suuragal tahay in aysan hal mar wada ahayn e, marba mid lala walaaleysiiyey[6]. Cumar ma degganayn Madiinah dhexdheeda, waxa ayna u badan tahay in uu ag degganaa Ansaarigii lala walaaleeyey, oo loo badinayo in uu ahaa Citbaan ibnu Maalik rc, oo Cumar waxa uu xadiis laga soo weriyey ku sheegay in isaga iyo deriskiisii Ansaariga ahaa, midba uu maalin-dhaaf ugu iman jirey Nebiga scw[7].

Cumar rc waxa uu ahaa lataliyaha labaad ee Suubbanaha scw. Xadiis uu diiwaangaliyey Imaam Tirmidi[8], Sheekh Albaanina sheegay in uu saxiix yahay[9], ayaa Cumar tilmaamayaa in Rasuulka scw iyo Abuu Bakar rc ay wada caweyn jireen, iyada oo Cumarna uu weheliyo, waxa ayna ka wada hadli jireen arrimaha Muslimiinta. Waxa ay ahaayeen hoggaankii ugu sarreeyey ee Muslimiinta, sida dagaalkii Uxud aynu ku arki doonnana, xitaa Mushrikiintu waxa ay aaminsanaayeen in Nebiga scw ka dib, Abuu Bakar iyo Cumar ay yihiin madaxda labaad iyo saddexaad ee hoggaamisa Muslimiinta.

6 Diraasah Naqdiyah, 1/165.
7 Halkuun.
8 Sunan at-Tirmidii 167.
9 Saxiix Sunan at-Tirmidi 179.

Xadiis kale oo uu Imaam Muslim diiwaangaliyey[10] ayaa Cali Ibnu Abii Daalib RC ku tilmaamayaa xidhiidhkii Nebiga SCW iyo labadiisa lataliye. Cali waxa uu sheegay in uu marar badan maqli jirey Nebiga SCW oo dhahaya, "Aniga iyo Abuu Bakar iyo Cumar baa nimid, aniga iyo Abuu Bakar iyo Cumar baa galnay, aniga iyo Abuu Bakar iyo Cumar baa baxnay..."

Mar kale Imaam Muslim waxa uu diiwaangaliyey[11] xadiis uu ka soo werinayo Abuu Hurayrah RC—Nebiga SCW oo koox saxaabada ah la fadhiya, Abuu Bakar iyo Cumarna ay ku jiraan, ayaa uu kacay. Waa ay sugeen ilaa uu aad u raagey oo ay ka baqeen in uu dhibaato la kulmay. Saxaabadii oo naxsan ayaa ka dabo tagey oo qaarba meel ka raadiyeen. Abuu Hurayrah RC waxa uu yidhi: beer isaga oo ku jira ayaa aan soo haleelay. Halkii ayaa uu Nebigu SCW ugu soo dhiibay labadiisi kabood, farriinna waa uu soo faray—waxa uu yidhi, "Qofkii aad la kulanto ee qiraya *Laa Ilaaha Illallaah*, qalbigiisana ka yaqiinsan, ugu bishaaree Janno."

Markii uu beertii bannaankeeda u baxay qofkii ugu horreeyey ee uu la kulmay waxa uu ahaa Cumar RC—"Labadan kabood yaa leh?" Ayaa uu Cumar weydiiyey. Abuu Hurayrah waxa uu u sheegay in ay yihiin kabihii Nebiga SCW, farriintii la soo farayna waa uu gaadhsiiyey. Cumar baa halkaa laabta ah jug siiyey ilaa uu salka dhulka ku dhuftay! "Noqo, Abuu Hurayroow!" ayaa uu ku yidhi. Naxdintii iyo filasho la'aantii waxa uu yidhi: ilmaa isku soo kay taagtay! Markii labadoodiiba ay Nebigii SCW u yimaaddeen, Cumar waxa uu Nebiga SCW kula taliyey in

10 Saxiix Muslim 2389.
11 Saxiix Muslim 52.

aan dadka farriintan loo sheegin, isaga oo ku sababaynaya in ay keeni karto isdhigasho iyo camalkooda oo yaraada. "Iska daa ha shaqaystaane," ayaa uu soo jeediyey. Nebiguna SCW halkii ayaa uu ku dhaafay.

Cumar RC shakhsiddaas adag ayaa uu lahaa. Intii Madiinah la joogey, marar badan ayaa sidan oo kale, talo uu Cumar soo jeediyey Nebigu SCW u meelmariyey, sida aynu arki doonno.

Abuu Bakar RC iyo Cumar RC shakhsiyadahoodu aad ayaa ay u kala duwanaayeen. Nebigu SCW waxa uu yidhi, "Dadku waa kala dun, waxaana xilliga Islaamka ugu akhyaarsan kuwoodi ugu akhyaarsanaa Jaahiliyadii." Soomaaliduna hore ayaa ay u tidhi: *abuur iyo waano abuur baa horreysey*. Cumar dabeecaddiisi baa uu Islaamka ku soo galay, Abuu Bakarna sidaas oo kale. In aad malag noqoto lagaama rabo, suuragalna ma aha e, intii lagugu abuuray meeshii aad dhigi lahayd, xumo iyo samaan, ayaa laguu xilsaaray.

Halka Cumar uu caanka ku ahaa ad-adaygga iyo kulaylka, Abuu Bakar waxaa lagu yaqaanney degganaan iyo debecsanaan—in kasta oo ciddii ka xanaajisa uu dab ka kicin jirey, Cumarna ku dhehe!

Cumar seeftaa galka uga baxsanayd, oo wixii uu qoonsado xoog ha lagu xalliyo ayaa uu taagnaa. Laakiin Abuu Bakar dhan kale ayaa uu ka eegi jirey. Dabeecadda ka sokow, Abuu Bakar waxa uu ka weynaa Cumar ilaa toban sano, waana uu ka hor islaamay, Nebigana SCW muddo dheer ayaa uu la qaatay.

Nebigu SCW mar uu labadooda la hadlayey waxa uu yidhi, "Haddii aad isu kay raaci lahaydeen cid kaleba

lama tashadeen."[12] Meelaha ay isku khilaafeen waxaa ka mid ahayd: sannadkii sagaalaad ayaa waxaa Nebiga scw u yimid wafdi ka socday Banuu Tamiim, caadaduna waxa ay ahayd marka ay dad soo islaamaan in Nebigu scw madax u magacaabo. Abuu Bakar waxa uu soo jeediyey nin la odhan jirey Qacqaac ibnu Macbad, laakiin Cumar kuma qancin oo waxa uu soo jeediyey in Aqrac ibnu Xaabis reerkaas madax looga dhigo. Abuu Bakar ayaa arrintii ka kululaaday oo yidhi, "Aniga in aad i khilaafto uun baa aad rabtaa!", Cumarna 'maya' ayaa uu ku jawaabay. Nebiga scw agtiisi ayaa ay ku murmeen oo hadallo isku dhaafsadeen, ilaa codkoodi kor u kacay, waana sababta ay ku soo degeen aayadaha ugu horreeya suuradda Xujuraat, ee ka digaya in Nebiga scw agtiisa codka kor loo qaado[13].

Taladu marba waa meel oo mar baa ay degganaansho, debecsanaan, iyo miyirin u baahan tahay, mar kalena seef dhiirran oo wixii ay taabato xaf ka siisa ayaa aysan ka maarmayn. Labadan ayaa uu Suubbanuhu scw isu miisaamayey markii arrin taladeed loo baahdo.

Dagaalkii Beder markii Mushrikiin badan la qabtay ee Nebigu scw talo weydiiyey saxaabadii, Abuu Bakar waxa uu ku taliyey in ay yihiin tolkii iyo ehelkii oo aan la dilin, lagana yaabee in Alle ka tawbad aqbalo oo soo hanuuniyo. Cumar waxa uu taladiisa ku bilaabay, "Rasuulkii Allow, waa ay ku soo saareen, waana ay ku beeniyeen e, qoorta ka goo!" Nebigu scw waxa uu yidhi, "Alle ayaa debciya quluubta rag ilaa ay ka debecsanaato caano, isaga ayaana adkeeya quluubta rag ilaa ay dhagaxa ka adkaato. Abuu Bakaroow

12 Diraasah Naqdiyah, 1/479.
13 Saxiixul Bukhaari 4566.

waxa aad ka dhigan tahay Ibraahiim, markii uu yidhi 'kii i raacaa aniga ayaa uu iga mid yahay, kii i caasiyana waxa aad tahay Dembidhaafe Naxariis-badane ah,' waxaa kale oo aad ka dhigan tahay Ciise markii uu yidhi, 'haddii aad cadaabto waa addoomadaadi, haddii aad u dembi dhaaftana waxa aad tahay Casiis Xikmad-badane ah.' Adiguna, Cumaroow, waxa aad la mid tahay Nuux markii uu yidhi, 'Rabbiyoow dhulka oogadiisa ha kaga tegin mid gaalada ka mid ah oo socda,' waxaa kale oo aad, Cumaroow, ka dhigan tahay Muuse markii uu yidhi, 'Rabbiyoow adkee quluubtooda, rumayn maayaan ilaa ay ka arkaan cadaab xanuun badan e."[14]

Dadkan iyo sidii laga yeelay iyo mawqifkan Cumar RC, dagaalka Beder ayaa ay ku iman doonaan, haddii Alle idmo.

In kasta oo uu Abuu Bakar RC ka islaamnimo horreeyey, Cumar waxa uu jeclaa in uu derajadiisa gaadho, khayrkana waa uu kula tartami jirey. Maalin ayaa Nebigu SCW saxaabada faray in ay sadaqo la baxaan. Amarkan Nebigu SCW waxa uu ku soo beegmay Cumar oo markaa xoogaa hanti ah haysta. Dabadeedna, waxa uu isyidhi maanta ayaa aad heshay fursad aad Abuu Bakar kaga hormartid. Hantidiisi badhkeed baa uu sadaqo ahaan u keenay. Marar badan oo ay saxaabadu sidan oo kale khayr ugu tartameen ayaa Abuu Bakar kaalinta koowaad ka galay. Laakiin Cumar maanta waxa uu rejaynayey, maadaama uu xoolihiisi kalabadh keenay, in uu derajadan helayo.

Abuu Bakar markii uu yimid isaga oo sadaqadii wada, Nebiga SCW ayaa weydiiyey, "Maxaa aad reerkaagi u reebtay?" Abuu Bakar waxa uu ku jawaabay, "Waxa aan u

14 Musnad Axmad 3452.

reebay Alle iyo Rasuulkiisa."![15] Hantidiisi oo idil ayaa uu keenay. Maalintaas ayaa uu Cumar go'aansaday in uusan mar dambe la tartamin Abuu Bakar. Cumar aad ayaa uu u qaddarin jirey Abuu Bakar, isaga oo ogsoon fadligiisa, iyo derajada uu Rasuulka SCW agtiisa ku leeyahay, waxa uuna qirsanaa in aysan saxaabada ku jirin cid Abuu Bakar RC ka fadli badan ama ka derajo sarraysa.

Mushrikiintii wax dagaal ah ulama iman Muslimiintii Madiinah joogtey. Iskahorimaadyo yaryari waa ay jireen, laakiin ma aysan ahayn wax sidaa u sii weyn. Sidaas ayaa uu ku dhammaaday sannadkii koowaad ee hijrada ka dambeeyey.

Beder[16]

Sannadkii labaad ee hijrada xigey ayaa sirdoonkii Nebigu SCW soo ogaadeen in ay jidka ku soo jirto hanti aad u badan, oo ay leeyihiin Mushrikiintii Makah. Waxaa lagu qiyaasay ilaa kun rati oo ay ku rarnaayeen alaabo jaad kasta leh, kana timid Shaam. Waxaa soo baxday fursad lagu soo dhacsan karo hantidii Muslimiintu ay Makah kaga tageen ama lagala hadhay. Hantidan Quraysheed ee meesha maraysa ayaa la damcay in la qabsado oo ay magdhow u noqoto e, dagaal qorshaha kuma jirin. Waxaa Madiinah ka baxay rag gaadhaya 313 nin, halka xoolaha la weerarayo ay la socdeen ilaalo afartan (40) nin ahi.

Safarkan waxaa madax ka ahaa Abuu Sufyaan ibnu Xarb, oo markii uu ka war helay ciidanka ku soo socda,

15 Sunan Abuu Daawuud 1678.
16 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 4/36-105.

qayladhaan u dirsaday Makah. Waxaa kale oo uu beddelay jidkii oo meel aan laga filaynin ayaa uu maray. Abuu Sufyaan waxa uu ahaa nin aad u caqli badan, kana mid ahaa madaxdii iyo odayaashii Quraysheed. Markii badankoodii Beder lagu laayey, dagaalkii Uxud isaga ayaa Mushrikiinta hoggaaminayey. Xilligan oo Carabtii wax akhrinta iyo qoraalka taqaannay ay farakutiris ahaayeen, Cumar waxa uu qoraalka ka bartay Abuu Sufyaan. Gabadhiisi Ramlah bint Abii Sufyaan RC ayaa ka mid ahayd Muslimiintii Xabasha u hijrooday, markii dambena waxaa guursaday Nebiga SCW.

Farriintii Abuu Sufyaan markii ay Makah gaadhay ayaa ay Mushrikiintii is-ursadeen, iyaga oo u arkayey in ay tahay fursad ay Muslimiinta ku baabi'in karaan. Abuu Jahal, oo uu Nebigu SCW ku tilmaamay, 'Fircoonkii Ummaddan', nacaybka uu Muslimiinta u qabeyna aan la tilmaami karin, ayaa soo kiciyey Mushrikiintii una ahaa hoggaamiye. Waxaa la soo abaabulay oo soo baxay ciidan gaadhaya ilaa kun nin (1000), oo ay ku jiraan 200 oo fardooley ah, halka ay Muslimiintu ka wateen 2 faras iyo 70 geel ah. Saddexdii boqol ee Muslimiinta ahaa, ninkiiba waxaa ku soo hagaagayey ku dhowaad saddex Mushrikiin ah.

Markii ay caddaatay in ujeeddadii loo soo baxay aan la helayn, Mushrikiintiina ay duullaan soo qaadeen, Nebigu SCW asxaabtiisi ayaa uu la tashaday. Abuu Bakar RC baa hadalka bilaabay, Cumarna waa uu ku xigey—oo labadooda oo jooga cid kale hadal kalama hormari jirin. Laakiin, Nebigu SCW waxa uu ku celcelinayey, "Dadoow ila taliya," isaga oo u dan lahaa Ansaartii joogtey in ay hadlaan, ilaa uu ka hadlay Sacad ibnu Mucaad RC, oo Aws madax u ahaa. Sababta uu Ansaarta u rabey waxa ay ahayd, heshiiskii uu Nebigu

scw Caqabah kula galay waxa uu ahaa in ay Madiinah ku ilaaliyaan, ee Quraysh in ay sidan ula diriraan kuma jirin. Sidaas awgeedna, Nebigu scw in uu oggolaanshahooda helo ayaa uu rabey, waana ay garab istaageen.

Halkii baa dagaal la isugu diyaariyey, oo ay labadii ciidan is-hor fadhiisteen. Nebigu scw aad iyo aad ayaa uu Alle u baryey, ugana tuugay guul iyo in aan kooxdan yar ee Muslimiinta ah la baabi'in. Dhanka kale Muslimiinta ayaa uu guul niyadda ugu dhisayey.

Markii ay soo degtay سَيُهْزَمُ الْجَمْعُ وَيُوَلُّونَ الدُّبُرَ, aayadda 45'd ee suuradda al-Qamar, Cumar waxa uu isweydiin jirey isbahaysigan la jebin doono cidda uu yahay, iyo cidda jebin doontaa waxa ay tahay. Maalintii Beder ayaa uu arkay Nebiga scw oo akhrinaya aayaddan. Waxa uu yidhi, "Maalintaas ayaa aan gartay waxa looga jeedo."[17]

Intii la isdiyaarinayey, Nebigu scw waxa uu saxaabada kala ballamay dad Mushrikiinta la socday, oo la soo khasbay dagaalna aan rabin. Dadkani waxa ay u badnaayeen ehelkii Nebiga scw oo markii hore Makah ku ilaalin jirey, waxa ayna ka koobnaayeen Banuu Haashim iyo dad kale oo aan dhibi jirin markii uu Makah joogey. Adeerkii Cabbaas waa kii la socday habeenkii uu Ansaarta heshiiska kula galayey Caqabah.

Saxaabi la odhan jirey Abuu Xudayfa ibnu Cutbah RC ayaa yidhi, "Oo ma intaanu aabbeyaashayo, wiilashayo iyo walaalahayo dilno, ayaa aanu Cabbaas daynaynaa?"

Nebigu scw Cumar baa uu ku yidhi, "Abaa Xafsoow, ma Rasuulka Alle adeerkii baa wejiga seef lagaga dhufanayaa?"

"Rasuulkii Alloow, ii oggoloow aan qoorta seef kaga

17 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 4/65.

dhuftee, wallaahi, waa uu munaafiqoobay."[18] Ayaa uu Cumar ku jawaabay. Sida Cumar sheegay, waa markii ugu horraysay ee Nebigu scw ku naanaysay *Abuu Xafsah*, sidaas ayaana ay ugu hirgashay oo ilaa maanta loogu yeedhaa.

Taariikhda Cumar ee xilligii Nebiga scw, marar badan baa ay inna soo mari doontaa isaga oo codsanaya in loo oggolaado in uu dilo qof 'xadgudub' la yimid, waxa ayna muujinaysaa ad-adkaantiisi iyo dabeecaddiisi aadka u kululayd—halka Abuu Bakar ahaa qof aad u deggan oo dabeecad qabow, dheellitirkuna waxa uu ka dhalanayey labadhexda kaadsiinyaha Abuu Bakar iyo kulaylka Cumar.

Qofkii ugu horreeyey ee goobtii dagaalka ku geeriyooday waxa uu ahaa Mihjac RC oo uu xoreeyey Cumar[19], kana mid ahaa Muhaajiriinta. Alle mahaddii, maalintaa guushii waxa ay raacday Muslimiintii, cadowgiina waxaa laga laayey ilaa 70, in le'egna waa laga qabsaday, kuwaas oo xal u raadintoodi la gudagalay markii uu dagaalkii dhammaaday.

Nebigu scw waxa uu bilaabay in uu saxaabadii kala tashado, wixii laga yeeli lahaa raggii dagaalka lagu qabtay. Abuu Bakar RC waxa uu ku taliyey in dadkani yihiin tolkood iyo walaalahood, ayna habboon tahay in laga qaato hanti madaxfurasho ah, oo waxtar weyn u soo kordhisa maamulka Muslimiinta ee curdanka ah. Dhaqaalaha ka sokow, Abuu Bakar waxa uu sheegay in uu ka rejo qabo in Alle soo hanuuniyo oo ay garab iyo taageero u noqdaan Muslimiinta kale mustaqbalka.

Cumar RC uma bogin taladan. Waxa uuna codsaday

18 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 4/77.
19 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 4/61.

in nin ay qaraabo yihiin oo dadka la qabtay ku jirey loo gacangaliyo si uu u dilo. Sidaas oo kalena, in Cali ibnu Abii Daalib loo dhiibo walaalkii Caqiil oo uu dilo, Xamse ibnu Cabdulmuddalibna loo dhiibo walaalkii…, "Si aynu Alle ugu muujinno in aynaan wax kalgacal iyo tudhitaan ah u hayn Mushrikiinta." Meeshaas adag ayaa uu Cumar ka istaagay. In si cad loo kala baxo—xaqa iyo baadilkuna kala soocmaan ayaa uu ku taliyey. *Al-Faaruuq*. Laba-labayntu kama mid ahayn dabeecadaha Cumar RC.

Aragtidan waxaa la qabey Sacad ibnu Mucaad RC, oo aan ka raalli ahaan in maxaabiis la qabsado, rabeyna in maadaama ay tahay goobtii ugu horraysey ee Mushrikiinta lagaga gacan roonaaday, in gamta laga dhigo oo dhegta dhiigga loo daro, cashar culus oo lama-illaawaan ahna loo dhigo, oo laga aargoosto, si aysan mar labaad u soo dhiirran.

Nebigu SCW waxa uu qaatay aragtidii Abuu Bakar ee madaxfurashada. Maalintii xigtey ayaa Cumar u yimid Nebiga SCW iyo Abuu Bakar oo ooynaya.

"Rasuulkii Alloow, adiga iyo saaxiibkaa maxaa idin ka oohiyey, haddii aan ooyi karo waan ooynayaa, haddii kalena waan iska oohinayaaye?" ayaa uu Cumar yidhi.

Markaas ayaa uu Nebigu SCW u sheegay in ay soo degeen aayado lagu canaanayo maxaabiistii ay qabsadeen, iyo madaxfurashadii ay oggolaadeen. Suuradda al-Anfaal waxa ay ku soo degtay dagaalkii Beder, waxaana ku jirta axkaam badan oo dagaalka la xidhiidha, waxaase arrintii dadkii la soo qabtay si gaar ah uga hadlaya aayadaha 67–71. Aayadahani waxa ay si cad u taageerayaan aragtidii Cumar, iyaga oo sheegaya in ay ahayd in aan maxaabiis la qaban ee goobtii dagaalka lagu laayo.

Saddex maalmood markii goobtii Beder la joogey, ayaa Madiinah loo laabtay. Dadkii dagaalka lagu qabsaday waxaa ku jirey Suhayl ibnu Camr oo ahaa aftahan, Qurayshna afhayeen u ahaa. Waa ninkii heshiiskii Xudaybiyah Quraysh ergada u ahaa ee ay Nebiga SCW heshiiska kala saxeexdeen, dabayaaqadii sannadkii lixaad.

Ibnu Isxaaq sida uu soo weriyey[20], Cumar waxa uu Nebiga SCW ka codsaday in oggolaansho loo siiyo, in uu Suhayl foolasha ka saaro, si marka uu isyidhaahdo hadalba, uu carrabka u ceshan waayo, sidaana uu Nebigu SCW ugaga nabadgalo aftahannimadiisa shirkiga u adeegaysa. Nebigu SCW waa uu ka diidey, isaga oo weliba raaciyey in laga yaabo maalin maalmaha ka mid ah in uu Suhayl dhihi doono hadal Cumar ka farxiya. Ibnu Kathiir waxa uu tilmaamay in sheekadani aysan sugnayn[21]. Furashadii Makah ee sannadkii 8'd ayaa uu Suhayl islaamay, markii uu Suubbanuhu SCW geeriyooday ee dad badani riddoobeenna, reer Makah isaga ayaa ay ku badbaadeen, oo hadal qiimo badan oo iimaankoodi sugay u jeediyey.

Si kasta oo uu u ad-adkaa, Cumar RC kama boodi jirin talada Nebiga SCW, fal uusan oggolaansho u haysanna kuma dhaqaaqi jirin—in kasta oo uu madaxda sare ahaa waa uu tixgelin jirey cidda talada ka leh. Xilligii Abuu Bakar khaliifka ahaana sidaas si le'eg ayaa uu u dhaqmi jirey.

Beder ka dib

Quraysh oo jaahwareertay dad badanina noloshii ka quusteen markii madaxdoodi inta la laayey maydkoodina

20 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 4/114.
21 Halkuun.

ceel lagu guray, ayaa maalin waxaa kulmay oo Kacbada agteeda ku sheekaystay Safwaan ibnu Umayah iyo Cumayr ibnu Wahb. Safwaan waxaa dhalay Umayah ibnu Khalaf oo ka mid ahaa madaxdii Quraysheed ee Islaamka aadka u la diriri jirey. Umayah waxa uu ku jirey madaxdii Mushrikiinta ee Beder lagu laayey, oo waxaa helay Bilaal oo ahaan jirey addoonkiisi. Umayah waa ninkii Bilaal aadka u ciqaabi jirey ilaa uu markii dambe Abuu Bakar ka iibsaday oo uu xoreeyey.

Cumayr—oo Ibnu Isxaaq ku tilmaamayo—"Shaydaan ka mid ah shayaadiintii Quraysh," waxa uu ahaa dadkii Nebiga scw iyo saxaabada aadka u dhibi jirey xilligii Makah. Wiilkiisi oo Wahb la odhan jirey ayaa ka mid ahaa maxaabiistii Madiinah lagu hayey.

"Wallaahi, dabadood noloshu khayr ma leh," ayaa uu Safwaan yidhi.

"Wallee run baa aad sheegtay. Wallaahi, haddii aan la igu lahayn dayn aanan gudi karin, iyo ilmo aan dabaday dayac uga baqayo, Muxammad baa aan aadi lahaa oo aan dili lahaa," ayaa uu Cumayrna yidhi.

Safwaan oo ay fursadi u muuqatay ayaa yidhi, "Daynkaagu aniga ayaa uu i saaran yahay oo kaa gudaya, ilmahaaguna ilmahayga ayaa ay wax la qabayaan, wax aan u awoodana waayi maayaan."

Waxaa lagu ballamay in hadalkii dhex maray iyo go'aankii la qariyo, Cumayrna inta uu seeftiisi diyaarsaday, oo uu sun mariyey, ayaa uu Madiinah u dhaqaaqay.

Cumar RC waxa uu lahaa fiiro iyo dareen dheer. Isaga iyo koox saxaabada ka mid ah oo Beder ka sheekaysanaya ayaa

waxaa Masjidkii hortiisa gaadiidkii uu watey kaga dagey nin seef wata. Cumar markiiba waa uu gartay oo waxa uu yidhi, "Eygani waa cadowgii Alle, Cumayr ibnu Wahb, wax aan xumaan ahaynna umuu iman."

Cumar waxa uu isla markiiba warkii u gudbiyey Nebiga scw, Suubbanuhuna waxa uu codsaday in Cumayr loo keeno.

Cumar inta uu ninkii u yimid ayaa uu isaga oo galkii seeftu ugu jirtey iyo qoortiisi isku haya keenay. Saxaabadii kalena waxa uu ku yidhi: Nebiga scw ag fadhiista oo ilaaliya.

"Cumaroow sii daa," ayaa uu Nebigu scw yidhi, waxa uuna raaciyey, "Soo durug, Cumayroow."

Cumayr sidii baa uu yeelay, waxa uuna Nebiga scw ku bariidiyey, "Ancam sabaaxan,"—subax wanaagsan—, oo ahayd salaantii Islaamka ka hor la isku bariidin jirey.

"Alle ayaa nagu sharfay bariidin ka wanaagsan bariidintaada, Cumayroow—in aanu isku salaanno bariidinta Ahlul Jannada." ayaa uu Suubbanuhu scw ugu jawaabay.

"Muxammadow, waa ay igu cusub tahay." ayaa uu Cumayr yidhi.

Nebigu scw waxa uu waraystay sababta uu Madiinah u yimid, taas oo uu kaga jawaabay in uu u yimid wiilkiisa oo uu rabo in loo sii daayo. Seefta maxaa kugu raray ayaa la weydiiyey, taasna waxa uu kaga jawaabay, "Oo maxay noo tartay?!"

Nebigu scw waa uu ku celiyey weydiintii isaga oo dhahaya, "Runta ii sheeg, maxaad u timid?"

Cumayr intiisi baa uu ku adkaystay, jawaab kalena ma bixinnin.

Markaa ayaa uu Nebigu SCW u sheegay hadalkii isaga iyo Safwaan ku dhex maray Kacbada agteeda. Cumayr aad ayaa uu yaabay, maxaa yeelay, isaga iyo Safwaan cidina ma wehelin, goobtii ayaana uu ku islaamay, isaga oo qiray in waxyigu dhab yahay, halkii ayaana wiilkiisi loogu sii daayey.

Xilligan dembi ayaa ay ahayd in qof Muslim ah oo hijro awoodaa uu Makah ku noolaado. Laakiin, Cumayr RC waxa uu Nebiga SCW ka codsaday in loo oggolaado isaga oo dhahaya, "Rasuulkii Alloow, waxa aan ahaa mid aad ugu dadaala deminta ilayska Alle (diinta), inta diinta Alle raacdayna aad u dhiba e, waxa aan jeclahay in aad ii oggolaatid oo aan Makah tago, dabadeedna aan Alle, Rasuulkiisa, iyo Islaamka ugu yeedho, laga yaabee in Alle soo hanuuniyo. Haddii kale diintoodaan ku dhibayaa sidii aan asxaabtaada diintooda ugu dhibi jirey."

Sidii baa uu Makah ugu laabtay oo uu dacwada uga wadey ilaa dad badani ku islaameen dadaalkiisi.

Safwaan oo intii uu Cumayr maqnaa dadka ku dhihi jirey: ku bishaaraysta dhacdo idin illowsiin doonta Beder, ayaa ka war helay in Cumayr islaamay. Markaas ayaa uu dhaar ku maray in uusan mar dambe la hadlin wanaagna u samayn.[22]

Dagaalkii Beder waxaa ku dhaawacmay Xafsah bint Cumar RC ninkeedi, Khunays ibnu Xudaafah RC, muddo ka dibna waa uu geeriyooday. Markii ay ciddo baxday, Cumar waxa uu ku dadaalay in uu gabadhiisa u raadiyo nin wanaagsan. Waxa uu u tagey Cusmaan ibnu Cafaan RC oo

22 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 4/118-120.

ugu jawaabay ii kaadi aan ka soo fekero e, laakiin dhawr cisho ka dib waxa uu u sheegay in uusan markaa guur diyaar u ahayn. Xilligan waxaa Cusmaan isna ka geeriyootay xaaskiisi Ruqiya bint Rasuul RC. Cumar oo u xanaaqsan Cusmaan, ayaa Abuu Bakr u soo bandhigay guurka Xafsah. Cusmaan jawaab ayaaba uu ka helay e, Abuu Bakar wuuba u aamusay! Cumar aad baa uu uga cadhooday falkaas Abuu Bakar.

Dhawr cisho ka dib, Xafsah waxaa soo doonay Nebiga SCW, sidaas ayaana Cumar ugu guuriyey. Abuu Bakar RC ayaa markaa Cumar u yimid oo yidhi, "Waxaan u malaynayaa in aad iga xanaaqday markii aanan kuu jawaabin." Abuu Bakar waxa uu Cumar u sheegay in uu maqlay Nebiga SCW oo Xafsah RC hadalhaya, uusanna rabin in uu sirtiisa sheego, laakiin haddii uusan guursan lahayn uu Abuu Bakr guursan lahaa[23].

Nebiga SCW iyo afarta Khulafada Raashidiinta ah waxaa ka dhexeeyey xidhiidh xididnimo, oo labo isaga ayaa soddog u ahaa, labana iyaga ayaa u ahaa. Cumar ka sokow, Abuu Bakar waxa uu dhalay xaaskii Nebiga SCW, Caa'isha RC. Cusmaan ibnu Cafaan waxa uu qabey Ruqiya bint Rasuul RC, markii ay geeriyootayna, waxa uu guursaday Saynab bint Rasuul RC. Cali ibnu Abii Daalibna RC waxa uu qabey Faadumo bint Rasuul RC.

Ummul Mu'miniin Xafsah RC aad ayaa ay u masayr badnayd, taas oo marar badan aabbaheed, Cumar, ku canaantay. Waxaaba dhacday in mar Nebigu SCW uu furay, laakiin, sida ay xadiisyadu sheegayaan, waxyi lagu amray in

23 Fatxul Baarii, 11/431-435.

uu ku noqdo, maadaama ay salaad iyo soon badnayd.

Uxud[24]

Dhacdada labaad ee xusidda mudani waa dagaalkii Uxud oo uu Cumar RC ka qayb qaatay. Dagaalku waxa uu dhacay bishii Shawaal ee sannadkii saddexaad hijrada ka dib, oo Beder iyo Uxud sannad baa u dhexeeyey. Sida culamada siiradu sheegeen—ka dib markii Beder lagu jabiyey, Mushrikiintii Quraysh waxa ay go'aansadeen in ay aargutaan. Iyaga iyo intii ay isbahaysan kareen ayaa is-ururSaday, waxaana la soo aadey Madiinah.

Nebigu SCW waxa uu soo jeediyey in aan magaalada laga bixin e, dhufays laga dhigto. Hayeeshee, rag aan Beder ka qaybgalin ayaa xamaasaddii jihaadka u haysay darteed, ku adkeeyey in Mushrikiinta loo baxo oo Uxud agteeda lagula diriro. Sidii ayaa lagu baxay, iyada oo Muslimiinta laga badan yahay saddex jibbaar (~1000 vs ~3000). Iyada oo ay tiro yaraantaasi jirto, ayaa haddana munaafiqii Cabdullaahi ibnu Ubay ibnu Saluul uu saddex boqol oo nin la noqday, waxaana isku soo hadhay ilaa toddoba boqol oo Muslimiin ah, iyo saddexdii kun ee Mushrikiinta ahaa. Cabdullaahi ibnu Cumar RC[25] iyo dhalinyaro kale oo rabey in ay jihaadaan da'yaraan ayaa looga reebay in ay dagaalka ka qaybqaataan. Halkii baa uu Nebigu SCW ciidankii ku diyaariyey, Mushrikiintiina ay ku diyaargaroobeen.

Saxaabadu fardo ma wadan, halka ciidanka Mushrikiinta ay ku jireen labo boqol oo fardooley ah, oo ay hoggaaminayeen Khaalid ibnul Waliid iyo Cikrimah ibnu Abii Jahal—oo

24 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 4/173.
25 Diraasah Naqdiyah, 1/242.

aabbihii Beder lagu diley. Nebigu scw waxa uu dejiyey qorshe waxyeellada fardooleydaas lagaga badbaadi karo, oo waxa uu konton nin oo qaansooley ah saaray buur yar oo goobta dagaalka u dhowayd—*Jabal ar-Rumaat* ayaa hadda lagu magacaabaa.

Mushrikiinta waxaa dabada ka wadey haweenkoodii oo heeso guubaabo ah qaadaya durbaannona ka garaacayey ciidanka gadaashiisa, si aysan u cararin.

Markii foodda la isdaray, dagaalkiina kululaaday oo cabbaar la iswadey, ayaa ciidankii Mushrikiintu jabay. Muslimiintii oo eryanaya ayaa qaar ka mid ah uu galay damaaci, oo ay xoolihii Mushrikiintu ka carareen ku mashquuleen. Waxa ay istuseen in ay adkaadeen ayna tahay in ay qaniimo ahaan u gurtaan hantida meesha daadsan. Nasiibdarro, qaansooleydii buurta la saaray markii ay arkeen guushii Muslimiinta ayaa ay amardiiddo weyn ku kaceen, oo ay buurtii ka degeen, aan ka ahayn taliyahoodii iyo dhawr kale oo ku adkaystay in ay fuliyaan amarkii Nebiga scw.

Fursaddaas ayaa uu Khaalid ka faa'iidaystay oo uu Muslimiintii ku dhabarjabiyey, xaaladdiina waa ay xumaatay ilaa la isla dhex maray in Nebigii scw la diley—been baa ay ahayd, laakiin dhaawac baa soo gaadhey. Saxaabo badan ayaa niyadjab ku dhacay markii ay warkaas maqleen oo iska fadhiistay murugo awgeed. Ibnu Isxaaq waxa uu sheegay in Anas ibnu Maalik adeerkii (Anas ibnu Nadar/ ض) u yimid dad ay ku jiraan Cumar iyo Dalxah oo iska fadhiistay!

"Maxaa idin fadhiisiyey?" ayaa uu weydiiyey.

"Rasuulkii Alle waa la diley," ayaa ay ugu warceliyeen.

"Oo dabadii maxaad nolol ku falaysaan?! Kaca oo ku dhinta wixii uu ku dhintay Rasuulkii Alle." Ayaa uu yidhi

Anas ibnu Nadar.[26]

Dagaalkii markii uu kaladagey ee la kala baxay ayaa Abuu Sufyaan oo faanayaa Muslimiintii u soo dhowaaday.

"Hubaloow kor ahow! Hubaloow kor ahow!" Ayaa uu yidhi, isaga oo sanammadooda kii ugu weynaa magacaabaya. Waxa uu intaa raaciyey, "Muxammad ma joogaa?" Nebigu scw waxa uu yidhi, "Ha u jawaabina."

"Meeyey Ibnu Abii Kabshah? Meeyey Ibnu Abii Quxaafah? Meeyey Ibnul Khaddaab? Kuwaas waa la laayey. Haddii ay nool yihiin waa ay jawaabi lahaayeen." Ayaa uu Abuu Sufyaan yidhi.

"Been baa aad sheegtay, cadowgii Allow, Ilaahayna waxa uu kuu reebay wax ku murug galiya." Cumar oo is-hayn waayey baa u jawaabey.[27]

'Ibnu Abii Kabshah' waxa uu uga jeedaa Nebiga scw, oo waxa ay ka tahay jeesjees. 'Ibnu Abii Quxaafah'-na waa Abuu Bakar rc.

Halkan waxaa ka muuqata in saddexda qof ee bulshada Muslimiinta ugu muhiimsani ay ahaayeen Nebiga scw, Abuu Bakar rc, iyo Cumar rc.

Abuu Sufyaan oo hadalkii ku soo noqday ayaa yidhi, "Waa maalin u dhiganta maalintii Beder, maalmuhuna waa isdabajoog, dagaalkuna waa ninba mar."

Cumarna waxa uu ugu jawaabay, "Ma sinna. Kuwayagii la diley Janno ayaa ay galayaan, kuwiinnuna Naar."

26 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 4/207.
27 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 4/194.

Goobtaas waxaa ku shahiiday toddobaatan (70) saxaabi oo ay ka mid ahaayeen Nebiga scw adeerkii Xamse ibnu Cabdulmuddalib RC, iyo Muscab ibnu Cumayr RC.

Guuldarradii Uxud waxaa ka dhashay in qabiilooyinkii Madiinah ku hareeraysnaa ay Muslimiinta ku dhiirradaan[28], oo ay isku dayaan in ay weeraraan Madiinah. Nebigu scw markii uu ka war helay in ciidammo Madiinah weerarta la qabanqaabinayo, ma uusan sugin e, mid-mid ayaa uu uga takhallusay meelihii khataruhu ka soo socdeen.[29]

Cumar RC iyo Xijaabka

Islaamka ka hor dumarka Carabtu siyaabo kala duwan, oo kala asturnaan badan ayaa ay u labbinsan jireen. Qaar baa jidhkooda oo dhan wada qarin jirey; qaar baa jidhkooda intiisa badan muujin jirey, qaar badan oo labadaa u dhexeeyaana waa ay jireen. Laakiin, badanaa laabta, qoorta, iyo timaha oo dhan ama qayb ka mid ah ayaa muuqan jirey. Waxaaba ka daran, Islaamka ka hor, Mushrikiinta qaar ayaa marka ay Kacbada dawaafayaan isqaawin jirey. Asturnaantaa guud ee timaha iyo qoorta qaybo ka mid ahi ay muuqdeen, ayaa lagu dhaqmayey ilaa diintu ay qaabaysay labbiska dumarka Muslimaadka ah. Xijaabka diintu ay sheegtay labbis keli ah kuma koobna e, waxaa lammaaniya kala soocnaanta ragga iyo dumarka, iyo in aysan isdhexyaacin kuwa aan maxramka isu ahayni.

Faralyeeliddii xijaabka ka hor, Cumar RC waxa uu kula taliyey Nebiga scw, in uu haweenkiisa u xijaabo, isaga oo u sababaynaya in dadka kuwooda wanaagsan iyo kuwo aan

28 As-Siirah an-Nabawiyah as-Saxiixah, 2/398.
29 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 4/343.

wanaagsanaynba ay galayaan guryaha Rasuulka SCW, taas oo uu Cumar u arkayey in aysan ku habboonayn haweenka Nebiga SCW, iyo sharafta gaarka ah ee ay leeyihiin. Hayeeshee, Nebigu SCW wax tallaabo ah kama qaadin arrintaas, isaga oo sugayey waxyi xagga Alle uga yimaadda.

Mar kale, sida ay Caa'isha RC soo werisay[30], iyada iyo Nebiga SCW oo weel cunto ku wada cunaya ayaa Cumar soo maray, ka dibna Nebiga SCW ayaa u yeedhay in uu cuntadii la cuno—illeen waa dad hal weel wax ku cunaya oo gacmahoodu isu dhaafayaan e, Cumar gacantiisi ayaa ku dhacday Caa'isha gacanteedi—"*XASS*!", oo ah ereydhawaaq qofku yidhaahdo marka uu dab ku dhego oo kale, lana macno ah '*AX!*', ayaa uu Cumar la soo booday. Waxa uu ku daray, "Haddii sida aan idin la rabo la iga oggolaan lahaa, ili idin ma aragteen."

Ugu dambayntii xukunkii xijaabka ee Cumar uu naawilayey ayaa soo dagey. Waxaa sannadkii shanaad ee hijrada uu Nebigu SCW guursaday Saynab bint Jaxsh RC. Arooskii markii uu dhammaaday, ee dadkii kala dareereen, ayaa dhawr nin ay sheekadii la tagtay oo ay illaaween in ay kacaanba! Suubbanuhuna SCW waa uu ka xishoodhay. Dhawr jeer baa uu guriga ka baxay bal in ay dareemaan, laakiin ma aysan dhaadin. Markaas ayaa waxaa soo degtay aayadda 53'd ee suuradda al-Axsaab, oo lagu magacaabo *Aayadda Xijaabka*, taas oo jidaynaysa in teed (xijaab) u dhexeeyo ragga iyo dumarka, aysanna ahayn in ay raggu isaga galaan dumarka oo aan si dhammaystiran jidhkooda u dedin—sidii ay hore caadadu ahayd.

30 Fatxul Baarii, 10/490.

وَإِذَا سَأَلْتُمُوهُنَّ مَتَاعًا فَاسْأَلُوهُنَّ مِن وَرَاءِ حِجَابٍ ۚ

"Haddii aad alaab weydiinaysaanna, ka weydiiya xijaab gadaashii."

al-Axsaab: 53

Cumar RC ma rabin oo keli ah in haweenka Nebigu SCW ay xijaabtaan, oo ay jidhkooda wada dedaan e, waxa uu doorbidayey in ay lahaadaan xijaab dheeraad ah—kaas oo ah in aysan guryahoodaba ka soo bixin, oo aan xitaa muuqooda la arkin! Waxa uu sii wadey dadaalkii uu ku rabey in xukunkaasi yimaaddo.

Berigaas guryaha Rasuulku SCW ma aysan lahayn musqulo, dumarkuna habeenkii ayaa ay bannaanka u bixi jireen. Habeen ayaa uu Cumar arkay Ummul Mu'miniin Sawdah RC oo meel maraysa, xijaabkeediina xidhan. Sawdah waxa ay ahayd haweenay laf weyn, oo qofkii yaqaannaa uu muuqeeda oo keli ah ku garan karo. Cumar ayaa la hadlay isaga oo muujinaya diidmo ah in ay bannaanka u soo baxdo.

Inta ay laabatay ayaa ay Nebiga SCW u dacwootay, ka dibna waxaa soo dagey waxyi Alle haweenka ugu oggolaanayo in ay u bixi karaan wixii dantooda ah. In kasta oo xukunka guud ee xijaabku uu waafaqay rabitaankii Cumar, haddana qaabkii adkaa ee uu u rabey uma dhicin. Waxaa xusid mudan in cidda uu Cumar rabo in ay sidan u xijaabtaan ay tahay xaasaska Nebiga SCW, ee uusan ka hadlayn haweenka Muslimiinta guud ahaantood. Hadalladiisan oo dhan kuma uusan soo hadalqaadin dumarka kale. Waxa uu ku

dadaalayey in haweenka Nebigu scw ay lahaadaan xurmo gaar ah, oo aan cid kastaa isaga galin, dadka kalena ay ka soocnaadaan.

"Xijaabku waa dhaqan Carbeed," ayaa beryahan dambe la innaga badiyey. Diintu ma samayn dad aan hore loo arkin, mana keenin xukunno marsoobax ah. Waxa ay xoojisay oo ay dhiirrigalisay wanaaggii ay bulshadu lahayd, wixii xumo ahaana waa ay la dagaallantay. Siyaabaha xumaha loola dagaallamana waxaa ka mid ah, in la gooyo jidadka xumahaas lagu gaadhi karo. Asturnaanta jidhka iyo kala soocnaanta ragga iyo dumarku, waxa ay ka mid yihiin hababka ay diintu ku ilaalisay dhowrsoonaanta qofka Muslimka ah.

Nebigu scw waxa uu yidhi, "Waxaa la ii soo saaray si aan u dhammaystiro akhlaaqda waxaangan."

U fiirso, ma uusan odhan, 'In aan dhiso ama sameeyo akhlaaq wanaagsan oo cusub'. Markii uu diinta fidinayey, waxa uu dadka ugu yeedhayey in wanaagga laga shaqeeyo, xumaha la diido, dulmiga laga dheeraado, madluumka la garab istaago, qofka aan waxba haysan la kaalmeeyo, ammaanada la ilaaliyo, deriska la xaq dhowro, martida la sooro,...—Waxyaalahani dadka kuma cusbayn oo waa ay samayn jireen e, diinta Islaamku waa ay sii xoojisay.

Dhaqanka suubban dadka oo dhan baa jecel. Kan dadka ugu anshaxa xumi waa uu jecel yahay dhaqanka wanaagsan, yuusanba ku dhaqmin e. Dhowrsoonaanta iyo asturnaantu waa wax dadku wada jecel yihiin, kuna dadaalaan, waxaase lagu kala duwanaan karaa xadka ay leeyihiin

dhawrsoonaanta iyo asturnaantu. Aadam cs iyo Xaawo cs markii Alle abuuray, qaawanaantii laguma dhaafin e, hu' ayaa loo sameeyey. Markii Ibliis beenta ka dhaadhiciyey ee ay gefkii ku dhaceenna, waa tii ciqaab ahaan looga qaaday hugii markii hore lagu maamuusay, dabadeedna ay isku dhedhejiyeen caleentii dhirta, si ay cawradooda u asturaan, ama sida Qur'aanku tilmaamay—*saw'adooda*; xumaantooda. Waa fidro Alle dadka ku abuuray.

Ilaa iyo bilowgeennii ma jirin diin Alle soo dejiyey oo qaawanaanta jidaysay, oo diimuhu waa hal mid, laakiin axkaamtooda ayaa kala duwanayd. Hadda saddexda diimood ee Samaawiga ah: Yahuudiyada, Masiixiyada, iyo Islaamkuba, asturnaanta waa ay wadaagaan, oo labbiska Yahuudda qaar iyo kan dumarka kaniisadaha ka shaqeeyaa, wax badan kagama duwana kan Muslimiinta dumarkoodu ay xidhaan.

Taas macnaheedu ma waxa weeyaan in xijaabku yahay caado iyo dhaqan ee uusan diin ahayn? Nebi Muxammad scw hortii waa la soomi jirey, la salaadi jirey, la xajin jirey, sakana waa la bixin jirey e, ma la odhan karaa soonka, salaadda, xajka iyo sakadu waa dhaqan ee diin ma aha? Asturnaantu waa wax ilaa Aadam iyo Xaawo jidaysnaa, diinteennuna ay inna fartay, waana dhaqan suubban oo sharaf leh.

Hidde iyo dhaqan dad u gaar ah waxaa laga hadli karaa, oo ay tixgelin yeelanayaan, marka uusan meesha oollin xukun ay shareecadu caddaysay. In dumarku jidhkooda asturaan waa waajib Alle saaray, hadalna kama furna. Dhaqan iyo dhaqan la'aan. Qofkii ku dhaqmaa Alle amarkiisii ayaa uu fuliyey, kii ka tagaana waxa uu sameeyey amardiiddo, waxa

uuna caasiyey Alle SWT.

Sida ku cad aayadaha Qur'aanka, xadiiska Suubbanaha SCW, iyo taariikhda Islaamkaba, xukunka xijaabku waxa uu ahaa mid lagu soo rogey dumarkii Muslimiinta ahaa xilligii Nebiga SCW, bilowgii Islaamkana waajib ma ahayn. Sidii haweenkaa hore loo faray ayaana looga rabaa kuwa hadda jooga iyo kuwa iman doonaba. Dumarkaa Carbeed ee hore iyo dumarka maanta, Carabtooda iyo Cajamtoodaba, isku si ayaa uu xijaabku waajib ugu yahay, sida salaadduba ay waajib ugu wada tahay.

Sida ay culamadu u badan yihiin, dumarka waxaa waajib ku ah in ay asturaan jidhkooda oo dhan, wixii aan ka ahayn wejiga iyo labada cumaacumood. Sidaas awgeed, niqaabku waa sunne e, waajib ma aha in ay dumarku wejigooda dedaan. Innagu, Soomaali ahaan, qoorta, dhegaha, qayb timaha ka mid ah, iyo cagahaba, waa aynu iska xalaashannay, laakiin diintu ma oggola, waxa ayna ka mid yihiin cawrada haweenka ee ay waajibka tahay in la asturo. "Waa dhaqan Soomaaliyeed," ma aha qiil lagaga baxsan karo xukun Alle dejiyey. Immisa dhaqan oo awooweyaasheen iyo ayeeyooyinkeen ay ku dhaqmi jireen, ayaa aynaan ku dhaqmin? Xukunka Alle SWT ayaa ka weyn dhaqanka ay dadku caadaysteen.

Diintu iyada ayaa qaabaysa dhaqanka qofka Muslimka ah. Iyada ayaa hagta rabitaankiisa iyo fekerkiisaba. Diintu waa ay soo dhoweysaa dhaqanka iyo caadada dadka, *bishardi*, in aan iskahorimaad meesha soo galin. Waxaa la inna faray in aynu is-asturno, laakiin qaabkii aynu u fulin lahayn innaga ayaa la innoo dhaafay, waana halkan booska dhaqanku soo galayaa.

Tan xijaabka, in kasta oo ay diintu jidaysay xidhashada xijaabka, haddana, dhaqanka iyo caadada bulshooyinka ayaa ay u daysey in ay sidii u cuntanta u fuliyaan.

Khasab ma aha in la xidho maro nooc gaar ah u samaysan, ama midab gaar ah leh, ama Sucuudiga laga keenay, iwm…. Marada aad rabto xidho, laakiin ha laga helo tilmaamihii diintu jideysay: maradu waa in ay asturto intii la rabey; waa in aysan ahayn cidhiidhi jidhka qaabkiisa muujinaya, waana in aysan ahayn dhaldhalaal indhaha soo jiidanaya, oo qofkii arkaaba uu indhaha la raacayo. Intaas marka la oofiyo, haweenayda ayaa ay u taallaa: boqor, bafto, subeeciyad, garays iyo guntiino, toob iyo dirac, Aliindi iyo Armani, kii ay xidhanayso. Waxa keli ah ee marwada sharfan laga rabaa waa: in labbiskeedu uusan xukunkii sharciga ahaa jabin—inta kale waa iyada iyo dookheeda, iyo dhaqankeeda.

Diintu innama galin cidhiidhi, isla markaana, sida duurjoogta innooma fasixin. Waxyaalo ayaa la inna faray, kuwo kalena waa la innaga reebay, iyada oo qofkii amarka Alle qaata abaalmarin loo ballanqaaday, kii diidana ciqaab loogu gooddiyey. Ogoow, Nebigu scw waxa uu innoo sheegay in Jannada lagu xeeray waxyaalo ay naftu dhibsato, qofkii in uu galo rabaana uu ku khasban yahay in uu u dulqaato. Halka Naarta ay ku hareeraysan yihiin waxyaalo ay naftu jeceshahay, kuwaas oo qofkii lugta la gala (sidii dabin) ay Naarta galitaankeeda u horseedi karaan. Alle ha innaga fogeeyo Naarta iyo wixii innoo dhoweyn karaba. Aamiin.

Banuu al-Musdaliq

Qabiilka Banuu al-Musdaliq oo degaankeedu u dhexeeyey Madiinah iyo Makah, kana qaybqaadatay duullaankii Uxud[31], ayaa Nebigu scw waxa uu ka war helay in ay isu diyaarinayaan weerar ay Madiinah ku soo qaadaan.

Nebigu scw waxa uu ku baxay isaga oo wata ilaa toddobo boqol (700) oo dagaalyahan[32]. Duullaankani sannadkii uu dhacay dood ayaa ka taagan, laakiin culamadu waxa ay u badan yihiin in uu ahaa sannadkii shanaad ee hijrada ka dib. Goor ay ahaydba, iyaga oo aan filanayn ayaa weerarkii lagu bilaabay, si fududna waa lagu jabiyey.

Intii goobta la joogey ayaa labo wiil oo mid Cumar u shaqaynayey, kana mid ahaa Muhaajiriinta, midka kalena la toloobay (*xaliif*) Ansaarta, ay isku dhaceen, oo kii Muhaajirka ahaa laaday kii kale, isna uu u habarwacday tolkii, "Yaa Ansaar aheey!", kii kalena, "Yaa Muhaajiriin aheey!"

Nebiga scw ayaa maqlay, waxa uuna ku yidhi, "Waa maxay habarwacashadan Jaahiliga ahi?" Suubanuhu scw intaa waxa uu raaciyey, "Iska daaya waa ay uraysaaye."

Warkii ayaa gaadhey madixii munaafiqiinta, Cabdullaahi ibnu Ubayi ibnu Saluul. Ka dibna waxa uu bilaabay in uu ka faa'iidaysto dhacdadaas, isaga oo Ansaartii ku leh: idinka ayaa waxan isu keenay, oo dhulkiinni dejiyey, hantidiinnina la qaybsaday. Waxa uu ku hadalqabsaday odhaah Carbeed oo tidhaahda, "Eygaaga naaxi ha ku cuno e." Waxa uuna soo jeediyey in ay taageeradooda ka gooyaan Muhaajiriinta

31 As-Siirah an-Nabawiyah as-Saxiixah, 2/405

32 As-Siirah an-Nabawiyah as-Saxiixah, 2/406, oo xiganaya Taariikh al-Islaam, 1/230.

si ay Madiinah uga guuraan. Intaas waxa uu raaciyey in marka ay Madiinah ku laabtaan, "Ka sharfta leh" uu ka saari doono, "ka liita"—isaga oo uga jeeda in u Nebiga SCW iyo Muhaajiriinta ka eryi doono Madiinah.

Goobta uu sidaa ka leeyahay waxaa fadhiyey wiil yar oo Ansaari ahaa, munaafiqanna ay tol ahaayeen. Yarkan oo magiciisu ahaa Sayd ibnul Arqam RC, ayaa warkii u geeyey Nebiga SCW iyada oo Cumar la joogo. Cumar baa isla markiiba soo jeediyey talo ah in la dilo munaafiqaas, "Ii daa aan qoorta ka jaro munaafiqan." Nebigu SCW taladaa ma oggolaan, waxa uuna yidhi, "Iska daa, dadku ku sheekaysan maayaan in Muxammad asxaabtiisa dilo e."

Suubbanuhu SCW waxa uu ku dhawaaqay in meeshii laga guuro, oo Madiinah loo dhaqaaqo. Waxa ay ahayd waqti uusan Nebigu SCW guuri jirin oo aan looga baran, waxaana u yimid Usayd ibnu Xudayr oo ka cabanaya guuritaanka xilligan ah. Nebigu SCW waxa uu ku yidhi, "Kuma soo gaadhin miyaa wixii saaxiibkiin yidhi?" Halkii ayaa uu Nebigu SCW ugaga warramay waxa dhacay. Maalintaas oo idil iyo habeenkeedi ayaa la socdey, ilaa maalintii labaad ay qorraxdii ku kululaatay. Markii la dageyna qofba meeshii uu haleelay ayaa uu, daal aawadii, hurdo la dhacay.

Nebigu SCW waxa uu diidayey in la had-hadlo, oo wixii labada wiil dhex maray ay faraha ka baxaan. Qabyaaladduna si Soomaalida ka daran ayaa ay dhiigga Carabta ugaga jirtey, dad badanna diintaba waa ay ku cusbaayeen, dhaqanka dadkuna waqti dheer ayaa uu qaataa in uu beddelmo. Sidaas awgeed, Nebigu SCW waxa uu ku mashquuliyey socodkan dheer.

Dhacdadan ka dib, markii uu munaafiqaasi qalalaase bilaababa tolkii ayaa canaanan jirey oo edbin jirey. Wiilkiisi oo ka war helay waxa aabbihii sameeyey, ahaana saxaabi sharaf badan, ayaaba kadinka magaalada u joogsaday, oo ka dhaariyey in uu galo ilaa Rasuulku scw u oggolaado! Heer waxa ay gaadhay wiilkiisi uu Nebiga scw u yimaaddo, isaga oo weydiisanaya oggolaansho in uu aabbihii gacantiisa ku dilo. Laakiin Nebigu scw waa uu ka diidey. Mar dambe isaga oo Cumar arrintan dareensiinayana waxa uu ku yidhi, "Sidee ayaa aad u aragtaa, haddii aan dili lahaa maalintii aad igu tidhi dil? Dad badan baa u gilgilan lahaa, kuwaas oo haddii aan maanta amro in ay dilaan dili lahaa."

Cumar aad ayaa uu u jeclaa Nebiga scw, waxaana la weynaatay aflagaaddadii uu munaafiqaasi ku kacay, iyo iskudirkii uu rabey in uu Muslimiinta kala qaybiyo, si uu u xalliyana waxa uu doorbiday in uu awood adeegsado, oo uu ninkaas halistiisa ummadda dhaafiyo. Nebiguna scw meel taas ka fog ayaa uu wax ka eegayey, waxa uuna dhowrayey maslaxad taas ka weyn, iyo halis ka ballaadhani in ay timaaddo haddii ninkaas la dilo.

Munaafiq iska daa e, Cumar waxa uu meel adag ka istaagay haweenkii Nebiga scw ka dib markii ay Xafsah rc, oo gabadhiisi ah, iyo Caa'isha rc abaabuleen arrintii ay ku soo degtay suuradda Taxriim. Aad iyo aad ayaa uu u jeclaa Nebiga scw, ugana dhiidhiyi jirey wax kasta iyo cid walba oo waxyeellaysa Suubbanaha scw.

Duullankani waa kii ay silsiladdu kaga luntay Ummul Mu'miniin Caa'isha rc, markii dambena lagaga guurey, ka dibna uu ka dhashay beenabuurkii weynaa.

Waxaa ku xigey duullaankii Axsaab ee ay isbahaysiga gaaladu ku soo qaadeen Madiinah. In kasta oo Cumar uu labadan dhacdaba goobjoog ka ahaa, haddana, ogaalkay, diiwaannada taariikhdu si gaar ah uma xusin magiciisa.

Xudaybiyah

Dabayaaqadii sannadkii lixaad ayaa uu Nebigu scw u baxay cumro, taas oo uu ka dhashay heshiiska ku caanka baxay *Sulxul Xudaybiyah*— ama Heshiishkii Xudaybiyah, oo dhex maray Muslimiintii iyo Mushrikiintii. Waa dhacdadii ay ku soo degtay suuradda al-Fatx ama *Innaa Fatax*.[33]

Goobta Xudaybiyah waxa ay 22 kiiloomitir waqooyi-galbeed ka xigtaa Makah. Xilliganna waxaa lagu magacaa Shumaysii, wax yar ayaana ay u jirta xuduudda Xaramka laga galo, waxaana la sii ag maraa marka Makah iyo Jiddah loo kala socdo.

Mushrikiintii Quraysheed markii ay ka war heleen in Nebigu scw cumro u soo socdo, waxa ay go'aansadeen in ay ka hor tagaan, oo aysan Muslimiinta u oggolaan in ay Xaramka iyo Makah soo galaan.

Wax la wada hadlo oo ergo la isdhaafsadaba, Qurayshi waa ay diiddey in ay Muslimiintu galaan Xaramka, Nebiguna scw in uu Makah ku dagaallamo ma rabin—oo waa Xaram dagaalku ka reebban yahay, xilliguna waa Bilihii Xurmada lahaa (*Ash-hur al-Xurum*) oo xitaa Carabta Mushrikiinta ahi ma dagaallami jirin. Sidaas awgeed, waxa uu isku dayey in uu Cumar ergo ahaan ugu diro Makah. Waa tii aynu soo aragnay in isaga iyo reerkiisu ay hayeen jagadii

33 As-Siirah an-Nabawiyah as-Saxiixah, 2/434.

safiirnimo ee Qurayshi lahayd. Cumar waxa uu yidhi, "Quraysh naftaydaan uga baqayaa, Makana ma joogto cid reer Banuu Cadiy ah oo i difaaci kartaa, Qurayshina waa ay ogsoon tahay nacaybka aan u qabo, iyo sida adag ee aan ula dhaqmo. Laakiin aan kuu tilmaamo nin ay iiga qaddarin badan yihiin—Cusmaan ibnu Cafaan." Sidii ayaa Cusmaan loogu diray Makah.[34]

Qurayshi fal dhaqanka wanaagsan ka baxsanaa ayaa ay ku kaceen, oo ergadii loo diray waa ay xidheen. Nebiga scw iyo asxaabtiina waxaa gaadhey war sheegaya in Cusmaan la diley. Nebigu scw waxa uu joojiyey waanwaantii, waxaana la qabtay *Baycatur Ridwaan*, taas oo ballan lagu galay in Quraysh la dagaallankeeda aan loo kala hadhin. Waxaa la isku dhaarsaday geeri.

Xudaybiyah waa meel saxare ah oo ay cadceeddeedu aad u kulushahay. Sidaas awgeed, maalintii dadku waxa ay raadsan jireen geed ay hadhsadaan, oo hal meel lama wada joogin. Markii ay baycadu bilaabatayna Cumar ma joogin e, waxa uu isu diyaarinayey dagaal. Wiilkiisi Cabdullaahi oo uu faraskiisi dagaalka u dirsaday ayaa arkay dadkii oo bayco galaya, ka dibna u sheegay markii uu u yimid. Markaas ayaa uu isna aadey geedkii baycada lagu galayey.[35]

Geedkii waxaa loo bixiyey *Shajaratur Ridwaan*, iyada oo loogu magac darayo baycadii. Waxaa jira warar tilmaamaya in beryo dambe ay dadku geedkaas aadi jireen si ay ugu hoos tukadaan, oo markii uu Cumar ka war helay uu amray in la jaro geedkaas. Waxa ayse u badan tahay in uusan isla geedkii ahayn e, geed kale oo goobta ka ag dhowaa ay u

34 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 4/379.
35 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 4/386.

maleeyeen. Maxaa yeelay, sida uu Bukhaari werinayo[36], saxaabadii maalintaa baycada ku gashay qaar ka mid ah, oo sannadkii ku xigey goobtii soo maray waa ay waayeen geedkii, lagana yaabee in daad la tagey.

Iyada oo qabanqaabadii dagaalka lagu jiro ayaa ay caddaatay in aan Cusmaan la dilin ee uu weli nool yahay. Mushrikiintii waxa ay soo direen ergooyin dhawr ah, laakiin waxba ma xallismin. Ugu dambayntii waxa ay soo direen Suhayl ibnu Camr, oo aynu soo sheegnay in uu ka mid ah maxaabiistii dagaalkii Beder lagu qabtay, Cumarna uu rabey in uu foolasha ka siibo! Suhayl waxa uu ahaa nin garaad badni iyo aftahannimo isku darsaday. Ujeeddada loo soo dirayna waxa ay ahayd: in uu Nebiga scw heshiis la galo, kaas oo qodobka ugu weynaa uu ahaa in Muslimiintu ay sannadkan iska laabtaan, oo ay soo noqdaan sannadka xiga, si aan Carabta kale ugu sheekaysan in ay Makah xoog ku galeen.[37]

Heshiiskan waxaa ku jirey qodob sheegaya in qofkii reer Makah ka soo islaama, ee Muslimiinta u taga la soo celiyo, kii Muslim ahaa ee Mushrikiinta ku biirase aan la celin doonin! Nebigu scw isaga oo aad uga xun ayaa uu ka oggolaaday. Qaddar Alle, waxaa isla markii yimid wiil uu Suhayl dhalay, oo intii uu islaamayba la ciqaabayey soona baxsaday. Suhayl waxa uu ku adkaystay in wiilkiisu noqdo qofkii ugu horreeyey ee qodobkani ku soconayo, haddii laga diidana heshiisku burburayo.

Nebiguna scw waxa uu yidhi: ha loo celiyo, laakiin Muslimiintii waa ay ku adkaatay. Cumar oo is-hayn kari

36 Saxiixul Bukhaari 3930.
37 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 4/388-391.

waayey ayaa u yimid Nebiga scw, "Miyaadan ahayn Nebigii Alle oo dhab ah?!" ayaa uu weydiiyey.

"Haa."

"Miyeynaan xaq ku taagneyn cadowgeennuna baadil?"

"Haa."

"Haddaba maxaynu wax liita diinteenna u dhaafsanaynaa?" ayaa uu Cumar yidhi.

"Waxa aan ahay Rasuulkii Alle, mana caasinayo, Isagaana ii hiilinaya," ayaa uu Nebigu scw ugu jawaabay. Taas oo ay ka muuqato in qaadashada heshiiskani ay ahayd waxyi Alle ka yimid.

"Miyaadan nagu dhihi jirin in aannu Baytka iman doonno oo aannu ku dawaafi doonno?" Ayaa uu Cumar yidhi.

"Haa. Miyaanse ku idhi sannadkan ayaa aynu imanaynaa?"

"Maya." Ayaa uu Cumar ku jawaabay.

"Haddaba waa aad imanaysaa kuna dawaafaysaa." Ayaa uu Suubbanuhu scw hadalkiisi ku soo afjaray.

Cumar oo weli xanaaqsan ayaa u tagey Abuu Bakar, oo intii in le'eg weydiiyey, warcelin middii Rasuulka scw u dhiganta, ayaa uu Abuu Bakarna ka helay. Waxa aad mooddaa in ay is-ogaayeen, sida ay isugu jawaab ekaadeen.

"Ninyahow, waa Rasuulkii Alle e, mana caasiyayo Rabbigii, Isagaana u hiilinaya e, dacalka qabso." Ayaa uu Abuu Bakar hadal ku soo koobay. Rasuulka tafta hayso oo ha ka hadhin.

Abuu Bakar iimaankiisu waxa uu gaadhsiisnaa heer aad u cajiib ah. Ilaa bilowgii nebinimada ee Islaamka loo soo bandhigay, hal mar kama shakiyin, walaacna ma galin.

Markii Nebiga scw la dheelmiyey, ee uu Mushrikiintii u sheegay in uu Baytul Maqdis tagey, dad hore u islaamay ayaa riddoobay markii ay maqleen. Mushrikiintii waxa ay u yimaaddeen Abuu Bakar iyaga oo ku dhahaya: saaxiibkaa maantana waxa uu la yimid eeg—rabana in ay khalkhal galiyaan. Abuu Bakar waxa uu ugu jawaabay,

"Ma sidaasuu yidhi?"

"Haa."

"Haddii uu yidhi run buu sheegay. Wax intaa ka fog baa aan ka rumaystaa; waxaan ka rumaystaa warka samada uga imanaya subax iyo galabba."

Markan ayaa ay ahayd markii *as-Siddiiq* lagu naanaysay. Iimaankiisa wax gilgili karaa ma jirin, waxa uuna ahaa tiir ay saxaabadu cuskadaan marka ay dhibaato ku timaaddo, kuna soo eertaan marka ay xaaladdu adkaato, sida markanba Cumar ugu yimid.

Cumar ma soo marin xilli uu go'aan Nebigu scw gaadhay, sidan si le'eg uga hor yimid. Raad weyn ayaana ay ku reebtay oo waxaa laga soo tebiyaa in uu yidhi, "Weli ma aanaan joojin sadaqo bixinta, soonka, salaadda, iyo xoraynta addoomaha, aniga oo ka cabsi qaba hadalkii aan maalintii ku hadlay."[38] Cumar waxa uu dhaqan galinayaa aayadaha iyo xadiisyada sheegaya in marka qofku uu gef ku dhaco, ay tahay in uu raaciyo wanaag tirtira xumaantii hore.

Nebigu scw waxa uu saxaabigii la celinayey kula dardaarmay in uu samro, Ilaahayna faraj u furi doono. Cumar oo seeftiisi wata ayaa garabgalay isaga oo ku waaninaya in uu samro, kuna dhahaya waa Mushrikiin dhiiggooduna kan

38 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 4/380.

eyga waxba ma dhaamo, isla markaana hoos-hoos seefta uga soo dhoweynaya—"Waxa aan rejaynayey in uu iga qaato oo uu aabbihii ku garaaco!" Ayaa uu Cumar yidhi. Ha ahaatee, wiilka waa ay ku adkaatay in uu aabbihii dilo, ama ujeeddadii Cumar ma uu dhugan.

Waxoogaa ka dib waxaa soo dagey aayadaha 10–11'd ee surradda al-Mumtaxanah, kuwaas oo ay ku jirto in Muslimka iyo Mushriggu hadda ka dib aysan isqabi karin. Maalintaas Cumar waxa uu furay labo xaas oo aan weli islaamin. Qariibah bint Abii Umayah waxaa markii dambe guursadey Mucaawiyah ibnu Abii Sufyaan. Qariibah waxa ay walaalo ahaayeen hooyadii Mu'miniinta, Umm Salamah RC (Hind bint Abii Umayah). Xaaska labaad, Umm Kalthuum bint Jarwal al-Khusaacii, oo dhashay Cubaydullaah ibnu Cumar, iyadana nin kale oo Abuu Jahm la odhan jirey ayaa guursaday.[39]

Afartaniba gadaal ayaa ay ka soo Islaameen, welibana labadan nin ee guursaday xaasaskii Cumar furay, Mucaawiyah iyo Abuu Jahm bin Xudayfah, mar labaad ayaa ay wada dooneen hal haweenay—Faatimah bint Qays RC, waxa ayna talo weydiisatay Nebiga SCW. Waxa uu Suubbanuhu SCW ku yidhi: Abuu Jahm dumarka ayaa uu garaacaa, Mucaawiyana waxba ma haysto e, Usaamah ibnu Sayd guurso, sidii baana ay yeeshay[40]. Mucaawiyah markii uu talada qabtay (41–60 H) ayaa waxaa soo booqday Abuu Jahamkii tartanka guurku hore u dhex maray, waxa uuna siiyey xoolo.

39 Diraasah Naqdiyah, 1/223.
40 Saxiix Muslim 1480.

Markii uu Nebigu scw ku laabtay Madiinah, ayaa waxaa u yimid saxaabi kale oo ka soo baxsaday ciqaabtii reer Makah ku hayeen. Nebigu scw heshiiskii ayaa uu fuliyey, waxaana lagu daray labo nin raadgoob ahaan Makah looga soo diray. Jidka iyaga oo ku sii jira ayaa ay meel ku dageen. Iyada oo la fadhiyo timirna la cunayo ayaa uu saxaabigii, oo magiciisu ahaa Abuu Basiir, labadii nin mid ku yidhi, "Hebeloow, seeftaadu wanaagsanaa, ma fiirin karaa?" Seeftii markii uu u dhiibayna nafta ayaa uu kaga jaray, kii labaadna naxdin baa uu orodkii ku galay Masjidkii Nebiga scw!

Abuu Basiir kuma negaan karin Madiinah, ee duurkaas ayaa uu iska joogey. Saxaabigii kale ee goobtii heshiiska Xudaybiyah laga celiyey, oo magiciisu ahaa Abuu Jandal, oo Makah ka soo baxsaday ayaa isna ku biiray Abuu Basiir. Sidii marba mid kale oo Makah ka soo cararay ugu imanayey ayaa ay koox noqdeen. Waxa ay bilaabeen in ay safarradii Qurayshta ee Shaam u socotay jidka u galaan, oo ay dilaan dadkii wadey xoolahana ka dhacaan. Mushrikiintii oo rafaaday ayaa Nebiga scw u soo diray wafdi, iyaga oo ka baryaya in uu ka joojiyo raggan. Si ay arrintan u soo afjaraanna waxa ay yidhaahdeen: hadda ka dib ciddii kuu timaadda lama soo celinayo e, ha kula joogaan!

Allaah swt waxa uu heshiiskii Xudaybiyah ku tilmaamay guul, waana sababta ay ku soo degtay suuradda al-Fatx, oo macnaheedu yahay guul iyo furasho. Heshiiskan iyo nabaddii ka dhalatay waxa ay suuragaliyeen in la isdhex socdo oo la wada hadlo. Qodobbada heshiiska waxaa ku jirtey in dagaalka la joojiyo muddo toban sano ah[41]. Arrintaasna

41 As-Siirah an-Nabawiyah as-Saxiixah, 2/442.

Muslimiinta dan weyn baa ugu jirtey, oo waxa ay hubeen in dadku diinta qaadan doonaan haddii la gaadhsiiyo, oo ay xujo ahaan iyagu gacan sarreeyaan. Go'aankii adkaa ee uu Suubbanuhu scw qaatay, Cumarna uu ka biyo diidey, waxaa ka dhashay in kun iyo afartii boqol (1400) ee maalintaa la socotay, ay noqdaan toban kun (10, 000), oo uu labo sano ka dib ku furtay Makah.

Khaybar[42]

Markii Xudaybiyah laga noqday, muddo gaabanna Madiinah la joogey, ayaa uu Nebigu scw duullaan ugu baxay Khaybar, bishii Muxarram ee bilowgii sannadkii toddobaad. Khaybar waxa ay Madiinah u jirtaa ilaa 153 kiiloomitir.

Saddexdii waaxood ee duullaankii Axsaab isu bahaystay la dagaallanka Muslimiinta, markii Mushrikiintii Quraysheed heshiis lala galay, Carabtii kalena la kala firdhiyey, waxaa loo soo jeestay in Yahuuddiina dhibtooda la xalliyo. Xilligan waxaa xarun u noqotay Khaybar oo ay hagardaamadooda ka soo maleegayeen, sidaas ayaana loogu duuley.

Cumar qayb ayaa uu ka ahaa duullaankan, waxaana jira warar sheegaya in qaar ka mid ah qalcadihii Khaybar loo diray ciidan uu Abuu Bakar hoggaaminayey, laakiin aysan ku guuleysan in ay qabsadaan. Ka dibna maalintii ku xigtey hoggaankii ciidankaas loo dhiibay Cumar, isna uusan ku guuleysan. Dabadeedna, Cali loo dhiibay oo uu isagu ku guuleystay qabsashadoodi. Waxaase dadka soo weriyey ku jira qaar aan warkooda lagu kalsoonayn. Imaam Bukhaari isagu waxa uu soo weriyey in bilowgiiba Cali hoggaanka loo

42 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 4/396; Fatxul Baarii, 9/294; Diraasah Naqdiyah, 1/492.

dhiibay, oo habeenkii uu Nebigu scw yidhi, "Berri calanka waxa aan siinayaa nin jecel Alle iyo Rasuulkiisa, Alle iyo Rasuulkiisuna ay jecel yihiin."[43] Sida Imaam Muslim uu diiwaangaliyey, waxa uu Cumar rc yidhi[44], "Maalintaa oo keli ah ayaa aan jeclaystay madaxtinimo." Waxa uu intaa sii raaciyey in uu subixii yimid isaga oo isdheeraynaya, si uu Nebigu scw u arko oo u xusuusto, hoggaanka iyo calanka duullaankana ugu dhiibo. Laakiin sharaftaa waxaa helay Cali rc.

Muddo lix bilood gaadheysa ka dib, waxaa Cumar rc hoggaamiye looga dhigay ciidan yar oo soddon nin ahaa, ujeeddadooduna ahayd in ay ku duulaan qabiil Carbeed oo degganaa dooxo lagu magacaabo Turabah, oo bariga Xijaas ku taalla. Habeenkii ayaa ay socon jireen, maalintiina waa ay dhuuman jireen. Hase ahaatee, waa laga war helay, waxa ayna gaadheen goobtii oo laga guurey, ka dibna Madiinah ayaa ay iskaga noqdeen. Waxa ay ka mid ahayd istiraatiijiyo lagu cabsi galinayo Carabta reer baadiyaha ah, si aysan Madiinah ugu soo dhiirran.

Qabiilkani waxa ay duullaan soo qaadeen furashadii Makah ka dib, waxaana lagu jabiyey dagaalkii Xunayn.

Cumratul Qadaa'

Sidii uu xusayey heshiiskii Xudaybiyah, Nebiga scw iyo saxaabadu sannadkii toddobaad dabayaaqadiisi, waxa ay Makah u aadeen gudashada cumradii loo diidey sannadkii

43 Diraasah Naqdiyah, 1.493-494; ar-Raxiiqul Makhtuum, 337.
44 Saxiix Muslim 2405.

hore[45]. Waxaa jirtey in Mushrikiintu ay faafiyeen dacaayad ahayd: in ay xummaddii Madiinah wiiqday Muhaajiriinta, oo ay iman doonaan iyaga oo taagdarreeyey. Nebigu SCW waxa uu saxaabadii amray in awood la muujiyo, oo marka dawaafkoodu ku beegmo dhanka ay Mushrikiintu ka daawanayaan la rucleeyo[46], taas oo gaaladii ka yaabisay—dadkii beenta iyo borobagaandada lagu qulaaminayeyna, indhahooda ku tustay xaqiiqada Muslimiinta iyo awoodda ay leeyihiin. Waxa ay ahayd dhoollatus guuleystay. Ilaa iyo maantana waa ta la rucleeyo qaybta hore ee dawaafka, inta u dhexaysa *Ruknul Yamaanii* iyo *Xajarul Aswadka*.

Cabdullaahi ibnu Rawaaxah RC ayaa Nebiga SCW hor socday, isaga oo tirinaya gabay faan, hanjabaad iyo maagitaan isugu jira. Cumar RC ayaa ay u cuntami weyday oo ku canaantay, "Ina Rawaaxoow, Rasuulkii Alle hortiisa, iyada oo weliba Xaramkii Alle la joogo miyaad gabyeysaa!" Cumar waxaa u muuqatay in aysan ahayn goob gabay laga tiriyo, ayna tahay xurmada Xaramka iyo Rasuulka oo meel lagaga dhacay, iyo weliba goob cadowgoodii ugu weynaa ka muuqdo, ayna tahay in cadho iyo collaytan loo muujiyo e, aan gabay booskiisi la joogin. Suubbanaha SCW ayaa ka celiyey oo yidhi, "Dhaaf Cumaroow. Fallaadho lagu gano gabayga ayaa kaga daran e."[47]

45 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 4/456; as-Siirah an-Nabawiyah as-Saxiixah, 2/464.
46 Saxiixul Bukhaari 4256.
47 Fatxul Baarii, 9/354.

Xidhiidhkii Dibadda

Laga bilaabo sannadkii lixaad, Nebigu SCW waxa uu gudagalay in uu farriimo u diro madaxdii ku hareeraysnayd, isaga oo ugu yeedhaya in ay islaamaan. Waxa uu warqado u diray Kisraa oo Faaris (hadda: Ciraaq, Iiraan…iwm) haystay, Qaysarkii Ruum (Biisandiyiinta) haystay, Najaashigii Xabasha (ma aha kii Muslimka ahaa), Muqawqaskii Aleksandariya ka talinayey, iyo kuwo kaleba.

Madaxdii uu Nebigu SCW farriimaha u diray waxaa ka mid ahaa midkii ka talinayey magaalada Busraa, oo hadda ka tirsan Suuriya, kana mid ahayd dhulkii Roomaanku ka talinayeen. Saxaabigii farriinta loo dhiibey oo magiciisu ahaa al-Xaarith ibnu Cumayr RC, ayaa waxaa jidka ka helay Shuraxbiil ibnu Camr al-Qasaanii, oo ahaa Carabtii Masiixiyiinta ahayd, kana mid ahaa dadkii Qaysarka ka hoos talinayey. Saxaabigii si xun baa ay u dileen.

Nebigu SCW markii uu warkii helay waxa uu go'aansaday, in Shuraxbiil iyo kooxdiisa duullaan lagu qaado, waxaana loo diray ciidan saddex kun (3000) gaadhaya, oo uu madax u ahaa Sayd ibnu Xaarithah RC. Waxaa ku-xigeenno u ahaa Jacfar ibnu Abii Daalib RC, iyo Cabdullaahi ibnu Abii Rawaaxah RC. Waa xilli dhawr bilood laga joogo cumradii uu Cabdullaahi ka gabyayey, ee Cumar ku canaantay.

Ciidankii Muslimiinta waxaa la kulmay ciidan ka kooban Roomaan iyo Carabtii Masiixiyiinta ahayd oo iswata, waxaana dagaalku ka dhacay goobta Mu'tah oo hadda ka tirsan dalka Urdun. Muslimiinta aad ayaa looga tiro badnaa, waxaana dhacday in saddexdii hoggaamiye ay si isdabajoog ah u shahiideen. Alle waxa uu ku badbaadiyey

Khaalid ibnul Waliid RC oo ciidanka la socday, soona islaamay markii cumrada laga soo noqday. Isaga ayaa qaab xeeladaysan ciidankii dagaalka uga saaray, oo Madiinah ku soo celiyey iyaga oo aysan dhibaato weyni soo gaadhin.

Sidaa laguma dhaafin e, waxaa bilaabatay in Carabtii Roomaanka la saftay xal loo raadiyo. Waxa ay noqotay in awood la tuso inta dagaalka rabta, inta kalena Islaamka loogu yeedho[48]. Camr ibnul Caas RC oo ay isaga iyo Khaalid hal mar soo wada islaameen, ayaa loo diray meesha la yidhaahdo *Daati Salaasil*. Camr ciidanka uu watey waxa ay ahaayeen saddex boqol (300) waxa ayse la kulmeen ciidan ka badan. Islamarkiiba qayladhaan ayaa uu Madiinah u dirsaday, waxaana laga soo dabo diray ciidan labo boqol (200) ah, oo ay ku jiraan Abuu Bakar RC iyo Cumar RC, uuna hoggaaminayey Abuu Cubaydah ibnul Jarraax RC. Carabtii lagu duuley oo Qudaacah la odhan jirey waa ay kala carareen, waxaana lagala noqday guul iyo haybaddii Muslimiinta, ee Mu'tah dhaawacu ku soo gaadhey oo la soo celiyey.

Waxaa la sheegaa in Camr uu ciidanka u diidey in ay dab shitaan habeenkii, arrintan oo uu Cumar ku gacansaydhay. Laakiin Abuu Bakar ayaa dejiyey Cumar isaga oo leh, "Iska dhaaf, Rasuulka Alle SCW waxa uu hoggaamiyaheenna uga dhigay aqoonta uu dagaalka u leeyahay e." Sidaas ayaa uu Cumar uga aamusay intii hadhay. Markii ay guulaysteenna Camr waa uu diidey in ciidankii jabay laga dabo tago.[49]

Markii Nebiga SCW la isula tagey ayaa warkii loo sheegay.

48 Ar-Raxiiqul Makhtuum, 360; as-Siirah an-Nabawiyah as-Saxiixah, 2/471.

49 Fatxul Baarii, 9/498-500.

Camr waxa uu go'aankiisa ku sababeeyey, in haddii ay dab shidan lahaayeen cadowgu ogaan lahaa tiradooda yar. Haddii ay ciidanka jabay eryan lahaayeenna, ay suuragal ahaan lahayd in gurmad u yimaaddo. Nebigu scw waa uu u bogey aragti wanaaggiisa.

Camr RC waxaa galay dareen. Isaga oo dhowaan soo islaamay, ayaa hoggaamiye looga dhigay ciidan ay ku jiraan Abuu Bakar iyo Cumar. Suubbanaha scw ayaa uu weydiiyey, "Dadka yaad ugu jeceshahay?"

"Caa'isha."

"Raggana?"

"Aabbaheed."

"Yaa ku xiga?"

"Cumar."

Dhawr nin oo kale markii uu sheegay Suubbanuhu scw, ayaa uu Camr weydiintii joojiyey—"Aniga oo ka cabsanaya in uu iigu dambaysiiyo," ayaa uu yidhi.

Camr ibnul Caas dhawr sano ayaa uu ka weynaa Cumar, islaamiddii Cumar ka dibna waa tii Caas ibnu Waa'il (Camr aabbihii) uu magan galiyey.

Cumar, Camr, iyo Khaalid waxaa dhex mari doona wadashaqayn iyo iskudhac, kan Cumar iyo Khaalid u dhexeeyey haba sii darnaado e.

Markii dhankii Carabta baadiyaha la moosay, Yahuuddiina Khaybar laga qabsaday heshiisna lala galay, waxa ay mar kale ka faruurantay dhankii Mushrikiinta Quraysh, oo heshiiskii Xudaybiyah jabiyey. Waxaana la galay qabanqaabada duullaan hor leh.

CUTUBKA 5

Bacdal Fatxi

"Alle waxa uu xaqa yeelay (saaray) carrabka Cumar iyo qalbigiisa."

—Nebiga scw,
Sunan at-Tirmidi, 4014.

Heshiiskii Xudaybiyah qodobbadii lagu kala saxeexday waxaa ka mid ahayd: in labada dhinac midba ciddii uu isbahaysi la leeyahay loo ammaangaliyo. Waxaa isbahaysi ka dhexeeyey Muslimiinta iyo qabiilka Khusaacah, halka Mushrikiintii Quraysheedna ay isbahaysi la lahaayeen Banuu Bakar. Khusaacah iyo Banuu Bakar waxaa dhex taallay cadaawad iyo aano soojireen ahayd. Dagaalkii iyo colaaddii labadan qabiil u dhexeeyey muddada dheer, heshiiskan ayaa qaboojiyey oo labadii reer kala dejiyey.[1]

Heshiiskii Xudaybiyah ee ahaa dabayaaqadii sannadkii lixaad, markii in muddo ah (17–18 bilood) lagu caanomaalayey, ee nabaddii ka dhalatay lagu barwaaqoobey, ayaa sannadkii siddeedaad, bishii Shacbaan, qabiilkii Banuu Bakar ay weerar kedis ah ku qaadeen Khusaacah. Habeennimo ayaa ay ahayd, Mushrikiintii Quraysheedna

1 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 4/524.

iyaga oo mugdiga ku hoos dhuumanaya ayaa ay hiil iyo hooba weerarkii uga qaybqaateen, maadaama goobtu ay Makah u dhoweyd.[2]

Camr ibnu Saalim al-Khusaacii ayaa Madiinah u cararay si uu Nebiga scw ugu wargaliyo waxa dhacay, isla markaana taageeradii isbahaysigooda ka dalbanaya. Gabay qiiro badan oo uu waxa tolkii lagu sameeyey ku tilmaamayo, Nebigana scw uu taageero kaga codsanayo, ayaa uu ka tiriyey Nebiga scw hortiisa. Ka dibna Suubbanuhu scw waxa uu ugu jawaabay, hadalna ugu soo koobay,

نُصِرتَ يا عمرو بن سالم

"Waa laguu hiiliyey, Camr ibnu Saalimoow."[3]

Mushrikiintii Quraysheed waa ay ka shallaayeen ballantii ay ka baxeen iyo heshiiskii ay buriyeen. Waxaa Madiinah degdeg ku tagey Abuu Sufyaan, bal in uu caanaha daatay dabaqabasho ku sameeyo. Gabadhiisi oo ahayd Ummul Mu'miniin, Umm Xabiibah, ayaa uu gurigeedi tagey, laakiin wanaag kalama kulmin. Mana ahayn in uu Muslimiinta wanaag ka fisho, isaga oo hoggaaminayey duullaankii Uxud ee ay Mushrikiintii Quraysheed Madiinah ku soo qaadeen sannadkii saddexaad, iyo Duullaankii Axsaab ee ay Gaashaanbuurtii shirkigu soo abaabuleen sannadkii shanaad.

Abuu Sufyaan waxa uu u tagey Nebiga scw, laakiin Suubbanuhu scw juuq uma odhan. Ka dibna Abuu Bakar

2 As-Siirah an-Nabawiyah as-Saxiixah, 2/473.
3 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 4/525.

RC ayaa uu u tagey, bal in uu Rasuulka SCW kala hadlo, isna waa uu ku hungoobay. Cumar RC baa ugu xigey.

"Ma aniga ayaad i weydiinaysaan in aan Rasuulka Alle SCW idiin ka ergeeyo?! Allaan ku dhaartaye, [hub] kale haddaan idiin waayo, saxar baan idin kula jihaadayaa!" Ayaa uu ugu warceliyey.[4] Saxarku waa waxa ugu yar ee la tilmaami karo, taas oo uu Cumar ku muujinayayey in aysan marna suuragal ahayn in uu dagaalka ka daayo. Waxa aad mooddaa in uu leeyahay: saxarna aan idin kula dagaallamee, inta aan noolahay waa innoo dirir.

Waxaa kale oo uu u tagey Cali RC iyo Faadumo RC, iyaguna waxa ay u sheegeen in aysan waxba u qaban karin, ka dibna Makah ayaa uu iskaga laabtay. Markii uu Makah gaadhey ee la waraystay, waxa uu Cumar ku tilmaamay, "Cadowga ugu colaadda badan," ee ay Qurayshi Muslimiinta ku dhex leedahay.

Nebigu SCW waxa uu amar ku bixiyey in duullaan loo diyaargaroobo, mase sheegin meesha loo socdo. Muslimiintii aan Madiinah degganaynna dad baa loo diray, oo qaarna Madiinah ayaa ay yimaaddeen qaarna jidka innagu kulmiya ayaa lagu heshiiyey. Intii la awoodey waa la qariyey in Makah loo jeedo.

Xaadib ibnu Abii Baltacah RC, oo ka mid ahaa Muhaajiriinta, kana qaybqaatay Beder iyo Baycatur Ridwaantii Xudaybiyah, Makana ay reer ka joogaan, laakiin aan ka dhalan ee la toloobay, ayaa warqad digniin ah Makah u diray. Haweenay Madiinah ka baxaysay ayaa uu u sii dhiibay. Goor ay meel dhexe sii marayso, ayaa Nebiga SCW loo waxyooday oo uu arrintii ka war helay. Labo ka mid

4 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 4/527.

ah dagaalyahannadii saxaabada—Cali ibnu Abii Daalib iyo Subeyr ibnul Cawaam—ayaa laga dabo diray oo warqaddii soo celiyey.[5]

Nebigu scw waxa uu u yeedhay Xaadib, oo waxa uu weydiiyey, "Xaadiboow, waa maxay waxani?"

"Rasuulkii Allow, ha igu degdegin—waxaan ahaa nin Quraysh la toloobey ee aan ka dhalan, Muhaajiriinta kula joogana waxay ku leeyihiin qaraabo u dhowrta ehelkooda iyo hantidooda. Sidaas awgeed, haddii taasi nasab (dhalasho) igu dhaaftay, waxaan jeclaystay inaan ku yeesho gacan ii dhowrta qaraabadayda, umana yeelin inaan diintaydii ka noqday ama Islaamka ka dib aan gaalnimo ku raalli noqday." Sidaas ayaa uu Xaadib ku cudurdaartay.

"Intaa run buu idiin ka sheegay," ayaa uu Suubbanuhu scw yidhi.

"Rasuulkii Allow, ii daa aan munaafiqan qoorta jaree!"

Nebigu scw waxa uu ugu jawaabay Cumar, "Waxa uu ka qaybqaatay Beder. Miyaadan ogeyn in Alle daalacday intii Beder joogtay oo uu yidhi: 'Sameeya waxaad doontaan, waan idiin dembi dhaafay e.'"

Markaas ayaa Alle soo dejiyey,

يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا لَا تَتَّخِذُوا عَدُوِّي وَعَدُوَّكُمْ أَوْلِيَاءَ تُلْقُونَ
إِلَيْهِم بِالْمَوَدَّةِ وَقَدْ كَفَرُوا بِمَا جَاءَكُم مِّنَ الْحَقِّ يُخْرِجُونَ
الرَّسُولَ وَإِيَّاكُمْ أَن تُؤْمِنُوا بِاللَّهِ رَبِّكُمْ إِن كُنتُمْ خَرَجْتُمْ
جِهَادًا فِي سَبِيلِي وَابْتِغَاءَ مَرْضَاتِي تُسِرُّونَ إِلَيْهِم بِالْمَوَدَّةِ وَأَنَا أَعْلَمُ

5 Fatxul Baarii, 9/381-384.

بِمَا أَخْفَيْتُمْ وَمَا أَعْلَنتُمْ ۚ وَمَن يَفْعَلْهُ مِنكُمْ فَقَدْ ضَلَّ سَوَاءَ السَّبِيلِ ﴿١﴾

"Kuwa rumeeyoow ha ka dhigannina cadowgayga iyo cadowgiinna cagal uu idin ka dhexeeyo kalgacal, iyaga oo beeniyey waxa idiin yimid ee xaq ah, u saarayana Rasuulka iyo idinkaba in aad Alle u rumayseen Rabbigiin, idinka oo u baxaya jihaad Dartay ah iyo raadinta raalli Ahaanshahayga in aad la siraysataan kalgacayl, Aniga ayaa u ogaal badan waxa aad qarinaysaan iyo waxa aad muujinaysaan, kii sidaa sameeya ee idin ka mid ahna waxa uu ka lumay jidka toosan."

al-Mumtaxanah: 1

Saxaabadu waa dadka ummadda Nebi Muxammad scw ugu sharafta iyo fadliga badan. Dhexdooda, waxaa ugu fadli badan Abuu Bakar RC iyo Cumar RC, oo ay weheliyaan labada khaliif ee Cusmaan ibnu Cafaan RC iyo Cali ibnu Abii Daalib RC. Waxaa ku xiga tobankii Jannada loogu bishaareeyey (afarta khaliif iyo lix kale), ka dibna intii Beder ka qaybqaadatay, ka dibna intii Baycatur Ridwaan ku gashay Xudaybiyah. Intii islaamtay furashadii Makah horteedna, waa ay ka fadli badan yihiin kuwii dabadeed islaamay.

Xaadib RC waxa uu watey sharaftii Muhaajirnimada, kaqaybgalkii Beder iyo Baycatur Ridwaan. Nebigu scw dadka wanaaggoodii hore waa uu tixgelin jirey, sidaas ayaana Xaadib cudurdaarkiisi lagu oggolaaday, gefkii uu

galayna looga cafiyey. Xaadib RC daacad ayaa uu ahaa, ee goldalooladaas ehelkiisa Makah joogey ayaa uu shaydaanku ka soo galay. Waxaa u muuqatay in ay wax u tari karto reerkiisa cadowga ka dhex jooga, oo dhibta lagaga yarayn karo. Waa dareen jira halistiisana leh, oo ay tahay loo feejignaado si aan cadowgu uga faa'iidaysan.

Maanta waxaa innoo jooga kuwo mujaahidnimo sheeganaya, oo aan, habayaraatee, wax tixgelin ah siin wanaagga iyo waxqabadka qofka—culamadii diinta u soo halgantay ee iyagaba diinta baray ayaa ay masaajidda ku dhex dilayaan. Iyagii baa isku jeesanaya oo iscunaya, hadhowna waxa ay ku dacwoonayaan 'diinta in aannu dhaqangalinno ayaa aannu rabnaa'! Fiicnaan lahaydaa in ay diinta ku dhaqankeeda iyagu iska bilaabaan—iyaga oo aan dagaal galin, cidna khasbin, ayaa dadka intiisa kalena ay raaci lahaayeen.

Cumar bilaash kuma helin naanaysta *al-Faaruuq*. Marka ay noqoto Xaqa iyo Baadilka, Islaamka iyo Shirkiga, mabda'iisu waa uu caddaa. Xaqa iyo inta raacda aad baa uu u jeclaa (*al-walaa'*), baadilka iyo intiisana lama tusi karin (*al-baraa'*). Wax kalgacayl iyo debecsanaan ah uma uusan hayn Mushrikiinta, waana kii meesha cad ka istaagay dadkii dagaalkii Beder lagu qabtay. Waa ay ku adkayd in uu fahmo qof Muslimnimo sheeganaya, haddana kalgacayl u haya kuwii diinta la dagaallamayey, ama iyaguba ku kacaya fal diinta iyo ehelkeeda ka dhan ah. Waana sababta uu Xaadib ugu tilmaamay munaafiqnimo.

Cumar RC ma aaminsanayn in qof Muslim ah, oo qummani, uu sirta Muslimiinta u gudbin karo Mushrikiintii

u halgamayey baabi'inta Muslimiinta iyo deminta ilayska diinta. Taageerada uu ka helay aayaddan kor ku xusan ayaa xoojinaysa mabda'ii uu Cumar ka duulayey.

Alwalaa' walbaraa' ma diidayo in xidhiidh wanaagsan oo shakhsiyeed uu dadka u dhexeeyo. Cumar isaga oo sidan xaqa ugu adag, ayaa uu haddana shakhsi ahaan wanaajin jirey dadka aan Muslimiinta ahayn. Waxa aan soo marnay isaga oo saxaabigii la hijrooday, ee misana riddoobey, warqad waano ah u diraya. Walaalkii oo ahaa mushrik joogeyna Makah, waxaa sugan in uu hadyad u diray. Markii uu khaliifka noqdayna, kutubta taariikhdu in badan ayaa ay xusaan qaabkii wanaagsanaa ee uu ula dhaqmi jirey dadka aan Muslimiinta ahayn, xuquuqdoodana u dhowri jirey.

Dadka uu Cumar diiddan yahay in kalgacayl loo muujiyo, waa cadow dagaal ka dhex aloosan yahay, oo hadh iyo habeen maleegaya sidii ay Islaamka iyo Muslimiinta u baabi'in lahaayeen. Aayadaha 8'd iyo 9'd ee isla suuraddan ayaa kala saaraya, isla markaana qeexaya xidhiidhka ay tahay in ay Muslimiintu la yeeshaan dadka kale.

لَّا يَنْهَاكُمُ اللَّهُ عَنِ الَّذِينَ لَمْ يُقَاتِلُوكُمْ فِي الدِّينِ وَلَمْ
يُخْرِجُوكُم مِّن دِيَارِكُمْ أَن تَبَرُّوهُمْ وَتُقْسِطُوا إِلَيْهِمْ ۚ إِنَّ اللَّهَ يُحِبُّ
الْمُقْسِطِينَ ﴿٨﴾ إِنَّمَا يَنْهَاكُمُ اللَّهُ عَنِ الَّذِينَ قَاتَلُوكُمْ فِي الدِّينِ
وَأَخْرَجُوكُم مِّن دِيَارِكُمْ وَظَاهَرُوا عَلَىٰ إِخْرَاجِكُمْ أَن تَوَلَّوْهُمْ
وَمَن يَتَوَلَّهُمْ فَأُولَٰئِكَ هُمُ الظَّالِمُونَ ﴿٩﴾

"Alle idin ka reebi maayo kuwa aan idin kula

dagaallamin diinta, ee aan idin ka saarin guryihiinni in aad wanaajisaan oo aad u caddaalad samaysaan, Alle waa uu jecel yahay kuwa caddaalad sameeya. Waxa uu Alle idin ka reebayaa kuwa idin kula dagaallamay diinta idin kana saaray guryihiinni, ee isu kaalmaysaytay bixintiinna in aad gacal ka dhigataan, qofkii gacal ka dhigtaana—kuwaasi iyagu waa daalimiin."

al-Mumtaxanah: 8–9

Qofkii wanaag innagula dhaqma, Alle waxa uu leeyahay

هَلْ جَزَاءُ الْإِحْسَانِ إِلَّا الْإِحْسَانُ ﴿٦٠﴾

"Abaalgudka wanaaggu ma wax aan wanaag ahayn baa?"

ar-Raxmaan: 60

Qofkii collaytan iyo xadgudub innagula dhaqmana, Alle waxa uu yidhi,

وَجَزَاءُ سَيِّئَةٍ سَيِّئَةٌ مِّثْلُهَا ۖ فَمَنْ عَفَا وَأَصْلَحَ فَأَجْرُهُ عَلَى اللَّهِ ۚ
إِنَّهُ لَا يُحِبُّ الظَّالِمِينَ ﴿٤٠﴾

"Abaalgudka xumaantu waa xumaan u dhiganta, qofkii iska dhaafa ee wanaag sameeyana ajarkiisu waa xagga Alle. Ilaahay ma jecla daalimiinta."

ash-Shuuraa: 40

Dad aad wejiga u kuududaysaa kuu soo dhowaan maayaan. Adiguna fursad aad xaqa ku gaadhsiisid heli maysid. Waxa la diidayaa waa in cadowga aad xidhiidh la yeelato. Xumaha ayaa aynu diideynaa ee qofka ma diidaynno, marka uu waantoobo, ee xaqa qaato, waxaa innagu waajib ah in aynu jeclaanno—walaalna ka dhiganno.

Nebiga scw iyo ciidankii oo jidka sii maraya ayaa waxaa la kulmay Cabbaas ibnu Cabdulmuddalib—Nebiga scw adeerkii—oo ciyaalkiisi wata una soo hijrooday Madiinah. Cabbaas waxa uu islaamay furashadii Khaybar horteed[6]. Waxaa kale oo jidka kula kulmay dhawr qof oo ay ka mid ahaayeen Nebiga scw ina-adeerkii, iyo seeddigii ay walaalo ahaayeen Ummul Mu'miniin Umm Salamah rc.

Ciidanka hortiisa waxaa la diray ilaalo jidka sii bannaysa, jaajuusiintana ka fogeysa, si reer Makah warka looga gooyo. Nebiguna scw waxa uu ku duceeyey in warkooda Alle ka indhasaabo Quraysh. Caadada dagaal ee Nebigu scw waxa ay ahayd: in uusan sheegin meesha duullaanka lagu yahay, marka laga reebo Tabuuk oo aad u fogeyd xilli adagna ku soo beegantay.

Abuu Sufyaan iyo dhawr soo raacay oo wardoon ahaa ayaa arkay Muslimiintii oo duleedka Makah jooga, waxa ayna galisay argagax.[7]

Ilaaladii ciidanka oo uu habeenkaa taliye u ahaa Cumar,

6 As-Siirah an-Nabawiyah as-Saxiixah, 2/476; al-Bidaayah wan Nihaayah, 4/535.

7 Fatxul Baarii, 9/390-391.

ayaa soo qabatay Abuu Sufyaan iyo dadkii la socday.

"Waxaan kuu wadnaa dhawr reer Makah ah oo aan soo qabannay," ayaa ay Cumar ku yidhaahdeen.

"Wallaahi, haddii aad Abuu Sufyaan ii keeni lahaydeen wax dhaamaa ma jireen!" Ayaa uu Cumar yidhi.

"Abuu Sufyaan baanu kuu keennay." Ayaa ay yidhaahdeen.

Kulankan Cumar iyo Abuu Sufyaan habeenkaas dhex maray, si kalena waa loo soo tebiyey. Sida Ibnu Isxaaq sheegay[8], Cabbaas oo baqashii Nebiga scw wata, ayaa ciidanka ka dhex baxay bal in uu helo cid reer Makah ah, si uu ugu waaniyo in ay isa soo dhiibaan dagaalna sidaa kaga nabad galaan. Ka dibna waxa uu la kulmay Abuu Sufyaan iyo kooxdii la socotay ee wardoonka ahaa. Cabbaas waxa uu soo kaxeeyey Abuu Sufyaan, oo isaga oo u wada Nebiga scw ayaa waxaa gartay Cumar, dabadeedna damcay in uu dilo—illeen waa hoggaamiyihii Muslimiinta ku soo duuley Uxud iyo Axsaab e.

Rasuulka scw ayaa la isula galay iyada oo la is-haysto.

Cumar waxa uu yidhi, "Waa kan cadowgii Alle, Abuu Sufyaan, oo soo gacangalay isaga oo aan ballan iyo heshiis toona haysan e, ii daa aan qoorta jaree!"

"Anigaa magan galiyey, Rasuulkii Allow." Ayaa Cabbaas yidhi.

Markii uu Cumar ku celceliyey ee uu ku adkaystay in Abuu Sufyaan dilkiisa loo fasaxo, ayaa Cabbaas yidhi, "Isdeji Cumaroow, wallaahi, haddii uu ahaan lahaa nin reer Banuu Cadiy ah, sidaa maad tidhaahdeene, laakiin waa reer Banuu Cabdi Manaaf!"

8 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 4/538.

"Isdeji Cabbaasoow, sidaana ha dhihin. Wallaahi, islaamiddaada ayaa aan ka jeclaa islaamidda aabbahay—haddii uu islaami lahaa—, maxaa yeelay, waxaan ogahay in Rasuulka Alle islaamiddaada ka jeclaan lahaa midda Khaddaab."

Cumar dareenkiisi iyo rabitaankiisiba waxa uu ka hormariyey sidii uu Rasuulku scw jeclaa, waxa ayna muujinaysaa jacaylka uu u hayey Suubbanaha scw.

Labadan siyaabood ee loo soo tebiyey, mar uu Ibnu Xajar isku dayey in uu iswaafajiyo waxa uu tilmaamay, in ay suuragal tahay in Cabbaas ka badbaadiyey askartii soo qabatay, ka dibna Cabbaas iyo Cumar ay isku qabsadeen wixii Abuu Sufyaan laga yeeli lahaa.[9]

Magangalyadii Cabbaas ayaa badbaadisey cadowgii wixii la ogaa dhigay Uxud iyo Axsaab. Laakiin, Islaamku aargoosi iyo xisaabtan ma aha, ee yoolku waa in dadka lagula dadaalo in ay xaqa Alle qaataan, wixii uu u jideeyeyna ay ku dhaqmaan.

Abuu Sufyaan isla subixiiba waxa uu ahaa Muslim. Si Islaamka laabtiisa loogu sii xoojiyana, labo tabood baa la yeelay. Subixii ayaa Cabbaas istaajiyey meel jidka ka mid ah, oo ciidankii tobanka kun ka badnaa ay marayeen. Sidii uu u lahaa, 'kuwani maxay ahaayeen?', Cabbaasna marba qabiilo Carbeed u magacaabayey, ayaa uu yaqiinsaday in shirkigii jabay, Makana gacantooda ka baxday. Dadkiiba waa kuwan wada islaamay e, maxaa idin reebay, ayaa dareenkiisa lagu beeray. Tabta labaad waxa ay ahayd in la sharfo—illeen waa nin madax ahaa e. Waxaa lagu dhawaaqay in qofka guriga Abuu Sufyaan galaa uu aamin yahay oo aan la taaban

9 Fatxul Baarii, 9/391.

doonin, si in uu tolkii waxtaray loo dareensiiyo. Cabbaas ayaa arrintan soo jeediyey oo yidhi: Abuu Sufyaan waa nin faanka jecel e, wax uu ku faani karo hala siiyo.[10]

Markii ay Makah ku wareegtay gacantii Muslimiinta, Suubbanuhu scw intii uusan Xaramka tegin, waxa uu amray in sawirrada Kacbada derbiyadeeda ku yaalla la tirtiro. Hawshan ahmiyadda weyn leh; in Kacbada laga daahiriyo shirkigii iyo raadadkiisi, oo ay mar kale noqoto xaruntii tawxiidka, waxa uu Nebigu scw u xilsaaray al-Faaruuq, Cumar ibnul Khaddaab rc, oo ahaa qofkii ugu habboonaa ee loo xilsaari karayey[11]. Halkaas ayaa ay Makah kaga daahirtay shirkigii, oo ay ilaa iyo maanta u tahay rugta muwaxidiinta adduunka ku nool idilkood.

Reer Makah intii shirkiga ku hadhay waa ay islaameen, Nebigana scw waxa ay la galeen bayco (heshiis). Suubbanuhu scw waxa uu ku fadhiyey buurta Safa, waxaana hoos taagnaa Cumar rc oo isagu baycada u fulinayey raggana gacanqaadayey[12]. Ragga ayaa markii hore baycada galay, markii ay toodii dhammaatayna waxaa bilaabantay baycadii dumarka. Nebigu scw ma gacanqaadi jirin dumarka aan maxaarimtiisa ahayn e[13], waa uu u gacanhaadin jirey ama hadalka ayaa uu ku koobnaan jirey.

Baycada dumarka iyo qodobbadeeda ay Nebiga scw kula heshiinayeen waa kuwa ku xusan aayadda 12'd ee suuradda al-Mumtaxanah dhammaadkeeda. Waana qodobbadii ku xusnaa Baycadii Caqabah uu Nebigu scw la galay ragga

10 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 4/538-542.
11 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 4/554; Fatxul Baarii, 9/406; Diraasah Naqdiyah, 1/500.
12 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 4/578.
13 Saxiix Muslim 1866.

Ansaarta, hijrada iyo jihaadka ka hor.

يَا أَيُّهَا النَّبِيُّ إِذَا جَاءَكَ الْمُؤْمِنَاتُ يُبَايِعْنَكَ عَلَىٰ أَن لَّا يُشْرِكْنَ بِاللَّهِ شَيْئًا وَلَا يَسْرِقْنَ وَلَا يَزْنِينَ وَلَا يَقْتُلْنَ أَوْلَادَهُنَّ وَلَا يَأْتِينَ بِبُهْتَانٍ يَفْتَرِينَهُ بَيْنَ أَيْدِيهِنَّ وَأَرْجُلِهِنَّ وَلَا يَعْصِينَكَ فِي مَعْرُوفٍ ۙ فَبَايِعْهُنَّ وَاسْتَغْفِرْ لَهُنَّ اللَّهَ ۖ إِنَّ اللَّهَ غَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿١٢﴾

"Nebiyoow marka ay kuu yimaaddaan mu'minaadku iyaga oo bayco kugula galaya: in aysan Alle cidna waxba la wadaajinayn (shirki samaynayn), in aysan waxba xadayn, in aysan sinaysanayn, in aysan ilmahooda dilayn, in aysan la imaanayn been ay ku kasbadeen gacmahooda iyo lugahooda, in aysan kugu caasiyayn wanaag, [intaa haddii ay oggolaadaan] dabadeed baycada la gal, Allena dembidhaaf u weydii, Alle waa Dembidhaaf-badane Naxariis-badane ah."

al-Mumtaxanah: 12

Cumar qodobbada ayaa uu mid-mid ugu yeedhinayey dumarka si ay baycada u galaan. Markii uu marayey '*in aysan waxba xadayn*' ayaa waxaa hadashay Hind bint Cutbah oo isqarinaysay intii hore. Hinda waa xaaskii Abuu Sufyaan, iyada ayaana lahayd sababta Xamse ibnu Cabdulmuddalib RC Uxud loogu diley. Intaa kuma aysan joogsan e, waxa ay codsatay in beerkiisa loo soo gooyo, ka dibna inta ay calaalisay baa ay haddana tuftay! Nebigu SCW aad ayaa uu

uga murugooday dilka adeerkii loo geystay, iyo weliba sida bahalnimada ah ee ay u jarjareen jidhkiisi. Waana sababta ay Nebiga SCW isaga qarinaysay.

Hinda waxa ay sheegatay in Abuu Sufyaan gacan adag yahay, oo ay mararka qaar ku khasbanaato in isaga oo aan ogeyn ay wax ka qaadato e, taas maxaa laga yeelayaa? Abuu Sufyaan ma fogeyn hadalkana waa uu maqlayey, isagaana u jawaabay oo waxa uu yidhi: wixii aad qaadatay waa kuu xalaal waxna kuuma haysto. Nebigu SCW waa uu qoslay markii uu gartay in ay Hinda tahay, waxna uma raacan.

Cumar waxa uu sii wadey yeedhintii qodobbada, oo markii uu sheegay qodobka ah '*...in aysan sinaysanayn,*' ayaa Hinda oo la yaabbani ay mar labaad hadashay, "Oo haweenayda xorta ah miyey sinadu ka suuroowdaa?!"

Cumar waxa uu ku xejiyey, '*in aysan ilmahooda dilayn,*' markaas ayaa ay Hinda tidhi, "Yaraantoodii baanu korinnay, idinkuna weynaantii baad ku disheen."

Cumar qosol baa uu is-hayn waayey ilaa uu dib-dib u dhacay!

Dadka la diley ee ay Hinda sheegaysaa waa kuwii Beder lagu laayey. Maalintaasna Mushrikiintii la diley waxaa ku jirey wiilkeedi, aabbaheed, adeerkeed, iyo walaalkeed.

Nebigu SCW waxa uu Makah ku negaa ilaa 19 maalmood oo tawxiidka la faafinayey, shirkigii iyo sanammadiisina la burburinayey. Khaalid ibnul Waliid RC ayaa loo diray in uu sanamkii Cusaa soo burburiyo, Camr ibnul Caasna waxaa loo diray Suwaac, Manaatna waxaa loo diray saxaabi kale.

Furashadii Makah waxaa ku soo afjarmay loollankii

u dhexeeyey tawxiid iyo shirkiga ee Jasiiradda Carbeed. Waxaa maalintan dhacay calankii shirkiga ee halkan ka taagnaa, ilaa markii uu Camr ibnu Luxayi al-Khusaacii shirkiga iyo sanammada keenay Makah, sidaana dadkii kaga fidneeyey tawxiidkii ay ka dhaxleen Nebi Ibraahiim cs iyo Nebi Ismaaciil cs, oo Kacbada u dhisay in Alle SWT lagu caabudo.

Alle waxa uu u soo diray Nebi Muxammad SCW in uu dadka u celiyo tawxiidkii asalka ahaa, Kacbadana ka daahiriyo shirkigii Camr keenay. Laakiin Quraysh waa ay la dagaallantay, si kastana waxa ay ugu dadaaleen in uusan guuleysan. Wax ay Islaamkii cabudhiyaan oo ay cunaha hayaanba, maalintan ayaa ay caddaatay in uu yahay cadceed aan sacabbada lagu qarin karin.

Halkan ayaana ay ka bilaabatay marxalad cusub oo ay dacwadii Islaamku gashay.

إِذَا جَاءَ نَصْرُ اللَّهِ وَالْفَتْحُ ۝١ وَرَأَيْتَ النَّاسَ يَدْخُلُونَ فِي دِينِ اللَّهِ أَفْوَاجًا ۝٢ فَسَبِّحْ بِحَمْدِ رَبِّكَ وَاسْتَغْفِرْهُ إِنَّهُ كَانَ تَوَّابًا ۝٣

"Marka uu yimaaddo gargaarka Alle, iyo furashadu. Oo aad aragtid dadka oo u soo galaya diinta Alle koox-koox. Ku tasbiixso mahadda Rabbigaa, dembidhaafna ka dalab, Isagu waa Alle tawbad aqbalid badan."

an-Nasr: 1–3

Muslimiintu iyaga oo tiro yar oo la rafaadiyey, ayaa ay

hantidoodii, ehelkoodii, iyo degaankoodii dhuumasho kaga baxeen. Siddeed sano ka dibna waxa ay soo noqdeen iyaga oo toban kun kor u dhaafay. Suubbanuhu scw waxa uu Makah ku soo laabtay, isaga oo kuwii la dirirayey ay u dirirayaan, kuwii cidhibtirkiisa u heellanaana ay guushiisa u halgamayaan.

Imaam Bukhaari sida uu werinayo[14], Carabta kale waxa ay sugayeen inta Nebiga scw iyo tolkii Quraysh ay dhan u kala dhacayaan, oo waxa ay go'aansadeen in haddii ay Qurayshtu guuleystaan ay xaaladdu sideedii hore ku socoto; sidii hore ayaa ay Carabta kale Quraysh ugaga dambaynaysaa diinta, maadaama ay Xaramkii gacanta ku hayaan. Haddiise uu ka guuleysto—waa Nebi waana ay raaci doonaan.

Xunayn[15]

Markii ilaa 19 maalmood lagu negaa Makah, ayaa waxaa Nebiga scw loo keenay, war sheegaya in qabiilooyinka Hawasaan iyo Saqiif ay meel Xunayn la yidhaahdo, oo Makah iyo Daa'if u dhexaysa, soo gaadheen iyaga oo duullaan ah. Waxaa loo diray nin soo basaasa oo warkooda soo ogaada. Markii uu soo laabtay, xogtoodiina la ogaaday ayaa loo baxay si looga hortago.

Sannadkii toddobaad, Nebigu scw waxa uu ciidan yar oo Cumar rc taliye u ahaa, u diray qayb ka mid ah degaankii Hawasaan oo Taribah la odhan jirey. Waxaana suuragal ah in ay ka cabsi qabeen, maadaama Quraysh laga adkaaday, in iyaga lagu soo jeesto, oo ay dabadeedna u muuqatay in ay duulaan inta aan lagu soo duulin. Waxaa kale oo suuragal

14 Fatxul Baarii, 9/415; Al-Bidaayah wan Nihaayah, 4/582.
15 Fatxul Baarii, 9/423-; al-Bidaayah wan Nihaayah, 4/582-.

ah in, maadaama Makah oo xaruntii Mushrikiinta Carbeed looga arrimin jirey ahayd laga qabsaday, Qurayshna ay islaameen, in ay qabiilooyinkani—Hawasaan, Saqiif iyo intii la socotay—la wareegaan talada Mushrikiinta Jasiiradda Carbeed.

Ciidankii Makah qabsaday ee ka koobnaa Muhaajiriin, Ansaar, iyo Carabtii kale ee soo gurmatey, iyo dadkii reer Makah ee dhowaanta soo islaamay, oo iskudhafan ayaa baxay. Ciidan baaxad leh oo tiro badnidiisi ay Muslimiintii islaweyni galisay ayaa samaysmay, "maanta nala ka guuleysan maayo,"[16] ayaa dad badan ku faraxsanaayeen.

Magaaladii Makah ee dhibta badan loo soo maray furashadeeda, waxaa guddoomiye looga dhigay Cattaab ibnu Asiid RC, oo markaas da'diisa lagu sheego inta u dhexaysay 18 ilaa 21 jir![17] Muslimiintii cusbaa waxbarashadoodiina, waxaa la sheegaa in masuul looga dhigay Mucaad ibnu Jabal RC, oo reer Maka macallin diinta bara u noqday, markaana da'diisa lagu qiyaaso inta u dhexaysa 18 ilaa 24 jir[18]. Diintan waxaa u soo halgamay dhalinyaro, waana halka ay ummadi ka hormarto ama ka dhabarjabto. Dhalinyartu ma aha 'madaxdii mustaqbalka' oo xilku in uu ku soo wareego sugaya e, iyaga ayaa mustaqbalka dhisa.

Maadaama goobta dagaalka looga horreeyey, ciidankii Muslimiinta oo markaa labo iyo toban kun (12,000) kor u dhaafayey, waxa uu afka uga galay ciidan isa sii diyaariyey oo dhufays ugu jira. Kaaga daran e, meel tog ah iyaga oo ku sii daadagaya, qorraxdiina ay indhaha ka hayso, ayaa weerar

16 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 4/583.
17 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 4/586.
18 Siyar Aclaam an-Nubalaa', 1/447.

lagu bilaabay. Hawasaan waxa ay ahaayeen qaansooley shiishka aad u yaqaan, Muslimiintiina leeb baa sidii roobka loogu rusheeyey. Fardihii iyo geelii ayaa diday, ciidankiina waa uu kala firdhaday, oo qofba naftiisi ayaa uu dhan ula cararay, ilaa ay Nebiga SCW agtiisa saxaabo tiro yari ku soo hadheen.

Ciidankii 12'ka kun korka u dhaafayey, Jaabir ibnu Cabdillaah RC oo joogey waxa uu sheegay, in saxaabadii Rasuulka SCW ku soo hadhay ay ahaayeen toban ama labo iyo toban![19]. Cabdullaahi ibnu Mascuud RC oo isagu aan ku jirin dadkii kala yaacay, waxa uu sheegay in ay ahaayeen siddeetan nin oo ay dib u gurteen, laakiin aysan dhabarka jeedin[20]. Saxaabi kale, Xaarithah ibnu Nucmaan RC, waxa uu ku qiyaasay ilaa boqol nin[21]. Cabdullaahi ibnu Cumar RC sidan oo kale wax aan boqol gaadheyn ayaa uu ku qiyaasay tiradii ku hadhay Nebiga SCW.

Ibnu Xajar[22] isagu waxa uu u badinayaa in bilowgii ay 12 ahaayeen, inta kalena ay degdeg u soo noqdeen oo sidaas tirada loogu daray. Inta yar ee Nebiga SCW ku soo hadhay waxa ay ahaayeen ehelkiisi—adeerkii Cabbaas, iyo ilmo adeerradii, iyo in aad ugu dhoweyd: labadiisi lataliye ee Abuu Bakar iyo Cumar, Usaamah ibnu Sayd oo uu Nebigu aabbihii Sayd korsaday, Usaamah walaalkii dhanka hooyo oo goobta ku shahiiday, Cabdullaahi ibnu Mascuud, Umm Sulaym—Anas ibnu Maalik hooyadii—oo Nebiga SCW aad ugu dhoweyd, maalintanna wadatey toorrey. Markii uu

19 As-Siirah an-Nabawiyah as-Saxiixah, 2/501.
20 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 4/595.
21 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 4/593]
22 Fatxul Baarii, 9/427-428.

Nebigu scw weydiiyey sababta ay u hubaysan tahay waxa ay tidhi, "Mushriggii ii soo dhowaadaan uurka kaga dooxayaa!" Jawaabteedu aad ayaa ay uga qoslisay Nebiga scw.

Maxaa yeelay, dumarku badanaa dhanka caafimaadka iyo dhiirrigalinta ayaa ay qaabilsanaayeen e, dagaalka ma gali jirin. Laakiin Umm Sulaym rc iyada oo hawsheedi wadata ciddii soo weerarta, in ay iska difaaci karto ayaa ay rabtey. Waxaa kale oo dadka sugnaaday ku jirtey saxaabiyad kale oo magaceedu ahaa Umm Xaarithah rc.

Umm Sulaym rc maalintan aad ayaa ay uga cadhootay raggii firxaday, waxa ayna eedda saaraysay Muslimiintii cusbaa ee furashadii Makah diinta ku soo biiray. Waxa ay tuhunsanayd in islaamnimadoodu ay dhab ka tahay, oo waxa ay islahayd ogaan baa ay u jabeen, si ay guuldarro u gaadhsiiyaan Muslimiinta. Umm Sulaym rc waxa ay rabtey in Nebigu scw sida ay u dhan yihiin laayo! "Alle ayaa innagaga fillaaday oo inna wanaajiyey," ayaa uu Suubbanuhu scw ku dejiyey cadhadii Umm Sulaym.[23]

Maalintaas dagaalku waxa uu gaadhey in Nebigu scw keligii u babacdhigo Mushrikiintii isaga oo baqashiisi saaran. Laakiin waxaa dib u celinayey adeerkii Cabbaas iyo ina-adeerkii Xaarith (kii markii Makah lagu socday jidka ugu yimid ee islaamay), si uusan cadowga u dhex galin. Nebigu scw guubaabin iyo dhiirrigalin ayaa uu intaa ku jirey, saxaabadiina markii saskii hore ka duulay koox-koox baa ay u soo noqdeen, iyaga oo geesinimada Nebiga scw ku dayanaya. Nebigu scw Cabbaas oo nin cod dheer ahaa ayaa uu ku lahaa dadka u dhawaaq, oo isna farriinta

23 Saxiix Muslim 1809.

gaadhsiinayey.

Saxaabi magiciisu ahaa Abuu Qataadah RC, oo dadkii markii hore cararay ku jirey, ayaa laga soo weriyey xadiis uu ku sheegayo in uu Cumar oo dadka ku dhex jira u tagey oo uu weydiiyey waxa dadkii ku dhacay, taas oo Cumar kaga jawaabay in ay tahay qadar iyo amar Alle[24]. Dadka qaar ayaa u daliishada in Cumar ku jirey dadkii cararay, laakiin uma badna in ay taasi dhacday. Warar badan ayaa sheegaya in uusan cararin. Midda kale, Abuu Qataadah warkiisa kuma cadda in Cumar cararay e, waxa uu sheegay in uu dadka la joogey, taas oo ay suuragal tahay in uu ka dabo tagey si uu u soo celiyo oo u dhiirrigaliyo.

Suuragal ma tahay in uu ku jirey dadkii cararay? Haa, oo Cumar waa banii aadan dareen leh ee dhagax ma aha. Laakiin, geesinimadii Cumar, habdhaqankiisi iyo wararka dhacdadan laga soo tebiyey ma taageerayaan in Cumar ku jirey dadkii cararay. Waxaase nasiibdarro ah, in ay dadka qaarkood ugu baxdo in ay raadiyaan fursad ay saxaabada wax kaga sheegaan, si ay shakhsiyaddooda wax u yeelaan, taas oo ay ka leeyihiin dano gaar ah, oo inta badan ku biyoshubta dadaal lagu rabo in hoos loogu rido kalsoonida ay ummaddu ku qabto saxaabada iyo sharaftoodii.

Saska mooyaan e, dhimashadu aad baa ay dhanka Muslimiinta ugu yarayd. Ugu dambayntiina guushii waxa ay raacday Muslimiintii. Waxa aad mooddaa in ay ahayd cashar samaawi ah, oo dadkii tiro badnidooda wax moodey lagu dareensiinayey ahmiyadda tayada iyo gargaarka Alle ay u leeyihiin helidda guusha. Isbahaysigii qabiilladii shirkiga

24 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 4/591-592; Fatxul Baarii, 9/438-439.

ku hadhay markii uu jabay waa ay kala firxadeen, waxa ayna u kala jabeen saddex qaybood oo ay midiba dhan u carartay, badankoodise waxa ay dhufays ka dhigteen Daa'if. Kuwan ayaa Nebiga scw iyo ciidanka intiisi badnayd ay ka dabo tageen, labadii kalena midba ciidan raacdo ah ayaa laga dabo diray.

Daa'if waxa ay lahayd qalcad ay adagtahay in xoog lagu galo—marka ay Muslimiintu u soo dhowaadaanba leeb ayaa lala beegsanayey. Dhawr iyo toban cisho markii lagu hareeraysnaa, ee loo gali waayey ayaa laga tagey. Ilaa labo iyo toban saxaabi ayaa ku shahiiday go'doomintii Daa'if[25], kuwo kalena dhaawac badan ayaa ka soo gaadhey. Saxaabadii oo ay fallaadhihii rafaadiyeen ayaa Nebiga scw ka dalbaday in uu reer Saqiif habaaro, laakiin waa uu ka diidey, habaarkiina duco ayaa uu ugu beddelay,

اللهم اهد ثقيف

"Allow hanuuni Saqiif."[26]

Waa markii labaad ee ay reer Daa'if ka badbaadaan habaar iyo halaag. Maalintii ay Nebiga scw dhagxiyeen ee Jibriil u yimid, isaga oo leh buurahan aan dusha kaga dedo, Suubbanuhu scw waxa uu yidhi: iska daa, waxa aan rejaynayaa in ay ka tafiirmaan kuwo Alle keligii caabuda e.

Duullaankii hore abaabulkiisa iyo taladiisa waxaa lahaa

25 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 4/620.
26 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 4/619.

boqorkii Hawasaan, Maalik ibnu Cawf. Si uusan u baqin ciidanku, dumarkii, carruurtii, iyo hantidii ay lahaayeen oo dhan baa uu soo kaxeeyey. Ninkii cararayaa halkee baa uu u carari! Maalik waa uu ku gacansaydhay taladii tolkii u soo jeediyeen. Markii laga adkaaday, dad iyo xoolo wixii ay wateen waa laga qabsaday, oo Muslimiintii ayaa ay gacanta u galeen. Daa'if markii laga noqday ayaa ay Hawasaan ergadeedii u yimaaddeen Nebiga scw, iyaga oo raba in ay Muslimaan, dadkii laga qabsadayna waa loo sii daayey. Laakiin hantidii qaniimo ahaan ayaa ciidankii loogu qaybiyey, weliba odayaashii Quraysh madaxda u ahaa ayaa qayb-libaax saami u helay, si qalbigooda loogu soo dumo, diintana loo jeclaysiiyo.

Maalik markii dambe waa uu islaamay waxaana madax looga dhigay tolkii. Duullaankiisi waxa uu ku jeediyey reer Daai'if ilaa uu noloshii ku cidhiidhiyey[27], iyaguna sannad ka dib, Ramadaantii sannadkii sagaalaad, ayaa ay yimaaddeen oo ay soo Islaameen.[28]

Iyada oo qaybintii qaniimada lagu jiro, oo uu Nebigu scw xoolihii qaybinayo, Cumarna la joogo, ayaa waxaa u yimid nin la odhan jirey Dul Khuwaysirah—"Muxammadoow, caddaalad samee!" Ayaa uu yidhi. Nebigu scw waxa uu ugu jawaabay, "Hoogi waaye! yaa kale oo caddaalad samaynaya haddii aan anigu caddaalad samayn waayo?!" Cumar markiiba waxa uu damcay in uu ninkii dilo, "ii oggolow aan dilo munaafiqan e," ayaa uu codsaday. Sidii caadada ahaydse, Nebigu scw kama oggolaan, laakiin waxa uu saxaabadii u sheegay in ninkani uu leeyahay dad marka ay saxaabadu

27 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 4/632.
28 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 4/685.

arkaan salaad iyo soon badnidooda, ay camalkoodaba xaqiri doonaan oo uu la yaraan doono; dad Qur'aan akhris badan laakiin uusan Qur'aanku ku duxayn, oo diinta uga siibanaya sida leebku qaansada uga baxo. Waa tilmaantii Khawaarijta.

Waxaa jirtey in jaahiliyadii uu Cumar ku nedray in uu habeen ama maalin ku ictikaafo (cibaado ugu negaado) Masjidka Xurmada leh (Xaramka). Si uu ku xusuustay mooye e, Nebiga scw ayaa uu weydiiyey in laga rabo nederkaas uu Islaamka hortii sameeyey, Suubbanuhuna scw waxa uu faray in uu oofiyo nederkiisa.[29]

Tabuuk

Maadaama Mushrikiintii intoodii badnayd ay soo islaameen furashadii Makah ka dib, waxaa la bilaabay in dacwadii lagu fidiyo degaankii ugu dhowaa, Shaam.

Xagaagii sannadkii sagaalaad ayaa mar labaad Roomaankii iyo Carabtii ku hoos noolayd lagu duuley[30], waana duullaankii ugu dambeeyey ee uu Nebigu scw ka qaybqaatay[31]. In kasta oo ay cimiladu aad u kululayd, dhaqaalaha Muslimiintuna xilligaa cidhiidhi ahaa, oo aysan weli beerihii soo go'in, waxaa la diyaariyey ciidan gaadhayey soddon kun (30, 000).

Tabuuk aad ayaa ay Madiinah uga fog tahay; ilaa 778 oo kiiloomitir weeye jidka casriga ah ee ay baabuurtu marto, haddana waxa ay ka tirsan tahay waqooyiga Sucuudiga. Cumar oo tilmaamaya dhibaatadii iyo harraadkii Tabuuk

29 Saxiix Muslim 1656; Fatxul Baarii, 9/435.
30 As-Siirah an-Nabawiyah as-Saxiixah, 2/522-538.
31 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 4/694.

ka soo maray, waxa uu yidhi: oonku waxa uu na gaadhsiiyey in aan awrtii gawracno oo aan uuskoodii miiranno si aan u cabno biyaha ku jira[32]. Saxaraha Carbeed iyo xagaagiisu waa rafaad iyo dhimasho, haddii aadan haysan biyo kugu filan.

Imaam Muslim waxa uu soo weriyey qayb ka mid ah dhibaatadii ay saxaabadu kala kulmeen socdaalkii dheeraa ee Tabuuk. Aad baa ay u gaajoodeen, waxa ayna Nebiga scw weydiisteen in uu u oggolaado in ay geelii u rarnaa qaar qashaan si ay u canaan, Suubbanuhuna waa uu u oggolaaday. Cumar ayaa u yimid Nebiga scw oo kula taliyey, "Haddii aad u oggolaato gaadiidka ayaa innagu yaraanaya." Maxaa yeelay, ciidan soddon kun gaadhayaa geel badan ayaa uu u baahan yahay, si uu u helo cunto ku filan.

Cumar waxa uu soo jeediyey in qof walbaa sahaydii u hadhay, intii ay doonto ha le'ekaato e, uu keeno. Dabadeedna inta la isku daro uu Suubbanuhu scw Alle barako ka baryo. Sidii ayaa la sameeyey, Allena waa uu u barakeeyey oo cuntadii la isu keenay markii qofba in qaatay, qayb ayaaba ka soo hadhay. Taladaas wanaagsan ee Cumar RC keenay ayaa lagu baxsaday oo lagaga badbaaday gaajo iyo gaadiid la'aanba.[33]

Tabuuk dagaal kama dhicin oo Muslimiintii waxa ay gaadheen goobtii oo aan cidina joogin. Degmooyinkii la sii marayna waxa ay heshiis ku galeen in ay taliska Muslimiinta ku hoos noolaadaan oo ay jisyo (cashuur) bixiyaan, taas oo degaankii Islaamku ka talinayey ballaadhisay, oo ilaa

32 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 4/661-662; Diraasah Naqdiyah, 1/503.
33 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 4/661-662.

xuduuddii Roomaanka gaadhsiisay.[34]

Dhawr iyo toban cisho ayaa Tabuuk lagu negaa, ka dibna waxaa lagu laabtay Madiinah.[35]

Geeridii Cabdullaahi Ibnu Ubay[36]

Cabdullaahi ibnu Ubay waa madixii Munaafiqiinta ee ay taladiisa ku socdeen. Hagardaamooyinkiisi waxaa ka mid ahayd, in markii saddex kun oo Mushrikiintii ahi ay Madiinah soo weerareen duullaankii Uxud, ciidankii Muslimiintuna uu ahaa kun, uu Cabdullaahi la noqday saddex boqol oo nin, si u wiiqo ciidanka Muslimiinta.

Duullaankii Banil Musdaliqna waa ninkii isku dayey in uu Muslimiinta isku diro, ee lahaa Ansaareey idinkaa isku dhergiyey eyga idin cunaya. Maalintaas waxa uu lahaa marka aan Madiinah ku noqonno ka sharafta leh (isaga iyo inta raacsan) ayaa Madiinah ka saari doona ka dullaysan, tilmaantaas oo uu uga jeeday Suubbanaha SCW iyo Muhaajiriinta.

Caa'isha RC dadkii beenta ka faafinayeyna waa uu ku jirey, oo hormuud ayaa uu ka ahaa aflagaaddaynta xaaska Nebiga SCW. In badan ayaa uu ku dadaalay xagaldaacinta iyo dhabarjebinta dacwada Islaamka, isaga oo taageersanaa dhiirrigalinayeyna hagardaamadii Mushrikiinta iyo Yahuuddu ku hayeen Muslimiinta. Suuradaha Tawbah iyo Munaafiquun dadka ay sida tooska ah uga hadlayaan, ee ay kashifayaan ayaa uu ku jiraa, madaxna u ahaa, oo uu isagu weliba qorshaynayey falalkoodii fooshaxumaa.

34 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 4/670.
35 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 4/672.
36 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 4/692-693.

Munaafaqiin badan ayaa ka hadhay duullaankii Tabuuk, sida ay xustay suuradda Tawbah. Markii duullaankii laga soo noqday ayaa uu Ibnu Ubay xanuunsaday. Ka dibna waxa uu u yeedhay Nebiga SCW, kana codsaday khamiiskiisa in uu siiyo si loogu kafno, iyo in uu ku tukado maydkiisa marka uu dhinto. Muddo labaatan cisho ah markii uu xanuunsanaa ayaa uu geeriyooday, dabadeedna wiilkiisi, oo isna Cabdullaahi magiciisu ahaa, ayaa Suubbanaha SCW u yimid, si uu ula socodsiiyo geeridii aabbihii khamiiskiina u qaado. Markii uu Nebigu SCW gaadhey waxa uu u tagey iyaga oo qabrigii galiyey, laakiin aan weli lagu daboolin, markaas ayaa uu faray in ay ka soo bixiyaan si uu ugu tukado salaaddii janaasada[37]. Markii uu damcay in uu saladdii galo ayaa waxaa ku soo boodey Cumar oo hor istaagay!

"Rasuulkii Allow, ma waxa aad ku tukanaysaa Ibnu Ubay?" Ayaa uu Cumar yidhi, isaga oo sheeg-sheegaya dhibaatooyinkii munaafiqani geystay iyo hadalladiisi—ma ninkii maalintii sidaa iyo sidaa yidhi…, ma ninkii….—"ma waxa aad ku tukanaysaa iyada oo Alle kaa reebay in aad ku tukato?!"

Nebigu SCW inta uu muusooday ayaa uu Cumar RC ku yidhi, "Iga leexo, Cumaroow." Laakiin Cumar ma joogsan e, waa uu sii wadey, isaga oo diiddan in Suubbanuhu SCW uu ku tukado ninkan.

"Alle ayaa i kala doorransiiyey aniguna waan doortay, haddii aan ogahay in toddobaatanka ka badan loogu dembi dhaafayana, waan u kordhin lahaa." Ayaa uu yidhi Suubbanuhu SCW.

Toddobaatanka uu Nebigu SCW sheegayaa waa,

37 Fatxul Baarii, 10/189-200.

اسْتَغْفِرْ لَهُمْ أَوْ لَا تَسْتَغْفِرْ لَهُمْ إِن تَسْتَغْفِرْ لَهُمْ سَبْعِينَ مَرَّةً فَلَن يَغْفِرَ اللَّهُ لَهُمْ ۚ ذَٰلِكَ بِأَنَّهُمْ كَفَرُوا بِاللَّهِ وَرَسُولِهِ ۗ وَاللَّهُ لَا يَهْدِي الْقَوْمَ الْفَاسِقِينَ ﴿٨٠﴾

"U dembidhaaf dalab ama ha u dembidhaaf dalbin, haddii aad u dembidhaaf dalabto toddobaatan goor, Alle u dembi dhaafi maayo, maxaa yeelay waxa ay beeniyeen Alle iyo Rasuulkiisi, Allena ma hanuuniyo qowm faasiqiin ah."

at-Tawbah: 80

"Waa munaafiq!" Ayaa uu Cumar yidhi, isaga oo weli ku sii adkaysanaya in aan Nebigu scw ku tukan janaaso.

Suubbanuhu scw taladii Cumar ma qaadan, salaad dheer ayaana uu ku tukaday, sida muuqatana Cumar kama hadhin e, salaadda waa uu ka qaybqaatay. Wax dhici kara ma aha in Nebiga scw iyo saxaabadii oo tukanaya uu Cumar iska taagnaa. Si kasta oo uu uga soo horjeeday in uu Nebigu scw munaafiqan ku tukado, kama suuroowdo in uu ka hadho.

Salaaddii iyada oo aan wax badan laga joogin, ayaa waxaa Nebiga scw ku soo dagey waxyi.

وَلَا تُصَلِّ عَلَىٰ أَحَدٍ مِّنْهُم مَّاتَ أَبَدًا وَلَا تَقُمْ عَلَىٰ قَبْرِهِ ۖ إِنَّهُمْ كَفَرُوا بِاللَّهِ وَرَسُولِهِ وَمَاتُوا وَهُمْ فَاسِقُونَ ﴿٨٤﴾

"Ha ku tukan mid ka mid ah oo dhintay weligaa, hana

istaagin qabrigiisa, iyagu waxa ay beeniyeen Alle iyo Rasuulkiisa waxa ayna dhinteen iyaga oo faasiqiin ah."

at-Tawbah: 84

Nebigu scw kuma tukan munaafiq dambe, qabrigiisana ma tegin. Maadaama Xudayfa Ibnul Yamaan RC ogaa Munaafiqiinta oo uu Nebigu scw u sheegay, Cumar marka uu doono in uu qof dhintay janaaso ku tukado, waxa uu eegan jirey Xudayfa—oo haddii uu arko isaga oo ka qaybqaadanaya janaasada qof geeriyooday, isna waa uu ku biiri jirey, haddii kalena waa uu ka fogaan jirey. Xudayfa ma sheegi jirin magacayada Munaafiqiinta oo waxa ay ahayd sir Nebigu scw ku aaminay, sidaas ayaana Cumar u eegan jirey Xudayfa. Mar waxaaba dhacday in Cumar dhaariyey Xudayfa, si uu ugu sheego in uu liiska Munaafiqiinta ku jiro iyo in kale! Cumar baa darajadiisa ka shakisan, immikana, sida aynu u badan nahay, waxa aad mooddaa in la innoo gooyey tigidhkii Jannada lagu gali lahaa.

Ibnu Xajar[38] markii uu axaadiista dhacdadan ku saabsan ka faalloonayey, waxa uu tilmaamay in Suubbanuhu scw ku wanaajinayey wiilka oo saxaabi wanaagsan ahaa. Markii aabbihii yidhi Nebiga scw ayaa aan Madiinah ka saaraynaa, wiilku inta uu kadinka magaalada seef la istaagay ayaa uu odaygii u diidey in uu magaalada galo, ilaa uu Nebigu scw oggolaansho siiyo! Heerkaas ayaa ay gaadhsiisnayd saamaynta uu Nebigu scw saxaabada ku lahaa. Mar kale waxa uu Nebiga scw oggolaansho u weydiistay in uu aabbihii dilo, laakiin Suubbanuhu scw ma siin, waxa uuna

38 Fatxul Baarii, 10/195.

faray in uu wanaajiyo aabbihii!

Maslaxad kale ayaa jirtey, oo in kasta oo uu munaafiq dhib badan ahaa, haddana tolkii madax baa uu u ahaa. Intii aysan islaamin, boqornimo in ay u caleemosaaraan ayaaba ay u diyaarinayeen. Sidaas awgeed, Nebigu scw dareenkooda ayaa uu dhowrayey, oo in uusan ku tukan odaygii reerka sharafdhac baa ay u keeni kartay reerka, iyo in dadka kale xantaan, sida uu tilmaamayo Ibnu Xajar[39]. Taasna waxaa laga dheehan karaa war Nebiga scw laga soo tebiyey, oo ka dib markii loo diidey in uu ku tukado Munaafiqiinta, uu Suubbanuhu scw leeyahay: khamiiskaygu waxba u tari maayo e, kun tolkii ahi in ay ku islaamaan ayaa aan rejaynayaa.

Maadaama aysan aayadaha u diidayaa markaa soo degin, Nebigu scw ma rabin eed iyo in ay munaafiqa tolkiisu xumaan dareemaan. Cumarna taladiisi waxa uu u diidey qaab wanaagsan, isaga oo weji furan iyo dhoolla-caddayn u muujinaya, si uusan uga xumaan talada lagu diidey. Aad ayaa uu u naxariis iyo qaddarin badnaa Suubbanuhu scw, dareenka dadkana aad ayaa uu u dhowri jirey. Nasiibdarro, waa dhaqan maanta aad innoogu yar.

Cumar markii uu tirinayey falalkii xumaa ee Ibnu Ubay, ee uu lahaa, "Waa Munaafiq!," Suubbanuhu scw kama celin, in kasta oo sida xadiis ku cad uu reebay in maytida wax laga sheego. Ibnu Xajar waxa uu leeyahay[40] waxaa laga qaadanayaa in maagitaanka la iska reebay uu yahay: wixii cay iyo aflagaaddo loola dan leeyahay, ee uusan ku saabsanayn ka faalloodka waxyaalihii qofkaasi sameeyey iyo

39 Fatxul Baarii, 10/194, oo xiganaya al-Aclaam, 3/1849.
40 Fatxul Baarii, 10/200.

ka sheekayntooda. Waase in qofka wanaagsan ee nool lagu tixgeliyaa maydkii dembiilaha ahaa.

Cumar in uu garabdaarka la sheego lahaa ayaa ay u badan tahay! Ma aha markii ugu horraysay ee talo uu bixiyey Qur'aanku ku taageeray. Imaam Tirmidii waxa uu soo weriyey xadiis[41] uu Nebigu SCW ku sheegayo in Alle xaqa saaray carrabka iyo qalbiga Cumar. Wiilkiisi Cabdullaahi ibnu Cumar RC ayaa isna laga soo weriyey in uu yidhi: mar kasta oo dadku arrin talo ka bixiyaan, Qur'aanku waxa uu taageeri jirey talada Cumar[42]. Nebiga SCW waxaa laga soo weriyey in uu yidhi: dadkii idin ka horreeyey waxaa ka mid ahaan jirey kuwo wax loo sheego—la ilhaamiyo—, haddii ay ummaddayda ku jiraanna Cumar ibnul Khaddaab waa kamid.[43]

Waxa aan soo aragnay taladii uu maxaabiistii Beder ka bixiyey iyo sida Qur'aanku u taageeray. Sidaas oo kale, waxa uu kaalin weyn ku lahaa soo dagitaankii aayadda xijaabka iyo xaaraantimayntii khamriga. Dawaafka Kacbada ka dib, labada rackadood ee Maqaamu Ibraahiim lagu tukado, waxa ay ahayd codsi uu Cumar RC ku yidhi Nebiga SCW: innooga dhig meel lagu tukado[44], ka dibna waxaa soo degtay aayad dhahaysa, "ka dhigta Maqaam Ibraahiimka musalle (goob salaadeed)."[45]

Mar ay xaasaskii Nebigu SCW masayreen oo uu ilaa bil ka maqnaa, Cumar waxa uu aad u canaantay xaasaskii Nebiga SCW, gaar ahaan gabadhiisi Xafsah RC. Hadalladii Cumar

41 Sunan at-Tirmidi 4014; Saxiix Sunan at-Tirmidi 3682.
42 Halkuun.
43 Saxiix Muslim 2398.
44 Saxiix Muslim 2399.
45 Al-Baqarah: 125.

waxaa ka mid ahayd in uu ku yidhi: haddii aad waxan joojin weydaan oo uu Rasuulka Alle scw idin furo, Alle waxa uu booskiinna ugu beddelayaa kuwo idin ka wanaagsan. Intaas ka dibna waxaa soo degtay aayadda shanaad ee suuradda Taxriim[46], oo xitaa ereyadii Cumar iyo kuwa aayaddu aad ayaa ay isugu dhow yihiin! Rasuulku scw waxa uu yidhi: haddii uu jiri lahaa nebi iga dambeeyaa waxa uu ahaan lahaa Cumar[47]. Weliba waxa uu sheegay in uu Cumar shabbaho Nebi Muuse cs, iyo Nebi Nuux cs—waa labadii Anbiyada ugu ad-adkaa, kana mid ahaa *Ulul Casmi*ga.

Cumar waxa uu sheegay in uu markii dambe la yaabay dhiirranaantiisi uu ku hor istaagay, kulana dooday Nebiga scw![48] Iyada oo aan Qur'aan ka soo degin sida uu mawqifkaas adag uga istaagay culamadu dhawr faallood ayaa ay ka bixiyeen. Waxaa suuragal ah in xag Alle swt lagaga ilhaamiyey[49]. Marka Alle yidhi: u dalab dembidhaaf ama ha u dalbin, haddii aad toddobaatan jeer u dalabto loo dhaafi maayo, waxaa suuragal ah in Cumar uu ka qaatay in aysan doorransiin ahayn e, la simayo oo aysan dheef lahayn. Maadaamana salaadda janaasadu ay tahay dembidhaaf dalab iyo shafaaco, ay soo hoos galayso aayadda, oo aysan habboonayn in lagu tukado.

Dabayaaqadii sannadkii sagaalaad markii la gaadhey xilligii xajka, Nebigu scw waxa uu hoggaaminta xajka u

46 Tafsiir Ibnu Kathiir, Taxriim: 5.
47 Sunan at-Tirmidii 4018.
48 Fatxul Baarii, 10/195-196.
49 Fatxul Baarii, 10/191.

dhiibey Abuu Bakar RC[50]. Isaga oo jidka ku sii jira ayaa ay soo dageen aayadaha bilowga suuradda Tawbah, ka dibna Cali RC ayaa laga dabo diray, si uu xogta aayadahani xambaarsan yihiin ugu gudbiyo Mushrikiintii soo xajinayey.

In kasta oo sannadkii siddeedaad Makah la furtay, nidaamkii hore ayaa sidiisi ku socday, oo Mushrikiintu sidoodii hore ayaa ay u soo xajiyeen sannadkii siddeedaad iyo kan sagaalaadba. Laakiin aayadahan ayaa arrintaa soo afjaray. Waxaa la faray in ay ku dhawaaqaan in hadda ka dib aan Mushrik dambe xajka imanayn, Kacbadana qaawanaan ku dawaafayn, qofkii Nebiga SCW ballan la galayna ay u jirayso ilaa xilligeedii dhammaanayo, kii kalena muddo afar bilood ah oo ammaan ah la siinayo.

Xajkan laguma xusin magaca Cumar, oo saxaabada Madiinah ka xajiday waxaa lagu qiyaasaa ilaa saddex boqol. Maadaama Abuu Bakar baxay, waxa ay u badan tahay in Cumar ku negaaday Madiinah oo uu Rasuulka SCW ku hadhay.

Xajkii Sagootinta[51]

Cumar RC markii uu khaliifka noqday, mararka qaar isaga oo la shiraya odayaashii saxaabada, weliba kuwii ugu sharafta badnaa ee Badriyiinta ahaa—waxa uu kaxaysan jirey Cabdullaahi ibnu Cabbaas RC oo markaas dhawr-iyo-toban-jir ahaa. Odayaashii qaarkood ayaa dhibsaday waxaana ay ka dacwoodeen sababta wiilkan yar golahooda

50 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 4/695; as-Siirah an-Nabawiyah as-Saxiixah, 2/546.
51 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 5/114-; as-Siirah an-Nabawiyah as-Saxiixah, 2/549.

Cumar u keenayo, illeen iyagaba waxaa u jooga kuwo la da' ah mana keenaan goobta shirka e. Cumar waxa uu doonay in uu tusiyo sababta uu wiilkan u keeno. Odayaashii ayaa uu weydiiyey waxa ay ka fahmeen suuradda Idaajaa' (an-Nasr) macnaheeda. Qaar waxa ay ku jawaabeen in ay ku saabsan tahay amar Muslimiinta la siinayo, oo ah in ay Alle mahadiyaan, dembidhaafna weydiistaan marka ay guuleystaan. Qaar kalena waa ay iska aamuseen oo wax jawaab ah kama aysan bixin.

Cumar waxa uu ku jeestay Cabdullaahi ibnu Cabbaas, isaga oo weydiinaya in uu odayaasha ku raacsan yahay aragtidooda. Cabdullaahi waxa uu sheegay in uusan ku raacsanayn sida ay u fahmeen, ka dibna waxa uu faahfaahiyey in qasadka suuraddu uu yahay: ogeysiis Suubbanaha scw geeridiisi in ay soo dhowaatay la ogeysiinayo, oo la leeyahay guusha iyo furashadu waxa ay astaan u yihiin ajashaadii, ee tasbiixda, xamdiga, iyo istiqfaarta badso. Cumar oo sharraxaadda Cabdullaahi ku qancay waxa uu yidhi, "Intaa aad sheegtay wax aan ahayn kama ogi."[52] Sidaas ayaana odayaashii ay kaga hadheen wiilkii. Cumar RC dadka waxa uu ku qiimayn jirey aqoontooda, kartidooda, iyo waxqabadkooda, sida aynu arki doonno. Sabab kale oo uu Cabdullaahi u soo dhoweyn jirey waxa ay tahay in uu ahaa Nebiga scw ina-adeerkii, oo Cumar aad ayaa uu u qaddarin jirey Nebiga scw ehelkiisii iyo qaraabadiisii (Ahlul Bayt).

Sida Cabdullaahi ibnu Cabbaas laga soo weriyey, Idaajaa' waa suuraddii ugu dambaysay ee soo degtay, Qur'aankii ka dambeeyeyna aayado goosgoos ah ayaa uu ahaa. Nebigu scw waxa uu bilaabay in uu saxaabada u diyaariyo geeridiisa

52 Fatxul Baarii, 11/135-139.

soo dhowaatay. Sannadkii tobnaad isaga oo Mucaad ibnu Jabal RC u diraya Yaman waa uu sii sagootiyey, "Waxaa laga yaabaa in aadan ila kulmin sannadkan ka dib," ayaa uu Suubbanuhu SCW ku yidhi, taas oo Mucaad ka murugooday kana oohisay.

Rasuulku SCW bishii 11'd (Dul Qacdah) ee sannadkii tobnaad ayaa uu xaj u baxay. Waana xajkii ugu horreeyey ee uu Madiinah ka xidhto, xajiyana hijradii ka dib. Sannadkan waxaa soo xajiyey in ka badan boqol iyo labaatan kun (120, 000) oo Muslimiin ah—23 sano ka dib markii isaga oo keligii ah uu Jibriil ugu yimid Qaar Xiraa'.

Suubbanuhu SCW aad ayaa uu saxaabada ula dardaarmay, u waaniyey, talooyin badanna u siiyey. "Waa la i kiin weydiin doonaaye, maxaad dhihi doontaan?" Ayaa uu yidhi SCW. Saxaabaduna waxa ay ugu jawaabeen, "Waxaanu markhaati ka nahay inaad gaadhsiisey [farriintii], gudatay [xilkii], aadna naseexaysay." Nebigu SCW inta uu farta samada u taago oo haddana dadka ku fiiqo ayaa uu odhanayey, "Allow markhaati ka ahow," intaas oo uu saddex goor ku celceliyey.

Khudbaddii Carafah ka dib, waxaa Suubbanaha SCW ku soo degtay,

الْيَوْمَ أَكْمَلْتُ لَكُمْ دِينَكُمْ وَأَتْمَمْتُ عَلَيْكُمْ نِعْمَتِي
وَرَضِيتُ لَكُمُ الْإِسْلَامَ دِينًا

"Maanta waxa Aan idiin dhammaystiray diintiinni, waxa Aanna dushiinna ku ebyey Nicmadaydii, waxa Aanna idiin ka raalli noqday Islaamka diin ahaan."

al-Maa'idah: 3

Cumar oo maqlayey ayaa ooyey, markii la weydiiyey sababtana waxa uu ku jawaabay, "Dhammaystiranka waxaa ka dambeeya hoosudhac uun." Markii uu khaliifka ahaa ayaa waxaa u yimid nin Yahuudi ah oo ku yidhi: aayaddan kitaabkiinna ku jirtaa haddii ay annaga nagu soo degi lahayd, maalintaa ciid baa aanu ka dhigan lahayn. Cumar waxa uu u sheegay in uu xusuusto maalintii ay Rasuulka scw ku soo degtay, iyo goortii ay soo degtayba: galabtii Carafah, maalin Jimce ahayd.[53]

Xajkii markii uu dhammaaday waxaa lagu laabtay Madiinah. Dabayaaqadii bishii Safar, sannadkii 11'd ayaa Suubbanuhu scw xanuunsaday, ilaa uu jiifka ka kici kari waayey.[54]

Maalin isaga oo xanuun darani hayo oo ay la joogaan rag Cumar ku jiro, ayaa Rasuulku scw yidhi: keena kitaab aydaan gadaashii lumin aan idiin qoro e. Saxaabadii qaar baa damcay in ay qalabkii qoraalka keenaan, qaarna waa ay ka diideen, iyaga oo dhahaya xanuunka daran baa ka keenay e, ha dhibina. Cumar isagu waxa uu yidhi, "Kitaabka Alle ayaa innagu filan." Saxaabadii muran ayaa ka dhex bilowday, taas oo uu dhibsaday Nebigu scw, ka dibna waxa uu ka codsaday in ay ka tagaan. Waxa uuna afka uga sheegay saddex talo: in ay Mushrikiinta ka saaraan Jasiiradda Carbeed, in ay wafdiga u sooraan sidii uu yeeli jirey, midkii saddexaadna weriyaha xadiisku waa uu hilmaamay.[55]

53 Fatxul Baarii, 10/82-84; al-Bidaayah wan Nihaayah, 5/236.
54 Ar-Raxiiq al-Makhtuum, 426.
55 As-Siirah an-Nabawiyah as-Saxiixah, 2/553-554.

Xilligan waxa uu Nebigu scw imaamka salaadda ka dhigay Abuu Bakar RC, oo booskiisi galay. Barqadii Isniinta, 12'kii Rabiicul Awal, sannadkii 11'd ayaa Suubbanihii scw la oofsaday isaga oo 63-jir ah.

Alleyl dumay albaabadoo la xidhay, uunkoo wada seexday
Onkad yeedhay uugaama roob, alif banaadiikh ah
Iihdayda bixi baa libaax iman la moodaaye
Raggase adhaxda iyo ooftu waa udub-dhexaadkiiye
Labadii wax laga eegi jiray waan ka awdnahaye
Halkaan aa ka leeyahay Ilaah kaliya uun baa og

Alleyl Dumay—Raage Ugaas.

Saxaabadii habeen baa ku dumay. naxdin iyo tiiraanyo aan la tilmaami karin ayaa ay la jaahwareereen. Qaar baa musiibadii fadhiga ka kici waayey; qaar baa ereyba ka soo bixi waayey. In badan oo uu Cumar ka mid ahaana waaba ay rumaysan waayeen in uu geeriyooday Suubbanuhu scw[56]. Cumar oo masjidka dhex taagan oo dadkii la hadlaya—hadalkiisi waxaa ka mid ahaa in sidii Muuse cs uu Nebigu scw Alle la soo munaajoonayo, soona laaban doono, qofkii dhaha Nebigii baa geeriyoodayna uu dili doono!—ayaa waxaa yimid Abuu Bakar RC oo warkii gaadhey.

Abuu Bakar isaga ayaa subaxaas dadka salaaddii tujiyey, ka dibna waxa uu u baxay gurigiisi oo duleedka magaalada ahaa. "Kiinnii Muxammad caabudayey, Muxammad waa uu geeriyooday. Kiinnii Alle caabudayeyna, Alle waa uu

56 Ladaa'if al-Macaarif, 110.

nool yahay mana dhinto." Ayaa uu Abuu Bakar yidhi[57]. Ka dibna waxa uu akhriyey,

وَمَا مُحَمَّدٌ إِلَّا رَسُولٌ قَدْ خَلَتْ مِن قَبْلِهِ الرُّسُلُ ۚ أَفَإِن مَّاتَ أَوْ قُتِلَ انقَلَبْتُمْ عَلَىٰ أَعْقَابِكُمْ ۚ وَمَن يَنقَلِبْ عَلَىٰ عَقِبَيْهِ فَلَن يَضُرَّ اللَّهَ شَيْئًا ۗ وَسَيَجْزِي اللَّهُ الشَّاكِرِينَ ﴿١٤٤﴾

"Muxammad ma aha wax aan ka ahayn rasuul ay hortii tageen rasuullo [kale], haddii uu geeriyoodo ama la dilo ma waxa aad dib u guraysaan raadkiinni? Qofkii raadkiisi dib u guraa [gaalnimadii ku noqdaa] waxba ka dhibi maayo Alle, Ilaahayna waa uu abaal marin doonaa kuwa mahadiya."

Aal Cimraan: 144.

Saxaabadu waxa ay sheegeen, sidii ay aayaddani u saamaysay in la moodayey in aysan horeba u maqlin. Cumar waxa uu yidhi: markii aan maqlay Abuu Bakar oo akhrinaya, lugihii baa aan ku taagnaan kari waayey, oo dhulka ayaa aan ku dhacay.

Hadalkaa Abuu Bakar RC ayaa saxaabo badan oo Cumar ku jiro u xaqiijiyey runtii ay u qaadan waayeen. Sida uu Imaam Tirmidi ku weriyey xadiis saxiix ah[58], Anas ibnu Maalik RC waxa uu yidhi: maalintii Rasuulku SCW Madiinah soo galay wax kasta ayaa nuurayey, maalintii uu geeriyoodayna wax kasta ayaa mugdi noqday. Cusmaan

57 Al-Bidaayah wan Nihaayah, 5/340-341.
58 Sunan at-Tirmidii 3946; Saxiix Sunan at-Tirmidii 3618.

ibnu Cafaan RC waxa uu sheegay in saxaabada qaar ay isla hadli gaadheenba murugo daraaddeed. Waxaa kale oo laga soo weriyey in maalmo ka dib, isaga oo meel fadhiya uu Cumar RC soo ag maray oo bariidiyey, laakiin, Cusmaan uusanba kala ogeyn waxa hareerihiisa ka socda. Waxa uu ku war helay markii Cumar u dacwooday Abuu Bakar RC, iyada oo uu Cumar u qaatay in Cusmaan wax kale dhibsaday.[59]

Habeenkii Arbacada ayaa Suubbanaha SCW lagu aasay goobtii uu ku geeriyooday, oo ahayd gurigii Caa'ishah RC.

59 Ad-Dabaqaat al-Kubraa', 2/238.

CUTUBKA 6

Cumarayn

"Ku dayda labada iga dambeeya: Abuu Bakar iyo Cumar."

—Nebiga scw,
Sunan at-Tirmidi, 3991.

Iyada oo ay murugadii qofba meel la marayso, oo ay saxaabadii qaar hadal soo saari la'yihiin, qaar lugahoodii ka waayeen awood ay ku istaagaan, qaarna meel ay joogaan iyo waxa ka ag dhacayaba aysan kala ogeyn—oo Abuu Bakar, Cumar iyo dad kale ay gurigii Nebiga scw joogaan, ayaa waxaa loo keenay war kale oo argagax dheeraad ah galiyey. Nin baa u yimid, oo inta uu derbiga dhanka kale ka soo istaagay Cumar u dhawaaqay, "Ii soo bax, Ina Khaddaaboow!" Cumar waxa uu ku jawaabay, "I dhaaf waan mashquulsanahaye." Ninkii waxa uu yidhi, "Ii soo bax wax baa dhacaye. Ansaartii way kulmayaane gaadha inta aysan ku kicin arrin dagaal idin ka dhex dhalisa."

Halkii baa uu Cumar ka kacay Abuu Bakarna ku yidhi inna bixi. Sababta uu ninku Cumar ugu yeedhay, ee uusan cid kale ugu yeedhin cid tilmaantay ma arkin.

Jidka waxa ay kula kulmeen Abuu Cubaydah, Caamir ibnul Jarraax RC, Abuu Bakar baana gacanta qabtay oo sii kaxeeyey. Waxaa kale oo ay jidka kula kulmeen labo saxaabi oo Ansaar ah oo u sheegay wixii dhacay—in ay Ansaartu rabaan in ay bayco la galaan Sacad ibnu Cubaadah. Labadan saxaabi waxa ay Abuu Bakar iyo Cumar kula taliyeen in ay iska noqdaan oo ay iyagu go'aanka gaadhaan, taas oo laga dareemayo in Ansaartu aysan ku midaysnayn doorashada Sacad ibnu Cubaadah[1]. Abuu Bakar iyo Cumar waxaa ka dabo yimid oo ku soo biiray koox Muhaajiriin ah.

Shirka Ansaartu ay qabsatay waxa uu ka dhacayey waab ay lahaayeen reer Ansaarta ka mid ah oo la odhan jirey Banuu Saacidah, uuna oday u ahaa Sacad ibnu Cubaadahan la rabo in uu talada qabto. Waabkani waxa uu caan ku yahay *Saqiifat Banuu Saacidah*. Sacad waa uu jiifay oo qandho haysa darteed ayaa uu la dednaa. Ansaarta waxaa u hadlay afhayeenkoodii, "Waxaanu nahay Ansaartii Alle iyo guutadii Islaamka. Idinkuna, Muhaajiriintoow, waxaad tihiin koox yar oo raba in ay na garbiyaan oo ay xaqayaga na duudsiyaan, taladana ay la keliyoobaan."

Markii uu hadalkii dhammaystay ayaa Cumar damcay in uu u jawaabo. Cumar waxa uu yidhi: waxa aan diyaarsaday hadal i cajabiyey oo aan rabey in aan dhiibto inta aan Abuu Bakar hadlin. Cumar fursaddaas ma helin oo Abuu Bakar ayaa aamusiiyey hadalkiina qaatay. Abuu Bakar waxa uu ahaa dadka cadhada kulul, Cumarna waxa uu yidhi, "Waxa aan dhibsaday in aan ka cadhaysiiyo. Abuu Bakar ayaa hadlay waana uu iga dulqaad iyo degganaan badnaa." Cumar waxa uu intaa ku sii daray in Abuu Bakar tilmaamay dhammaan

1 Fatxul Baarii, 15/655.

qodobbadii uu Cumar rabey in uu ka hadlo, isaga oo weliba aftahannimo dheeraad ah ku sii qurxiyey.

"Dhammaan wanaagga aad sheegateen waa mid aad leedihiin, cidina dafiri mayso fadligiinna iyo geesinnimadiinna, iyo xaqa aad nagu leedihiin. Waadna og tihiin in reerkan Quraysheed ay Carabta ku dhex leeyihiin darajo aan cid kale ku lahayn—dhalasho ahaan iyo degaan ahaanba, Carabtuna uma hoggaansamayso nin aan iyaga ahayn, ee Alle ka cabsada oo Islaamka ha kala jebinnina, hana noqonnina ciddii ugu horraysay ee Islaamka dhibtan u keentay. Amiirradu waa annaga, wasiirraduna waa idinka." Ayaa uu Abuu Bakar yidhi, ka dibna Cumar iyo Abuu Cubaydah inta uu gacmaha qabtay, waxa uu hadalkiisi ku daray, "Labadan nin baan idiin dooraye midkaad rabtaan bayco la gala."

Cumar ma jeclaysan arrintan oo waxa uu yidhi: hadalkii Abuu Bakar intan wax aan ka ahayn ma aan qoonsan, in qoorta la iga jaro ayaana iiga fududayd in aan Abuu Bakar madax u noqdo.

Xabbaab ibnul Mundir oo Ansaarta ka mid ahaa ayaa hadalkii qaatay oo soo jeediyey, "Annaguna amiir baanu soo saaraynaa, idinkuna amiir soo saara Quraysheey." Taas oo macnaheedu yahay aynu talada wadaagno. Xabbaab hadalkiisa waxaa ku jirtey in aysan tartan ka ahayn e, ay ka cabsi qabaan in ay taladu gacanta u gasho dad ay dileen aabbayaashood iyo walaalahood, oo ka dibna sidaa Ansaarta looga aargoosto.

Al-Khaddaabi[2] waxa uu odhaahdan saxaabiga ku sababeeyey, in Carabtu aysan madaxnimo u aqoonsanayn

2 Fatxul Baarii, 15/659.

qof aan reerkooda ka mid ahayn, Xabbaabna uu arrintaa ku socday isaga oo aan ka war hayn imaarada iyo axkaamta Islaamku siiyey, iyo in hoggaanka sare ay Qurayshi leedahay.

Buuq badan ayaa meeshii ka furmay, taas oo Cumar ku dhalisay cabsi weyn uu ka qabey in khilaaf ballaadhani dhasho oo la kala jabo. Haddii ay goobta ka tagi lahaayeen iyada oo aan arrintan la xallin oo aan cid talada loo dhiibin, waxa ay ka baqeen—sida Cumar sheegay—in ay Ansaartu bayco la galaan cid kale, oo ay noqoto: ama in lagu raaco qof aan la isku waafaqsanayn, ama lagu diido oo fasaad meeshii ka dhasho. Belaayo xilligeedi joogta dib looma dhigto e, Cumar waxa uu ku tallaabsaday in uu doodda soo afjaro. Laakiin, sida aynu arki doonno, qaabka uu u maray raalli kama uusan ahayn ee dantaa ku khasabtay.

Sidii aan soo sheegnay, Cumar waxa uu ahaa nin cod dheer, oo haddii uu hadlo ay adag tahay in hadal kale la isdhaafsado. Waxa uu bilaabay in uu Ansaartii xusuusiyo fadliga Abuu Bakar iyo heerka uu ka joogey Nebiga SCW. Waxa uu u sheegay in uusan jirin qof Abuu Bakar RC uga dhowaa Nebiga SCW, ilaa iyo bilowgiina uu ku xidhnaa oo uu dhibaato badan u soo maray dacwada. Waxa uu xusuusiyey in Abuu Bakar ahaa qofkii ay Nebiga SCW godka wada galeen, markii ay Mushrikiintu eryanayeen ee Qur'aanku tilmaamay. Waxa uu xusuusiyey in Nebigu SCW amray in Abuu Bakar salaadda tujiyo, isaga oo cid kasta oo kale u diidey.

Markii uu dareensiiyey darajada Abuu Bakar RC, ayaa waxa uu weydiiyey, "Kiinnee ku dhiirran kara (kiinnee naftiisu ku qanci kartaa) in uu u taliyo Abuu Bakar?", taas oo looga jawaabay, "Ilaahay baanu ka magangalnay in

aannu Abuu Bakar hoggaaminno." Cumar markiiba Abuu Bakar ayaa uu gacanta qabtay si uu bayco ula galo, laakiin waxaa kaga horreeyey Bashiir ibnu Sacad RC—Nucmaan ibnu Bashiir RC aabbihii—oo Ansaari ahaa. Halkii baa loo kala degdegay oo intii joogtay ay gacanqaadeen si ay baycadooda u siiyaan. Sidii ay ugu dadaalayeen in ay Abuu Bakar u kala horreeyaan, waxa ay ku sigteen in ay Sacadkii jiifey ku tuntaan, markaasaa mid ka mid ahi yidhi, "Waad disheen Sacad ibnu Cubaadah!" Cumarna habaar ayaa uu u sii raaciyey, "Alle ha dilo Sacad ibnu Cubaadah!"

Intii cariishkan isugu timid markii ay baycadii dhammeeyeen, waxaa la tagey Masjidkii si dadka intii kalena ay Abuu Bakar bayco ula galaan. Baycadu maalintii Isniinta ahayd intii ka hadhay ilaa talaadadii waa ay socotay, ilaa laga dhammaaday habeenkii Talaadada ee ay Arbacadu soo galaysanna, lama aasin Suubbanihii SCW. Runtii in aan la aasin dan ayaa ku jirtey, oo waxa ay Muslimiinta ku khasbaysay in ay arrinta ciddii booskiisa gali lahayd si degdeg ah u dhammeeyaan. Midda kale, iyada oo Nebigii SCW weli dhulka korkiisa ku sugan yahay, in ay iskhilaafaan waa ay ku adkayd.

Subixii Talaadada Abuu Bakar oo fadhiya ayaa Cumar istaagay oo hadal jeediyey. Waxa uu dadkii u sheegay in hadalkii uu shalay yidhi iyo baycadii Abuu Bakar, aysan ahayn wax uu Qur'aanka ka keenay ama wax uu Nebigu SCW kula sii ballamay e, uu rejaynayey in Nebigu SCW uu arrintan cidda ka dambayn doonta sii xallin doono. Waxa uu ka hadlay in waxyigii iyo hanuunkii Alle ku soo dejiyey Nebiga SCW ay weli yaallaan, haddii ay ku dhegganaadaanna

ay hanuunsamayaan. Ka dib waxa uu bilaabay in uu Abuu Bakar iyo fadligiisa ka faalloodo, isaga oo dadka u sheegaya in uu yahay saxaabada ka ugu fadliga badan; in uu yahay Saaxiibkii Rasuulka SCW, iyo midkii ku weheliyey godka. Hadalkiisi waxa uu ku soo gunaanaday, "Kaca oo baycada la gala."

Halkii ayaana dadkii intii hadhay ay Abuu Bakar bayco kula galeen. Khudbaddii xilqabashada ee Abuu Bakar RC jeediyey waxaa ka mid ahaa[3]:

> "Madax baa la iiga kiin dhigay mase ihi ka idiinku khayrka badan. Haddii aan wanaag sameeyo igu kaalmeeyaa, haddii aan xumo sameeyana i toosiya. Runtu waa ammaano, beentuna waa khiyaano. Midkiinna taagta darani agtayda awood baa uu ku leeyahay ilaa aan xaqiisa u soo dhiciyo, haddii Eebbe idmo. Midkiinna awoodda lihina waa uu taagdaran yahay ilaa aan xaqaas ka qaado, haddii Eebbe idmo. Dadkii ka taga jidka Alle ku jihaadkiisa, Alle waa uu dulleeyaa. Xumaantuna dadka ay ku faafto, Alle waxa uu ku baahiyaa belaayo. I adeeca intii aan Alle iyo Rasuulkiisa adeeco, haddii aan Alle iyo Rasuulkiisa caasiyana wax daacad (hoggaansan) ah idin kuma lihi."

Waxaa la sheegaa in Sacad ibnu Cubaadah RC, Cali ibnu Abii Daalib RC, Subeyr ibnu Cawaam RC, iyo dhawr qof oo kale aysan baycada ka soo qaybgalin. Markii uu Abuu Bakar dadkii Masjidka fadhiyey ka waayey Cali iyo Subeyr, waa

3 Albidaayah wan Nihaayah, 7/6-7.

uu u yeedhay isaga oo ku canaanaya in ay kala jebinayaan Muslimiinta[4], markaas oo ay baycadii iyaguna galeen. Midda Cali, waxaa jira warar kale oo sheegaya in uu baycada Abuu Bakar la galay lix bilood ka dib, markii ay xaaskiisi Faadumo bint Rasuul RC geeriyootay. *Calaa iyo kulli xaal*, Muslimiintii sidaas ayaa ay hoggaamiye ku samaysteen, dhawr qof in ay ka biyadiideen ama ka cagajiideenna waxba uma dhibin, oo Abuu Bakar fadligiisa, kartidiisa, iyo awooddiisa hoggaamiyenimo cidina dood kama qabin. Cali iyo Subeyrna waxa ay ka cadhoodeen in aan markii hore lala tashan, iyada oo weliba Cali loo sheego sababo kale.[5]

Sidaas ayaa Abuu Bakar RC ku noqday *Khaliifatu Rasuulillaah* SCW—waxaana bilaabmay Xilligii Khilaafada. Cumarna RC kaalintaa weyn ayaa uu ka qaatay in laga hor tago dhibaato Muslimiinta ka dhex dhalata, iyo madaxtinimo la isku qabsado ama lagu loollamo.

Waxaa jira saddex qodob oo, xataa haddii Sacad Ibnu Cubaadah RC maalintaa la dooran lahaa, madaxtimadiisa dhibaato weyn u keeni karey. Midda hore, furashadii Makah, Sacad waxa uu wadey calankii Ansaarta[6]. Waa tii aynu soo sheegnay in Cabbaas ibnu Cabdulmuddalib RC uu Abuu Sufyaan jidka istaajiyey, si uu u tusiyo awoodda ciidanka Muslimiinta. Guutadii uu Sacad calanka u sidey markii ay soo ag martay, ayaa Sacad la hadlay Abuu Sufyaan una hanjabey, isaga oo leh maanta waa maalintii la idin gumaadi lahaa, dhiiggiinna iyo xurmadiinnana la bannaysan

4 Albidaayah wan Nihaayah, 7/6-7.
5 Albidaayah wan Nihaayah, 7/7-8.
6 Fatxul Baarii, 9/388, 392-394.

lahaa. Abuu Sufyaan waxa uu u dacwooday Nebiga SCW, taas oo kalliftay in Sacad la casilo, calankii uu wadeyna lagu wareejiyo wiilkiisi. Ibnu Hishaam waxa uu sheegay in Cumar uu Nebiga SCW u tagey arrintana kala hadlay, isaga oo leh waxa aan ka baqayaa in uu Sacad waxyeello weyn gaadhsiiyo Quraysh. Ibnu Xajar isagu waxa uu tilmaamayaa in ay taasi fog tahay, marka loo eego mawqifkii uu Cumar ka taagnaa Mushrikiinta Quraysheed, iyo nacaybkii uu u hayeyba.[7]

Qodobka labaad ee madaxtinimada Sacad dhibta u geysan karey, waa loollankii Islaamka ka hor ka dhex jirey labada reer ee ay Ansaartu ka koobnaayeen: Aws iyo Khasraj. Muddo aad u dheer ayaa dagaal ka dhex aloosnaa, ilaa markii ugu dambaysay ay isku madhiyeen dagaalkii *Maalintii Bucaath*[8], oo hijradii Nebiga SCW ka horreeyey saddex sano. Dhacdadan oo madaxdoodii ku dhammaadeen, waxa ay qayb ka ahayd sababihii u fududeeyey in ay Islaamka qaataan. Sacad ibnu Cubaadah RC waxa uu oday dhaqameed u ahaa Khasraj, halka Sacad ibnu Mucaad RC uu Aws oday dhaqameedkeeda ahaa.

Muddada kooban (10+ sano) ee ay Muslimiinta ahaayeen, ma ahayn mid si buuxda u dawayn kartey dakanadii iyo aanadii soojireenka ahaa, taas oo xoojinaysay in Sacad ibnu Cubaadah RC uusan ku habboonayn qabashada talada Muslimiinta, iyada oo ay dhici kartey in garabka kale ee Ansaartu (Aws) ay ka horyimaaddaan. Sacad ibnu Mucaad RC isagu waxa uu geeriyooday duullaankii Banuu Quraydah ka dib.

7 Fatxul Baarii, 9/393.
8 Fatxul Baarii, 3/260-262.

Tusaale muujinaya in boogihii aysan weli bogsoon, oo Nebiga SCW oo dhex jooga ay dagaal ku sigteen, waxaa soo weriyey Imaam Bukhaari. Markii been-abuurka laga sameeyey Ummul Mu'miniin Caa'isha RC, dadkii dhibtaas ka qaybqaatay waxaa hormuud u ahaa munaafiqii Cabdullaahi ibnu Ubay. Nebigu SCW maalin ayaa uu saxaabadii ka dhex istaagay[9], isaga oo ku dacwoonaya: yaa iga qabanaya ninkan reerkaygii dhibay. Waxaa istaagay oo u jawaabay Sacad ibnu Mucaad RC (Aws) oo yidhi: haddii uu Aws ka tirsan yahay aniga ayaa kaaga filan oo qoorta ka goynaya, haddii uu walaalahayo Khasraj yahayna waa aad na amri kartaa, annaguna waa aanu fulinaynaa.

Sacad ibnu Cubaadah (Khasraj) oo dareenkii qabyaaladdu uu qaaday ayaa kacay oo yidhi: been baa aad sheegtay e, dili maysid mana awooddid in aad disho, haddii uu tolkaa ahaan lahaana ma aadan disheen. Usayd ibnu Xudayr RC (Khasraj) oo ay Sacad ilmo adeer ahaayeen ayaa isna kacay isaga oo dhahaya: adiga ayaa been sheegaya ee waa aanu dilaynaa, adiguna waxa aad tahay munaafiq u doodaya munaafiqiinta.

Hadallo kulul baa la isdhaafsaday, ilaa ay xaaladdii meel xun gaadhey, oo ay ku dhowaadeen in ay dagaallamaan Aws iyo Khasraj. Laakiin Nebiga SCW ayaa intii la isku qaylinayey isna dejinayey, ilaa ay kala aamuseen oo ay kala dageen.

Qodobka saddexaad waa midka uu Abuu Bakar tilmaamay markii uu Ansaarta la hadlayey. Qurayshtu waxa ay Carabta kale ku dhex lahaayeen qaddarin badan, aadna waa looga dambeeyey, maadaama ay Xaramka

9 Fatxul Baarii, 9/246,

gacanta ku hayeen. Yathrib (Madiinah) Carabta kale uma lahayn ahmiyad diineed, oo Aws iyo Khasraj iyagaaba Makah u aadi jirey xajka. Sidaas awgeed, ma aysan lahayn darajada Quraysh mid u dhiganta oo ay Carabta kale ugu hoggaansanto. Haddii uu Ansaari khaliif noqon lahaa, waa ay adkaan lahayd in ay Carabta kale aqbalaan, waxa ayna rabi lahaayeen in iyagana markooda talada loo dhiibo, si ay khilaafadu wareegto iyo wax lagu diriro u noqoto.

Haddii, sidii la soo jeediyey, Ansaarta iyo Muhaajiriinta midba amiir iska soo saari lahaa, maxaa qabiilooyinka Carbeedna u diidaya in mid walbaa amiirkeeda soo dirsato? Dhaqankii jirey waxa uu ku salaysnaa: inta nin reer hebel ahi ii talin lahaa, mid reerkayga ah baa aan ka doortay. Weli dhaqankii qabiilka iyo qabyaaladda ku dhisanaa ayaa socday, oo aan meesha ka bixin. Xadiiska Nebiga SCW ee talada guud ee Muslimiinta ku koobaya Qurayshna, taas ayaa uu xal u yahay, oo waxa uu horjoogsanayaa in ay talada Muslimiintu noqoto wax la isku qabqabsado. Khilaafada iska daa e, Nebinimadii ayaa lagu qabsaday Rasuulka SCW, dad badanna waxa ay ula dagaallamayeen yaan reer Banuu Haashim nin ahi idiin talin!

Sannadkii ugu dambeeyey khilaafadiisi, ayaa Cumar RC waxaa loo sheegay hadal nin yidhi—"Haddii Cumar dhinto waxaan bayco la galayaa hebel." Cumar aad ayaa uu uga cadhooday hadalkaas. Khudbad dheerna waa uu ka jeediyey, isaga oo ka digaya in dadka taladooda la dhaco oo xaqooda laga duudsiyo, iyada oo cid gaar ahi ay talada Muslimiinta wadatashi la'aan ku qabsanayso, inta baycadii Abuu Bakar tusaale laga dhigto.

Cumar waxa uu sheegay in baycadii Abuu Bakar ay ahayd wax aan qorshaysnayn oo si kedis ah u dhacay, si dhibaato ka weyn looga badbaado, waana ay hirgashay, sharkeediina Alle ayaa ummadda ka badbaadiyey. Laakiin, cid Abuu Bakar u dhiganta oo lala simi karaa ma jirto. Sidaas awgeedna, wixii dhacay tusaale lagama dhigan karo, oo qofku cidda uu jeclaysto iskama siin karo bayco, iyada oo aan Muslimiinta wax laga weydiin taladooda ciddii qaban lahayd. Waxa uu ku daray in qofkii sidaas yeela, isaga iyo cidda uu baycada la galay toona aan lagu raacin, ee ay khatar ugu jiraan in xadgudubkaas daraaddii loo dilo.

Ciidankii Usaama

Waxaa jirey ciidan uu Nebigu SCW u diyaariyey in ay duullaan kale ku qaadeen goobtii Mu'tah ee Sayd ibnu Xaarithah RC, Jacfar ibnu Abii Daalib RC, iyo Cabdullaahi ibnu Rawaaxah RC lagu diley. Waxaa ciidankan madax looga dhigay Sayd wiilkiisi—Usaama ibnu Sayd RC. Ciidankan waxaa ku jirey Cumar RC. Waxaa kale oo la sheegaa in Abuu Bakarna uu ku jirey[10]. Iyaga oo aan duleedka Madiinah dhaafin, ayaa uu Nebigu SCW aad u xanuunsaday, ka dibna halkii ayaa ay joogeen iyaga oo ka war sugaya xaaladdiisa.

Geeridii Nebiga SCW ka dib, Carabtii soo islaamtay intoodii badnayd diintii waa ay ka noqdeen, oo waa ay riddoobeen—wixii aan ka ahayn Madiinah, Maka iyo Daa'if. Dadkii riddoobey qaar ka mid ahi waxa ay laayeen Muslimiintii ku jirtey ee diidday in ay diinta ka noqdaan, kuna adkaystay Islaamka. Halka Munaafiqiintii ay awood

10 Albidaayah wan Nihaayah, 7/9-11.

yeesheen oo ay madaxa taageen. Waxaa iyaguna ku darsamay qabiilooyin aan gaaloobin, laakiin diidey in ay sakadii bixiyaan.

Sidaas awgeed, Abuu Bakar RC waxaa lagula taliyey in uu soo celiyo ciidankii Usaama—oo 700 oo nin halkii Roomaan iyo dad kale oo Madiinah aad uga fog ay duullaan ku qaadi lahaayeen, ay habboon tahay in dhibaatooyinka Madiinah ka ag qarxay xoogga la saaro, iyada oo weliba laga cabsi qabey in Madiinah la soo weeraro. Cumar waxa uu ka mid ahaa dadkii Abuu Bakar kula taliyey in ciidanka Usaama la baajiyo. Laakiin Abuu Bakar meel adag baa uu ka istaagay. Si cad ayaana uu u diidey in uusan fulin ama uu wax ka beddelo go'aan uu gaadhey Nebigu SCW.

Hadalladiisi waxaa ka mid ahaa: haddii aynu dhammaanayno, oo ay eydu jiidanayso lugaha Hooyooyinka Mu'miniinta (xaasaskii Rasuulka SCW), ciidanka Usaama baaqan maayo. Markii uu ku adkaystay in ciidanku baxo, ee laga dhaadhicin kari waayey ha joogaan, ayaa Cumar loo yimid oo lagu yidhi: bal la hadal oo ciidanka cid aan Usaama ahayn ha u dhiibo. Abuu Bakar inta uu Cumar gadhka qabtay baa uu ku yidhi, "Hooyadaa kaa goblantay, Ina Khaddaaboow! Ma amiirkii Rasuulka Alle SCW cid aan ahayn baan amiir ka dhigaa?"

Sidii ayaa ciidankii ku baxay, laakiin Cumar ma raacin oo Abuu Bakar ayaa Usaama ka codsaday in uu uga tago. Maalintaa wixii ka dambeeyey, mar kasta oo uu Cumar arko Usaama waxa uu salaanta u raacin jirey "...Amiirkiiyoow."

Nebigu SCW aad ayaa uu u jeclaa Usaama iyo aabbihiiba, oo Islaamka ka hor Sayd waxa uu ahaa Ina Muxammad.

Markii Nebiga SCW cid waliba ka gabbato, ee ay ku dhici waayaan in ay arrin kala hadlaan, Usaama ayaa ay saxaabadu diri jireen. Markan uu Nebigu SCW hoggaamiyaha uga dhigayo ciidanka uu Cumar ku jiro, Usaama waxa uu ahaa 18 jir! Cumar markii uu khaliifka noqdayna, dhaqaalihii Baytul Maalka laga bixin jirey, Usaama ayaa ka saami badnaa Cabdullaahi ibnu Cumar RC. Markii Cabdullaahi aabbihii u dacwoodayna waxa uu Cumar ugu jawaabay: Nebigu SCW aabbihii ayaa uu ka jeclaa aabbahaa, adigana isaga ayaa uu kaa jeclaa, markaa waxa aan doorbiday in aan jacaylkii Nebiga SCW, ka hormariyo jacaylkayga aabbanimo!

Usaama RC waxa uu ahaa geesi talada iyo hoggaaminta ku wanaagsan. Midda kale, maadaama aabbihii goobtan lagu diley, in isaga loo dhiibo maslaxad dheeraad ah baa ku jirtey oo aargoosi baa uu rabey, taas oo dhiirranaan dheeraad ah siinaysay.

Maalintii uu Suubbanuhu SCW geeriyooday, dareenkii murugada badnaa iyo sidii ay uga naxeen geeridiisa, waxa ay Caa'isha RC ku tilmaantay in ay ka dhignaayeen: riyo dardhaday (caacay) ka dib markii xilli qaboobe ah roob helay, oo ay qadhqadhyo la gariirayaan, iyada oo midba meel iskojinayo, taas oo ay weliba ugu darsantay baqdin ay ka qabaan bahallo dhan kasta kaga soo ciyaya.[11]

Abuu Bakr RC debecsanaantiisi iyo naxariistiisi ayaa dad badan hoosaasiyey. Qaar baa u qaatay in uu yahay nin jilicsan oo aan mudnayn in ay wax iskaga tiriyaan. Waana mid ka mid ahayd sababihii qaarkood iyaga oo weli Muslimiin ah, ay u diideen in ay sakadii bixiyaan. Waxaase ka qabsatay

11 Albidaayah wan Nihaayah, 7/10.

middii Cigaal Shiidaad mid la mid ah: *ma waxaan ku mooday, mise waxaad noqotay, mise waxaan loo noqon doonin!*

Bixitaankii ciidankii Usaama guul weyn baa ka dhalatay. Madiinah iyo Mu'tah—oo hadda Urdun ka tirsan—intii u dhexaysay dadkii ay ku sii mareen oo dhan baqdin baa gashay. Waxaa la yidhi dadkani haddii aysan awood badan lahayn iskama ay soo baxeen. Ciidankii Usaama waa ay guuleysteen hanti badanna waxa ay ka soo qaateen Roomaankii. Hiraqalkii Roomaanka u talinayey ayaa waxaa islamar gaadhey warkii geerida Nebiga SCW iyo weerarkii Usaama ku qaaday, arrintaas oo ka yaabisay, ayaa waxaa laga sheegaa in uu yidhi, "Waa maxay dadkan saaxiibkood (Nebiga SCW) dhintay ee haddana dhulkayagii nagu soo weeraray!" Markii uu ciidankii Madiinah ku soo laabtay ayaa, nashasho ka dib, loo diray in ay ku duulaan dadkii riddoobay.

Dagaalladii Riddada iyo dadkii Sakada diidey[12]

Si aan Madiinah weerar kedis ah loogu soo qaadin, Abuu Bakar waxa uu ku hareereeyey ciidan ilaalo ah oo qaarba dhan la dhigay, waxaana loo dhiibey saxaabo ay ka mid ahaayeen Cali ibnu Abii Daalib RC, Subeyr ibnul Cawaam RC, Dalxah ibnu Cabdallah RC, Sacad ibnu Abii Waqaas RC, Cabduraxmaan ibnu Cawf RC, iyo Cabdullaahi ibnu Mascuud RC.

Wefdiyo kala duwan oo Carabtii ah ayaa Abuu Bakar u yimid, iyada oo qaar ku dacwoonayaan in ay sakada u bixin jireen in ay helaan ducada Nebiga SCW. Haddana,

12 Albidaayah wan Nihaayah, 7/17-.

maadaama uu geeriyooday, aysan jirin sabab ay sakada u bixiyaan.

Saxaabadii waxa ay Abuu Bakar kula taliyeen: haddiiba ay intan oggol yihiin, innaga daa dagaalkooda oo soo dhowee, iyagaa hadhow marka iimaanku laabtooda si fiican u dego sakadana bixin doona e. Abuu Bakar waa uu diidey. Waxaa yaab lahayd in Cumarkii dagaalka badnaa ee Abuu Bakar uu dejin jirey, uu hadda isagu *bareegga* hayo, Abuu Bakarna u joogsan la'yahay!

Cumar dood ayaa uu Abuu Bakar la galay, isaga oo ku dacwoonaya: "Maxaad kula dagaallamaysaa dadka iyada oo uu Rasuulkii Alle scw yidhi, 'Waxaa la i faray in aan dadka la dagaallamo inta ay ka dhahayaan *laa ilaaha illallaah*. Qofkii yidhaahda *laa ilaaha illallaah* waxa uu iga dhowrtay xoolihiisii iyo naftiisii, aan ka ahayn xaqiisa, la xisaabtankiisana Alle ayaa iska leh."[13]

"Wallaahi, haddii ay ii diidaan dabar ay u keeni jireen Rasuulka Alle scw, waan kula dagaallamayaa haysashadiisa. Sakadu waa xaqa maalka. Wallaahi, waan la dagaallamayaa qofkii kala saara salaadda iyo sakada." Ayaa uu Abuu Bakar ku adkaystay.

Cumar, sida muuqata, kama war hayn xadiiska wiilkiisu werinayo ee Saxiix Muslim ku diiwaangashan, kaas oo faahfaahin dheeraad ah ku daraya inta uu Cumar u soo daliishaday Abuu Bakar.

أمرت أن أقاتل الناس حتى يشهدوا أن لا إله إلا الله وأن محمدا رسول الله
ويقيموا الصلاة ويؤتوا الزكاة فإذا فعلوا ذلك عصموا مني دماءهم وأموالهم إلا
بحق الإسلام وحسابهم على الله

13 Saxiix Muslim, xadiiska: 32.

"Waxaa la i faray in aan dadka la dagaallamo inta ay ka qirayaan *laa ilaaha illallaah Muxammad Rasuulullaah*, ee ay salaadda ka oogayaan sakadana ka bixinayaan. Haddii ay sidaa yeelaan, waxa ay iga dhowrteen dhiiggoodii iyo xoolahoodii, aan ka ahayn xaq Islaam, la xisaabtankoodana Alle ayaa iska leh."[14]

Sidaas oo kale, waxaa go'aankii Abuu Bakar xoojinaysay aayaddan,

فَإِذَا انسَلَخَ الْأَشْهُرُ الْحُرُمُ فَاقْتُلُوا الْمُشْرِكِينَ حَيْثُ وَجَدتُّمُوهُمْ وَخُذُوهُمْ وَاحْصُرُوهُمْ وَاقْعُدُوا لَهُمْ كُلَّ مَرْصَدٍ ۚ فَإِن تَابُوا وَأَقَامُوا الصَّلَاةَ وَآتَوُا الزَّكَاةَ فَخَلُّوا سَبِيلَهُمْ ۚ إِنَّ اللَّهَ غَفُورٌ رَّحِيمٌ ۝٥

"Marka ay dhammaadaan bilaha xurmada leh, ku dila Mushrikiinta meel kasta oo aad ka heshaan, qabsada, go'doon galiya, una fadhiista dhufays kasta, haddii ay tawbad keenaan oo ay salaadda oogaan, sakadana bixiyaan, u banneeya jidkooda—Alle waa Dembidhaaf-badane, Naxariis-badane ah."

at-Tawbah: 5

Sida aayaddan ku cad, in dagaalka laga joojiyo oo faraha laga qaado, Alle waxa uu ku xidhay: in ay tawbad keenaan, salaadda oogaan, sakadana bixiyaan. Abuu Bakar ulama

14 Saxiix Muslim, xadiiska: 36.

dagaallamayn in ay carqaladeeyeen dhaqaalihii dawladda —sida ay ku doodaan dadka qaar aragtiyo quruumo kale oo aysan fahansanayn ka soo dibiray—, maxaa yeelay, khasab ma aha in sakada loo eego dawladda e, qofku isaga ayaa toos u siin kara dadkii loogu talagalay: masaakiinta, fuqarada, kuwa sakada ka shaqeeya, kuwa diinta lagu soo dhoweynayo, xoraynta addoomaha, furdaaminta kuwa daynta lagu leeyahay, ku bixinta jidka Alle (jihaadka, iwm), iyo qofka socotada ah ee sahaydii ka go'day. Sakada inta la ururiyo ayaa loo qaybin karaa dadka mutaysatay ee isla degaankaas laga soo ururiyey jooga.

Cumar RC marna kama hadlin dadkii riddoobay ee diinta ka baxay, ee waxa uu Abuu Bakar RC kala hadlayey waa kuwii Muslimiinta ahaa, laakiin, diidey in ay bixiyaan sakadii. Waxaa la yaab ah, in dadka qaar intan u soo daliishadaan in aan qofkii riddooba waxba loo raacanayn. Waxa aad arkaysaa iyaga oo ku dacwoonaya in Cumar uu Abuu Bakar ku diidey la dagaallanka dadkii riddoobey. *Nin daad qaaday xumbo cuskay*. Kuwii sakada bixinteeda diidey qudhooda Cumar waxa uu ku raacay Abuu Bakar. Cumar waxa uu yidhi: markii aan arkay sida uu Abuu Bakar ugu qanacsan yahay la dagaallanka dadkan, ayaa aan gartay in ay sax tahay oo aan ku qancay.

Salaadda iyo soonku waa lammaane aan marna kala hadhin, sida Qur'aanka iyo Sunnaduba caddeeyeen. Waa labo ka mid ah shanta tiir ee ay diintu ku taagan tahay. Sakada oo tiirkii saddexaad ah haddii ay diideen, oo loo daayo, maxaa xigi karey? Abuu Bakar waa uu diidey in isaga oo taladu ay gacantiisa ku jirto Islaamka marba in la buriyo, oo la rifo, ilaa magac mooya e, aan wax kale ka hadhin.

Abuu Bakar RC waxa uu diyaariyey ciidammo kala duwan oo ku duula dadkii diinta ka riddoobey, iyo kuwii sakada diidayba. Waxaa la sheegaa in ay ahaayeen 11 ciidan[15]. Ciidanka ugu muhiimsan waxaa watey Khaalid ibnul Waliid RC, muddo koobanna guulo badan ayaa uu ka soo hooyey muhimaddii loo xilsaaray. Qabiilooyin badan baa Islaamkii ku soo noqday, shaydaannadii durbaanka u garaacay ee madaxnimada raadinayeyna, waxaa laga dhigay mid fiigay, mid la diley, iyo mid la soo qabtay. Qabiilooyinkii laayey intii ku adkaysatay islaamnimadoodiina, Abuu Bakar waxa uu Khaalid faray in uu Muslimiintaas si fiican ugu soo aargudo, waana uu fuliyey amarkaas.

Reerahan mid ka mid ah markii Khaalid birta ka aslay, baa ay Abuu Bakar wefdi u soo dirsadeen iyaga oo heshiis raadinaya. Abuu Bakar waxa uu kala doorransiiyey dagaal lagu xaalufiyo iyo heshiis dullayn ah. Dagaalka garannay e, waa maxay ta kale? Ayaa ay weydiiyeen. Qodobbadii Abuu Bakar sheegay waxaa ka mid ahaa: in hubka iyo gaadiidka laga dhigo, in wixii ay hanti Muslimiinta ka qaadateenna ay soo celinayaan, Muslimiintii ay dileenna magtoodii ay bixiyaan, kuwii laga dileyna naar ay galayaan oo aan mag laga siinayn—dabadeedna ay xoolahooda baadiyaha ku raacdaan, ilaa ay Muslimiintu go'aan kale ka gaadhaan, oo haddii ay wanaag ku joogaan la cafiyo, haddii kalena loo raadiyo xal kale.

Abuu Bakar Muslimiintii baa uu qodobbadan u soo bandhigay, waana lagu raacay, wixii aan ka ahayn in ay mag ka bixiyaan Muslimiintii ay dileen. Cumar waxa uu yidhi, "Dadkii innaga dhintay amar Alle ayaa ay u dagaallamayeen,

15 Albidaayah wan Nihaayah, 7/22-23.

ajarkoodana Alle ayaa siinaya oo wax mag ah ma laha." Saxaabadii kalena sidii Cumar ayaa ay dhaheen.

Qabiilooyinkii riddoobay waxaa ka mid ahayd Banuu Tamiim[16]. Bilowgii waa ay kala qaybsameen oo qaarkood islaamnimadoodii ayaa ay ku adkaysteen, sakadiina waa ay bixiyeen. Qaar kale waxa ay sugayeen bal dhanka wax u dhacaan oo tallaabo ma aysan qaadin. Qaarna waa ay riddoobeen oo gaalnimo ayaa ay mar kale caddaysteen. Iyaga oo sidaa u kala qaybsan, ayaa waxaa u timid haweenay Sajaax lagu magacaabo oo nebinimo sheeganaysa, wadatana ciidan ay leedahay Abuu Bakar baa aan ku duulayaa. Sajaax waxa ay reer Banuu Tamiim ku qancisay in ay raacaan, arrintaas oo uu kaalin weyn ka qaatay Maalik ibnu Nuwayrah, oo madaxdii reerka ka mid ahaa.

Ciidankeedii iyo ciidankii Banuu Tamiim iyada oo wadata, ayaa ay damacday in ay Musaylamah weerarto, oo ay dhulkiisi qabsato. Tani waxa ay u suuragalinaysay in ay hesho ciidanka laxaadka leh ee Musaylamah, iyo dhaqaalaha degaankiisa yaalla—waxa uu ka talinayey dhul ballaadhan oo beeraley ah.

Musaylamah markan waxaa duullaan ku ahaa ciidankii Abuu Bakar diray, oo ay hoggaaminayeen Thumaamah ibnu Uthaal iyo Cikrimah ibnu Abii Jahal. Intii uu labo ciidan u babacdhigi lahaa, Musaylamah waxa uu iska laaluushay Sajaax—waxa uu u ballanqaaday hantidii ay markii hore Nebiga scw u geyn jireen. Sajaax iyo Musaylamah waxa ay go'aansadeen in ay kulmaan si ay heshiiskoodii u dhammaystiraan. Kulankii waxa uu ku dhammaaday labadii

16 Albidaayah wan Nihaayah, 7/28-32.

qof ee nebinimada sheeganayey in ay isguursadaan. Waxaa la sheegaa in Musaylamah meher ahaan Sajaax u siiyey, in uu tolkeeda ka cafiyey salaadaha cishe iyo subax! Hantidii markii ay gacanta ku dhigtay, muddo ka dib ayaa waxaa soo gaadhay in Khaalid ku soo foolleeyahay Yamaamah iyo degaankii Musaylamah, ka dibna meeshii ay markeedi horaba ka timid baa ay ku noqotay![17]

Maalik ibnu Nuwayrah waxa aad mooddaa in uu dan kale ka lahaa Sajaax. Waa uu ka xumaaday xidhiidhkii iyada iyo Musaylamah dhex maray.

Khaalid oo hawlihii loo diray soo fuliyey, ayaa ka war helay in Maalik iyo tolkiisi ay joogaan meel aan ka fogeyn. In kasta oo aysan muhimaddiisi ku jirin, waxaa u muuqatay fursad aan mudnayn in la dayaco. Saxaabadii qaar baa ka hadhay markii hore, laakiin, markii uu ka tagey ayaa ay aragtidoodii beddeleen oo ay ka dabo tageen. Markii uu degaankii gaadhey waxa uu u diray dad la soo hadla, waana ay ku guuleysteen in ay qanciyaan, oo waxaa Khaalid u yimid odayaashii Banuu Tamiim, oo muujinaya in ay riddadii ka noqdeen una hoggaansamayaan talada khaliifka, ayna bixinayaan sakadii ay markii hore diideen.

Waxaa ka hadhay Maalik ibnu Nuwayrah oo aan isagu weli go'aan qaadan, waxaana soo qabtay ciidankii Khaalid isaga iyo intii ku hadhayba. Saxaabadii waxa ay isku qabteen in dadkani Muslimiin yihiin iyo in kale. Abuu Qataadah, al-Xaarith ibnu Ribcii RC, isagu waxa uu yidhi waa ay tukadeen, kuwo kalena waxa ay sheegeen in aysan aadaan iyo salaad toona ku arkin dadkan.[18]

17 Albidaayah wan Nihaayah, 7/30.
18 Diraasah Naqdiyah, 1/532.

Markii hore ee ay Banuu Tamiim soo islaameen, sakadooda waxaa u xilsaarnaa Maalik ibnu Nuwayrah, isaga ayaana diidey bixinteeda markii uu geeriyooday Nebigu scw. Sidaas oo kale waa kii raacay Sajaax ee tolkiisana ku dhiirrigaliyey in ay raacaan 'nebiyaddan cusub'. Markii odayaasha reerku Khaalid u yimaaddeenna waa uu ka hadhay.

Kutubta taariikhdu waxa ay qoraan warar iskahorimanaya marka ay ka hadlayaan wixii dhex maray Khaalid ibnul Waliid iyo Maalik ibnu in Nuwayrah. Qaar[19] waxa ay tilmaamayaan in markii la isku khilaafay in ay addimeen ama tukadeen, uu Khaalid amray in la xidho ilaa arrintooda go'aan laga gaadhayo. Ka dibna habeenkaas oo ay dhaxan aad u darani dhacaysay, uu Khaalid askartiisi qaar ka mid ah ku yidhi hadal dhaliyey in ay maxaabiistii laayaan. Hadalkiisa waxaa lagu fasiri karaa "maxaabiista hala dedo/diiriyo.", laakiin ereyga Carabiga ah ee أدفئوا (*adfi'uu*) degaankaas waxaa looga yaqaanney macnaha ereyga أقتلوا (*aqtuluu*), oo ah dila. Kala duwanaanshahan lahjadeed ayaa dhaliyey Maalik iyo dadkii lala soo qabtay in qaarkood la dilo. Abuu Qataadah waxa dhacay waxa uu ku eedeeyey Khaalid, isaga oo leh adiga ayaa ka masuul ah dilkooda.

Ilo kale waxa ay tilmaamayaan in Khaalid iyo Maalik ay doodi dhex martay, ka dibna uu Maalik yidhi hadal uu Khaalid u arkayey riddo iyo gaalnimo uu dil ku mutaystay, dabadeedna uu ku xukumay dil, sidaana lagu diley. Kuwo kalena waxa ay qoraan waxyaalo aan macquul ahayn, sida: in Khaalid madixii Maalik ka dhigtay dhardhaar, timihiisina xaabo, oo uu hilib ku dul karsaday! Timaha hilibka xaabada

19 Diraasah Naqdiyah, 1/533.

u noqonayaaba wax lala yaabo ah.

Si ay ku dhacdayba, saxaabadii Khaalid la socotay raalli kama noqon dilka Maalik, waxa ayna u arkayeen in uu ku degdegay go'aanka—waa haddii aynu qaadanno ilaha tilmaamaya in hadal dhex maray dartii loo diley—ayna ahayd in uu u kaadiyo ama uu Abuu Bakar iyo Madiinah u gudbiyo. Dilka Maalik waxaa sii foolxumaysay in Khaalid guursaday xaaskii Maalik laga diley! Tan ayaa cid kastaa ka booddey.

Cumar RC waxa uu ku jirey dadkii aadka uga cadhooday falkii Khaalid ku kacay. Waxa uu Abuu Bakar RC kula taliyey in uu awoodda Khaalid xadeeyo, isaga oo ku dacwoonaya, "Seefta Khaalid hubsasho ma leh." Abuu Bakar RC dadka uu hawl u dirayo waxa uu si guudmar ah ugu tilmaami jirey hawsha laga rabo, waana uu la dardaarmi jirey, laakiin xorriyad ayaa uu u siin jirey faahfaahinta hoose ee la xidhiidha fulinta. Sidaas ayaa uu Cumar u leeyahay awoodda Khaalid xad u samee.

Cumar rabitaankiisu kuma koobnayn in awoodda Khaalid la xaddido oo keli ah, ee waxa uu aad ugu celceliyey Abuu Bakar in uu talada ciidanka ka casilo. Laakiin Abuu Bakar kama yeelin. Isaga oo adeegsanaya tilmaantii Nebigu SCW ku sheegay Khaalid RC maalintii Mu'tah, waxa uu Abuu Bakar yidhi, "Galka galin maayo seef Alle ku siibay gaalada."

Abuu Bakar raalligalin ayaa uu ka bixiyey wixii dhacay, magtii Maalikna waa uu dhiibey, Khaalidna Madiinah in uu yimaaddo ayaa uu ku amray. Markii uu Khaalid yimid ee uu ka warramay wixii dhacay, sheegtayna sababihii ku kallifay, Abuu Bakar aad baa uu u canaantay, laakiin ma casilin,

cudurdaarkiisina waa uu aqbalay. Ka dibna Musaylamah ciidankii ku maqnaa ee aan wax guul ah ka soo hoyn ayaa uu ka dabo diray.

Dhacdadan sheekhooyinka laga soo weriyo waxaa ka mid ah: in markii Cumar ka war helay waxa dhacay uu yidhi, "Cadowgii Alle waxa uu ku xadgudbay qof Muslim ah, ka dibna inta uu diley ayaa uu xaaskiisi koray!" Kolkii Abuu Bakar u yeedhayna, waxa uu Khaalid yimid isaga oo dirayskiisi dagaalka xidhan, oo ay cimaamaddiisa madaxa ugu duuban ka soo taagan yihiin leebab. Markii uu Masjidka soo galay ayaa Cumar arkay, oo inta uu ku kacay leebabkii ka siibay ka dibna kala jabiyey—isaga oo dhahaya: ma istusnimo ayaa aad qof Muslim ah u dishey, dabadeedna u kortay xaaskiisi?, isaga oo weliba ugu dhaaranaya in uu dhagax ku dili doono![20]

Wararka dhacdadan faahfaahinayaa ma aha kuwo xadiis ahaan sugan oo kalsooni lagu qabo. In ay dhacday shaki kama taagna, laakiin sidii ay wax u dhaceen iyo faahfaahinteeda, sababihii keenay, iyo kaalintii Khaalid toona wax sugan lagama hayo. Sidaas awgeed, ma habboona in axkaam laga soo dhiraandhiriyo, ama sharafta saxaabada wax lagu yeelo warar aan sugnayn.

Waxaase hubaal ah, in aan Abuu Bakar RC cafiyeen haddii uusan cudurdaar meelmar ah haysan. Cumarna markii uu arkay in Abuu Bakar cafiyey ayaa uu iska daayey, taas oo ay keenayso dhowridda kaladambaynta iyo qaddarinta qofka kaa sarreeya. Si aysan meeshu fawdo u noqon, qofku waxa uu ku khasban yahay in uusan dareenkiisa iska raacin e, uu dhowro kaladambaynta iyo sida loo kala amar sarreeyo.

20 Diraasah Naqdiyah, 1/534.

Dhanka Abuu Bakar, waxaa laga yaabaa in uu ka dabqaadanayey dhacdo tan la mid ah, oo isla Khaalid ku kacay markii Makah la furtay. Guutadii ciidanka ahayd ee uu watey markii ay dadkii loo diray gaadheen, kana gacan sarreeyeen, ayaa ay muslimeen. Laakiin halkii ay dhihi lahaayeen 'waanu muslimnay' ama shahaadada qabsan lahaayeen, waxa ay dhaheen, "*Saba'naa.*" Ereygan Mushrikiinta ayaa u adeegsan jirey qofkii Muslim noqda.

Khaalid kuma qancin in ay islaameen, saxaabadii la socotay qaarkii la taliyeyna ma dhegaysan e, dadkii qaar ayaa uu amray in la dilo[21]. Nebigu SCW markii uu ka war helay waxa dhacay, aad baa uu uga xumaaday, oo waxa uu dhahayey, "Allow bari' ayaa aan ka ahay waxa Khaalid sameeyey," dadkii la diley iyo hanti waxyeellowdayna waa uu magdhabay. Laakiin Nebigu SCW ma casilin Khaalid.

Khaalid RC waxa uu soo islaamay goor dambe, waqti badanna lama qaadan Rasuulka SCW. Waxa uu ahaa dagaalyahan aan tabaha iyo xeeladaha dagaalka lagu gaadhin, oo guulo badan soo hooyey. Laga bilaabo markii uu soo islaamay ilaa geeridiisina, inta uusan dagaal ku jirin waa ay koobnayd. Waxaana muuqata in Nebiga SCW iyo Abuu Bakar RC ay isu miisaameen gefafka ka dhacay iyo degdeggiisa badan, iyo maslaxadda ku jirta awooddiisa dagaal, ayna maslaxaddu ka badnayd gefafkan kooban.

Runtii, waxa aan dhihi karnaa, Alle SWT gargaarkiisa ka sokow, go'aan adayggii Abuu Bakar RC ee uu diiday in uu wax la-saayiraad ah la galo dadkii riddoobey iyo kuwii sakada diidey, iyo seeftii kululayd ee Khaalid RC ee dadka argagaxa galisay, ayaa lagu badbaaday—dad badan oo xaqii

21 Albidaayah wan Nihaayah, 7/32.

ka leexdayna ku soo celiyey, kuwii waswaasku galayna ku sugay jidka toosan.

Cumar iyo Khaalid isma raaci karin, oo waxa ay ahaayeen labo nin oo dab ka karayo. Laakiin, degganaanta Abuu Bakar waxa ay dheellitir u noqon kartey degdegga Khaalid, halka Cumar uu ka doorbidayey Abuu Cubaydah, Caamir ibnul Jarraax RC oo ka degganaan badnaa Khaalid. Laakiin Abuu Cubaydah iyo Abuu Bakar isma raaci karin.

Abuu Bakar RC siyaasaddiisu waxa ay ahayd: in aan Islaamku hoos uga dhicin heerkii uu marayey markii uu geeriyooday Rasuulku SCW. Waxa kale oo uu go'aansaday in uusan hannaankii siyaasadeed ee Nebiga SCW waxba ka beddelin e, uu sidii wax kastaa u socdeen u sii wado. Cumar RC waa uu ka siyaasad duwanaa, oo waxa ay siyaasaddiisu ku dhisnayd in wixii dantu ku jirto la eego, sida aan ku arki doonno markii ay noqotay in Qur'aanka qoraalkiisa hal meel la ururiyo.

Waxa aad mooddaa in midkoodba xilligii uu ku habboonaa uu talada qabtay, oo haddii Cumar uu Khaliif ahaan lahaa xilligii riddada, uusan guushii Abuu Bakar oo kale soo hooyeen, haddii Abuu Bakar khaliif ahaan lahaa xilligii Cumarna, aysan dhisanteen dawladdii uu Cumar dhisay.

Al-Yamaamah[22]

Musaylamah oo isagu Nebiga SCW oo nool yidhi nebinimada ayaa aan kula wadaagaa, dad badan oo tolkii ahina ay raaceen, oo ay diintii ka riddoobeen, waxaa la sheegaa in uu

22 Albidaayah wan Nihaayah, 7/32-37.

haystay ciidan gaadhaya afartan kun (40, 000).

Abuu Bakar RC waxa uu diray ciidan uu hoggaaminayey Cikrimah ibnu Abii Jahal RC, kaas oo uu amar ku siiyey in aysan dagaal galin ilaa ciidanka labaad soo gaadho. Ciidanka labaad waxaa hoggaaminayey Shuraxbiil ibnu Xasanah RC. Cikrimah ma sugin e, ciidankii Musaylamah oo in badan ka awood badan ayaa uu dagaal ku qaaday, laakiin guuldarro ayaa ka raacday, dhawrkii kun ee dagaalyahan ee uu wateyna halis weyn ayaa uu galiyey. Degdeggani waxa uu keenay in ciidankii Cikrimah kala firdhay markii laga awood batay. Shuraxbiilna gefkii oo kale ayaa uu ku dhacay waana laga adkaaday.

Dilkii Maalik ibnu Nuwayrah ka dib, ayaa Khaalid laga soo dabo diray labadii ciidan ee Cikrimah iyo Shuraxbiil—isaga ayaa isku habeeyey, guutooyinna u kala sameeyey. Taliyeyaashii guutooyinkan waxaa ku jirey Sayd ibnul Khaddaab RC oo ka weynaa Cumar.

Dagaal adag oo aan hore loo arkin baa la galay. Ciidankii Muslimiintana waa laga gacan roonaaday markii hore, ilaa ciidankii Musaylamah ay galeen teendhadii Khaalid, oo ahaa taliyaha ciidanka Muslimiinta.

Waxba lalama hadhin; jid kasta oo ciidanka lagu guubaabin karey ayaa loo maray. Koox-koox baa la isu dhaarsaday, si loo arko cidda dhankeeda laga soo dhaco. Sayd ibnul Khaddaab markii uu ciidankiisi dhiirrigalin u dhammeeyey, ee ay caddaatay in aan hadal dambe hadhin, waxa uu ku dhaartay in uusan mar dambe hadlin ilaa uu Alle kala kulmo! Shahaado ayaa uu isu diyaariyey, ka dibna ciidankii Musaylamah ayaa uu gunto u galay ilaa uu ka shahiiday.

In badan ayaa uu raadinayey shahaado, oo maalintii Beder baa Cumar siiyey diraca birta ah ee dagaalka loo xidho, laakiin waa uu diidey isaga leh waxa aan rabaa in aan shahiido. Markii ay isku celceliyeen cabbaar, midkoodna ma xidhan e, la'aantiis baa ay dagaalkii Beder ku galeen. Dagaalkan Yamaamah Sayd waxa uu sidey calankii Muhaajiriinta, waxaana markiiba kala wareegay Saalim mawlaa Abii Xudayfa RC—oo ka mid ahaa xufaaddii afarta ahayd ee Qur'aanka ha laga barto uu yidhi Nebigu SCW. Saalim waxa uu qotay god uu qaarka dambe la galay, si wax kasta oo dhaca uusan goobtiisa uga dhaqaaqin.

Dagaal ba'an oo labada dhinacba aad ugu le'deen ka dib, beenaalihii Musaylamah waa la diley, ciidankiisina halkaas ayaa lagu jabiyey, guushiina ay ku raacday Muslimiinta. Intii ka dhimatay mooyaan e, intii kale waa ay tawbad keeneen, riddadiina waa ay ka noqdeen.

Abuu Maryam al-Xanafii ayaa diley Sayd ibnul Khaddaab, laakiin markii dambe waa uu tawbad keenay, khilaafadii Cumarna mar ayaa garsoore looga dhigay magaalada Basrah[23]. Cumar aad ayaa uu u jeclaa walaalkii Sayd, geeridiisuna aad ayaa ay u murugo galisay, "Wuu iga hor islaamay, wuuna iga hor shahiiday," ayaa uu Cumar odhan jirey, marka uu walaalkii xusuusto. Wiilashiisana labo ayaa uu u bixiyey magaca Sayd. Dabayl marka ay bari ka soo dhacdaba, waxa uu odhan jirey: caraftii Sayd baa aan dareemayaa. Dhanka Bari waxaa Madiinah ka xigta goobtii Sayd ku aasnaa iyo degaankii Yamaamah (hadda waa duleedka waqooyi ee caasimadda Sucuudiga, Riyaad).

23 Albidaayah wan Nihaayah, 7/49; Dabaqaatul Kubraa: Abuu Maryam al-Xanafii.

Isaga oo sidaa u jeclaa, haddana, ninkii diley ayaa uu madax ka dhigay oo uu magaalo dhan garsoorkeedii u dhiibay! Dareenka Cumar waxaa hagaysay diinta, oo sheegtay in ay tawbaddu baabi'iso wixii ka horreeyey, qofkana aan loo qabsan karin.

Dagaalkii Yamaamah Muslimiintii ku shahiidday waxaa lagu qiyaasaa inta u dhexaysa lix boqol ilaa toddobo boqol (600–700), oo ay ka mid ahaayeen saxaabo badan oo xufaaddii Qur'aanka ah.

Guud ahaan, dagaalladii lala galay dadkii diinta ka riddoobey waxa ay socdeen ilaa hal sano. Goob kastana Muslimiinta ayaa ku guuleystay, ilaa Jasiiradda Carabtu u hoggaansantay Islaamka, oo Muslim iyo cid Islaamka ku hoos nool mooyaan e, aan cid kale joogin.[24]

Guushii Yamaamah ka dib, Abuu Bakar waxa uu Khaalid amray, in maadaama Jasiiraddii Carbeed Islaamku ka taliyo, uu Ciraaq aado oo uu diinta ugu yeedho—haddii ay Islaamka qaadan waayaanna uu jisyo (cashuur) kula heshiiyo, haddii ay diidaanna uu la dagaallamo.[25]

Sidaas ayaa uu Ciraaq u dhex qaaday isaga oo diinta ugu yeedhaya, intii nabad rabtana heshiis la galaya, kuwii ka horyimaaddana la dagaallamaya… Waxa uu gaadhey xuduudda hadda u dhexaysa Ciraaq iyo Suuriya—halkaas oo uu dagaal culus kula galay, kagana guuleystay, is-huwan ballaadhan oo Roomaan, Faarisiyiin, iyo Carab isugu jirtey.[26]

24 Albidaayah wan Nihaayah, 7/43.
25 Albidaayah wan Nihaayah, 7/62.
26 Albidaayah wan Nihaayah, 7/78.

Intii uu Khaalid RC ka dagaallamayey Ciraaq, Abuu Bakar RC waxa uu qorshaynayey in Shaamna lagu duulo, oo inta Roomaanka laga saaro diinta lagu faafiyo. Waxa uu diyaariyey afar ciidan. Ciidan uu hoggaaminayey Yasiid ibnu Abii Sufyaan RC oo Dimishiq u jeeda; ciidan uu hoggaaminayey Abuu Cubaydah Ibnu Jarraax RC oo Xums u jeeda; Camr ibnul Caas RC iyo ciidan uu hoggaaminayey oo Falasdiin u jeeda, iyo Shuraxbiil ibnu Xasanah RC oo hoggaaminayey ciidan u jeeda Urdun.[27]

Afartan taliye hortood, waxa uu Abuu Bakar ciidamadan midkood hoggaamintiisa u magacaabay Khaalid ibnu Saciid ibnul Caas RC—oo ka mid ahaa shaqaalihii uu Nebigu SCW u diray Yaman, kana soo laabtay geeridiisi ka dib. Khaalid waxa uu Madiinah soo galay isaga oo xidhan jubbad diibaaj (xariir) ka samaysan. Cumar baa arkay Khaalid oo maradan quruxsan ee qaaliga ah ku xarragoonaya. Dadkii ka ag dhowaa ayaa uu u dhawaaqay oo uu amray in ay ka jeexjeexaan oo ay gubaan! Cumar waxa uu ahaa garsoore, oo Abuu Bakar ayaa u magacaabay, amarkiisuna waa uu fulayey. Khaalid kax baa uu xanaaq la noqday, markaas ayaa waxa uu Cali oo joogey ku yidhi, "Abu Xasanoow, madaxnimadii miyaa la idiin ka xoog batay reer Cabdimanaafoow!" Cali RC waxa uu ugu jawaabay in aysan ahayn loollan qabiil ee ay tahay khilaafo.

"Aamus afka Alle ku gooye!" ayaa uu Cumar ku yidhi, isaga oo weliba maagitaan kale ugu sii daraya. Sidaa kagama uusan hadhin e, wixii dhacay ayaa uu Abuu Bakar u sheegay, laakiin Abuu Bakar waxba kama soo qaadin xilligaas. Maalintii ciidanka loo dhiibay ayaa Cumar mar

27 Albidaayah wan Nihaayah, 7/83.

kale Abuu Bakar la hadlay, sidaas ayaana looga casilay ciidankii Shaam. Laakiin waxaa loo dhiibay guuto taageero u noqota afarta ciidan ee kale, waxaana la fadhiisiyey meel Taymaa' la dhaho oo meeldhexaad ahayd.

Cumar ma aqoon islaweynida, dadka islaweyn ee kibrana waa uu necbaa. Qofkii uu in yar oo islaweyni iyo iscajabin ah ka dareemo, waxa uu ku dadaali jirey in u dhulka cagaha u dhigo, oo uu kibirka iyo santaagga ka saaro—mid uu shaabuugeeyo, mid uu timaha ka xiiro—.

Roomaankii markii ay duullaankii ka war heleen, waxa ay diyaariyeen ciidammo aad u badan oo ay meel kasta ka soo ururiyeen. Afartii ciidan ee Abuu Bakar RC degaannada kala duwan u dirayna waa ay isu yimaaddeen, laakiin weli aad ayaa looga tiro badnaa.

Dabadeedna, Abuu Bakar ayaa ay qayladhaan u dirsadeen, isaguna saxaabadii ayaa uu la tashaday, waxaana go'aankii noqday in Khaalid laga diro Ciraaq, oo uu afarta ciidan ee Shaam loo diray la wareego intiisana ku xoojiyo[28]. Sida Imaam Dabarii iyo Ibnu Kathiir soo tebiyeen, Khaalid markii uu warqadda akhriyey waxa uu wareejintan Ciraaq laga beddelay ku eedeeyey Cumar, "Kani waa samayntii Gurey. Waxa uu iga xaasidayaa in aan furashada Ciraaq masuul ka noqdo!"[29]

Si kastaba ha ahaato e, Khaalid degdeg ayaa uu u baxay, ciidankiina waxa uu ka dusiyey jid saxare ah oo aan cidi marin. Dhawr maalmood ka dibna labadii ciidan oo ish-orfadhiya ayaa uu u yimid, halkaas oo uu kula wareegay

28 Albidaayah wan Nihaayah, 7/78.
29 Halkuun.

hoggaankii ciidankii Muslimiinta ee afarta taliye kala wateen, waxa uuna ka dhigay hal ciidan oo israacsan.

Ururintii Qur'aanka[30]

Qur'aanku waa uu wada qornaa xilligii Nebiga SCW, laakiin, hal meel laguma ururin, suuradihiisuna ma habaysnayn. Saxaabadu waxa ay ahaayeen mid Qur'aanka xidfiyey iyo mid meel ku qortay.

Saxaabo badan oo ka mid ahaa xufaaddii Qur'aanka, ayaa ku shahiiday dagaalkii Yamaamah ee lala galay Musaylamah. Waxaa ku jirey Saalim mawlaa Abii Xudayfah RC, oo ka mid ahaa saxaabadii uu Nebigu SCW ku taliyey in Qur'aanka laga akhristo.

Cumar RC waxa uu dareemay in haddii ay xaaladdu sidan ku socoto, xufaaddii Qur'aanku ay dagaal ku madhan doonaan, taasina ay keeni karto in Qur'aankii kala lumo. Cumar waxa uu arrintii u geeyey Khaliifkii Rasuulka Alle SCW, Abuu Bakar RC—waxa uuna ku yidhi: waxa aan ku talinayaa in aad amarto ururinta Qur'aanka. Maadaama uusan Rasuulku SCW xilligiisi arrintan oo kale ku dhaqaaqin, Abuu Bakar waa uu ka biyadiiday in uu sameeyo wax uusan Rasuulku SCW samayn.

In aan Nebigu SCW ururin Qur'aanka ma tusinayso in aan la oggolayn, oo ficilka Nebiga SCW toos loogu xambaari maayo waajibnimo, wixii uu ka tageyna lagu xukumi maayo xaaraantinimo, haddii aysan la socon qariino tusinaysa xukunka falkaas. Sidaas awgeedna, maadaama aysan jirin wax daliil naqli (Qur'aanka iyo Sunnada) ah

30 Albidaayah wan Nihaayah, 7/79; Fatxul Baarii, 11/165-184; Diraasah Naqdiyah, 1/524-527.

ama caqli ah oo diidaya, ayse jiraan waxyaalo halis ku ah dhammaystirnaantii Qur'aanka, oo haddii aan la ururin ay ka dhalan karto in qaarkii lumo, Cumar waa uu ku dhabar-adaygay in uu Abuu Bakar ku qanciyo, mana dayn ilaa uu ku guuleystay—isaga oo ururinta Qur'aanka tilmaamayana waxa uu ku lahaa, "Arrinkani, wallaahi, waa khayr."[31]

Markii ay fikraddii Cumar ka dhaadhacday ee uu aqbalay, Abuu Bakar waxa uu dalbay in loo yeedho Sayd ibnu Thaabit RC. Ka dibna fikraddii Cumar soo jeediyey ayaa uu la wadaagey, isaga oo u raacinaya, "Waxaad tahay nin dhalinyaro ah oo caqli badan, xumaanna kugu tuhmi mayno oo waxaad waxyiga u qori jirtey Rasuulkii Alle SCW, ee Qur'aanka dabagal ku samee oo soo ururi."

Sayd masuuliyaddan waxa uu ku tilmaamay in ay uga fududaan lahayd in ay u xilsaaraan buur dhan in uu meesheedii ka raro. Qur'aanka isu ururintiisu ma sahlana, haddii qofku dareensan yahay Qur'aanku waxa uu yahay iyo ahmiyadda uu leeyahay. In uu Sayd masuuliyaddaas qaado waxaa ka dhalanaysa in cid kasta oo ka dambaysaa ay tixraacdo qoraalkii uu diyaariyey. Waxaa isna ku soo dhacday su'aashii uu Abuu Bakar weydiiyey Cumar, oo waxa uu yidhi, "Sidee ayaad u samaynaysaan wax uusan samayn Rasuulkii Alle SCW?" taas oo Abuu Bakar kaga jawaabay intii Cumar isaga ku qanciyey, "Arrinkani, wallaahi, waa khayr."

Cumar waxa uu ku guuleystay in uu Abuu Bakar si fiican uga dhaadhiciyo aragtidiisi ahayd in Qur'aanka hal meel lagu ururiyo, ilaa heer Abuu Bakar qudhiisu u dooday, isaga oo isla hadalkii Cumar adeegsanaya—isna waa uu ku

31 Fatxul Baarii, 11/170.

guuleystay in uu Sayd ku qanciyo fulinta hawshaas.

Markii uu Nebigu scw Madiinah u hijrooday, ayaa loo keenay Sayd oo agoon ah da'diisuna tahay 11 jir, siina bartay 17 suuradood. Nebiga scw ayaa uu ku dul akhriyey, Suubanuhuna scw waa uu u bogey fariidnimadiisa. Isaga oo yar ayaa uu Nebigu scw faray in uu barto afkii Yahuudda, kaas oo uu bil badhkeed ku bartay, ka dibna isaga ayaa waraaqaha u qori jirey.

Sayd waxa uu ku jirey saxaabadii Qur'aanka qori jirtey. Waxaa kale oo uu ka mid ahaa culamadii saxaabada, isaga oo aad ugu xeeldheeraa Qur'aanka iyo aqoonta dhaxalka. Nebiga scw waxaa laga soo weriyey in uu yidhi: ummaddayda waxaa aqoonta dhaxalka ugu badiya Sayd. Afartii saxaabi ee garsoorka caanka ku ahaa ayaa uu Sayd ka mid ahaa—saddexda kalena waa Cumar, Cali, iyo Cabdullaahi ibnu Mascuud. Sayd marka uu heerkan joogo, masuuliyadda intan le'egna loo xilsaarayo, waxa uu jiraa 22 ama 23 sano.

Abuu Bakar RC waxa uu sheegay afar qodob oo uu daraaddood u xushay Sayd: dhalinyaranimo, caqli badni, ammaano, iyo in uu Qur'aanka hore u qori jirey. Ibnu Xajar[32] oo ka faalloonaya qodobbadan Abuu Bakar adeegsaday, waxa uu yidhi: dhalinyaranimadu waxa ay leedahay firfircooni, xamaasad, dadaal, karti iyo hawlkarnimo dheeraad ah. Caqliga iyo garaadka wanaagsanina waxa ay qofka siiyaan awooddii garasho ee uu ku fulin lahaa hawsha u taalla. Qur'aanku waa waxyigii Alle u soo dejiyey hanuunka dadka,

32 Fatxul Baarii, 11/169.

waana in aan wax shaki ahi ka imaan sugnaanta aayadihiisa. Sidaas awgeed waa lamahuraan in qofka ururintiisa loo igmanayaa, uu noqdo qof hufan oo aan cidina xumaan ku tuhmayn, laguna aamini karo in uu xilkan sida ugu heerka sarraysa u guto. Qodobka afraad ee Abuu Bakar tilmaamay waa in Sayd hore u qori jirey Qur'aanka, sidaas awgeedna, uu khibrad dheer yahay dadka kale.

In kasta oo ay joogeen saxaabo badan oo hawshan lagu aamini karo, kuwo qoritaanka waxyiga khibrad u lahaa, kuwo dhalinyaranimo iyo caqli ku tilmaannaa—Sayd ayaa wada kulansaday tilmaamihii dadka kale ku dhex yaacsanaa.

Waa waajib diini ah iyo lamahuraan maamul wanaag, in hawsha loo dhiibo qofka ugu habboon fulinteeda, taas oo ka dhalanaysa in la ogaado waxa ay u baahan tahay, ka dibna loo raadiyo qofka sida ugu wanaagsan u dabooli kara baahiyaha hawshaas.

Sayd markiiba hawshii ayaa uu bilaabay, oo cid kasta oo Qur'aan meel ku qoran haysay, ama Qur'aan xifdisanayd ayaa uu ka soo ururiyey. Qorshaha ay dejiyeen waxa uu ahaa in aan xifdi keli ah laga qorin, ee la helo isaga oo qoraal ah, ka dibna loo helo labo qof oo markhaati u ah qoraalkaas, si qoraallada la adeegsanayaa ay u ahaadaan kuwo Nebiga scw laga qortay, ee aan mar dambe xifdi ka iman[33]. Cumar ayaa dadka wargaliyey isaga oo ka codsanaya, "Qofkii wax Qur'aanka ka mid ah ka qaatay Rasuulka scw ha noo keeno."

Waxaa muuqata in Cumar uu la shaqaynayey Sayd, oo uu xitaa dhaarinta markhaatiyada Sayd kala qaybqaatay. Waxaana jira warar muujinaya in Sayd markii hawsha loo

33 Fatxul Baarii, 11/171.

dhiibay, uu shardi ka dhigay in Cumar la shaqeeyo[34].

Sayd markii uu ururiyey Qur'aankii uu helay oo dhan, waxaa ka dhinnaaday labada aayadood ee suuradda Tawbah u dambeeya oo uu xifdisanaa, laakiin uusan qoraalkeedii helin. Xifdigiisa kama uusan qorin, kumana darin ururintii ilaa uu baadhitaan u galay. Markii dambe waxa uu ka helay saxaabi la odhan jirey Abuu Khusaymah al-Ansaarii[35]. Markii uu Qur'aankii soo wada ururiyey, qoraalkii waxa uu u geeyey Abuu Bakar oo hayey ilaa uu ka geeriyooday, ka dibna waxa uu ku wareegay Cumar, markii uu geeriyoodayna Ummul Mu'miniin Xafsah bint Cumar RC ayaa haysay.

Waxaa muuqata in xilligii Abuu Bakar iyo Cumar toona aan loo baahan, oo uu ahaa kayd, maadaama ay dadka intooda badani xifdigooda adeegsanayeen. Laakiin markii dhulkii Muslimiintu ka talinayeen ballaadhay, ee dad badani ay diintii soo galeen khilaafadii Cusmaan RC, ayaa waxaa dhacday in Xudayfah ibnul Yamaan RC oo furinta dagaalka ee Armiiniya iyo Aderbaayjaan ka soo noqday uu khaliifkii saddexaad, Cusmaan ibnu Cafaan RC u yimid oo uga warramay dad reer Ciraaq iyo reer Shaam ah oo Qur'aanka akhrintiisi isku qabsaday, ayna lamahuraan tahay in Cusmaan ka gaadho inta aan, sidii Yahuudda iyo Kiristaanka, la isku qabsan Qur'aanka.

Markaas ayaa Cusmaan ka soo qaaday Xafsah, oo suuradihii la isku xejiyey si uu u noqdo *Musxaf* xidhiidhsan. Ka dibna nuqullo kale ayaa laga minguuriyey, gobol kastana hal nuqul oo ay ka qortaan ayaa loo diray. Guddigan cusub ee Cusmaan saaray Sayd waa uu ku jirey. Ilaa iyo maantana

34 Fatxul Baarii, 11/173.
35 Fatxul Baarii, 11/169.

waa Musxafka aynu haysanno ee aynu Qur'aanka ka akhrisanno—ururintiisuna waxa ay ka dhalatay aragtidii Cumar iyo sidii uu ugu dadaalay in Abuu Bakar fuliyo, in kasta oo uu markii hore diidey.

Sannadkan, sannadkii 12'd, Cumar waxa uu guursadey Caatikah bint Sayd ibnu Camr ibnu Nufayl RC—oo ahayd ina-adeertii la dhalatay Sayd ibnu Camr RC, oo isna qabey Cumar walaashii, Faadumo bintil Khaddaab RC. Caatikah waxaa ka geeriyooday Cabdullaahi ibnu Abii Bakar RC, oo u dhintay dhaawac ka soo gaadhay Daa'if. Cumar markii uu geeriyoodayna waxaa guursaday Subeyr ibnul Cawaam RC, isagiina waa laga diley. Ka dib ayaa Cali ibnu Abii Daalib RC soo doonay, laakiin waa ay diidday iyada oo leh in lagu dilo ayaa aan ka baqayaa! Ilaa ay ka geeriyootayna mar dambe ma aysan guursan.[36]

Xilwareejintii Abuu Bakar[37]

Abuu Bakar RC waxa uu geeriyooday sannadkii 13'd, bishii Jumaadal Aakhirah, galab Isniin ah. Isla habeenkiina waxaa lagu aasay Nebiga SCW dhinaciisa. Waxa uu ahaa 63-jir, muddadii khilaafadiisuna waxa ay ahayd labo sano iyo saddex bilood.[38]

Geeridiisu kedis ma ahayn e, waxa uu bukaan ahaa 15 maalmood oo uu Cumar hawlihii Abuu Bakar, sida tujinta salaadda, masuul ka ahaa. Abuu Bakar isaga oo dareensan wixii dhacay markii uu Nebigu SCW geeriyooday iyada oo

36 Albidaayah wan Nihaayah, 7/79.
37 Diraasah Naqdiyah, 2/547.
38 Albidaayah wan Nihaayah, 7/102.

aan ciddii beddeli lahayd la ogeyn, waxa uu bilaabay in uu inta noloshiisa ka hadhay cid ku ogaado talada Muslimiinta.

Waxa uu isugu yeedhay qaar saxaabada ka mid ah, isaga oo leh xaaladdayda waa aad aragtaan, una malaynmaayo in aan waxa i haya ka kici doono, Allena ballantii iyo baycadii aad ila gasheen waa uu idin ka furay, arrintiinina waa uu idiin soo celiyey e, amiir ka dhigta qofkii aad jeceshihiin. Waxa uu intaa u raaciyey in haddii isaga oo nool ay qof talada u magacaabaan, ay yaraanayso halista in ay gadaashii isku khilaafaan ciddii beddeli lahayd[39].

Saxaabadii waxa ay u baxeen in ay qof soo xulaan, laakiin kuma aysan guuleysan, maadaama ay cidna ku heshiin waayeen. Abuu Bakar ayaa ay taladii kula soo noqdeen, oo ay yidhaahdeen adiga ayaa aanu kugu kalsoon nahay oo aanu kuu daynay e, qof magacaw. "Ma laga yaabaa in aad isku khilaaftaan?" Ayaa uu Abuu Bakar weydiiyey. Taas oo ay kaga jawaabeen in ay go'aankiisa ku qanacsan yihiin, wixii uu go'aamiyana ay qaadan doonaan.

"Ballan Alle idin ku og yahay miyaa in aad ku raalli ahaanaysaan?" Ayaa uu Abuu Bakar ku celiyey, iyaguna, "Haa," ayaa ay ugu jawaabeen.

Waxa uu ka codsaday in ay ka war sugaan inta uu ka soo xulayo qofka ugu habboon, ee daryeeli kara maslaxadda diinta iyo dadka. Abuu Bakar isaga oo ogsoon in cid Cumar u dhigantaa aysan jirin, ayaa uu haddana wadatashi bilaabay. Waxa uu u yeedhay Cabduraxmaan ibnu Cawf RC, Cusmaan ibnu Cafaan RC, Saciid ibnu Sayd ibnu Camr RC—waa saddex ka mid ah tobankii Jannada loogu bishaareeyey—, Usayd ibnul Xudayr, iyo saxaabo kale oo

39 Manaaqib Cumar, 55.

Muhaajiriin iyo Ansaarba isugu jira. Waxa uu ka warsaday aragtidooda Cumar ku aaddan iyo in uu gudan karo xilka khilaafada. Saxaabadii Abuu Bakar la tashaday waa ay taageereen Cumar, iyaga oo u arkayey in aysan jirin cid kaga habboon booska khilaafada.

Markii ay muuqatay in ay taladii dhanka Cumar u badatay, ayaa Dalxah ibnu Cubaydillaah RC—oo isna ka mid ah tobankii Jannada loogu bishaareeyey—oo dacwo ahi u tagey Abuu Bakar, isaga oo leh Cumar oo aan madax noo ahayn ayaa na dhibay e, maxaa uu samayn doonaa marka uu taladayada gacanta ku dhigo! Dalxah waxa uu ku yidhi Abuu Bakar, "Rabbigaa maxaad ku dhahaysaa marka uu ku weydiiyo talada aad Cumar noogu diibtay, adiga oo ogsoon qallafsanaantiisa?!"

Abuu Bakar oo xanuunkii la jiifa, hadalkii Dalxana ka kululaaday, ayaa dalbaday in la fadhiisiyo—"Ma Alle ayaad igu cabsiinaysaa?" Ayaa uu yidhi, isaga oo raacinaya, "Waxaan dhahayaa: Allow, waxaan taladoodi u dhiibay dadkaaga kii u khayrka badnaa."[40]

Markii uu go'aankiisi gaadhey, Abuu Bakar waxa uu u yeedhay Cusmaan ibnu Cafaan sii u diyaariyo qoraalkii xilwareejinta. Magacaabidda Cumar ka sokow, waxa uu qoraalku ahaa dardaaran uu dadka ku boorrinayo in ay is-addeecaan oo ay kaladambaynta ilaaliyaan. Gabagabada qoraalka waxaa ku jirtey, "Haddii uu caddaalad sameeyo waa sida aan filayo kuna aqaanno, haddii uu isbeddelana, qof kastaa waxa uu leeyahay waxa uu kasbado ee dembi ah—khayr ayaa aan doonay, qaybkana ma ogi."

Waxa uu ku soo afmeeray salaan ay ka horrayso suuradda

40 Diraasah Naqdiyah, 2/562.

Shucaraa' aayadda ay ku dhammaato qaybteeda ugu dambaysa[41],

وَسَيَعْلَمُ الَّذِينَ ظَلَمُوا أَيَّ مُنقَلَبٍ يَنقَلِبُونَ ﴿٢٢٧﴾

"Kuwa wax dulmiyaana waa ay ogaan doonaan meesha ay ku dambayn doonaan."

ash-Shucaraa': 227

Kutubta taariikhda qaar ayaa soo tebiyey in iyada oo uu Abuu Bakar qoraalka u yeedhinayo Cusmaan, markii uu marayey magaca Cumar uu xanuunkii ka tan batay uuna miyir beelay, ka dibna Cusmaan ku qoray Cumar magiciisa. Markii Abuu Bakar soo miiraabayna uu Cusmaan ka mahadiyey isxilqaankaas iyo tallaabada wanaagsan ee uu qaaday. Haddii uu Abuu Bakar sidaa ku tegi lahaa, wixii muddada la qorshaynayey waa ay kala daadan lahaayeen, Cusmaanna waa uu ka war hayey in Cumar lagu wareejin doono, oo dadkii Abuu Bakar kala tashaday ayaa uu ku jirey.

Cusmaan waxa uu qaaday warqaddii oo shaabbaddii Abuu Bakar wadata, si uu ugu dul akhriyo saxaabadii oo Masjidka ku sugeysay. "Bayco ma la galaysaan qofka halkan ku xusan?" Ayaa uu dadkii weydiiyey. Markii ay muujiyeen in ay raalli ka yihiin, una hoggaansami doonaan go'aanka Abuu Bakar, ayaa uu u akhriyey warqaddii. Sidaas ayaana ay ku aqbaleen oo ay baycadii kula galeen Cumar RC.

41 Manaaqib Cumar, 55-59.

Ilaha qisadan laga soo xigtay qaarkood waxa ay tilmaamayaan in markii Cusmaan warqadda keenay, uu Cumar goobta fadhiyey isaga oo ul haysta, dadkana ku waaninaya in ay addeecaan Khaliifka Rasuulka Alle SCW—tilmaantii Abuu Bakar loogu yeedhi jirey—. Waxaa muuqata in uusan ka war hayn cidda uu Abuu Bakar magacaabay, laakiin uu diyaar u ahaa in uu taageero oo u hoggaansamo, ciddii ka hortimaaddana uu tallaabo ka qaado. Ilo kale ayaa iyaguna waxa ay sheegeen in markii Abuu Bakar arrinta xilwareejinta u soo bandhigay, Cumar uu diidey. Laakiin Abuu Bakar khasbay oo uu weliba u hanjabay haddii uu amardiiddo la yimaaddo.

Hawlihii kale markii ay dhammaadeen, Abuu Bakar waxa uu Cumar la yeeshay shir gaar ah oo uu kula sii dardaarmay kuna waaniyey—isaga iyo Muslimiintana waa uu u duceeyey.

Markii uu Abuu Bakar geeriyooday, taladu toos ayaa ay Cumar ugu wareegtay, 22'kii Jumaadal Aakhirah, 13H—maadaama hore loo dhammeeyey hawshii baycada. Hawshii ugu horreysay ee uu Cumar qabtay waxa ay ahayd in ciidammadii dagaalka ku maqnaa la wargaliyo. Farriinta waxaa qaaday labo saxaabi: Shaddaad ibnu Aws RC iyo Maxmiyah ibnu Jaz'i RC. Ku wargalinta geerida Abuu Bakar RC ka sokow, waxaa qoraalka ku jirtey casilaaddii Khaalid ibnul Waliid RC, iyada oo taladii ciidanka lagu wareejiyey Abuu Cubaydah RC.[42]

42 Albidaayah wan Nihaayah, 7/102-103; Diraasah Naqdiyah, 2/568.

Cabdullaahi ibnu Mascuud RC waxaa laga soo weriyey in uu yidhi, "Dadka waxaa ugu *fiiraaso* badnaa (fiiro dheeraa) saddex: Casiiskii Masar markii uu haweenaydiisa ku yidhi 'wanaaji joogiddiisa (Nebi Yuusuf CS) waxaa laga yaabaa in uu inna anfaco ama aynu ilmo ka dhigannee,' iyo haweenaydii aabbaheed ku tidhi, 'Aabbow adeegso (Nebi Muuse CS), cid la adeegsado waxaa ugu fiican midka awoodda leh ee aaminka ahe,' iyo Abuu Bakar markii uu khilaafada ku wareejiyey Cumar."[43]

***

43 Tafsiirka Ibnu Kathiir, Yuusuf: 21.

Dibdheh

Buuggani waxa uu ku bilowday Cumar RC oo ka faalloonaya saboolnimadii iyo silicii uu ku soo koray. Waxa uu ahaa wiil yar oo saxaraha Makah ee kulaylka badan, marna aabbihii geela ugu raaca, marna habaryarihii adhiga ugu raaca, ka dibna fiidkii in yar oo sabiib ah gacanta loogu shubo. Buuggu waxa uu ku dhammaaday iyada oo gacanta loo galiyey dawlad Jasiiradda Carbeed oo idil ka talisa, ciidankeediina albaabbada ku garaacayo labadii quwadood ee xilligaa adduunka ugu awoodda badnaa: Ruum iyo Faaris.

Tobankii sano iyo lixdii bilood ee xigeyna wax weyn ayaa uu adduunka ka beddelay. Ilaa iyo maantana sooyaalkii uu ka tagey ayaa saamayn weyn ku leh nolol maalmeedkeenna. Waana mawduuca uu ku saabsanaan doono buugga labaad ee midkan xigaa, haddii Alle idmo.

Tixraac

١. أسد الغابة في معرفة الصحابة. ابن الأثير. دار ابن حزم. بيروت. الطبعة الأولى، ١٤٣٣هـ - ٢٠١٢م.
٢. الاستيعاب في معرفة الأصحاب. أبو عمر يوسف عبد الله محمد عبد البر. تحقيق محمد علي البجاوي. دار الجيل. بيروت. الطبعة الأولى، ١٤١٢هـ - ١٩٩٢م.
٣. تاريخ الخلفاء، أبو الفضل جلال الدين عبد الرحمن بن أبي بكر السيوطي. وزارة الأوقاف والشؤون الإسلامية - قطر. الطبعة الثانية، ١٤٣٤هـ -٢٠١٣م.
٤. تاريخ دمشق. أبو القاسم علي بن الحسن بن هبة الله - ابن عساكر. تحقيق عمرو بن غرامة العمروي. دار الفكر للطباعة والنشر والتوزيع. ١٤١٥ هـ - ١٩٩٥م.
٥. تفسير القرآن العظيم (تفسير ابن كثير). أبو الفداء عماد الدين إسماعيل بن عمر بن كثير القرشي الدمشقي. /http://quran.ksu.edu.sa/tafseer/katheer
٦. جامع البيان عن تأويل آي القرآن. أبي جعفر الطبري. تحقيق عبد الله التركي. دار هجر. القاهرة. الطبعة الأولى، ١٤٢٢هـ.
٧. جمل من أنساب الأشراف. أحمد بن يحي بن جابر البلاذري. تحقيق سهيل زكار - رياض زركلي. دار الفكر. بيروت. الطبعة الأولى، ١٤١٧ هـ - ١٩٩٦م.
٨. حلية الأولياء وطبقات الأصفياء، أبو نعيم أحمد بن عبد الله الأصفهاني. السعادة - مصر - تصوير مكتبة الخانجي ودار الفكر. ١٤١٦هـ- ١٩٩٦م.
٩. دراسة نقدية في المرويات في شخصية عمر بن الخطاب وسياسته الإدارية. عبد السلام بن محسن آل عيسى. الجامعة الإسلامية. المدينة المنورة. الطبعة الأولى، ١٤٢٣هـ - ٢٠٠٢م.
١٠. الرحيق المختوم. صفي الرحمن المباركفوري. دار احياء التراث.

١١. سنن أبي داود. سليمان بن الأشعث الأزدي السجستاني - أبو داود. تحقيق شعيب الأرناؤوط وآخرون. دار الرسالة العالمية. البعة الأولى، ١٤٣٠م - ٢٠٠٩هـ

١٢. سنن الترمذي (الجامع الكبير)، أبو عيسى الترمذي. تحقيق بشار عواد معروف. دار الغرب الإسلامي. الطبعة الأولى، ١٩٩٦م.

١٣. سير أعلام النبلاء. (ت: الأرناؤوط). أبو عبد الله شمس الدين محمد بن أحمد بن عثمان الذهبي. تحقيق شعيب الأرناؤوط - بشار معروف - آخرون. مؤسسة الرسالة. ١٤٠٢ - ١٩٨٢.

١٤. السيرة النبوية (سيرة ابن هشام)، أبو محمد عبد الملك بن هشام. تحقيق مصطفى السقا - إبراهيم الأبياري - عبد الحفيظ الشلبي. شركة مكتبة ومطبعة مصطفى البابي الحلبي (تصوير دار إحياء التراث العربي).

١٥. السيرة النبوية الصحيحة، أكرم ضياء العمري. مكتبة العلوم والحكم. الطبعة السادسة، ١٤١٥هـ - ١٩٩٤م.

١٦. صحيح سنن الترمذي - ضعيف سنن الترمذي، محمد ناصر الدين الألباني. مكتبة المعارف.الطبعة الأولى، ١٤١٩هـ - ١٩٩٨م.

١٧. الطبقات الكبرى. أبو عبد الله محمد بن سعد، البصري، البغدادي - ابن سعد. تحقيق محمد عبد القادر عطا. دار الكتب العلمية. بيروت. الطبعة الأولى، ١٤١٠ هـ - ١٩٩٠ م.

١٨. عبقرية عمر. عباس محمود العقاد. مؤسسة إقرأ. ٢٠١٤م.

١٩. العقد الفريد. أحمد بن محمد بن عبد ربه الأندلسي. تحقيق مفيد محمد قميحة. دار الكتب العلمية. الطبعة الأولى، ١٤٠٤هـ - ١٩٨٣م.

٢٠. عمر بن الخطاب؛ حياته- علمه - أدبه. علي أحمد الخطيب. عالم الكتب. بيروت. الطبعة الأولى، ١٤٠٦هـ - ١٩٨٦م.

٢١. عمر بن الخطاب، شخصيته، وعصره. علي محمد الصلابي. دار الغد الجديد. القاهرة. الطبعة الأولى، ١٤٣٥هـ - ٢٠١٥م.

٢٢. فتح الباري بشرح صحيح البخاري. أحمد بن علي بن حجر العسقلاني. تحقيق نظر بن محمد الفاريابي. دار طيبة. الرياض. الطبعة الأولى. ١٤٢٦هـ - ٢٠٠٥م.

٢٣. فقه السيرة. محمد الغزالي. تحقيق محمد ناصر الدين الألباني. دار الكتب الحديثة. الطبعة السادسة، ١٩٦٥.

٢٤. لطائف المعارف فيما للمواسم من وظائف. عبد الرحمن بن أحمد بن رجب زين الدين أبو الفرج الحنبلي الدمشقي. دار ابن حزم. الطبعة الأولى، ١٤٢٤هـ - ٢٠٠٤م.
٢٥. ميزان الاعتدال فى نقد الرجال، أبو عبد الله محمد بن أحمد بن عثمان بن قايماز الذهبي شمس الدين. تحقيق علي محمد البجاوي.تصوير دار المعرفة - بيروت.
٢٦. مناقب أمير المؤمنين عمر بن الخطاب. أبو الفرج عبد الرحمن بن علي بن محمد بن علي بن الجوزي. تحقيق حلمي محمد إسماعيل. دار ابن خلدون. سنة النشر: ١٩٩٦م.

"Taariikhdu waynoo musbaax maanka caawima'e,
Adoo male gudaayaad yaqiin marar ku gaadhaaye,
Makaankaaga waa inaad taqaan meelba waxa yaalle."

—Xaaji Aadan Afqallooc, ahun.

"Nebiga scw ka dib, taariikhda Islaamka ma soo marin qof ka saamayn badnaa Cumar ibnul Khaddaab rc, waana ay adag tahay in la helo cid u dhiganta, shakhsiyad ahaan iyo waxqabad ahaanba. Cumar waxa uu ahaa *cabqari* weyn oo islaamka bilay.

Buuggani waxa uu guudmarayaa taariikh nololeedkii Cumar ibnul Khaddaab rc, qaybtiisan koowaadna waxa ay diiradda saaraysaa sannadihii hore ee noloshiisa: heerkii uu bulshada kaga jirey iyo saamayntii uu ku lahaa, habkii uu uga falceliyey diintu markii ay soo degtay, islaamiddiisi iyo isbeddelkii ay dhalisay, kaalintii uu ka qaatay xoojinta iyo faafinta diinta, iyo booskii uu kaga jirey bulshadii cusbayd ee Muslimiinta.
Waxa uu buuggani tilmaami doonaa qayb ka mid ah shakhsiyaddii Cumar rc, iyo habdhaqankiisi. Waxaa kale oo innoo muuqan doonta habkii uu Nebigu scw u qaabeeyey shakhsiyaddii Cumar rc.

Waxa aynu arki doonnaa xidhiidhka Cumar iyo Qur'aanka ka dhexeeyey, iyada oo uu Cumar qayb ka ahaa sababihii ay ku soo degeen qaybo aan yarayn oo Qur'aanka ka mid ah, ilaa uu Nebigu scw sheegay in Alle swt xaqa dhigay Cumar carrabkiisa iyo qalbigiisa."

GARANUUG
Quudi Maankaaga,
Kobci Garaadkaaga.
www.garanuug.com
info@garanuug.com